# IRRIDAHA GUUSHA {2}




**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## XOGTA SHAKHSIGA:-

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

# BUUGGA IRRIDAHA GUUSHA {2}

## QORAAGA BUUGGA

CUMAR SH.C/LAAHI CAWED (HONG-KONG)

## TIFAFTIRAYAASHA BUUGGA

1) C/FATAAX XASSAN X.FAARAX

2) ABOKOR SH.C/LAAHI CAWED

XUQUUQDA DAABACAADDA BUUGGANI WAY SUGANTAHAY, WAXAANA DAABICI KARA CIDDA AY KHUSAYSO OO KELIYA, BUUGGANNA LAMA DAABICI KARO, LAMANA BADIN KARO, LAMANA TURJUMI KARO, QAYB KAMID AHNA LAMA SAWIRAN KARO, IYADA OO AAN WAX OGGOLAANSHO AH LAGA HAYSAN QORAAGA BUUGGA.

(ALL RIGHTS RESERVED, NO PART OF THIS BOOK MAY BE REPRODUCED, STORED IN ARETRIEVAL SYSTEM, TRANSMITTED IN ANY

FORM OR BY ANY MEANS, ELECTRONIC, MECHANICAL, PHOTOCOPYING, OR OTHERWISE, WITH OUT THE PRIOR WRITTEN PERMISSION OF THE AUTHOR OF THE BOOK).

## KALA XIDHIIDH QORAAGA BUUGGA

EMAIL:- CUMARCABDILAAHI94@GMAIL.COM

MOBILE:- 063-4377671 AMA 065-4377671

FACEBOOK:- CUMAR HONGKONG

MARCH-2026-HARGEYSA, SOOMAALILAND

## MAHADNAQ

Ugu horrayn waxa mahad oo dhami ay usugnaatay **ILAAHAY (swt),** inoo suurto geliyay dhammaystirka hawshan ballaadhan ee qoritaanka buuggan **IRRIDAHA GUUSHA 2.**

Waxa kale oo aan si gaar ah ugu mahad-naqayaa waalidkay, sababna u ah in aan maanta soo gaadho halkan iyada ah, sidoo kale waxa mahad gaar ah leh tifaftirayaasha buuggan isaga ah, **C/FATAAX XASSAN X.FAARAX & ABOKOR SH.C/LAAHI CAWED,** oo iyaga oo aan ku shaqaynayn wax adduun ah, balse ku hawlgalay niyad-sami iyo garab-istaag.

Waxa kale oo aan halkan ku xusayaa uguna mahad-celinayaa Qoraa/Abwaan:- **CABDIRISAAQ MAXAMED CABDILAAHI (ODAY),** ahna macallinkaygii dugsiga sare oo aan uga mahad-celinayo doorkii talo-bixineed, dhiirigelineed iyo gacan ka gaysashadii soosaarista buuggan isaga ah.

Waxa kale oo aan bogaadinayaa dedaalka la taabankaro iyo dhiirigelinta uu ila garabtaagnaa saaxiibkayga qaaliga ah, **C/FATAAX XASSAN X.FAARAX,** min-bilawgii hawshan iyada ah illaa dhammaystirkeedii, taas oo suurto gelisay in marba-marka ka dambaysa aan kusii dhiirado hore uwadka irrintan iyada ah, (Qoraalka buuggan).

Ugu dambayn waxa aan mahad-naq lamid ah kuwa hore ugudbinayaa dhammaan shakhsiyaadka si dadban iyo si toos ahba uga qayb-qaatay marxaladihii kala du-duwanaa ee uu soo maray diyaarinta buuggan **IRRIDAHA GUUSHA 2.**

## HORDHACA BUUGGA

Sida aynu wada ognahay ama aynu ka wada war qabno, tan iyo bilawgii qarnigan 21aad, illaa iyo dhammaadkii qarnigii20aad, waxa dunidan ama caalamkan aynu ku noolahay kusoo kordhay ama kusoo biiray wax loo yaqaanno baraha bulshada (social media), kuwaas oo ay isticmaalaan dhammaan jiilasha kala ged-geddisan ee bulshadu, hadday tahay yar iyo waynba.

Sidoo kale waxa isticmaala dhammaan qaybaha kala duwan ee ay ka koobantahay bulshadu, sida:- Dhallinyaro, Siyaasiyiin, Aqoonyahan, Culimo awdiin, Cuqaal, Salaadiin, Weriyayaal, Abwaano, Dhakaatiir, Macallimiin, Barayaal sare, Madaxwaynayaal iwm, kuwaas oo mid-kasta oo ka mid ahi uu kusoo gudbiyo ama kusoo bandhigo, waxyaabaha uu jecelyahay ama xiiseeyo, sida:- wararka ciyaaraha, wararka caalamka, xikaayaadka ama sheekooyinka yar-yar ee qosol-qosolka ah, qissaska diiniga ama jacaylka ama Arrimaha guudba ah, hadday yihiin kuwo hore udhacay ama kuwo imminka dhacayba, waxyaabaha la xidhiidha dhaqanka, waxyaabaha khuseeya siyaasadda, halxidhaalayaasha iwm.

Haddaba aniga (ururiyaha buugga) oo ka mid ah bulshada isticmaasha kuna xidhan barahaas bulshada, siiba barta **face-book**, kana duulaya halku dhigga ah:- in baraha bulshadu ay yihiin mindi labo af-leh ( xumaan & samaan), kana mid ah dadka

wax ka dhex kaydiya, kuna dhex kaydiya bartan iyada ah, ayaa waxaan inbadan kudhex arkay bartan maqaallo fara-badan oo runtii aad iisoo jiitay, xikmad iyo macne qoto-dheerna ku fadhiya, si dareen lehna uga hadlaaya una taabanaaya waaqaca nolosha aadamaha, kuwaas oo ay qoreen aqoonyahan fara-badan oo rag iyo haweenba leh oo ku xidhan kuna taxan bartan.

kuwaas oo sababay in aan ku hammiyo in haddii aan ka dhex sameeyo bartan iyada ah baadhitaan, raadin iyo baadigoob khuseeya maqaallada ay qoreen dadka aqoonyahanka ahi ee ku xidhan bartan, kuwaas oo ah maqaallada muhiimka iyo waxku'oolka ah, taabanayana kana hadlaaya waaqaca nolosha aadamaha, ka dibna aan isu keeno oo ururiyo, habeeyona aan ka samayn karo buug wayn oo waxku'ool ah, kaas oo wax kusoo kordhin kara anficina kara bulshadan aan la noolahay iyo bulshada caalamkaba.

Fikraddaas oo kama danbaystii intaan ku qancay aan ku dhaqaaqay, hirgeliyeyna, taas oo dedaal dheer, baadigoob, raadin, isukeenid, ururin, kalashaandhayn, kalasaarid iyo habayn dheer kadib natiijadii kasoo baxday ay noqotay/tahayna buugaagtan taxanaha ah ee lamagac baxay **IRRIDAHA GUUSHA,** haddana akhriste aad akhriyayso taxanihii labaad ama buuggii labaad ee **IRRIDAHA GUUSHA 2.**

Sababta ay buugaagtani magacaas uqaateenna akhriste waxaad ogaan doontaa fahmina doontaa marka aad dhex gasho buugaagtan iyaga ah, akhridona waxa ku qoran ee ay ka hadlayaan.

Haddaba buuggan **IRRIDAHA GUUSHA 2** waxa uu ka koobanyahay boqol iyo konton (150) qisso iyo saddex (3) maqaal.

Marka aan leeyahay qissona, qissasku waxa ay u kala baxaan kuwo male awaal ama dadsamee ah (fiction stories) iyo kuwo dhab ah , dhacayna (fact history), kana dhacay koonkan/caalamkan aynu ku noolahay korkiisa/dushiisa, markay sidaa tahayna dhammaan boqol iyo kontonka (150) qisso ee ku jira buuggani waa kuwo dhab ah, dhacayna (fact history), kana dhacay meelo kala du-duwan oo ka mid ah koonkan/caalamkan aynu ku noolahay korkiisa/dushiisa, waana qissas dhammaan mid kasta oo ka mid ahi ay si dareen leh utaabanayso ugana hadlayso waaqaca nolosha aadamaha.

Haddaba aniga (ururiyaha buugga) oo kaduulaaya kala duwanaanta xagga xiisaynta ee aadamaha ayaa buuggan waxaan ukala qaybiyay uuna ukala qaybsanyahay una kala xidhanyahay saddex (3) qaybood oo kala ah:-

- ✓ **Qaybta koowaad:- qissas diini ah (25 Qisso).**

- ✓ **Qaybta labaad:- qissas jacayl ah (25 Qisso).**

- ✓ **Qaybta saddexaad:- qissas guud (100 Qisso).**

Halka saddexda (3) maqaalna ay ka yihiin, saddex (3) maqaal oo kala raacsan saddexda qaybood ee ay u kala qaybsanyihiin qissasku, taas oo mid kastaaba

uu ka hadlaayo mawduuc ku saabsan qaybta uu raacsanyahay, soona xidhaayo, soona geba-gebaynaayo, soona af-meeraayo qaybtiisa.

Qisso kasta oo ku jirta buugganina waxa ay leedahay duluc, gun & gebo-gebo iyo cashar laga baranaayo, taas oo qofka akhristaha ah usoo koobaysa nuxurka iyo gobo'da ay ku fadhido qissadani uu wakhtiga badan soo akhriyayay, taas oo dhawrka baaragaraaf ee udanbeeya qisso kastaana uu ka hadlaayo arrintaa iyada ah.

Sidoo kale anigoo (ururiyaha buugga) kaduulaaya qodobka ah:- in sawirku uu soo dhaweeyo fahamka aadamaha, ayaa waxa aan ku dadaalay in bar-bilawga qisso iyo maqaal kastaba aan dhigo sawir ku habboon, taas oo ALLAH (SWT) igu guuleeyay aanaan ku guulaystay.

Si kastaba ha ahaatee, waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in qof kasta oo akhriya, ha ugu yaraato hal qisso ama maqaal'e uu noloshiisa saamayn ku yeelan doono, saamayna doono.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in qof kasta oo leh han, hammi, himilo, hiigsi iyo hadaf, kaas oo akhriya, fahmana buuggan, ALLAHNA (swt) talo saarta, uu ku guulaysandoono himiladiisa iyo riyadiisa, (haddii Allaha awoodda lihi idmo).

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qof kasta oo akhriya da'da uu doono ha ahaadee in dhabanka iyo gacantu ay in badan isku daali doonaan, iskuna sawirmi doonaan.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qofkasta oo akhriya mar, laba, saddex iyo inkabadanba hadduu akhriyo aanu ka xiiso goyn-doonin akhrintiisa iyo ku noq-noqoshadiisa.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qof kasta oo akhriya ugu yaraan hal baaragaraaf oo ka mid-ah, in uu guntiga u adkaysan doono sidii uu buuggan uwada akhriyi lahaa una dhammayn lahaa.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in uu qof kasta da'da uu doono iyo marxaladda uu doono ha ku jiree, ka kafayn karo baahidiisa akhris.

Waayo haddii uu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska diiniga ah, waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska diiniga ah, sidoo kale haddii uu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska jacaylka ah, waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska jacaylka ah, sidaa si lamid ah, hadduu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska ka hadlaya waaqaca guud ee noloshana, waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska guud.

Guntii iyo geba-gebadii in kasta oo aan dedaal iyo daacadnimo ugu ban-baxay arrintan iyada ah (qoraalka buuggan), haddana aadmiga qallooc iyo wax lagu qoonsado lama waayo, gefkana waxa aan u ahay bani-aadam.

Haddaba wixii uu buuggani gol-daloolo yeesho, akhristayaasha buugganina ay dareemaan, ugu horrayn waxaan ucaddaynayaa in aanay ahayn wax aan ubadheedhay, una sugnaatay shaydaan iyo ehelkii, iyagana waxa aan si kal iyo laab ah uga codsanayaa in ay igalasoo xidhiidhaan, iigunasoo gudbiyaan wixii talo, tusaale iyo iin uu buuggani leeyahayba ah ciwaannada iyo telifoonnada ku lifaaqan bogagga hore ee buugga, si aannu ugu dedaalno wixii gol-daloolo ah ee aannu isla fahanno, islana afgaranno, aanay ugusoo bixin daabacaadaha danbe ee buugga, kuwa horena intii aanu kaqaban-karno aanu kaqabano.

**FG:- BUUGGANI WAA BUUG TAXANE AH QAYBTANINA QAYBTII LABAAD.**

**AKHRIS WACAN:-**

# TUSMADA BUUGGA

## Q:-KOOWAAD-QISOOYIN DIINI AH:-


1) **Nebi daa’uud (cs) iyo gabadhii cabanaysay!!!--------------------------------28**

2) **Ninkii reermiyiga ahaa ee Nebiga (scw) ka oohisiiyay!!!-------------------31**

3) **Ilaalinta niyadda qofka bani-aadamka ah!!!---------------------------------34**

4) **Heshiiskii safwaan iyo cumayr binu-wahab!!!-------------------------------36**

5) **Cumar binu-khaddaab iyo gabadhii addeecadda ahayd!!!---------------42**

6) **Haweenaydii cabanaysay iyo cumar binu-khaddaab!!!-------------------44**

7) **Hoggaamiyaha wanaagsan iyo sida uu uga damqado ummadda uu madaxda u yahay!!!------------------------------------------------------------46**

8) **Hoggaanka fiican iyo qiimaha uu uleeyahay bulshada!!!-----------------49**


**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

9) Cali binu abuu-daalib iyo ninkii yuhuudiga ahaa!!!-----------------------52

10) Fadliga tasbiixda!!!-------------------------------------------------------------55

11) Ardaygii faqiirka ahaa iyo sh. Sulaym al-suyuudi!!!-----------------------58

12) Ibnu-siiriin iyo wiilkii yaraa!!!-------------------------------------------------62

13) Wiilkii yaraa ee Alle kacabsiga badnaa!!!-------------------------------------65

14) Ka dheerow malaha!!!------------------------------------------------------------67

15) Sanam dumin uma socotide waxaad usocotaa soordoon!!!---------------70

16) Bal kawarran haddaan annagu cuni lahayn!!!------------------------------74

17) Noqo akhriste anfaca naftiisa!!!----------------------------------------------79

18) Shanlaysadii gabadhii fircoon!!!----------------------------------------------81

19) Allah ma mooga waxa ay samaynayaan daalimiintu!!!--------------------84

## IRRIDAHA GUUSHA {2}

20) Miraha istiqfaarta!!!-----------------------------------------------------------------88

21) Fadliga salliga Rasuulka (scw)!!!---------------------------------------------91

22) Ninkii oomay iyo gabadhii musalliyadda ahayd!!!-------------------------96

23) Wiilkii yaraa iyo odaygii ay ku rafiiqeen salaadda!!!---------------------98

24) Iga gaarsii umadda xataa hal aayad!!!-------------------------------------102

25) Fadliga istiqfaarta!!!---------------------------------------------------------104

26) Sadaqada iyo sirta ku duugan---------------------------------------------106

## Q:-LABAAD-QISOOYIN JACAYL AH:-

27) Waxa uu dib uhelay 70 sanno kadib weliba iyada oo hadlaysa!!!------108

28) Aniga ma qurxooni miyaa!!!-----------------------------------------------112

29) Maamadii reer chechniya (shiishaan)!!!-----------------------------------115

30) Ku dheh waan ku jeclahay!!!-------------------------------------------------117

31) Waad samaysay, hadda kadibna sidaas usamay weligaa!!!--------------119

32) Qaali waxaan arkay lugahaaga!!!------------------------------------------121

33) Laxdii lugta loogu xidhay daasadda!!!--------------------------------------123

34) Fadlan lacag ku shubo!!!---------------------------------------------------126

35) Wireleskii bilaa passwordka ahaa!!!----------------------------------------128

36) Marwadii masayrka badnayd!!!---------------------------------------------131

37) Masayrkii xadhkaha goostay!!!---------------------------------------------133

38) Guursan maayo illaa aan helo gabadh garaad badan!!!-----------------135

39) Waxaan guursanayaa nin farxad isiin kara!!!-----------------------------138

40) Guurkii shuruudaha watay!!!----------------------------------------------140

41) Ninkii lagu casuumay ka qaybgalka arooska xaaskiisa!!!---------------143

42) Gabadhii iyadu is guursatay!!!---------------------------------------------146

43) Iyadaa isku haysa!!!---------------------------------------------------------149

44) Doob dareenbaa dilay!!!----------------------------------------------------152

45) Xaaskaaga ilaasho!!!--------------------------------------------------------153

46) God qiyaano ha qodin haddaad qodona hadheerayn!!!------------------156

47) Dunidan maxaad ka qabataa oo shaqo ah!!!-------------------------------160

48) Eygii qabay ayaa lasoo islaamay!!!-----------------------------------------163

49) Inantii boqorka iyo ninkii shaqaalaha ahaa!!!----------------------------165

50) Maanta waa markii ugu horraysay ee aan ogahay halka ay usocoto xaaskaygu!!!------------------------------------------------------------------169

51) Ku quus qaado!!!-------------------------------------------------------------171

52) Toddoba (7) qodob oo adkayn kara xiriirka lammaanaha--------------173

## Q:-SADDEXAAD-QISOOYIN GUUD:-

53) Albaabadii guusha!!!----------------------------------------------------------178

54) Caqli kula dhaqan ninka casrigan dunida jooga!!!-----------------------180

55) Ogow in ay jiraan dad kaa caqli badani!!!----------------------------------182

56) Wastaadkii iyo madaxii shirkadda!!!----------------------------------------184

57) Dhalashadii saddex geesoodka ahayd!!!-------------------------------------186

58) Wiilkii agoonka ahaa ee isha qudha hooyadii ku nacay!!!---------------188

59) Gabadhii aan carruurta lahayn iyo wiilkii yaraa ee la noolaa!!!-------193

60) Miraha ixsaan falka!!!---------------------------------------------------------195

61) Ninkii hooyadii ka oohiyay si ay xaaskiisu ufaraxdo!!!------------------197

62) Hooyo isug waan kuusoo laabanayaaye!!!----------------------------------200

63) Akoonkaaga buuxso intuusan albaabku xirmin!!!------------------------202

64) Awrba awrka hore ayuu socodkiisa leeyahay!!!---------------------------204

65) Jinnigii insigu xaday!!!-------------------------------------------------------207

66) Qofku waxa uu ka cabsan karaa lakulanka cadawgiisa balse kama cabsan karo lakulanka cid uu jecelyahay!!!--------------------------------209

67) Ninkii waalnaa ee khaddiibka noqday!!!-------------------------------------213

68) Dukaanlihii iyo garsoorihii!!!-------------------------------------------------215

69) Saddexdii C/laahi ee walaalaha ahaa!!!-------------------------------------221

70) Ninkii xaakimka ahaa iyo jirrabiddii bulshadiisa!!!----------------------227

71) Markabkii ugu waynaa qarnigii 20aad!!!----------------------------------229

72) Marna haka quusan gar-gaarka Eebbe (swt)!!!----------------------------231

73) Xirfad yeello!!!-----------------------------------------------------------------233

74) Odaygii nasiibka badnaa!!!---------------------------------------------------235

75) Qalbiga Allah swt caabudaa marwalba wuu qoyanyahay!!!-------------237

76) Kula dhaqan dadka dabeecaddaada wanaagsan hana kula dhaqmin dabeecadohooda!!!------------------------------------------------------------239

77) Odaygii hawlgabka ahaa iyo haweenaydii ay deriska ahaayeen!!!----241

78) Baaqiga iska hayso!!!--------------------------------------------------------244

79) Ilaahayow ii quudi sida aad uquudiso tukaha yar!!!--------------------246

80) Odaygii duqda ahaa iyo kiishkii lacagta ahaa!!!-------------------------250

81) Ninkii doolliga jawaanka ku sitay!!!---------------------------------------252

82) Ha quusin mac-macaanka adduunka!!!-----------------------------------254

83) Dadka dhintay waxay qayb kayihiin nolol maalmeedka caadiga ah!!- 257

84) Keligaa ayaa dhimanaaya!!!--------------------------------------------------260

85) Ogow lacagtu ma aha mid wax-kasta kuu filinaysa!!!-------------------262

86) Shirqoolkii dilka!!!-----------------------------------------------------------264

87) Wiilkii damiir-laawaha ahaa!!!---------------------------------------------267

88) Wiilkii damcay inuu ka sinaysto gabadh mayd ah!!!--------------------269

89) Ka reebtoonow qadafka!!!--------------------------------------------------273

90) Dadka waxa qanciya dhaqanka dadka ee maaha badeecadda uu iibinaayo!!!-------------------------------------------------------------------276

91) Ganacsadihii muslimka ahaa iyo ninkii yuhuudiga ahaa!!!-------------278

92) Ninkii taajirka ahaa ee dabaqa saarnaa iyo miskiinkii faqiirka ahaa!!!----------------------------------------------------------------------------281

93) Mulkiilihii hudheelka iyo ninkii miskiinka ahaa!!!-----------------------283

94) Ninkii faqiirka ahaa iyo kiishkii lacagta ahaa!!!---------------------------286

95) Qofka muuminka ahi waa inuu ku qanco wixii Rabbi (swt) uqoro!!!-- 288

96) Ha ka cabsan in aad seegto arsaaqdii Rabbi (swt) kuu qoray!!!--------290

97) Adduunyadu waa hadhkaa labadiisa gelin!!!-----------------------------292

98) Waxa aad goosanaysaa wixii aad beeratay!!!-----------------------------294

99) Kalluumaystihii la xoogay!!!-----------------------------------------------296

100) Ilaahay ayaa iigakaa qaaday!!!--------------------------------------------298

101) Waa gabadhii albaabka iga furi lahayd!!!-------------------------------300

102) Walaalihii aan isu tallaabi jirin!!!-----------------------------------------303

103) Labadii saaxiib ee safarka wada galay!!!--------------------------------305

104) Iska ilaali saaxiibbada xun-xun!!!-----------------------------------------307

105) Haku ged-degin cadhadaada!!!---------------------------------------------310

106) Allah (swt) ayaa isiiyay dawo kadib markaan unaxariistay mid kamid ah addoomadiisa!!!-------------------------------------------------------------313

107) Dhakhtarkii caaqilka ahaa iyo xariifkii reer magaalka ahaa!!!-------315

108) Si deg-dega arrimaha ha uga go'aan gaadhin!!!-------------------------319

109) Inantii khamaarka lagu kala helay!!!-------------------------------------322

110) Kooxdii shaqada!!!----------------------------------------------------------325

111) Indheergaradkii iyo dira-diraalihii!!!-------------------------------------327

112) Niyaddaa saldhig ah!!!-----------------------------------------------------330

113) Damacaaga oo caqli hoggaamin waayaa waxla'aanbuu ku badaa!!!- 332

114) Waa bashar adiga oo kale ah!!!---------------------------------------------334

115) Maxaa iga maqan!!!---------------------------------------------------------339

116) Dadku waxa ay daba socdaan ma aha qofka!!!---------------------------341

117) Dadku intooda badan waxa ay arkaan xumaanta oo keliya!!!--------343

118) Qawsaarkii adhiraaca ahaa iyo nimankii socotada ahaa!!!------------345

119) Sirmaqabe Allaa usahan ah!!!---------------------------------------------347

120) Wakhti walba ahaw mid digtoon!!!----------------------------------------349

121) Ninkii ku bad-baaday salaantiisii wanaagsanayd!!!---------------------352

122) Deddel qaabka iyo habka aad wax uwaddo marka aad aragto in aanay usocon sidii aad ugu tala-agashay!!!----------------------------------------354

123) Hubsiimo halbaa lasiistaa!!!-----------------------------------------------356

124) Hilibkii dabku kari waayay!!!---------------------------------------------359

125) Haddii aan email samaysan lahaa waxaan noqon lahaa shaqaale nadiifiya musqulaha shirkadda micro-soft!!!------------------------------361

126) Keennee xoog badan!!!------------------------------------------------------364

127) Ka digtoonow malahaaga!!!--------------------------------------------------366

128) Akhlaaqda wanaagsan!!!---------------------------------------------------369

129) Weligaa ha rajo dhigin hana isdhiibin!!!---------------------------------371

130) Darawalkii cayaarta badnaa!!!---------------------------------------------373

131) Waxkasta oo dhaca ma-mudna in aad jawaab ama fal-celin ka bixiso!!!------------------------------------------------------------------------375

132) Faa'iidada Alle kacabsiga!!!------------------------------------------------377

133) Dheefta sadaqada!!!----------------------------------------------------------381

134) Wanaagga sadaqada!!!------------------------------------------------------383

135) Ka xamdinaq nimcada Eebbe (swt) ku siiyey!!!-------------------------387

136) Orodoo sii khamriga duuliyaha diyaaradda!!!--------------------------389

**137) Duuliyihii reer Canada iyo koobkii shaaha ahaa!!!---------------------391**

**138) Waxaad waraabisaa beerta hebel!!!---------------------------------------394**

**139) Kaalay adigu qabo!!!-------------------------------------------------------396**

**140) Bad-baadada sadaqada!!!--------------------------------------------------398**

**141) Ilaahay (swt) waxa uu naga xijaabay ayaa wax walba ka wayn!!!---400**

**142) Ninkii saddexda kun ku iibsaday saddexda talo!!!----------------------403**

**143) Soo dhawayntii lala ashqaraaray!!!----------------------------------------407**

**144) Bani-aadamku nimcada ma xejiyo!!!---------------------------------------410**

**145) Faa'iidada samirka!!!-------------------------------------------------------413**

**146) Hadduu Alle asturo ceebahaaga ma jirto sabab aad uraadiso ceebaha dadka kale!!!-------------------------------------------------------------------416**

**147) Is xisaabi intaan lagu xisaabin!!!-------------------------------------------429**

148) Sacii liqay mobileka!!!-------------------------------------------------------426

149) Addoontii ilaahay ku xidhnayd!!!-------------------------------------------429


150) Noqo wakhti kasta mid Alle (swt) xusa oo xasuusta!!!------------------432

151) Bisadda iigu dhiib!!!-----------------------------------------------------------434

152) Ka fogow waxa dhibta kuu keenaya xattaa haddii uu qof kale masiirkaas ku faa'iiday!!!---------------------------------------------------436

153) Maaraynta wakhtiga--------------------------------------------------------438

154) Tixraac--------------------------------------------------------------------------448




**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

# Q:- KOOWAAD-QISOOYIN DIINI AH:-

## NEBI DAA’UUD (CS) IYO GABADHII CABANAYSAY!!!



Maalin Maalmaha kamid ah Haweeneey ayaa guriga ugu timid Nebi Daa’uud Caleeyhi Salaam, iyadoo Su’aashay bal inuu uga Jawaabo in Rabbigiisa uu yahay Mid Daalim ah ama Caadil dadkiisa u Siman yihiin?, Nabiyullaahi Daa’uud ( c s ) oo Su’aasha Naagtu filan waa ay ku Noqotay ayaana ku Jawaabay - Rabbigeyga waa Mid u Cadaalad falo Addoomadiisa oo aan kala Jecleyn ee adiga Ma ii Sheegi kartaa arrinta kugu Qasabtay Su’aasha aad I weydiisay waayo Rabbigeygu waa Mid ka Nazahan xumaanta idilkeed.

Gabadhii ayaa ku Jawaabtay - aniga waxaan ahay Hooyo uu Ninkeeda ka dhintay, waxaan leeyahay Saddex Carruur ah oo yar-yar, waxaan Noloshooda ku

dabaraa Tolliin aan gacantayda ku sameeyo kadibna aan Suuqa u iib geeyo anigoo Qarashaadka iga soo gala Masaariif uga dhiga Raashiinka ay Ilmaha Cuni lahaayeen.

In kastoo Shaqada Tolmada tahay Mid adag haddana waa Meesha keliya ee Noloshayadu ku tiirsan tahay, si kastaba ha ahaatee Shalay anigoo Suuqa aaday ayaa dhibaato igu dhacday kadib Markii gobol Tolliin ah oo aan rabay inaan iibiyo uu Haad Samada sare ka yimid gacantayda kala baxay dibna ula duulay oo Hawada la aaday, waxaan durbadiiba bilaabay inaan Murugoodo anigoo ka Fikirayo Maxaad Ciyaalka ku Quudin doontaa, taasi ayaana keentay in walwal badan igu dhasho ilaa iminkana Ma helin wax aan Ilmaha siiyo!!!.

Haddaba gabashii oo weli hadalkeeda sii wadata ayaa waxa Mar Qura la soo garaacay Albaabkii guriga, Cajiib waxaa Markiiba guriga gudaha u soo galay Koox ganacsato ah oo Lacag badan gacanta ku sido iyagoo ugu horreyntii warbixin ku Saabsan imaashahooda u Jeediyay Nebi Daa'uud Caleeyhi Salaam kuna yiri - Nebi Alloow waxaan kuugu nimid inaad Xoolahaan siiso Qofka Mudan ee dhibaateeysan adiga ayaa garanaya baahida dadka sida ay u kala daran tahaye?!!!.

Nebi Daa'uud (Caleeyhi Salaam ) waxa uu isla goobtii ku weeydiiyay Nimanka bal in ay u Sheegaan Sababta ku kaliftay in Xoolahan oo dhan ay siiyaan dadka Masaakiinta ee dan yarta ah?, Intaas kadibna Mid kamid ah raggii ganacsatada ahaa ayaa ku Jawaabay:- Nebi Alloow Shalay annagoo Badda dhex Maquuranayna ayaa waxaa na asiibay Dabeeylo aad u daran taasoo keentay in Markabkii Qeyb kamid ah dilaacdo oo aan dabadeedna Biyaha ku darsoono.

Intaas kadib anagoo xaaladeena Qatar ku Jirto ayaa waxaa dushayadii soo istaagay Haad Afka ku sido Maro gaduudan oo Xadhig ka sameysan noona soo tuuray, waxaan ku badbaadnay Maradaas gaduudan Xedhigii ku xirnaa oo aan Markabka ku hagaajinay, Markaas waqtigaas ayaan ballan Qaadnay in Maalka saaran Markabka aan Sadaqeeysano si loo gaarsiiyo Cid kasta oo dhibaateysan!!!.

Marka Sheekada ay intaas Marayso, Nebi Daa'uud ( Caleeyhi Salaam ) waxa uu Milicsaday haweenaydii isagoo ku yiri - Rabbigaa waa Mid kugu Irzaaqo Badda iyo Barriga bal arag sida ay wax Noqdeen xaal aad Rabbigaaga ku tilmaantay inuu yahay Daalim, iminka Qaado Xoolahaan oo Caruurtaada ku Quudi!!!.

Si kastaba Dulucda Qisada laga fahmi karo waxa ay tahay inaad Rabbigaa ku kalsoonaato oo aad talada saarato waayo waxaa hubaal ah in Rabbigaa uu kafaala Qaadayo Noloshaada, Ogsoonoow haddii lagu dhaafiyo Sheey aad Jeceshahay waxa xaqiiq ah in laguugu baddalayo wax ka Khayr badan haddii aad la timaado Sabir iyo raali ahaansho badhax tiran!!!.

Hana ka murugoon dhib ku gaadhay, keliyaatana muuji Samir iyo aaminsanaan ah in wax kastaaba ay ku yimaadeen kuna dhaceen qaddarta rabbi (swt), waayo waxa laga yaabaa in sidaasi khayrkuba uu kuugu jiro!!!.

Ahawna mid markasta rajada ka fiiriya xagga wanaagsan, waayo rajada iyo filashadu waxa ay saamayn muuqata ku yeelataa hab-nololeedkaaga!!!.

## NINKII REERMIYIGA AHAA EE NEBIGA (SCW) KA OOHISIIYAY!!!



Maalin Nabiga (scw) isagoo xaalada dadka eeg'eegaya, waxa ay ku howlanyihiina fiirinaya ayuu maqlay nin reer baadiyo ah oo leh: Yaa kariim, Rasuulkuna (scw) wuxuu ku dhahay: Yaa kariim.

Reer baadiyihi wuxuu dhahay: Yaa kariim haddana mar labaad, Rasuulkuna (scw) mar labaad ayuu haddana wuxuu dhahay: Yaa kariim. Kadib reer baadiyihi inta uu fiiriyay rasuulka (scw) ayuu wuxuu ku yiri:- Ninkaagan wejiga furan ee qaabka qurxan inaan reer baadiyo ahay darteed miyaad iigu jeesjeesaysaa, Allaah baan ku dhaartaye wejigaaga furan iyo qaabkaaga toosan ayaan kugu dhaafay ma ahane Nabiga (scw) ayaan kaaga dacwoon lahaa!!!.

Rasuulku (scw) inta uu dhoola caddeeyay ayuu yiri:- Yaa akhul Carab (Walaalka carbeedoow) Rasuulkaaga ma taqaanid miyaa?, ninkii reer baadiyaha

ahaana wuxuu dhahay:- Maya, waan aaminay mana arag, waan rumeeyay mana la kulmin. Wuxuu ku dhahay rasuulku (scw):- ogoow inaan ahay rasuulkaaga adduunka iyo shafiicaaga aakhiro!!!.

Wuu u soo cararay oo jilba jabsaday iskuna dayay inuu gacanta ka shumiyo rasuulka (scw) , kadib Wuxuu rasuulku (scw) dhahay:- ha igu sameyn sida loo sameeyo boqorada Ruum iyo cajamta!!!.

Jibriil (cs) ayaa soo degay oo dhahay:- Salaamu caleyka yaa Muxammad, Rabbigaa wuxuu ku leeyahay ku dheh kan kula jooga yuusan damcin deeqdeena waan xisaabineynaa maalinta Qiyaamo!!!.

Reer baadiyihiina wuxuu dhahay: Illaahey ma I xisaabinayaa Rasuulki Alloow (scw)!!!?, kadibna wuxuu rasuulku(scw) ku dhahay: Haa, insha Allaah!!!.

Wuxuu dhahay: Wallaahi hadduu I xisaabiyo anigana waan xisaabinayaa!!!.

Rasuulkuna (scw) wuxuu ku dhahay:- Maxaad Rabbigaa ku xisaabineysaa yaa akhal Carab!!!?

Wuxuu dhahay: Hadduu dembigeyga igu xisaabiyo waxaan ku xisaabinayaa dembi dhaafkiisa, hadduu igu xisaabiyo bakhiilnimadeyda waxaan ku xisaabinayaa deeqsinimadiisa, hadduu igu xisaabiyo tabar-daradeyda waxaan ku

xisaabinayaa awooddiisa, kadib rasuulku (scw) wuu ooyay illaa ay gerkiisa ka qoysay ilmadii, Jibriil ayaana soo degay oo dhahay: Rabbigaa wuxuu ku leeyahay oohinta jooji, waxaa ku mashquulay malaaikta Carshiga xambaarsan'e, midka kaa oohinayana ku dheh: yuusan na xisaabin ma xisaabineynee wuxuuna noqonayaa rafiiqaaga jannada.

Taasi waa mid kutusinaysa rumaynta dhabta ah iyo darajada lagu gaadho, waana mid ku tusinaysa rumaynta iyo jacaylka dhabta ah ee xabiibkeenna muxammed (scw) iyo darajada aad ku gaadhi-karto, taas oo aan ku koobnayn aakhiro oo qudha, balse aad ku faa'iidayso adduun iyo aakhiroba!!!.

Yaa Allaah!!! naga yeel kuwa rasuulkooda muxamad (scw) ushafeeco qaado maalinta qiyaame, nagana yeel kuwa kula rafiiqa jannada!!!.

## ILAALINTA NIYADDA QOFKA BANI-AADAMKA AH!!!



Maalin Maalmaha ka mid ah ayaa Nin Maskiin ah wuxuu Hadiyad ahaan ugu keenay Nabiga (CSW) Xirmo Canab ah, markaas ayuu Nabigu (CSW) wuxuu Goostay Xabad ka mid ah Canabkii wuuna Cunay, haddana wuxuu Goostay mid kale wuuna Cunay, haddana mid kale illaa uu ka Dhammeeyay Xirmadii Canabka ahayd!!!.

Ninkii Maskiinka ahaa isagoo aad u Faraxsan ayuu baxay asxaabtii la joogtay Nabiga (CSW) mid ka mid ah ayaana ku yiri Nabiga (CSW):- Nabi Alloow sidee baad u wada Cuntay Canabka Adigoo waxna naga Siin!!!?.

Markaas ayuu Nabigu (CSW) yiri:- Canabka uu Ninka i siiyay wuxuu ahaa mid Qaraar waxaan Diiday inaan Wax idinka siiyo oo marka aad Afka Gelisaan Wejigiinu Baddalmo oo aad Sheegtaan ama aad Dareensiisaan inuu Canabku Qaraar

yahay oo uu markaa Niyad Jab ku Dhaco, sidaas darteed ayaan u wada Cunay si aan Farxad ugu Muujiyo oo uusan Niyada uga Jebin Ninkaa Miskiinka ah!!!

Ilaalinta niyadda qofka bani-aadamka ahi waa muhiim, waana arrin ay ina farayso diinteenna suubani, sida aynu qisadan ka dheehanaynona ah arrin uu suubaneheenii muxamed (scw) uu inagu tarbiyadaynayay markii ay dhacaysay qisadan aynu kor kagasoo sheekaynay!!!.

Ku dedaal markasta iyo goob kastaba in aad ilaaliso niyadda qofka bani-aadamka ah, waayo niyadda qofku waa sida dhalada oo kale, dhaladuna hadday jabto lagama yaabo in ay marnaba sideedii kusoo noqoto!!!.

## HESHIISKII SAFWAAN IYO CUMAYR BINU-WAHAB!!!




Cumeyr wuxuu ka mid ahaa dadkii ka qayb galay dagaalkii Badar isagoo la safnaa gaalada, nasiib wanaagse kuma uusan dhiman laakiin waxaa lagu qafaashay wiilkiisa Wahab oo gacanta u galay Muslimiinta. Haddaba Cumeyr wuxuu ka cabsan jiray in ay Muslimiinta u qabtaan wiilkiisa dhibaatadii uu aabihiis u geysan jiray Nebiga (scw) iyo asxaabtiisa waayo wuxuu Cumeyr ka mid ahaa kuwii sida aadka ah u cadaadin jiray Nebiga (scw) iyo asxaabtiisa.

Maalin maalmaha ka mid ah ayna tahay goor subax barqin ah ayaa wuxuu Cumeyr aaday Kacbada si uu u soo dawaafo Kacbada, isla mar ahaantaana u barakeysto sanamyadii yaallay, Markii uu yimi kacbadii ayaana waxa dhacday wuxuu arkay Safwaan Binu Umaya oo ag fadhiya dhagax (Xajarul-aswad).

Cumeyr ayaa salaamay Safwaan isagoo ku yiri "Subax wanaagsan", Safwaan ayaana u jawaabay Cumeyr isagoo leh "Subax wanaagsan Cumeyroow".

Waxaa fur-furantay sheeko, kadib waxay isla soo qaadeen jabkii iyo dhibaatadii ka qabsaday dagaalkii Badar. Waxayna tiriyeen dadkii la qafaashay oo ay qafaasheen Muslimiintu, waxay si murugo leh ay uga sheekeesteen dadkii gaalada ahaa ee ku dhintay dagaalka, dabadeedna lagu guray ceelkii weynaa dhexdiisa, kadib safwaan ayaa hadalkii qaatay oo yiri "Wallaahi kheyr kuwaa gadaashood ma ahaanin". Cumeyr ayaana u celiyay "Haa oo waa runtaa".

Wax yar ayeey aamusnaayeen ka dibna Cumeyr ayaa yiri "Haddayan jirin deyn laygu leeyahay oo aan cid iga gudda aanay jirin iyo carruur aan uga cabsanayo caydh iyo dayac- darro waxaan aadi lahaa Muxammed si aan u soo dilo", Wuxuu haddana si hoos ahaan ah u yiri "heesashada ay heestaan wiilkayga ayaa sabab iiga dhigayso inaan saa yeelo"!!!.

Intaa kadib safwaan ayaa hadalkii ka faa'iidaystay oo wuxuu Cumeyr ku yiri "Cumeyroow waa tan koowaad'e deynta lagugu leeyahay annigaa dusha saartay oo anaa kaa gudaya, tan labaad ee ah ciyaalkana aniga ayaa kuu kafaalo qaadaya noloshooda oo waxay wax la wadaagayaan carruurtayda waayo maalka iyo hantida aan haysto ayaa ku filan dhammaantood raashinka ay cuni lahaayeen"!!!.

Haddaba Cumeyr ayaa hadalkii u riyaaqay oo wuxuu Safwaan ka codsaday in hadalkani uu ahaado qarsoodi Safwaana wuu ogolaaday, Cumeyrna wuxuu ka dhaqaaqay meeshii uu fadhiyay ee Kacbada isagoo cadaawad iyo xiqdi aad u weyn u haya Rasuulka (scw) iyo asxaabtiisa .

Cumeyr wuxuu u diyaar garoobay sidii uu u fulin lahaa ballantii uu qaaday isagoo diyaarsaday qalabkii iyo gaadiidkii uu ku safri lahaa. Dhinaca kale wuxuu xirtay seeftiisii suntu marsanayd, wuxuuna u safray magaalada Madiina isagoo doonaya inuu soo dilo Rasuulka (scw).

Markii uu yimi magaaladii wuxuu aaday dhinaca Masjidka halkaasoo uu joogay Rasuulku (scw), markii uu u soo dhowaaday meel u dhow iridka Masjidka ayaana waxaa arkay Cumar Binu Khadaab oo markaa la fadhiyay qaar ka mid ah Asxaabta iyagoo ka sheekaysanayay dagaalkii Badar iyo wacdarihii ay ku dhigeen gaalada, sida qafaalka ay qafaasheen qaar ka mid ah gaalada, laynta ay laayeen iyo weliba sida uu Ilaah ugu manaystay gar-gaar aad u weyn.

Cumar Binu khadaab ayaa wuxuu deymooday dhinaca Masjidka isla markiina wuxuu arkay Cumeyr Binu Wahab oo ka soo degaya ratigii uu fuushanaa isagoo sita qalabkii dagaalka, Cumar ayaana intuu soo booday yiri isagoo argagaxsan " Eygan waa cadawgii Alle (swt) ee Cumeyr binu Wahab, wallaahi waxaan shar ahayn lama iman".

Cumar wuxuu ku yiri raggii uu la fadhiyay "La socda marka uu u galayo Rasuulka (scw) idinkoo ku hareeraysan kana digtoonaada inuu dhakro ama dilo Rasuulka (scw)", Cumarna wuxuu markiiba u galay Rasuulka (scw) isagoo ku yiri "Rasuulkii Ilaahayow waxaa yimi Cadawgii Alle (swt) ee Cumeyr Binu Wahab isagoo xidhan seeftiisii sumeysnayd, u maleyn maayana inuu u yimi waxaan ahayn Shar".

Rasuulkuna (scw) wuxuu yiri "ii soo geliya"!!!.

Haddaba, Cumar wuxuu soo aaday Cumeyr isagoo qabtay khamiiska uu qabay kuleetigiisa seeftana wuxuu kula xiray qoortiisa ka dibna wuxuu ula yimi Rasuulka (scw), kolkii uu arkay Rasuulku (scw) waxa uu sameeyay Cumarna wuxuu ku yiri "Siidaa Cumaroow".

Rasuulkuna (scw) wuxuu Cumeyr ku yiri:- "ii soo dhawoow". Kadib Cumeyr Binu Wahab wuxuu u soo dhawaaday Rasuulka (scw) wuxuuna ku yiri isagoo salaamaya Rasuulka Subax wanaagsan", Rasuulkuna (scw) wuxuu ugu jawaabay "Ilaah wuxuu nagu maamuusay salaan ka kheyr badan salaantaada waana salaanta ay isku salaamaan Ahlu-jannaha!!!.

Cumeyr wuxuu yiri " Wallaahi adigana kama fogid salaanteenna.

Intaa ka dib Rasuulku (scw) wuxuu Cumeyr weydiiyay sababta uu u yimi, Cumeyrna wuxuu yiri:- " waxaan u imi inaad ii soo deysaan wiilkayga oo aad igaga qafaalateen dagaalkii Badar, Rasuulkuna (scw) wuxuu weydiiyay waxa ku xanbaaray inuu seefta wato haddiiba uuba saa u yimi!!!.

Cumeyr wuxuu yiri:- "inkaar Allaha ku rido seefo oo dhan waayo maxay noo qabatay oo tartay dagaalkii Badar!!!.

Haddaba Rasuulku (scw) wuxuu u sheegay sababta uu u yimi inay ahayd inuu dilo Rasuulka (scw) arrinkaasna waxaa loogu sheegay si waxyi ahaan ah, wuxuuna Rasuulku (scw) Cumeyr ku yiri:- "Adiga iyo Safwaan ayaa waxaad fariisateen meel u dhow dhagaxii ku ag yiillay Kacbada dabadeedna waxaad isku soo

qaaddeen oo aad ka wada hadasheen dadkii gaalada ahaa ee lagu laayey dagaalkii Badar!!!.

Adigaa waxaad tidhi haddii aysan jiri lahayn deyn laygu leeyahay oo aan jirin cid iga gudda iyo ilmo aan uga cabsanayo ceydh iyo gaajo inay u dhintaan, waxaan u kicitimi lahaa sidii aan u soo dili lahaa Muxammed (Rasuulka scw), hase ahaatee Safwaan ayaa kaa xanbaaray deyntaada iyo ciyaalkaaga si aad anniga ii disho,laakiin Ilaah ayaa iga kaa ilaaliyay"!!!.

Cumeyr afkuu kala qaaday oo waxaa ka soo haray fajac iyo yaab dabadeedna isagoo aan hadal kale odhan ayuu yiri "Waxaan qirayaa inaad tahay Rasuulkii Ilaahay!!!.

Guntii iyo gebagebadii arrintaa iyada ahi waxa ay si cad oo shaki la’aan ah kuu tusinaysaa kuuna bayaaminaysaa cadaawada iyo xiqdiga ay mar walba Mushrik, yuhuud iyo nasaara u hayaan shucuubta ama ummada muslimka/muslimiinta ah iyo sidoo kale shirqooolada ay habeen iyo maalinkasta umaleegayaan ummada muslimiinta ah.

Arrintaa illaa xiligaa rasuulka (scw) taagnaydna maaha mid dhamaatay ee waa mid maalin walba, saacad walba iyo sikin walba taagan joogtana. Taas oo inkasta oo aynu leenahay ALLE (swt) inaga nabad geliya haddana laynooga baahanyahay inaynu goor kasta iyo goob kastaba kafeejignaano kana taxadarro!!!.

Ahaw sikin kasta mid feejigan digtoonna, lana socda waxa hareerihiisa kasocda kana dhacaya, waayo feejignaanta sare waxaad kaga bad-baadikartaa shirqoollo badan oo ay cadawgaagu kuusoo maleegeen!!!.

**ALLOW NA ILAALI, ADIGAA WAX ILAASHEE!!!.**

# CUMAR BINU-KHADDAAB IYO GABADHII ADDEECADDA AHAYD!!!




Cumar Bin Al khaddaab (RC) ayaa maalin u yeeray haweeneey kamid ah bulshadii uu xukumayey, Fariintii madaxweynaha ayaa loo geeyey waxaana loo sheegay in ay timaaddo madaxtooyada. kadib markii warkaa loo keenay aad ayay u naxday, iyadoo ka fekeraysa sababta uu ugu yeerayo madaxweynuhu, intii ay soo socotay ayayna welweshay oo su'aalo badan isweydiisay, Xaamilo ayayna ahayd, kadib wiil meyd ah ayay soo tuurtay!!!.

Warkii waxa uu gaaray madaxweyne Cumar ( r c) oo sugaya gabadha uu u yeeray, raggii la joogay oo asxaabta nabiga (scw) u badnaa ayuuna weydiiyey bal in gabadhaas uu u yeeray ee ilmaha dhicisay uu wax mas'uuliyad ku leeyahay iyo inkale!!!?.

Maya, Wax sabab ah si toosan iyo si dadbanba uguma lihid dhicinta gabadhaas in aad u yeertana xaq ayaad u leedahay ayayna ugu jawaabeen!!!.

Cali Bin Abii Daalib (RC) ayaa yimid, kadib Cumar Bin Al khaddaab ( r c ) ayaa dhacdadii dhiciska u sharraxay kadibna weydiiyey bal in gabadhaas uu u yeeray ee ilmaha dhicisay uu wax mas'uuliyad ah ku leedahay iyo inkale, calina (rc) wuxuu yidhi:- Magta ilmaha adiga ayaa lagugu leeyahay ee iska bixi sababta oo ah adiga oo wata magaca madaxweynaha dowladda Islaamka ayaad u yeertay haybaddaada iyo cabsida ay ka qaadday ayaana sabab u ah dhicinta gabadhaas, Cumarna ( r c ) inta uu garowsaday ayuu Cali qudhiisa faray in uu diyada soo uruuriyo!!!.

Taasi waxa ay si cad kuu tusinaysaa waagii ay ummada muslimiinta ah utalinayeen hogaamiyayaasha dhabta ahi, aanay go'aan qaadashada iyo go'aan gaadhista isku koobi jirin keligood, xattaa hadii ay tahay arrin iyaga saamaynaysa, go'aanku uu yahay bulshada ay xukumayaan mid gacantooda ku jira sida aynu kadheehanayno qisadan!!!.

Hoggaamiye kastaana waxa uu noqdaa mid ummadda uu utalinaayo kudhexleh sumcad, sharaf, karaamo iyo qaddarin haddii uu go'aanka iyaga dib ugusoo celiyo uuna tusiyo una muujiyo cidda go'aanka kama dambaysta ah qaadanaysaa, gaadhaysaana ay iyaga tahay!!!.

## HAWEENAYDII CABANAYSAY IYO CUMAR BINU-KHADDAAB!!!




Qof Dumar ah ayaa Maalin maalmaha ka mid ah u timid Cumar bin khaddaab (R C) waxeyna ku tiri:- Amiirkii Mu'miniintow Ninkeygu waa Nin aad u Qiima badan sababtoo ah Maalintii oo dhanna wuu Soomaa Habeenkiina wuxu u taagan yahay salaatul Leyl!!!.

Intaas markey mareyso ayey ka Xishootay iney sheegto Dantii ay ka lahayd Amiirka weyna iska baxday, Amiirkiina ma uusan Fahmin Gabadhu Ujeedadii ay lahayd hase yeeshee Saxaabi ag joogay Cumar bin Khaddaab (r c) ayaa ku yiri:- Yaa Amiiral Mu'miniin gabadhu wey kuu soo Cabataye maad Xalisid Dhibkeeda!!!?.

Cumar bin Khaddaab (r c) isagoo yaaban ayuu Saxaabigii ku yiri:- sidee ayey iigu Cabatay bal ii sheeg!!!?, Saxaabigii ayaana yiri:- Gabadhu waxey ka

Cabanaysaa Howsha Gogosha ee Ninkeeda waxeyna kugu tiri:- Ninkaygu Habeen iyo Maalinba Cibaado ayuu ku Mashquulsan yahay oo Howshii Qoyska kama helo!!!.

Cumar (r c) ayaa yiri:- Walaahi adiga ayaaba Fahmay Ruux aan adiga ahayna ma Xukumaayo Gabadha Arrinteeda ee bal Xukun adigu!!!.

Saxaabigii ayaa yiri:- Ninka waxaan ka soo Qaadeynaa inuu leeyahay Afar Xaas, Ninka Afarta Xaas leh wuxuu Xaaskiisa Afaraad ka Maqnaadaa Saddex Maalmood Maalinta Afaraadna wuu u yimaadaa, markaa Ninkaasi ha Cibaadaysto Saddexda Maalmood ee kale Habeen iyo Maalinba, Maalinta afraadna Gabadha Xaqeeda ha siiyo oo ha Qanciyo!!!.

Cumar (r c) ayaa aad ula yaabay Saxaabiga Caqligiisa iyo Ra'yigiisa wuxuuna ku yiri:- Xukunkaaga ayaaba ka sii daran Fahankii aad markii hore Fahantay Gabadha Cabashadeeda oo aanan Anigu Fahmin, Saacaddaa laga bilaabona waxaad tahay Guddoomiyaha Gobolka Basra, wuxuuna Casilay Guddoomiyihii hore ee Gobolka Basra, wuxuuna ku Beddelay Saxaabigan dambe oo Arrintan Go'aamiyey, wuxuuna Saxaabigaasi ahaa Kacab Ibnu Suraara (rc) ujeedada uu cumar (rc) sidaa usamaynayayna isaga ayaa u xogagaal ahaa!!!.

Garashada iyo garaadku kuma salaysna mansabka ama booska shaqo ee aad markaas joogto ama hayso, halkuseegay ayuuna mid kale helayaa oo aanu seegayn, guushaaduna waxa ay ku jirtaa in aad arintaa iyada ah yaqiinsato taladana aad waxkasiiso kuwa kaa ag dhaw!!!.

**ALLOW TALADA SAN NAWAAFAJI!!!.**

## HOGGAAMIYAHA WANAAGSAN IYO SIDA UU UGU DAMQADO UMMADDA UU MADAXDA UYAHAY!!!




Cumar Binu Khaddaab ( ilaahay ha ka raali noqdee) xilligii Amiirkii Muslimiinta uu ahaa ayaa Habeen habeenada ka mid ah waxaa dhacday in uu dhex qaaday xaafad ka mid ah xaafadaha Madina al-Munawarrah si uu u ogaado dareenka iyo dhibaatada dadkiisa, dabeedna isagoo wata socodkiisii ayaa wuxuu maqlay oohin waxaana uu ku leexday gurigii ay kasoo baxaysay oohintu!!!.

Markaas ayuu waxuu arkay haweenay iyo caruurteeda oo oynaya iyo digsi dabka saran, Kadib ayuu haweenaydii weydiiyay waxa keenay oohinta caruurta, Gaajo in ay hayso ayayna u sheegtay Amiirka.

Haddaba digsiga maxaa saaran ayuu haddana weydiiyay, Biyo caruurta lagu sasabo ayaa saaran ayayna ugu jawaabtay, Maysan garana inuu ninka la hadlayo yahay Cumar (r c), waxayna bilowday inay eed dusha uga tuurto Cumar (r c) iyada oo ku eedaysay inuu iska indha tiray dhibka haysta iyada iyo caruurteeda. Cumar (r c) oo aan wali isu sheegin ayaana markaa weydiiyay waxa uu u qaban karo asaga oo markaas illin badan ka qubanayso!!!.

Haweenaydii ayaa u sheegtay inay waajib tahay Cumar (r c) inuu ogaado dareenka ummaddiisa maadaamo uu yahay Amiirkooda!!!.

Cumar (RC) oo uu la socdo gacan yarihiisii Aslam ayaa markaas soo aaday dhanka magaalada illaa uu gaaray Baytul Maalkii Markaas ayuuna bilaabay inuu soo raro cunto kala duwan saliid, bariis, subag iyo xogaa lacag ah, kadib markuu jawaankii buuxiyay ayuu ka codsaday Aslam inuu dhabarka u saaro, Aslam ayaana diiday asaga oo ka xishooday inuu Amiirka Muslimiinta jawaan buuxo dhabarka u saaro!!!.

Cumar (r c) ayaa ku adkaystay kuna yiri Aslam:- “Ma adiga ayaa Maalinta Qiyaamaha culayska iga qaadi doona, Waa inaan aniga xanbaaro jawaankan maadaama Maalinta Qiyaamo aniga la i waydiin doono”!!!.

Aslam ayaa markaas Cumar (r c) u saaray dhabarka iyaga oo bilaabay inay aadaan dhankii guriga haweenaydii baahnayd, Markii ay tageen gurigii ayuuna

Cumar (r c) digsi ka buuxiyay raashin illaa uu ka bislaado haddana u soo riday ama u soo guray carruurtii iyaga oo ka dhargay isla markiina bilaabay cayaar!!!.

Haweenaydii oo aad u faraxsan ayaa Cumar (r c) ku tiri: "wallee adaaba ka fiican Amiirka Muslimiinta", Cumar (r c) oo aan wali isu sheegin ayaana ku jawaabay:- "Hadaad aniga iga soo war doonto waad arki doontaa Amiirka Muslimiinta insha'Allah." Kadib ayuu iska fariistay isaga oo fiirsanaya carruurtii oo cayaar gashay!!!.

Kadib cumar (r c) Intuu Aslam jaleecay ayuu yiri:- "Ma ogatahy waxa igu keenay inaan halkan fariisto!!!?, cabbaar ka hor carruurtaan way ooyaysay iminkana way qoslayaan oo cayaar ayay ku jiraan kadib inaan iska fiirsado faraxooda ayaan jeclaystay ayuu usii raaciyay!!! .

Walaal qisadan waxaan cashar ahaan uga baran karnaa hogaamiyaha wanaagsan iyo sida uu ugu danqado ummadda uu madaxda u yahay isla markaana uga warqabo xaaladaha ay ku noolyahiin gaar ahaan dadka masaakiinta ah ee aan waxba heysan, hoggaamiyaha dhabta ahina waa ka kusifooba arrimahaa iyaga ah!!!.

Sida uu suubaneheennu (scw) inoo sheegayna hoggaamiyaha caadilka ahi waxa uu kamid yahay kuwa hadhsada hadhka ALLAH (swt), maalinta aanu hadhkiisa mooyee hadh kale jirin, hoggaamiyayaasha qaaciidada samafalka iyo caddaaladda ku shaqeeyaana waa kuwa if iyo aakhiroba liibaana!!!.

## HOGGAANKA FIICAN IYO QIIMAHA UU ULEEYAHAY BULSHADDA!!!




Cumar Binu Khaddab (Alaah Haka Raali Noqdee) Ayaa Wuxuu Ka Dalbay Reer Ximis In Ay Usoo Qoraan Magacyada Fuqarada Iyo Masaakiinta Ku Nool Magaalada Si Uu U Siiyo Qaybta Ay Ku Yesheen Beetul Muslimiinka, kadib markay Soo Gudbiyeen Magacyadii Wuxuu Ka Dhex helay Liiskii Waaligii Magaalada Ximis Saciid Binu Caamir (Alaah Haka Raali Noqdee) !!!.

Waa La Yaabay, waxaana lala yaabay saciid (Alaah Haka Raali Noqdee) In Uu Ka Mid Noqdo liiskii Fuqarada MuslimiinTa ee cumar binu khaddaab (Alaah Haka Raali Noqdee) dalbaday, markaasuu cumar binu khaddaab Wuxuu Su'aalay Sababta Uu Uga Mid Noqday liiska Fuqarada Muslimiinta saciid binu caamir!!!.

Kadib waxay U Sheegeen Sababta Uu Uga Mid Noqday In Ay Tahay "Wuxuu Bixiyaa Dhammaan Mushaharkiisa Oo uu Siiyaa Fuqurada Iyo Masaakiinta, Haddii Lagu yiraahdo Maxaa Kugu Qasbayana Wuxuu Dhihi Maxaan Sameeyaa Waxaan Ahay Masuulkooda'e Waana la iSu'aali maalinka Qiyamaha'e'', intaana waxa ay sii raaciyeen laakiin Amiirku Wuxuu leeyahay Saddax Ceebood Oo aanu Ku Aragnay!!!.

Midda Kowaad'e Gurigiisa kama Soo Baxo Illaa Barqadii Mooyee, Midda labaad Habeen Oo Dhan LaMa Arko, Midda Saddexaade Wiigii Maalin Lama Arko, Saddexdaa Ceebood Ayaan ka Haynaa!!!.

Kadib Cumar binu khaddaab (Alaah Haka Raali Noqdee) Wuxuu Waydiiyey Waaligii Ceebihii Lagu Soo Eedeeyey Wuxuuna yiri Saciid Bin Caamir (Alaah Haka Raali Noqdee):- waa Run Amiir Asbaabta keentay Ceebahana Waa Sidan: Midda In aan Soo baxin Barqadii Waxaan U Khidmeeyaa Ehelkayga Maxaa yeelay Ma lihi khaadim noo khidmeeya xaskaygana Waa Jiroolay, Midda labaad ee Aanan Soo bixin habeenkiina Maalinkii Oo Dhan Ayaan U Taaganahay xaajadooda habeenkiina Waxaan Gutaa Cibaadada Allaah (s w t), Midda saddexaad ee ah in aanan Soo bixin Isbuucii Maalin Waxa weeye Waxan Dhaqaa Maalinkaa Maradayda Oo Waxaan Sugaa Inta ay Ka Qallalayso Maxaa Yeelay Mahaysto Maro kale Oo aan Iskaga Baddalo!!!.

Kadib waa ooyey Cumar (Allaah haka Raali Noqdee)

## IRRIDAHA GUUSHA {2}

Taasina waa mid ku tusinaysa hogaamiyaha dhabta ah kana cabsanaya allah (s w t) iyo sida uu isaga ilaaliyo isagana dhawro hantida iyo maalka ummada ee uu gacanta ku hayo, wuxuuna isaga ilaaliyaa in xattaa ay wax yar oo ilimaqabatay ahi ay ugasoo gudubto sida qofka salaad saxa ahi uga ilaaliyo ugana dhawro in maradiisa In yar oo nijaas ahi soo gaadho!!!.

Waana kaas hoggaamiyaha if iyo aakhiroba liibaanay, dunidana kaga tegaya sumcad, sharaf, karaamo iyo qaddarin, aakhirona qaba filasho wacan!!!.

# CALI BINU ABUU-DAALIB IYO NINKII YUHUUDIGA AHAA!!!




Xilligii uu khaliifka muslimka ahaa cali binu abii daalib (RC) ayaa waxaa dhacday in nin yuhuudi ah uu qaatay maro (khamiis) ah oo uu lahaa cali binu abii daalib, markaas baa Cali (RC) ku Arkay Maradiisii Nin Yuhuudi ah, waxuuna ku yiri:- Maradaan Anigaa leh ee isii!!!?, ninkii yahuuda ahaa ayaana yiri:- Ma lihid ee Maxkamadda ina geey meeshaas ayaan ku kala baxeynaa’e,(Bal u fiirso Qofka uu sidaa leeyahey Waa Amiirul-muminiin)!!!.

Cali (RC) ma uusan Xanaaqin mana uusan Dhihin Anigoo ah Amiirul mu'miniin miyaad sidaas i Leedahay ee si Tartiib ah ayuu u Raacey Dhankaa iyo Maxkamadii, maxkamadii markii la tagey ayaana Cali (RC) lagu yiri:- Marqaati ma Heysataa oo Cadeeynaaya inaad Adiga leedahey Maradan!!!.

Ka dib Cali (RC) baa yiri:- Marqaati aan ka aheen Wiilkeyga ma Heesto, Qaadigii Maxkamada ayaana yiri:- Wiilkaaga Marqaati makuu noqon karo ee iska Tag, ninkii yuhuudiga ahaa baana loo Xukmiyey in Marada uu leeyahey!!!.

Kadib yahuudigii aad ayuu ula yaabey Cadaalada meeshaan Taala iyo sida aan looga kala Hiilinin Asaga oo ah Yuhuudi iyo Amiirkii Mu'miniinta oo dhan, kadib ninkii Yahuudiga ahaa Markuu arkay arrintaa iyada ah ayuu isla goobtii ku Islaamay isagoo dhahaayo:- Laa'ilaaha ilalaahu Muxamad rasuulullaah (s c w), isla maarkaana wuxuu yiri:- Maradana waxaa iska leh Cali bin Abii Daalib (RC) ee hala siiyo anigana waan islaamay!!!.

Xukunka islaamka caddaaladda waa loo simanyahay madax iyo minjoba, waxaana daliil cad inoogu filan qissadan iyada ah ee aynu kor kusoo xusnay, mana aha caddaaladdu marka kiis laga xaqsoorayo mid latixgeliyo arrimaha sida:- mansabka siyaasadeed, heerka dhaqaale, heerka aqooneed, qabiilka ama qoomiyada ama asalka ama jinsiga qofka taas oo inbadan maanta kadhacda goobaha caddaaladda ee waddammo badan oo muslimiin ah, aarintaas oo runtii wax laga xishoodo lagana yaq-yaqsoodo ah.

Qof kasta oo qof sida mansabka siyaasadda ama aqoon ahaan uu ka sarreeyo ay isla aadaan caddaaladdana waa in aanu ufahmin in ay jirto wax uu qofkan kale dheeryahay ama kaga sarreeyo, fahmona in caddaaladda loo simanyahay!!!.

Is dhul-dhigguna waa mid kordhisa, korna uqaadda sharafta iyo karaamada qofka bani-aadamka ah!!!.

**ALLAHAYOW CADDAALADDII UMMADDA MUSLIMIINTA AH NOOSOO NOOLEE, YAA RABBAL-CAALAMIIN!!!.**

## FADLIGA TASBIIXDA !!!




Saxaabiga Coof Bin Maalik (r c) Ayaa Wuxuu Aaday Rasuulka (Scw) Markaasuu Wuxuu ku yidhi:- Rasuul Alloow Wiilkaygii Maalik Adiga Ayuu Kuu Raacay Duulaaan Mana Soo Laaban Ciidankii Oo Dhan Waa Ay yimaadeen Ee Maxaan Sameeyaa Rasuul allow, markaasuu Rasuulku (Scw) Ku Yiri:- Yaa Coowf Badiya Adiga iyo Xaaskaagaba Laaxawla Walaa Quwata Illaa Billaah!!!.

Coowf (r c) Wuxuu Aaday gurigiisii Oo uu Kaga Yimi Xaaskiisa Oo Kaliya, Markaasay Xaaskii Waxay Ku Tiri:- Rasuulka Alle (Scw) Muxuu Ku Soo Siiyey, Wuxuuna ku yidhi Rasuulka Alle (scw) Wuxuu Inoo Dardaarmay Aniga Iyo Adigaba In Aan Badino Laaxawla Walaa Quwata Illaa billaah!!!.

Markaaysay Waxay Tiri Gabadhaa Muminada Ah Ee Saabirada Ah Run Ayuu Sheegay Rasuulka Alle (Scw), Markaasay U Fariisteen labadoodiiba In Ay Aqriyaan Dikri Laxawla walaa quwata Illaa Billaah, markii La Gaaray Habeenka Galinkii Danbe Oo Ay Shanqartii Yaraatay Ayaana Alaabkii La Soo garaacay, Coowf (r c) Waa kacay Albaabkii Ayuuna Furay, mise Waaba Wiilkiisii Maalik Oo Wata Tira Ari ah Oo Uu Ka Soo Qaniimaystay Mushrikiintii!!!.

Markaasuu Coowf (r c) Waydiiyey Wiilkiisii Maalik Sida Ay Wax U Dhaceen Wuxaanuu ku Yidhi Maalik Aabe Cadawgii Ayaa i Qabtay Waxayna igu Xireen Silasilad, aadbay iigu aadkeeyeen Marka La Gaaray Habeenkii Ayaan Waxaa Damcay In aan Baxsado Laakiin Waan Kari waayey Silsilada Xoogeeda iyo Culayska Ay Lahayd, ka Dib Aabe Waxaan Dareemay Silsiladii In Ay Iga Furmayso, Waan yaabay Mana U Jeedo Waxa Iga Furaya Ka Dib gacmihii Iyo Lugihii Ayaan Kala Baxay, Aabe Waa Kaa Aan Idinkeenay Qaniimadii Mushrikiinta!!!.

Maasha allaah Markaasuu Wuxuu yiri Coowf (r c) Wiilkaygiyoow Masaafada Inoo Dhaxeysa Anaga iyo Cadawgaa Aad bay U Fogtahay, Sideed Ku Soo Jartay Masaafadaa Intaa leeg Saacado Gudahood!!!.

Wuxuu yiri Maalik Aabe Markay Silsiladii Iga Furantay Waxaan Dareemay In Malaaik Ay i Xanbaarayso Subxaanallaah, ka Dib Coowf (r c) Rasuulka (scw) Ayuu U Tagay Inta Uuna uwarramin Ayaana waxa dhacday Rasuulku (Scw) Wuxuu ku yidhi:- Yaa Coowf  Bisharayso Allaah (swt) Ayaa Wuxuu Ku Soo Dajiyey Arrinkiinna Aayad Quraan Ah !!!.

Allaah (swt) Wuxuu yidhi:- "Qofkii allaah Ka Baqa Waxa loo yeelaa Makhraj Waxaana laga Arzaaqaa Meel uunan Filayn''!!!.

Walaal Ogoow Laaxawla walaaquwata illaa Billaah In Ay Tahay Kanzi Ku yaalla Carshiga Allaah (swt) Hoostii Waxayna Dawo U Tahay Cuduro badan Ee Dheh Walaal Laaxawla walaa quwata Illaa billaaah Waxaa laga yaabe in uu Allaah (swt) kaaga Feedo Kurbo Ku haysa'e, lagamana yaabo in marna haba yaraatee aad ku qasaarto xuska allah (swt), xittaa haddii aanad ifka kula kulmin fadliga xuskaasna waa mid ajarkiisa iyo xasanaadkiisu uu kuusii yaallo aanaad ugu tegi doonto daarta danbe ee aakhiro!!!.

# ARDAYGII FAQIIRKA AHAA IYO SH. SULAYM AL-SUYUUDI!!!



Xusuus qor uu lahaa Alle ha u naxariistee Sheikh Ali Dandaawi ayaa mid ka mid ah qoraalada ku qoran waxaa uu kaga hadley qisso dhab ah oo beri hore ka dhacday Magaalada Dimishiq ee dalka Suuriya waxaana uu qoraalkiisa ku bilaabey sidan:-

Waxaa ku yaalay Magaalada Dimishiq ee dalka Suuriya Masjid weyn oo la yiraahdo "Jaamic Al Tawbah" waxaana Masjidkan uu ku ooli jirey meel macaasida lagu sameyn jirey berigii hore ka dibna waxaa iibsadey mid ka mid ahaa Boqorradii qarnigii toddobaad ee Hijriyada intuu dumiyey ayuuna Masjidka ka dhisay!!!.

Masaajidka waxaa joogi jirey sheekh da'diisu ilaa 80 jir ku dhawdahay magaciisana waxaa la oran jirey Suleym Al Suyuudi iyadoo dadka degan xaafadana ay aad ugu kalsoonaayeen waxii ku saabsan arrimaha diintooda iyo aduunyadooda la xiriiraba waa ayna kula noqon jireen.

Sheekha waxaa la joogi jirey Ardey aad u dhawrsi badnaa oo aan waxba heysan, masjidka ayuuna seexan jirey, dabeed waxa soo marey ardeygaas inuu laba maalin waxba cunin inta badana maba heli jirin wax uu cuno, maalintii seddexaad ayuu ardeygii is yiri waad dhimaneysaa dabeedna waxa uu ku fekarey waxuu sameyn lahaa, markaasuu waxuu is tusay in ay u banaantahay inuu wax xado si uu naftiisa u bad baadiyo!!!.

Masaajidka waxuu ku yaaley xaafado qadiim ah guryaha berigii horena waa xiriirsanaayeen oo dhinaca ayey isku wada hayeen qofkuna waxuu awoodayey intuu guri fuulo ama koro uu xaafada oo dhan isku maro!!!.

Ardeygii masaajidka ayuu dusha sare ka fuuley ka dibna waxuu ku dul socday xaafadihii isku dheganaa, markaasaa indhahiisu waxa ay ku dhaceen dumar ka dibna waa uu ka il laabtey ama ka jeedsadey oo wuu ka fogaadey, dabeedna waxuu arkey guri cidla ah oo ay kasoo baxeyso Carafta cuntada, gaajadii heysay darteed sidii birlabta oo kale ayaa gurigii loogu jiidey markaasuu gurigii kor ka dalooliyey ka dibna jikadii ayuu galey digsigii dabka saarnaa ayuuna daboolka ka qaadey mise waxaa kar karaya hilib!!!.

Kadib midbuu lasoo baxey oo qaniiney markaasaa caqligiisii iyo diintiisa islaamka u soo noqdey,dabeedna waxuu yiri "ACUUDU BILLAAH" ma anigoo ah nin cilmi leh oo masaajidka degan ayaan guryaha dadka u dhacayaa oo xadayaa?, waxuu sameeyey ayaana la weynaadey ka dibna waa Istiqfaarsadey waxuuna dherigii ku celiyey hilibkii, ka dibna waxuu kusoo noqdey masaajidkii iyo sheekhii oo dersi bixinaya, kadib sheekhii ayuu iska ag fariistey isagoo aan awoodin inuu maqlo waxa uu sheegayo sheekhu!!!.

Kadib gaajo awgeed Markii uu dersigii dhamaadey ee ay dadkii kala dareereen ayaa waxaa sheekhii u timid haweenay asturan, dabeedna sheekhii bey la hadashey hadal uusan maqleyn ardeygii, kadibna sheekhii ayaa soo jaleecay ama eegay dhinaca ardeygii, keligiis ayuuna arkey inuu ka joogo ardeydii markaasuu u yeeray waxuuna ku yiri reer ma leedahay?!!!.

Kadib ardaygii wuxuu yidhi "Maya" misana sheekhii ayaa mar labaad ku celiyey oo ku yiri reer ma dooneysaa?, ardeygii ayaana intuu cabaar uu aamusay ayuu ku yiri:- macalinkeygiiyow waxaan Rooti siisto ma heysto markaa maxaan ku guursadaa?!!!.

Sheekhii waxuu ku yiri haweentani waxa ay ii sheegtay in ninkeedii uu dhintey Magaaladana ay ku cusub tahay cidna uma joogto aan adeerkeed oo nin weyn ka aheyn waana uu la socdaa haatan waxaana ay dhaxashey gurigii ninkeeda iyo xoogaa hanti ah waxaana ay dooneysaa nin ay ku guursato Sunada Rasuulka ( SCW ) si aysan keli u noqon oo aysan markaa u damaacinin dadka xun-xun ee ma rabtaa inaad guursato!!!.

Ardeygii waxuu yiri "Haa", kadibna sheekhii haweeneydii ayuu weeydiiyey waxuuna ku yiri ninkan adiguna ma rabtaa gabadhyahay?, waxaana ay ku tiri "Haa", dabeedna adeerkeed buu u yeeray iyo laba marqaati ah meherkiina sheekhii ayaa ka dhiibey, waxuuna ku yiri qabso ninkaaga ka dibna gacantiisa ayey qabsatey oo gurigeedii la aadey, markii gurigii ay gashey ayna iska fayday wejiga, mise waa gabar dhalinyaro ah oo aad u qurux badan!!!.

Ninkii gurigii ayuu eegay mise waaba gurigii uu goor dhaweyd lahaa ka xad hilibka, dabeedna waxa ay gabadhii ku tiri:- wax ma cuneysaa markaasuu ku yiri:- "Haa", kadib jikadii bey gashey iyadoo daboolka ka qaadeysa digsigii ayeyna waxa ay tiri cajiib badanaa yaa guriga soo galey maanta!!!.

Ardeygii waa uu ooyey ama ilmeeyey qissadii ayuuna uga sheekeeyay xaaskiisa cusub waxaana ay ku tiri:- tani waa " MIRAHA AMMAANADA" waayo waxa aad ka dhawrsatey inaad cunto oo ka dheregto Hilib xaaraan ah markaasaa ILAAHEY ( S W T) waxuu ku siiyey gurigii dhammaa iyo gabadhii laheyd si xalaal ah!!!.

Tanina waa miraha ALLE kacabsiga iyo kadhawrsoonaanta maxaariimta, waana hubaal marka aad shay uga tagto ALLAH (SWT) dartii in ALLAH (SWT) uu kuugu beddeli doono wax ka khayr badan!!!.

**ILAAHAYOW ADIGAA WAX HANUUNIYA EE NA-HANUUNI, YAA RABBAL CAALAMIIN!!!..**

## IBNU-SIIRIIN IYO WIILKII YARAA!!!



IMaamu Ibnu-Siiriin Wuxuu yiri:- Waxa aan Soo galay Masjid Ka Mid ah Masaajidda Ka Dib Waxaan Arkay Ayuu yiri Wiil yar Oo Aan Cumrigiisa Ka Badnayn 10 Sanno oo Tukanaya. waxaad Mooddaa Geed Timireed Sida Uu u Taagan yahay Oo Uu U Hagaajinaayo Salaaddiisa Qushuuca Iyo DagganaanTa Ka Muuqatana Waan Yaabay ayuu leeyahay sheekhu!!!.

Waan yaabay Sida Uu Ugu Xasilaayo Sajuudda Iyo Rukuucda Wax Loo dhigo Ma arag ayuuna yidhi sheekhu!!!.

Markuu Dhameeystay Salaaddii Ayaan UDhawaaQay Oo aan Ku Iri Ii Kaalay Wiilkeygiiyoow ayuu yidhi sheekhu, kadib waa ii yimid Waxaanan Ku Iri Ina Ayaa Tahay, wuxuuna yiri Waxaan Ahay ogoon Hooyo Iyo Aabena Midna Ma lihi.

## IRRIDAHA GUUSHA {2}

Kadib waxaan Ku Iri Maku raali Noqonee IMaam Imaamyada Muslimiiinta Ka Mid ah in uu Kuu noqdo Aabo iyo Hooyo, wiilkiina Wuxuu yiri:- Waa Ogolahay Laakiin Waxaa Ku Xiran Shan Shuruud!!!.

Halkaa markay xaaladu maraysay Imaamkii Waa Yaabay Wuxuuna yiri:- Shuruudaha Maxay Yihiiin Bal ii sheeg, ka dib wuxuu yiri:

1) Ma I Quudinaysaa Haddii aan Gaajoodo, Imaamkiina Wuxuu ku yidhi:- Waan Ku Dhargini Illaa aad Ka Dharagto!!!.

2) Ma I Waarabinaysaa Haddii Aan Oomo, Imaamkiina Wuxu yidhi:- haddana Haa!!!.

3) Ma Ii Gadee Dhar Hadduu Dharkayga Dhamaado, Imaamkiina Wuxuu yiri:- Haa Waxaan Kuu gadi Dharka Kan ugu Quruxsan!!!.

4) Ma I CaaFinaysaa Haddan Xanunsado, Imaamkiina Wuxuu yiri:- Waan ku Tacaali Jiradaada, Waxaanaan Kuu Keeni Dhaqtar Ku Daweeya SababTiina Ayaan la imaani Allaana ( s w t) Kugu CaaFini Oo laga Sugi CaaFimaad!!!.

5) Ma Isoo Nooleeynee Haddaan DhinTo, Imaamkiina Wuxuu yidhi:- Middaa Maya, Maxaa yeelay Nolosha Iyo Geerida Allaah ( s w t ) ayaana Haya!!!.

Bal Fiiriya WalaalaYaal Wuxuu Ugu JawaaBay sheekha Wiilkan Yar Ee aan Gaarin 10 Sanno, Waa Hadal Cajiib ah!!!.

Wuxuu yiri War Nin Yahoow Haddaadan I CaaFin Karin Haddaan Xanuunsado Oo aadan I Soo Nooleeyn Karin Haddaan DhinTo Iga Tag, Imaaamkiina Wuxuu yiri:- Xaggeen Kaaga Tagaa!!!.

Wiilkii Wuxuu Yiri Iiga Tag Allaha I Abuuray Ee I hanuninaya, Allaha IQuudiya I Waraabinayana Markaan Gaajoodo Oo aan Oomo, Iiga Tag Allaha I CaaFiya Marka Aan Jirrado, Imaamkiina Wuxuu Yiri:- Laa illaaha illallaah Ka Dib Wiilkii Waa Tagay!!!.

Allaah Subxaanah WaTacaalaa Ayuu Tala Saartay Asagaana Ku Filan, WalaalaYaal QoFka Muslimka Ah Waxaa Looga Baahanyahay In Uu Allaah (swt) Uu Ku KalSoonaado Oo yaqiintaas oo kale ay Qalbigiisa gasho, markaas ayuuna noqonayaa mid noloshan adduun ee gaaban ku qaata kuna dhammaysta intii rabbi (swt) uu uga qoray raaxo iyo qanaacad wanaagsan!!!.

# WIILKII YARAA EE ALLE KACABSIGA BADNAA!!!



Imaam Abuu-Xaniifa (RC) Iyo Rag Asxaabtiisa ka Mid Ah Baa Iyagoo u Socda Masaajidka Waxay Soo Mareen Cunug Yar oo Meel Webi ah ku Weysaysanaaya Oo Aad U Ooynaya, kadib Abuu Xaniifa ayaa Weydiiyey sababta uu La Ooyaayo cunugii yaraa?, wuxuuna yidhi Cunugii yaraa:- lImaamow iska kay daa oo Faraha iga Qaad, waxaan la Oynayo Illaah keliya uunbaa Ila Oge, Imaam Abuu Xaniifa ayaana mar Labaad Su'aashii ku celiyey cunugii yaraa?!!!.

Kadib ayuu wiilkii yaraa wuxuu ku yidhi abuu-xaniifa:- Qur'aanka Ayaa Waxaan Ka Akhriyey Aayad Dhahaysa **(Naarta ka dhowrsada taasoo lagu Hurinayo Dadka & Dhagaxa oo loo diyaariyey Gaalada)!!!.**

Kadib Imaamkii ayaa ku yiri:- Hadalkaagu waa Sax Wiilkeygiyow, Laakiin weli waad Yar tahay oo Aayadaasu Adiga ku qaban mayso, Cunugii yaraa ayaana ku jawaabey:- Imaamow markaynu Rabno inaan Dab Shidano Sow Xaabada teeda Yaryar Dabka kuma Hurino ka hor intaan teeda Waaweyn ku Shidin ?, Ka dib Imaam Abuu Xaniifa Raggii la socdey intuu Fiiriyey buu ku yiri:- Ilaah baan ku dhaartee Cunugaan yari intaan Ilaahey ka Baqeyno in ka badan ayuu ka Baqayaa!!!.

Walaal alle kacabsigu yaraan iyo waynaan makala laha, waxaana laynooga baahanyahay in aynu ubadkeenna yar-yar ku tarbiyadayno diin teena suuban iyo axaadiista rasuulka ( s c w ) inta ay ku jiraan marxaladda carruurnimada, si hadhaw uu uwaynaado isaga oo ah qof xooggan oo awood iyo baawarba leh, hadday noqoto xag iimaan iyo xag dhaqanba!!!.

Ubadkaaga oo aad ku tarbiyadayso dhaqan wanaagsan iyo akhlaaq wanaagsanna waa mid kamida guulaha ugu waawayn ee laga gaadho nolosha adduunyo iyo aakhiraba!!!.

## KADHEEROW MALAHA!!!



Suldaankii dawladdii cusmaaniyiinta u talinayey intii u dhaxaysay sannadihii 1623-kii ilaa 1640-kii ayaa waxyaabaha lagu bartay intii uu xukunka hayay waxaa ka mid ahaa inuu u kuur galo oo ka war hayo xaaladaha ay ku sugan yahiin dadka masaakiinta ah.

Haddaba waxaa dhacday in xili fiid ah uu dareemay walaac waxaana uu go'aan saday inuu u yeero ilaaladiisa gaarka ah dabeedna dibada ayuu u soo baxay, markaas ayuu waxuu la kulmay meel dadku uu ku buuqsan yahay waxuuna arkay nin dhulka yaala, Suldaankii ayaana soo dul istaagay balse ninku mayd ayuu ahaa, mana jirin cid danaynaysa arrimaha ninka dhulka yaal, qof kastaana hawlahiisa gaarka ah ayuu ku mashquulsanaa!!!.

Ka dibna suldaankii ayaa qaar ka mid ah dadkii wadada marayey weeydiiyay:- " Maxuu ahaa ninkan dhulka yaala oo aanay jirin cid ka murugooneysa

? Meeyayse reerkiisii ?, dadkii ayaana waxa ay ku yiraahdeen "Ninkaan aad iyo aad ayuu khamriga u cabi jiray waana uu sinnaysan jiray", dabeedna suldaankii ayaa waxuu yiri:- kama mid aha ummadda Nabi Muxamed ( NNKH ) haatana igu caawiya inaan maydka ninkan gurigiisa u qaadno!!!.

Dadkii waxa ay suldaanka ku caawiyeen qaadista maydka, kadib markii gurigiisa la keenay ayaa suldaanka iyo ilaaladiisa ay ku hareen gurigii, markii ay xaaskiisii aragtay maydka ninkeeda ayaana iyadoo ku dul barooranaysa waxa ay tiri "ALLE ha kuu naxariisto, saaxiibkii ILLAAHAYOW, waxaanan marag ka ahay inaad ka mid ahayd kuwa dhawrsan"!!!.

Suldaankii oo la yaabban hadalka haweenayda ayaa yiri:- "Sidee buu uga mid ahaa kuwa dhawrsan, iyadoo dadku ay ka sheegayeen wax aan wanaagsanayn, oo xittaa aanay jirin cid ka fekaraysa maydkiisa, waxa ayna ku jawaabtay haweenaydii "Taas waa mida aan filanayay, ninkaygu habeen kasta waxuu u bixi jirey ama aadi jirray maqaayadaha lagu caweeyo, waxuu soo iibsan jiray khamri badan dabeedna guriga ayuu keeni jirray waana uu daadin jirray,waxuuna igu oran jirray "Muslimiinta qaar ka mid ah oo shaydaanku duufsaday ayaan maanta bad baadiyey kuwaas oo khamrigan iibsan lahaa!!!.

Sidoo kale waxuu aadi jirray goobaha dumarka jirkooda ka ganacsada, lacag ayuuna siin jirray mid ka mid ah dumarkaa si ay u xirato albaabkeeda ilaa waagu uu ka baryo, dabeedna guriga ayuu kusoo noqon jirray waxuuna igu oran jiray " Caawa waxaan ka bad baadiyey dembi haweenay da' yar iyo dhalinyaro xaqa rumaysay!!!.

Haweenayda uu ninka ka dhintay iyadoo hadalkeedii sii wadata waxa ay tiri:- ninkaygu dadku waxa ay arkeen isagoo khamri iibsanaya iyo isagoo galaya

goobaha lagu sinnaysto sidaa darteed ayey dadku uga hadli waayeen arimahiisa, maalin ayaana ku dhahay "Ma jirto cid maydkaaga mayraysa ama dhaqaysa, majirto cid maydkaaga ku tukan doonto, mana jirto cid maydkaaga aasi doonto waayo dadku nin xun ayey kuu maleynayaan" kadib Waa uu igu qoslay waxuuna igu yiri Gacaliso ha cabsan, Alle idinkii kuwa xaqa rumeeyay suldaankooda oo ka mid ah kuwa dhawrsaday ayaa maydkayga ku tukan doonna'e!!!

Kadib "Suldaankii ayaa bilaabay inuu ilmeeyo ama ooyo, waxuuna yiri:- "ILLAAHAY baan ku dhaartay run buu sheegay, aniga oo ah suldaan ayaa berri mayri doona, ku tukan doona waana xabaali doonnaa"!!!.

Wayna dhacday sidaasi suldaankii, culumadii, dadkii dhawrsanaa iyo dad kale ayaana maydka ninkaas ku tukaday!!!.

ILLAAHAY SUBXAANA WATACAALAA waxuu yiri "Kuwa xaqa rumooyoow ka dhawrsada wax badan oo mala ah, maxaa yeelay malaha qaarkiis waa dembi, hana is jaajuusina, qaarkiinna qaar yuusan xamanin, miyuu jecel yahay midkiina inuu cuno hilibka walaalkiis oo mayd ah, waad necebtahiin arrintaas, eebana ka dhawrsada waa tawbad aqballe naxariistee.

Hasamaynin wanaag iyo samafal adiga oo sharaf, sumcad iyo karaamo kaga doonaya cidkale ALLE ( s w t ) sokadii, ee usamee wanaag kasta iyo samafal kasta adigoo ALLE (s w t ) raali'ahaansho kaga dalbaya iyo wanaag, markaas ayaad noqonaysaa kii liibaanay if iyo aakhiroba ALLENA (s w t) waa arke ogna waxkasta , xattaa waxa dadka qalbiyadooda ku jira!!!.

## SANAM DUMIN UMA SOCOTIDE WAXAAD USOCOTAA SOOR-DOON!!!



Wuxuu yidhi Iimaamu Xassan albasri (Alle ha u naxariistee):- waxaa jiray Geed ay dadku caabudaan Illaahay sokodii oo caan noqday, dabeed nin wadaad ahaa ayaa arrintaas aad uga cadhooday waxaanuu wacad ku maray inuu Geedkaas soo jaro!!!.

Maalintii danbe ayuu u qaatay waysada inuu u safro soo jarista geedkaas isagoo horena u sii qaatay seef aad u afbadan, intii uu jidka kusii jiray ayuu la kulmay nin waxaanu ku yidhi:- sheekhow xagaad u socotaa?, wuxuuna ku jawaabay Geed meel xagaas ku yaala oo dadku caabudaan, waan ka cadhooday waanan soo jarayaa!!!.

Ninkii ayaa ku yidhi:- waar maxaad u jari sheekhow ilayn adigu ma caabudid geedkaas wax dhibana kuguma hayo adiga'e, sheekhii ayaana aad uga cadhooday warka ninkaas waxaanuu doonay inuu iska dhaafo isagoo aad u cadhaysan, laakiin ninkii ayaa ku soo booday isagoo doonaya inuu la dagaalamo sheekha, kadib sheekhii iyo ninkii ayaa is qabsaday oo dagaal dhex maray, dabadeed sheekhii ayaa ninkii legday, ninkii ayaana qayliyey oo yidhi waar iga kac, waar iga kac!!!

Dabadeed sheekhii ayaa ka kacay oo hore u sii socday, markaasuu haddana ninkii ku soo booday mar labaad sheekhii si uu ula dagaalamo, sheekhii ayaa haddana ay is galeen ninkii dabadeed mar labaadkiina sheekhii ayaa ninkii beerka kaga fadhiistay, sidii oo kale ayuuna u qayliyey, sheekhii ayaa ka kacay haddana, ninkii ayaa yidhi markuu sheekhii kari waayey, sheekhow waxaan ku idhi:- ma iska joogi haddaan subax kasta ku siiyo hal diinaar!!!.

Sheekhii ayaa si deg-dega isku beddelay oo yidhi:- "haa'', ninkii ayaana yidhi:- subax kasta ka qaado birkimadaada hoosteeda hal diinaar oo danahaaga ku qabso, sheekhiina wuxuu yidhi:- hawraarsan iyo waa yahay halkaas ayaana uu dabadeed sheekhii geedkii iskaga daayey kuna noqday gurigiisii isagoo ku faraxsan inuu subax kasta ka heli doono birkinta hoosteeda hal diinnaar!!!.

Markii sheekhii dhowr subxood uu helay diinnaarkii ayaa subaxdii danbe uu waayey halkii diinaar, kadib sheekhii ayaa aad uga cadhooday inuu lacagtii waayey dabeed seeftii ayuu la soo baxay oo wuxuu u dhaqaaqay xagii Geedkii, maxaase dhacay?!!!.

Dariiqii markii uu sii dhex socday ayaa waxa la kulmay ninkii maalintii hore la kulmay waxaanu yidhi:- sheikh xagee u socotaa?, wuxuuna yidhi:- waxaan u socdaa geed halkaas ah oo dad caabudaan ayaan soo jarayaa, ninkii ayaana ku yidhi:- sheekhow geed soo jari mayside ma diinaarkii ayaad wayday!!!.

Sheekhii ayaa aad u cadhooday oo yidhi:- maya waan soo jarayaa, ninkii ayaana ku soo booday sheekhii, dabeed sheekhii ayuu intuu kor u qaaday dhulka ku dhuftay, markuu soo kacayna haddana dhulka ku jiiday, markuu soo kacayna haddana legday, sheekhii oo naftu hayso oo naqaskii ku dhegay ayuu ninkii la hadlay muxuuna ku yidhi:- Sheekhow horta anigu iblays ayaan ahay maantana waan kaa adakahay, waxaanse ku waydiiyey laba su'aalood?, sheekhow ta koobaad waxaa weeye maalintii hore miyaad garan sababta aad iiga adkaatay? Maantane maad garan sababta aan dhulka anigu kuu jiiday?!!!.

Sheekhii ayaana yidhi:- maya, Iblays wuxuu dabadeed yidhi:- maalintii hore waxaad ahayd mukhlis mumin Illaahay diintiisa difaacaya sidaas ayaad iiga adkaatay, maantase waxaan kaaga adkaaday ma tihid mukhlis diinta Alle u socda ee waxaad tahay nin Diinaarkii doonaya oo aduunyo u dagaalamaya!!!.

Qissadani waxay inoo sheegaysaa wax kasta ama camal kasta oo aynaan ikhlaas ku darin inaan Illaah (swt) inaga aqbali doonin, Waxay kaloo inoo sheegaysaa qisadani in Iblays cadaawad aad u balaadhan inoo hayo khaasatan dadka Ehlu diinka ah, (Haka baqan Iblays , ha baylihin islaam) oday xikmad badnaa ayaa sidaas odhan jiray Alle ha u naxariistee!!!.

Suubaneheennuna (scw) wuxuu xadiis inoogusheegay in camal kasta oo la-qabanayaa uu yahay niyadda, halka allah (swt) uu eegayaana ay tahay niyadda, mana aha qorshe kasta iyo doorasho kasta oo laguusoo bandhigo haddana in aad ka laabato himiladaada, hiigsigaaga iyo yoolkaaga, haddii aad aaminsantahay in aad ku taagantahay waddadii xaqa ahayd ama saxda ahayd, haddiise aad dabinkaa gasho ogow in aad guul-darraysatay!!!.

Allah swt waxa uu aadyad qur'aan ah inoogu sheegay in shaydaan uu cadaw inoo yahay, inana aynu cadaw kadhigano.

## BAL KAWARRAN HADDAAN ANNAGU CUNI LAHAYN!!!



Qisadan waxaa soo wariyay Axmed binu- Maskiin oo ahaa nin ka mid ah Culimadii Taabiciinta kuwa aad looga danbeeyo waxuuna yiri:- waxaa jiray Wakhti xilliyada ka mid ah Nin la oran jiray Abu- naasir Siyaad oo la noolaa xaaskiisa iyo Carruurtiisa waxaana ay ku noolayeen Nolol Adag oo wax la'aan ah, Maalin ka mid ah Maalmaha isagoo socda Dariiqa oo aad u Werwersan oo ka fikiraya Xaaskiisa iyo Ilmihiisa oo la Ooyaya Gaajo ayaa waxaa uu soo maray mid ka mid ah Culimadii muslimiinta ee wakhtigaa oo la oran jiray Axmed binu- Maskiin.

Markaa ayuu ku yiri:- dhib ayaa i haysa, Reerkii Gaajo ayay u liitaan, markaa ayuu ku yiri:- ii soo raac dhinaca Badda, markaa ayay u socdeen dhinacii Badda, markaa ayuu ku yiri:- Tuko laba ragcadood!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Markii uu Tukaday ka dib ayuu ku yiri dheh Bismillaah markaa ayuu yiri:- Bismillaah markaas ayuu ku tuuray Shabakadda Kalluunka lagu dabo Badda waxa ay joogaan Badda agteedii markaa, markii uu ku tuuray Shabakada Badda in yar ka dib ayuu Kalluun weyn galay, markaa ayuu Sheekhii ku yiri orad oo iibi Kalluunka oo Reerkaga Cunto ugu soo iibi, markaa ayuu iibiyay oo ay u goysay Lacagtii Kalluunku laba xabbadood oo Khubas ah, mid waxaa ku dhex jira Hilib xabada kale ee khubasta ahna waxaa ku dhex jira Mac-macaan, kadib waxa uu doonay in Sheekhii mid uu siiyo labada xabbadood ee Khubusta ahaa.

Markii uu u tagay Sheekhii si uu u siiyo mid labada xabadood ee Khubusta ah oo uu yiri Sheekh mid qaado, kadib Sheekhii waxuu ugu jawaabay haddii aan Cunto kaa rabo maan soo bixiyeen Kalluunka!!!.

Sheekhu waxa uu ahaa mid aan khayrka uu u sameeyo Dadka aan ujuuro kaga qaadan markaa ayuu ku celiyay Cuntadii loo keenay oo uu ku yiri:- orad oo la noqo oo u gee Cuntada Xaaska iyo Carruurta dabeedna isagoo Cuntadii oo dhan sida labadii xabbadadood ee Khubusta ahaa ee mid ay ku dhex jireen Hilibku midna Mac-macaanku oo ku sii socda Gurigiisii ayaa waxaa Jidkii kaga soo hor baxay Gabar wadata ilma yar oo Gaajo ay la Ooyayaan labadooduba iyadoo Diiftii Gaajadu ka muuqato!!!.

Markaa ayuu eegay labadii xabbadood ee Khubusta ahaa ee uu u siday Reerkiisa markaa ayuu Naftiisii la sheekeystay isagoo ku leh kuwan waa sidii Reerkaagii oo kale maxaad samaysaa markaa ayuu eegey Gacantiisii iyo Cuntadii uu ku siday, markaa ayuu haddana eegay Gabadhii iyo ilmihii yaraa mise waa Hooyadii oo ilamadu ka da'ayso Gaajo awgeed, maxaan sameeyaa ayuu haddana isweydiiyay

markaa ayuu Gacanta ka saaray wixii uu u siday Reerkiisa oo dhan isagoon waxba ka reebin, isagoo leh hoo oo qaado labadan xabbadood ee Khubusta ah ayaan hayaaye!!!.

Markaa ayay Hooyadii Wejigeedii farxad isku soo taagtay ilmihiina Dhoola Caddeeyay, markaa ayuu u dhaqaaqay xagii Gurigiisii isagoo wali sita Murugadii iyo Hammigii oo ka fakiraya xaggeed wax uga raadisaa Xaaskaaga iyo ilamahaaga!!!.

Isagoo u socda xaggii Gurigii oo murugaysan ayuu maqalay Nin dhawaaqaya oo leh yaa yaqaana Abu naasir Siyaad oo i tusaya, waa isaga magaciisii ninka la raadinayaa markaa ayay Dadkii tuseen oo u sheegeen in uu ninkan yahay markaa ayuu Ninkii ku yiri:- Aabahaa ayaa igu lahaa Deyn 20 Sanno ka hor markaa wuu dhintay anigoon iska bixin Dayntii markaa ayuu ku yiri wiilkeygiyow 30 kun oo Dirham ayuu Aabahaa igu lahaa qaado waa kuwan waa Maalkii Aabahaa’e!!!.

Abu-naasir siyaad waxa uu markiiba ka mid noqday Dadka Maalqabeenka ah markii uu helay Lacagtan waxuu yeeshay Guri waxa uu ka mid noqday Dadka Ganacsadayaasha ah dhawr kun ayuu Sadaqo u baxsaday isagoo ilaahay (swt) uga mahad celinaya arrintaa!!!.

Waxa uu yiri ayaamo badan ayaa i dhaafayay anigoo Sadaqaysanaya illaa aan gaaray heer ay Naftaydii ay la yaabtay, waxa uu yiri Habeen ka mid ah Habeennada ayaan Riyo ku arkay anigoo Hurda iyadoo Camalkaygii la miisaamayo oo uu ii dhawaaqayo kii dhawaaqayay Abu Naasir siyaadaw kaalay eeg xasnaadkaaga iyo Xumaantada Miisaankaaga, markaa ayaa la saaray Xasanaadkaygii iyo

Xumaantaydii Miisanka markaa ayaa waxaa batay Xumaantaydii oo Miisaankii hoos u riday.

Markaas ayaan iri meeyey Maalkii aan Sadaqaystay markaa ayaa la saaray Maalkii aan Sadaqaystay mise markii la saaray Miisanka 1000-kii Dirhamba oo kasta Shahwaadka Nafta iyo Qiimayntii naftayda ayaa googoostay Sadaqadaydii illaa ay Sadaqadaydii ay noqotay sida Cudbiga ama suufka oo kale mid aan waxba tarayn oo aan miisaanka waxba ku kordhinayn.

Markaa ayaa waxaa xoog batay Xumaantaydii oo Miisaankii hoos u riday markaa ayaan Ooyay oo aan iri maxaa i badbaadinaya Maanta, markaa ayaan maqalay kii dhawaaqayay oo leh wax maw hareen markaa ayaan maqlay Malag leh waxaa u haray laba xabbadood oo khubus oo uu sadaqaystay markaa ayaa la saaray Miisaankii labadii xabbadood ee Khubuska ahaa markii la saaray ayuu Miisaankii sinmay oo uu isla ekaaday Xasanaadkaagii iyo Xumaantaydii!!!.

Markaa ayaan Maqlay mid kale oo Dhawaaqaya oo leh wax maw hareen markaas ayaan Maqlay Malag leh waxaa u haray shay markaa ayaa la waydiiyay markaa ayuu ku jawaabay Oohintii hooyada markii uu siiyay labada xabbadood ee Khubusta ahaa!!!.

Markaa ayaa la saaray Oohintii Miisaanka markaa ayuu miisaankii Xasanadku kor u kacay, waxa uu yiri:- markaas ayaan farxay, in yar ka dib ayuu yiri:- haddana waxaan maqlay kii Dhawaaqayay oo oo leh wax maw hareen markaa ayuu yiri haa waxaa u haray Dhoola cadayntii ilamaha yar markii uu siiyay labada xabadood ee Khubusta ah!!!.

Markaa ayaa la saaray Miisaankii markii la saaray ayuu kor u kacay miisaankiisii Xasanaadku way ku filan yihiin Xasanaadku iminka, markaas ayaan maqalay kii dhawaaqayay oo leh wuu Liibaanay -wuu Liibaanay, markaa ayaa waxa uu yiri:- waan ka toosay Huradadii isagoo leh bal ka warran haddaan marka aan helay kalluunka aan anigu Cuni lahaa ama aan reerkaygii siin lahaa!!!.

maanta Dad badan waxa ay ka fakirayaan in ay Naftooda iyo Reerkooda kaliya Quudiyaan, Noloshaaduna Aakhiro iyo Adduunba waxa ay ku xiran tahay Nolosha Dadka kale, mana jirto cid kelideed iskafayn-karta ama is bixin karta!!!.

Walaalkay iyo walaashay kuwii wax ku qaata qissadan Alle (swt) haynaga dhigo qissadanina waa mid ina tusinaysa wanaaga iyo faa'iidada ay leedahay sadaqadu, iyo waxaad baxsato in aanad haba yaraatee marnaba ku qasaarayn, xittaa hadday jeex timira tahay, abaalgudkeedana xittaa haddii aanad lakulmin inta aad nooshahay uu yahay mid aad aakhiro ugu tegayso, marnabana aanad seegayn, waase haddii aad ku bixisay niyad aad Allah uun swt ku raali gelinaysid!!!.

## NOQO AKHRISTE ANFACA NAFTIISA!!!



Sheekh wayn oo caan ka ah dunidoo dhan qasatan dalka indiya sheq zaki ayaa waxaa uyimid nin gaal ah waxa uuna waydiiyay oo uu su'aalay yirina: shiikhow maanta waxaan wataa sharuud, sharuudaasna haddaad iiga jawaabto waan soo islaamayaa, sheekhiina wuxuu ku yiri:- sodaa su'aashaada!!!.

Ninkii gaalka ahaa ayaa yiri shiikhow waxaan rabaa inaan arko ama aad itusto illahiinna, shiikhiina wuxuu yiri:- waan ku tusin illaaheena lkn adigana hal sharuud ayaan kugu xiraayaa, ninkiina wuxuu yiri isna waan fulin!!!.

Kadib sheekhii wuxuu yiri cabaar Qoraxda fiiri, ninkii ayaana wuxuu yiri:- sideen kufiiriyaa qorraxda lamaba eegi karree!!!.

Markaas ayuu sheekhu ku yiri ninkii gaalka ahaa, bal kawaran allihii abuuray qoraxdaan aadan fiirin karin ma suura galbaa inaad Isaga eegto ama aad aragto, ninkii gaalka ahaana oohin ayuu ladhacay oo durbadiiba meeshii ayuu kusoo islaamay!!!.

Muhiimadu waa in shaygan aad raadinayso aad adigu daacad katahay marka hore, haddii arrintan aad raadinayso aad daacad katahay adigu, arrin xaqana ay tahay su'aashaad doonto qaboo waayimaysid cid sidii ugu saxsanayd kuuqancisa, sida bal eeg ninkan aynu kor kusoo xusnay allah ayuu raadinayay inuu arko cid tusisa ayuuna rabay daydayayayna, miyay jirikartaa su'aal taa ka wayn oo uu qof iswaydiin karaa?!!!.

Haddana markii uu helay cid awood uleh su'aashiisaas inay kaqanciso wuu ku qancay waanakaa kuqaatay kunasoo galay diintii hanuunka!!!.

Noqo qof wax kasta ama shay kasta oo uu raadinaayo ama uu udhaqaaqo qabashadeeda daacad ka ah, ayna si dhab ah ugasoo go'day niyaddiisa, doonitaankiisa iyo rabitaankiisa, haddii aad sidaas samaysona, yeeshona waxa hubaal ah in hawlkasta ama arrin kasta oo aad udhaqaaqdo aad noqondoonto mid ku guulaysta kana gaadha ujeedkii iyo yoolkii uu kalahaa!!!.

## SHANLAYSADII GABADHII FIRCOON!!!



Haweeneydii timaha u shanleyn jirtay inantii fircoon ayaa maalin maalmaha ka mid ah waxaa ka dhacay shanladii ey ugu shanleyneysay inantii fircoon, kadib wey foorarsatay si ay shanladii usoo qabsato waxayna tiri:- **( bismillah ),** kadib gabadhii fircoon ayaa ku tiri allaha aad sheegayso sow aabahay maahan, haweeneydii ayaana ku tiri:- mayee waa Allaha aabahaa iyo aniga iyo adigaba na uumay!!!.

Kadib gabdhii aabeheed fircoon ayey u tagtay weyna u sheegtay wixii ay tiri haweeneydii, fircoonna wuu u yeeray haweeneydii,wuxuuna ku yiri:- waa kuma rabbigaagu?, waxayna ku tiri:- “Rabigeygu waa rabigaaga waana allah (SW)!!!.

Kadib fircoon ciidankiisi ayuu ku amray iney saliiid badan u karkariyaan lana keeno haweyneyda iyo 3 deeda wiilba, iyana sidii lafaray ayay yeeleen, ugu horayna waxay keeneen wiilkeedii ugu weynaa waxayna soo kor istaajiyeen saliiddii oo karkaraysa, markaasuu fircoon weydiiyey haweeneydii waa kuma rabigaagu? Waxayna ku tiri:- "Rabigeygu waa rabigaaga waana allah (sw), wiilkeedii koowaad ayaana kadib lagu tuuray saliiddii illaa ay lafihiisii kor sabeeyaan saliidda!!!.

Wiilkeedii 2aad ayaa haddana la keenay saliiddii korkeeda markaasuu fircoon weydiiyey haweeneydii isla su'aashii, waxayna ugu jawaabtey isla sidii, wiilkeedii 2aad ayaana lagu tuurey haddana saliiddii isla sida kii hore illaa lafihiisa ey kor sabeeyeen saliiddii!!!.

Kadib waxa lasoo gaaray wiilkeedii saddexaad oo ahaa naas nuug aan hadli karin ayna aad u jecleyd, dabadeed fircoon ayaa weydiiyey isla su'aashii, kadib markan haweeneydii waa ey aamustay xoogaa iyadoo u naxeysa saqiirkeeda, Dabadeed ALLE ( s w t ) ayaa ka hadashiiyey canugii yaraa oo la hadlay hooyadii iyadoo aysan qof kale maqal wuxuuna ku yiri :- "dheh waxaad ku socotaa wadada xaqa ahe'', saasi markay dhacday ayaana Haweeneydii ku tiri si kalsooni leh:- "Rabigeygu waa rabigaaga waana allah (SW), waana lagu tuurey wiilkeedii yaraa iyo iyadiiba!!!.

Kadib Lafahii wiilasha iyo haweeneydiiba waxa lagu shubay waadi, habeenkii dheelminta ayaana rasuulka ( s c w ) iyo jibriil ( c s ) waxa ey soo kor mareen waadigii lagu shubay lafihii wiilasha iyo hooyadood, Nebiga ( s c w ) ayaana waxa usoo carfay udgoon aad u fiican wuxuuna weydiiyey jibriil (c s ) waa maxey

udgoonkaan?, wuxuuna ugu jawaabay waa haweeneydii timaha u shanleyn jirtey inantii fircoon iyo wiilsasheedii!!!.

Haddaynu nahay ummad muslimiin ah waxa aynu rumaysanahay in daarta lagu waarayaa aanay ahayn tan adduunka ee ay tahay ta aakhiro, sidaa darteed qisadana waxa aynu ka faa'iidaynaa mar haddii aad xaq ku taagan tahay inaanay kusoo wajihin haba yaraatee wax yar oo cabsi ahi, niyada iyo naftana aad usheegto xattaa haddii aad arintaa iyada ah ku waydo naftaada oo ah waxa qofka bani-aadamka ah ugu qaalisan aad guulaysanayso, noqonaysona mid foosay daartii lagu waarayay ee aakhiro!!!.

Yaa Allah dariiqaaga xaqqa ah nawaafaji.

## ALLAH MA MOOGA WAXA AY SAMAYNAYAAN DAALLIMIINTU!!!




Waa Qissa Dhab ah oo Ka Dhacday Magalada Baqdaad Ee Dalka Ciraaq, qissada ayaa Waxay Ka Hadleeysaa gabar cafiifad ah oo Canugeeda Lagu Dilay horteeda iyadiina Ladilay Markii Lagu Ciyaarey Sharafteeda oo la Fara xumeeyey, dhacdadii markay ka soo wareegtay 20 Sanno Ayaana Allaah ( s w t ) u Aaray gabadhii, Gabadha Dhawrsoonna ma ogala Allah ( s w t ) In Lagu Ciyaaro Sharafteeda oo Lagu Xad gudbo Jirkeeda.

Sida Uu Ku Qorey Dikrul khidaab Kitaabkiisa CadaalaTu SaMaa, Magaalada BaQdaad Waxa Muddo 40 Sanno Ku Dhow hilible Ka Ahaa Nin, wuxuuna DukaanKiiSa Furi Jiray Fajarka Ka Hor Wuxuuna Soo Qali jiray neeFkiisa KaDibna Wuxuu Ku Soo LaaBan Jiray gurigiisa, Markay Qoraxda Soo BaxDo Ayuuna Dib U Furi Jiray meheraddiiSa Ama TukaankiiiSa!!!.

## IRRIDAHA GUUSHA {2}

Maalin Maalmaha Ka Mid Ah Markuu Soo Qalay neeFkiisii Ayuu Wuxuu U Soo LaabTay gurigiisa Ayadoo Mugdi Daran Uu Jiro, isagoo Dharkiisa uu Leeyahay dhiigii Neefkii Uu Soo qalay kadib Asagoo Ku SocDa Wadadii gurigiisa Ayaa Wuxuu Maqlay DhawaaQ Ka Yeraya Meel Wado Dhinaceeda ah oo Mugdi Ah, xageeda Ayuu uJihaysTay Asagoo Daydayaya, haddaba Si Lama Filaan Ah ayuu hortiisa ugu Soo Dhacay Nin Dhaawac ah Oo La Daray Dhawr Toorey Oo Dhiigiisa Qubanayo Oo Ay Ku TaaganTahay Tooraydii JirkiiSa, tooreydii Ayuuna Ka Siibay Wuuna Soo Xambaarey Si uu u Badbadiyo Dhiiggiisiina Wuxuu Ku Qubanayaa JirkiiSa!!!.

Nasiib Darro Ninkii Waa DhinTay Asagoo Ku Jira gacanTiisa, DaDkii Ayaa Ku Soo Ururey Markay arkeen Asagoo gaCanTiisa Ay Ku JirTo Tooraydii, Oo Dhiig Ka Muuqdo dharkiisa oo dhan, isna Argagax Ka Muuqdo, ayaa dadkii Waxay Ku Tuhumeen Dilka Ninka Waxaana Lagu Xukumay Dil Toogasha ah!!!.

Markii La Keenay Fagarihii QisaaSka Oo Uu yaQiinsaday in la Dilaayo Ayuu Qayliyey isaga oo leh:- Imaqla Dadow Wallhi Ayaan Ku DhaarTee Ma dilin ninkaan Laakiin Waxaan Dilay NaF kale 20 Sanno Ka hor MaanTana Ayadii Ayaa La ii QisaaSi!!!.

Wuxuu yiri:- 20 Sanno Ka Hor Waxaan Ahaa nin dhalinyara ah Waxaan Lahaa Doon Waxaan Dadka U kala gudbin jiray Wabiga Labadiisa Dhinac Maalin maalmaha Ka mid ah ayaa Waxaa ii Timid gabar Taajirad ah oo la SocoTa HooyadeeD, WaxaaN U gudbiyey Wabiga Dhiniciisa Kale!!!.

Maalin kale ayey haddana Ii Timid Waxaan Raacnay doonTii, Ka Dib Qalbigaygu Wuxuu Bilabay in uu gabadhii Ku xirMo, Waan jeclaaday gabadhii Ayadiina Way I jeclaaTey kadib Waxaan go'aan Ku gaaRnay In Aan Is guursanno, kadib Waxan Ka Doonay Aabahed, Waa iiDiiday Maadaama Aan ahaa Nin Faqiiiir ah oo Xoola haysan, Ka Dib gabadhii Waa Kala go'nay Ma Arag Maalinkii Ka Dib Ayada iyo Hooyadeedba Waxaana BaaQi igu Noqday jecelkeedii, Ka Dib 2 Sanno Ama 3 Sanno Ka Dib Anigoo Saaran doonTayda oo Sugaaya RakaaB Ayaa Waxaa Ii Tinid haweenay WadaTa Canug Yar!!!.

MarkaaS ayaan Ka Dalbay In aan Qaado, kadib Way Soo Raacaday DoonTii Si aan Ugu gudbiyo DaanTa Kale, Markaan Maraynay Wabiga BarTamihiisa Ayaan Soo Eegay mise Waaba Hawebaydii Saaxibadayda ahayd, aad ayaan Ugu Farxay AragTideeda Waxaana Bilaabay In aan uga sheekeeyo Oo aan Ku Soo qaado Jeceelkeennii hore, Si aadaable ayeyna Waxay Iigu Tiri:- Walaal Waan Guursaday Waana Kan Aad Arkayso Canugayga, Aabahay ayaa nin Isiiyey, Calaf iskumaynaan lahayn!!!.

Ka Dib Shaydaan ayaa I tusinayey in aan Ku Dhaco Oo aan Ka Zanaysto, Markaan U Soo Dhawaadayna Way Qaylisay Waxayna I XasuusiSay Allaah ( s w t ) laakiin Dhag jalaQ Uma Siin, Gacmaha Ayaan Ula Tagay, kadib Maskiinta Waxay Bilawday in ay ISkakay DiFaacdo inTii Karaankeed ah.

Canugeda oo Ka Ooynayo HorTeeDa Markan arkay In aan Mari La'ahay ayaan Waxan Soo QabTay Canugii Waxanan Ku iri Haddaanad Is Dhiibin Canugan ayan Wabiga KuTuuri, Way Ooysay, Way Ibariday Dhagse jalaq uma Siin Waxaanan

Canuga madixiisa Muquursiiyey Biyihii, Markuu U dhawaday dhimasho Ayaanan Ka soo Saaraay Ayadoo Fiirinaysa!!!.

Markay Fiirin Waysay Ayey Indhaheeda DaboolaaTay, Canugiina Sidii ayuu Ku DhinTay Waxaana Ku Tuuray Wabiga, Ka Dib Ayadii Ayaan Waxaan QabTay Timaheeda Waxaana Madaxeda galiyay Biyaha Si Ay iSu DhiibTo, Way Diiday Ka Dib gacmihii Ayaa I daalay Waana HaynkariWaayey Waxaana Ku Sii Daayey Wabigii Wayna DhimaTay!!!.

Markay Maqleen Dadkii Qisadan Waa Ooyeen Ka Dib Madaxa ayaa Laga Jaray ninkii!!!.

Allaah ( s w t ), Ma Mooga Waxa ay Samaynayaan daallimintu, ficil kasta oo aad samaysona ama wanaag ha ahaado ama samee ogow in aad abaal-marintiisa maalin'uun aad la kulmaysid, ama ha dibdhacdo ama hasoo hormarto'e, ama ifka kula kulan ama aakhiro dib halaguugu dhigo'e!!!.

## MIRAHA ISTIQFAARTA!!!




Waxa jiray Laba Nin Oo Saaxiiba ah Oo Shirkad Ka Wada Shaqeeya, Labada Nin Midkood Baa Lagu Ibtileeyey Sannado Badan Carruur la'aan, aad Ayuuna U jeclaystay Mar uun in Uu Helo Carruur Dadaal badan Ayuuna Galiyey Arrinkaa Sida Uu Sheegay, Laakiin Ma Helin MIraheedii Illaa Uu Ka Qaatay Naseexa Uu Siiyey Saaxiibkii!!!.

Sida Uu Sheegayo Ninka Qisada Soo Wariyey Wuxuu yiri:- Maalinbaa Ayagoo Shaqadii Ku Dhex jira Ayey Sheekeysteen Waxaana Dhexmartey Sheekadan:- Wuxuu yiri Midkood Saaxiib Mararka Qaar Waxaad Shaqada Soo Gashaa Adigoo Murugaysan Ee Maxaad La Murugsantay Oo kugu Dhaca, Ii Sheeg saaxiib!!!.

Wuxuu yiri:- Saaxiib Sida Xaqiiqada ah Haddaan Kaagu Warramo Aniga In Mudda ah Ayaan Xaas lahaa Allena (swt) Ima Siin Carruur, Waxaan aaday Dhaqatiir Fara Badan Maanan Helin Cafimaad, Ee Maxaa Xal ah Oo aad Heysaa saaxiib!!!.

Saaxiibkii Wuxuu ku yiri:- Saaxiib Waxaan Kaaga Sheekayn Doonaa Qissa Cajiiba Oo aan Ka Maqlay Nin Wanaagsan Wuxuuna igu Yiri:- Maalinbaa Waxaa Dhacday In Nin Dhalinyara ah Uu Soo galay Masjid Waqti aan Ahayn Xilliga Saalaadda La Tukado!!!.

Masjidka Waxaa Horey U Fadhiyey Nin Oday ah Oo Ku Ictikaafayey, kadib odaygiibaa Su'aalay Ninkii Dhalinyarada ahaa Oo ku yiri Wiilkeygiyoow Maxaa Waqtigan aad Ugu Soo Xarootay Masjidka Oo aad Lamuragaysantahy Ii sheeg!!!.

Wuxuu yiri Ninkii Dhalanyarada ahaa:- Adeer Muddo Hore Ayaan guursaday ALLAHNA ( s w t ) Ima Siin Carruur aan La Ciyaaro Oo ayagana Ila Ciyaaraan, Waxaan U Tagay Dhaqatiir Badan Mana helin Cafimaad, kadibna wuxuu yiri Odaygii Adeer Waxaan ku siini Dawo Laakiin Dawadan Qaadashadeeda Way adagtahay, Laakiin Wallaahi ayaan Ku Dhaartee Haddii aad Si Fiican U Qadato Waxaad Heli Cafimaad Insha allaah, wiilkiina wuxuu yiri:- Maxay tahay Dawadaa Adeer, kadib odaygii Wuxuu yiri:- Waa In aad Soo Toostaan Fajarka Hortii Saacad adiga Iyo Xaaskaba Oo aad Saacaddaa U Qaybisaan 2 Qaybood Nuska Koowaad Ka Yeela Qiyaamuleyl Nuska Kalena Ka Yeela Istiqfaar !!!.

Ninkii Wuxuu U Tagay Xaaskii Wuxuu ku yiri:- Al Xamdulillaah Xabiibi Waxaan Helay Dawadii aan Baadi goobaynay Waligeen, waxayna Tiri:- Maxay tahay Dawada aad Soo heshay, Ka Dib Waa uu U Sheegay Waxayna Tiri:- Waa yahay aynuna Samayno, Ka Dib Waxay Sameeyeen Sidii Lagu yiri Sameeya, Markay Wadeen Nidaamkii 15 Bari Ayaana gabadhii Waxaa Ka Soo Muuqday Calamadihii Lagu yaqanay Gabadha Markey Uurka Qaaddo, Ka Dib Waxay U Tageen Dhaqtar Waxaana lagu Sameeyey Baaritaan Waxaana Loo Sheegay in ay Gabadha Uur leedahay, Ninkii aad Ayuu U Farxay Allaah ( s w t ) Ayuuna Ku Mahdiyey!!!.

Ninkii Saaxiibkii ahaa Ayaa Sheekada Wadee Wuxuu leeyahay Maalinkii aan Uga Sheekeeyey Qisadii Ka Dib Ma arag saxiibkey, Muddo Bil ah Ka Dib ayaana Maalin Meel Ku Kulanay isagoo Aad U Faraxsan Oo DHoola Caddeynaya Ayuuna Isalaamay Oo hab Isiiyey, markaasaan Waxaan ku iri:- Saxiib Maansha allah, Aadbaa U Nuuraysaa Oo Wajigaaga U Ifayaa Bal Ii Warran, Wuxuuna Yiri:- Saaxiib Maalinkii aad Iiga Sheekaysay Qissadii Illaa iyo Maanta Waxaaan Ku Jiray Ku Dhaqanka Iyo Sameynta Sidii aad Iigu Sheegtay, Allah Mahadiina Xaaskii Uur Ayeey Qaaday!!!.

Allahu Akbar, Waxa aan ku Iri kadib ayuu yidhi:-Waa Allah Mahaddii.

Haddaba Walaal Istiqfaartu Qiimahaa ayay Leedahay ee Ha Moogaan, haddii Lagugu Ibtileeyey Carruur la,aanna Tijaabi Adiguna Insha allah Waad Ku guulaysaniye!!!.

## FADLIGA SALLIGA RASUULKA ( S C W )!!!




Waxa Jiray Nin Oday ah oo daganaa Magaalo, Ninka waxa ku cuslaaday xaaladdii uu ku noola wuxuuna galay deymo faro badan si uu u maareeyo nolashiisa caadiga ah, waxa lagu yeeshay lacag tiro badan heer lacagta lagu yeeshay ey gaartay Boqol Diinnaar!!!.

Wuxuu awoodi waayay in uu bixiyo lacagta lagu yeeeshay, waxaana taagnaa daruufihii uu u qaatay Lacagaha deymaha ah, maalin ayuu baxay wuxuuna u tagay Nin Lacag lahaa oo taajir ah wuxuuna dhahay bal Lacag i deymi, waxayna ku ballameen in uu muddo Kusoo celiyo, Lacagtii ayuuna qaatay wuxuuna iskaga guday Deymiihii kale, waxay aheyd deyn Deyn ku gud, muddo kadib waxa la gaaray xilligii isaga iyo Taajirka ay ballameen, Taajirkii ayaana dhahay muddadii waa la gaaray ee Lacagtayda isii, laakiin isaga waxba ma heyn, wuxuuna ka codsaday in uu waqtiga u

dheereyo, laakiin ninkii taajirka ahaa wuxu go'aan saday in uu dacweeyo, wuxuuna ka dacweeyay maxkamadda Magaalada, kadibna maxkamaddii ayaa ninkii deynta lagu lahaa u dirtay farriin.

Markii uu imaaday Maxkamadda waxay amartay in uu Lacagta iska bixiyo isaguna wuxuu Yiri:- Aniga waxba ma haayo, haddii aan haysto Lacag aan bixiyo dacwadayda Maxkamada maba imaan laheen, Intaas markuu dhahayna maxkamaddii waxay amartay in la xiro oo xabsiga la dhigo, maaddaama uu Lacagtii lagu lahaa iska bixin waayay!!!.

Markay Maxkamaddii go'aankaas xariga ah Gaartay, Ninkii deynta lagu lahaa wuxuu yiri:- qaadiyow waxaan raba in aan u tago Reerkayga una sheego in la i xiraayo ee i Fasax, Qaadigiina wuxuu dhahay:- yaa kaa ah damaanad (yacni yaa ku damiinanayo) kadib wuxuu dhahay ::Rasuulka Alle ( salallaahu caleyhi wasalam ) ayaa iga damaanad ah, haddaan soo noqon waayo Adduun iyo Aakhiraba kama mid ihi Ummada Nabi Muxamad ( salallaahu caleyhi wasallam )!!!.

Qaadigu wuxuu ahaa Nin wanaagsan wuxuuna dhahay bax oo aad Reerkaga kadibna soo noqo oo wuu fasaxay!!!.

Markuu ku noqday gurigiisa Ninkii deynta lagu lahaa wuxuu arrinka dhacay uga warramay Xaaskiisa asagoo dhahay:- arrinka sidaas ayuu u dhacay waxaana la igu xakumay xabsi si aan idiin soo booqdana waxa damaanad u dhigtay Nabi Muxammad (salallaahu caleyhi wasallam)!!!.

Gabadhiisii ayaa arinkii la yaabtay, waxayna dhahday haddaba haddii ey sidaas tahay oo Nabiga (SWC) dartiis fursadan Yar ku heshay aan ku sallino Nabiga ( salallaahu caleyhi wasallam ) waxa Laga yaabaa in Allaah ( s w t ) faraj intan ka weyn noo furo'e, waxayna bilaabeen inay ku salliyaan Nabiga ( salallaahu caleyhi wasalam ) ilaa ey ku hurdeen!!!

Markay hurdeen kadib Ninkii deynta lagu lahaa wuxuu riyo ku arkay Nabiga ( salallaahu caleyhi wasallam), Nebiguna (salallaahu caleyhi wasallam) riyada wuxuu ku dhahay:- Subaxdii markuu waaga baryo waxaad u tagtaa gudoomiyaha magaalada, salaana iga gaarsii, waxaadna ku dhahdaa deynta iga bixi, hadduu ku dhaho maxa cadeyn u ah oo kugu Aamina Inaad Nabiga (salallaahu caleyhi wasallam) riyo Ku Aragtayna Waxaad Dhahda:-marka kowaad Gudoomiyaha habeen kasta kun mar ayaad Nabiga Ku salidaa ( sakallaahu caleyhi wasallam ) marka labaadna haddaad ka shakiso inaad tirada qaladay waad ku soo celisa illaa aad tirada buuxiso!!!.

Kadib ninkii wuu baraarugay, subaxdiina isla markiiba wuu baxay wuxuuna u tagay Guddoomiyaha Magaalada, wuxuuna dhahay:- Nebiga ( salallaahu caleyhi wasallam ) ayaa ku soo salamaayay, wuxuuna dhahay guddoomiyaha magaalada utag oo deynta hakaa bixiyo, Guddoomiyahiina wuxuu dhahay:- waa meeqo deynta lagugu leeyahay?, ninkiina wuxuu dhahay:-waa 500 oo diinnaar, Gudoomiyahiina wuuxu dhahay:- maxaa caddeyna inaad run sheegaysid?, ninkiina wuxuu dhahay labo arrimood ayaa caddeyn u ah, waa mida koowaade adiga Habeenkasta 1000 mar ayaad Nabiga ( SWC ) ku salidaa!!!.

Gudoomiyahiina wuxuu dhahay:- waa runtaa, wuxuuna dhahay maxay tahay tan kalena?, Ninkiina wuxuu dhahay:-tan labaadna waa in aad habeen hore qaladay tirada oo aad ku celisay, laakiin Nabiga ( salallaahu caleyhi wasallam ) wuxuu dhahay:- 《ugu bishaaray tiradii ayadoo kaamil ah ayay i soo gaartay!!!.

Guddoomiyihii wuu is hayn kari waayay kadibna wuxuu bilaabay oohin asagoo leh run ayaad sheegtay Alle hakaa raali noqdee wuxuuna soo siiyay Lacagtii deynta eheed ee lagu lahaa, ninkii deynta lagu laahana wuxuu soo aaday dhankii maxkamadda, wuxuuna imaaday Maxkamaddii, wuuna soo galay.

Kadib ayaa waxa ka hor yimid ninkii Lacagta kulahaa wuxuuna dhahay:- waan ku cafiyay, sababtoo ah Nabiga (SWC) ayaan xalay riyo ku arkay wuxuuna igu yiri :- (Ninkaas cafi oo ka furo deynta, deyntaas haku furato maalinta Qiyaamaha'e), maxkamaddii ayaana la soo galay kadib ninkii deynta lahaa ayaa is taagay wuxuuna dhahay:- qaaddiyow Ninkan waan cafiyay Lacagtaan ku lahaana kama rabbo, waxa aan gacanta ku haayaana waa kiish ey ku jirto 500 oo Diinnaar oo aan asaga ugu tala galay, xalay ayaana Rasuulka (salallaahu caleyhi wasallan ) riyo ku arkay wuxuuna i dhahay:- (Ninkaas cafi oo ka furo deynta, deyntaas haku furato maalinta Qiyaamaha'e) !!!.

Kadib ninkii maskiinka ahaa ee deynta dilootay Maxkamada ayuu ka soo baxay asaga oo wata Lacag fara badan, middii uu ka soo qaatay Guddoomiyaha ee uu rabay in uu deynta iskaga bixiyo iyo isla Gudoomiyaha miduu masariif ahaanta u siiyay iyo Lacagta uu siiyay Ninkii horay deynta ugu lahaa ee ka cafiyay, wuxuuna

heerkaa ku gaaray in uu ka Xoroobay deymihii lagu laha asagiina lacag ku helay waa salliga Suubanaha muxammed ( sallallaahu caleyhi wasallam )!!!.

Haddaba akhriste ha dhayalsan salliga rasuulka ( s c w ) sida aynu ognahayna waxa jira axaadiis farabadan oo kusoo aroortay salliga rasuulka ( s c w ) iyo qiimaha uu leeyahay, Sidaa awgeed iskuday inaad marwalba afka ku hayso salliga rasuulka ( s c w ) oo aad akhrisato waxa hubaal ah in aad if iyo aakhiroba ku liibaani doontide, waase haddaad sidaas samayso iyadoo niyadaadana la'eegayo!!!.

# NINKII OOMAY IYO GABADHII MUSALLIYADDA AHAYD!!!




Qolyo ayaa safar wada galay, kadib ayagoo ku guda jira safarkii ayuu nin kamida ragii safarka ku jiray oon xuni qabtay, kadib meel uu ceel kuyaallo ayuu arkay, ceelkii ayuuna tagay hayeeshee wadaan iyo wax kaloo uu biyaha ku darsado ayuu waayay wax weel ah oo ceel lagaga cabikarona may sidan, kadib wax uu sameeyo asagoo garanla ayay haweeney u timid.

Haweenaydii ayaa dabadeed waxay weydiisay waxa helay, wuxuuna usheegay arrinta haysata kadib waxay ku tiri:- kaleexo anaa soodarayee, waxayna tiri:- biyoow kor soo aada, sidii ayayna noqdeen, yaab iyo amakaag!!!.

Kadib ninkii baa yiri:- sidee baad saan ku yeeshay? waxayna tiri anigu nabigeenna suuban (scw) ayaan aad u jeclahay marwalbana waan ku salliyaa, ALLE (swt) ayaana wax badan ii fududeeyay ee mar walba badi salliga nebiga (sallalaahu calayhi wasallam)!!!.

Alle (s w t ) wuxuu dhahay:- qofkii raba in uu aniga ijeclaadow nebi Muxammed (sallalaahu calayhi wasallam) jeclaw, markay arrintu sidaa tahayna waxa hubaal ah haddaad saas samayso rasuulkana (sallalaahu calayhi wasallam) jeclaato, salligana badiso in uu adigana ALLAH (s w t ) ku jeclaan doono, waxyaalo farabadana kuu fudaydin doono!!!.

# WIILKII YARAA IYO ODAYGII AY KU RAFIIQEEN SALAADDA!!!




Waxaa jiray Wiil yar oo Arday ah, Maalin isagoo iskoolka jooga kuna jira Xiisooyinka uu Malinkaa Lahaa Ayaa Macalinka Xiisaddaas ku jiray wuxuu ka Sheekenaayay Faa'idada ay Leedahay Salaadda Subax iyo Ahmiyado Gaar ah iney leedahay, Wiilkii yaraana aad ayuu u Saameeyay Hadalkii Macalimka, horayna muusan u Tukan jirin Salaadda Subax!!!.

Markuu Xaafaddii ku laabtay ayuu wuxuu Bilaabay inuu Fikiro siduu ugu soo kici lahaa Salaadda Subax ee Berri, Xal kale muusan helin oo aana ka aheyn inuu soo jeedo Habeenkii oo dhan illaa uu ka maqlo Aadaanka Saladda Subax, xaqiiqdiina wuu Sameeyay Fikirkiisa, markuu Maqlay Aadaankii ayuu si Deg-deg Ah isku soo Diyaariyay, laakiin Mushkilo ayaa ku soo baxday taaso ah sidee ayuu ku Aadayaa Masjidka!!!.

Masjidku wuu ka Fog yahay, Aabihisuna Ma aha mid Salaadda Subax u soo kaca oo Tukada, mana Awoodo Inuu kaligiis baxo, kadib wuxuu Fariistay Albaabka hortiisa isagoo Ooyaya, laakiin si Kedis ah ayuu wuxuu umaqlay Shanqar Kabo Ruux Wadada Maraaya, si dhaqsi ah ayuuna Albaabka u soo furay, mise waa Oday Waayeel Ah oo Masjidka u socda!!!.

Wuxuu Eegay Odaygii wuuna gartay Odayga, waa Awoowihii Saaxiibkiisa Axmad ee jaarkooda ahaa, kadib wuxuu Bilaabay wiilkii inuu Odayga Dabakaco si Tartiib ah isagoo doonaaya inuusan Fahmin si aan waalidkiisu u Ogaanin, muddo wuxuu xaalku sidaas ahaadabana ka dib Odaygii Waayeelka ahaa wuu Geeriyooday, Canugii ayaana Ogaaday, Geeridaasina Murugo weyn Ayay ku noqotay Wiilka, si daran ayuuna u Ooyay illaa ay la yaabeen Waalidkiisu!!!.

Ka dib Aabihiis ayaa ku yiri:- Maxaad sidan oo dhan ugu Ooyeysaa Odaygan?, Ma uusan ahayn Canug yar oo kula Da’ ah, oo aad wada Ciyaari jirteen, mana ahan Ehel kuu Dhow’e ?, kadib wiilkii ayaa Aabihiis ugu jawaabay:- Aaboow Odaygaas wuxuu ii qabtay ama Booska uu ii hayey Adiga oo i Dhalay oo Aabaheey ah iima aadan Qaban, Xaqna waan u leeyahay inaan u Ooyo ama aan ka Tiiraanyoodo Geeridiisa, Intaas ka dib Aabihii aad ayuu u yaabay, una Qaracmay oo wuxuu Aamini waayay Hadalkan uu kula hadlay Wiilkiisa!!!.

Misana Wiilkii oo hadalkiisa sii wato ayaa wuxuu sii raaciyey:- uma Ooynaayo inaan la Ciyaari jiray, ama inuu Ehel ii yahay, ee waxaan ugu Oynayaa Salaadda Awgeed, (Weliba Wiilkii isagoo ay illintiisu ay si Xad dhaaf ah u Daadaneyso) ayuu misana Aabihiisa ku yiri:- Aboow maxaad u Tukan weysay Salaadda Subax? oo maxaad u noqon weyday sidii Ninkaas oo kale iyo Niman badan oo aan Masjidka ku arko Salaadda Subax?!!!..

Haddaba, Aabihii isagoo yaaban ayuu wuxuu Wiilkiisa ku yiri:- Xaggee ku soo Aragtay Nimanka?, wiilkii ayaana dabadeed yiri:- Masjidka, (intaas ka dibna Qisadii ayuu uga Shekeeyay Aabihiis), aad bayna u Saameysay Aabiihii Qisadaasi uu uga Sheekeeyey Wiilkiisa, wixii Maalinkaa ka dambeeyeyna, waxa Masjidka isku raaci jiray Labadooda (Wiilka iyo Aabihiis) oo ay Salaadda Subax ku soo wada Tukan jireen!!!.

In badan ayay macallimiintu hadlaan, waxna sheegaan, ardaydoodana casharo muhiim ah siiyaan, hayeeshee cidda ku hanuunta fahantana ayaaba iska yar, hanuunkuna kuma xidhna da'a, marxalad iyo wakhti toona waana mid kayimaadda xagga ALLE (swt), arrintaa iyada ahna qisadan aynu kor kusoo xusnay ayaa aad inoogu bayaaminaysa!!!.

Waxa kale ee waxyaabaha aynu qisadan ka faa'iidayno kamid ah, saamaynta uu ubadku hadduu wanaagsanaado kuyeelan karo waalidkii, hadduu waalidkii yahay mid kharriban!!!.

Haddaba marka uu ilmihii yaraa uu sidaa usaamayn karo waalidkii, waalidka iyo habdhaqankiisu intee inleeg ayuu saamayn karaa ilmihiisa yar ayaad filaysaa akhriste?, waa su'aal mudan inaad iswaydiiso, naftaaadana uga jawaabto kana qanciso akhriste inta aanad dhaafin boggan!!!.

Waalidka leh dhaqan suubban oo wanaagsan diintana ku salaysan waxa ay ugogol-xaadhaysaa ubad leh dhaqan suubban oo wanaagsan, diintana kusalaysan, saynu inbadan aragnayna ilmuhu waxa uu qaataa dhaqanka waalidkii hadduu xunyahay iyo hadduu sanyahayba, soomaaliduna waxa ay ku maah-maahdaa:- awrba awrka horuu socodkiisa leeyahay!!!.

Ubad dhaqan ahaan iyo akhlaaq ahaan uhagaagsan ama uwanaagsanina waa mid kamida guulaha ugu waawayn ee uu qof waalid ahi uu gaadho If iyo Aakhiroba!!!.

Ku dedaal in aad hagaajiso wanaajisona dhaqankaaga kuna salayso diinteenna suubban, si aad tusaale fiican ugu noqoto ubadkaaga, Adiga oo rajaynaayana in aad hesho faa'iidada xadiiskii kasugnaaday rasuulkeenii suubanaa ee Muxammed SCW ee ahaa:- in ubadka saalixa ah ee wanaagsani ay lamid tahay sadaqatu jaariya, ducadiisa iyo waxa uu ubixiyo waalidkii marka uu geeriyoodona uu helayo Allahna SWT uu miisaanka xasanadka ugu daraayo.

## IGA GAARSII UMMADDA XATAA HAL AAYAD!!!



Qisadani Waxay Ka dhacday Masjid Ku Yaalla Dalka Maraykanka, Wuxuuna Yiri Imaamkii Masjidka Markaanu Ka baxnay Salaadii Maqrib ayaa Waxaa Istaagay Nin Madow Ah oo aad uxoogan, dadka Masaajidkuna Magaraneyn, kadib ninkii wuxuu iga Codsaday Maykarafoonka Waana Siiyey!!!.

Kadib wuxuu u jeestay Dadkii Wuxuuna yiri:- ( Assalamu Caleykum Waraxmatullahi Wabarakaatuhu ), Wuxuuna Akhriyey Suurada Al-Faatixa Aayad Aayad Illaa uu ka Dhammeeyey Wuxuuna ku Akhrinayey si dhib ah, hadaysan dadka Masjidka Jooga ay Faataxada aqoonna Maysan Ka Fahmeen Wuxuu Ninkaasu Akhrinayay xattaa hal Xaraf, kadib Makarafoonkii Ayuu Damiyey Wuxuuna Aaday Gadaashii Masjidka WuxuunaTukaday Laba Rakco oo Sunno Ah!!!.

Imaamkuna Kor ayuu Kala socday, Imaamkana Waxa qalbigiisa ku wareegayey Waxyaabo fara badan oo ay ka midyihiin:- Muxuu ula jeedaa arrinkan cod macaana malahane?,Tajwiidna malahee iyo waxyaabo kale ayuu Qalbiga iska weydiiyey, ninkiina Markuu Salaaddii Sunnaha Kabaxay Ayuu Masjidkii Kabaxay, kadib imaamkii Ayaa kadaba Baxay Wuxuuna weydiiyey Waxa ku Kalifay Arrintaan iyada ah?, laakiin Wuxuu ugu Jawaabay Jawaab uu Imaamkii Ladhacay lana ilmeeyay, lana ooyay, wuxuuna yiri:- Waxaan Ahay Nin Ku Cusub Diinta Islaamka Laba bari kahor Ayaana Islaamay, Waxaana akhristay Kitaab KuTurjuman English, Waxaana Ku Arkay Xadiis Aad u Wanaagsan kaasoo igu Dhaliyey waxaan Sameeyey Caawa!!!.

Kadib Imaamkii Ayaa weydiiyey Muxuu yahay Xadiiskaasi?, Wuxuuna ugu Jawaabay:- Waa Xadiiska Leh "Iga Gaarsii Ummadda Xittaa Aayad" Anna Waxaan Xafidsanaa Toddoba Aayadood Caawaana Gaarsiiyey Dadka!!!.

Haku deg-degin go'aan qaadashadaada iyo kafal celinta aragtiyahaaga adiga oo aan xog'ogaal ahayn waayo waxa dhici karta in arrintuba aanay ahayn saad adigu ufahantay una qaadatay ee ay ka duwantahay kana fogtahay, sida si lamida qissadan qurxoon ee aynu kasoo sheekaynay, soomaaliduna waxay ku maah-maahdaa (intaanad falin kafiirso)!!!.

Qofka arrintaa iyada ah layimaaddana waxa hubaal ah in uu ka bad-baadidoono dabino farabadan oo uu ku dhici lahaa, dhibna uu kala kulmi lahaa sidii uu uga samata-bixi lahaa!!!.

# FADLIGA ISTIQFAARTA!!!



Haweenay muslimad ah ayaa waxay tiri:- ninkaygii Allaha u naxariistee wuu dhintay ama geeriyooday anigoo da'daydu tahay 30 jir waxaana lahaa shan carruur ah oo gabdho iyo wiilal isugu jira. adduunyada ayaa dhabtii igu madoobatay bey tiri, sidii aan u oynayey ama u ilmaynayay indhaheyga nuurkooda ayaa yaraaday, waxaan is tusay iskana dhaadhiciyey inaan ahay qof aad u nasiib xun ayay dhahday.

Carruurtaydu waa ay yar-yar yihiin, waxaa dhaqaale ahaan nasoo galana waxba nooma taraan, waxaana masaariif noo ahaa bay tiri xoogaa ilmaha aabahood nooga dhintay.

Kadib waxay tiri haweenaydani maalin anigoo iska fadhiya ayaan furay Idaacada Qur'aanka kariimka ah ee Makkah dabeedna waxaan ka maqley xadiis Rasuulka ( calayhi salatu wasalaam ) uu kaga hadlayo istiqfaarta, markaas ayaana bilaabay inaan Istaqfaarka badiyo caruurtaydana sidaa ayaan ku amrey!!!.

Waxaa dhacday muddo yar ka dib in dhul aanu lahayn beri hore oo uu jid ama waddo la dhisayey uu maray oo aanu ka samirney xilligii ninkaygu noolaa ay nooga timid lacag aad u badan,oo malaayiin ah!!!.

Kabid wiilkayga weyn wuxuu noqday kan u horeeya Taxfiidka Quraanka mandiqadeyda, waxaana masuul looga dhigay dadka tabarta daran waxtarkooda, khayrkii ayaana nagu batay, nolol fiicana waan ku noolaaney, Illaaheyna ( s w t ) wuu ii xafiday wiilasheyda iyo gabdhaheygaba, wel-welkii iyo muragadii i heysayna Allaah ( s w t ) waa uu iga fayday igana qaaday, waxaana noqday qof farxaan ah!!!.

Intaas oo dhan iyo kabadanba walalayaal waa fadliga Istiqfaartu ay leeyahay!!!.

Haddaba Qof kasta oo naga mid ah waxaan kula dardaarmayaa nafteyda iyo naftiinaba inaan Istaqfaarta badino, waxba ma noqaneyno markaad fadhisid, haddii aad soconeysid, haddii aad shaqo joogtid, haddii aad bas sugaysid ama gaari aad kaxeynayso iyo meel kasta iyo saacad kastaba waad awoodi kartaa inaad istiqfaarsato, xattaa inaad weyso qabtona kaama rabto!!!.

ILLAAHAY ( s w t ) ha ina waafajiyo wuxuu jecel yahay oo Raalli ka yahay!!!.

## SADAQADDA IYO SIRTA KU DUUGAN!!!



Sadaqada aynu ka hadlaynaa waa ta Addoonku u bixiyo Allah (swt) dartiis, ee aanay ku jirin ujeedooyin kale oo ku lammaan sida:- Is tus-tuska dadka, halagu ammaano, iwm. sadaqadda sidaas ahina waa mid qofka bixinaya uu Allah (swt) agtiisa uu kala kulmidoono Abaal marin aad u weyn dunida korkeeda iyo Akhiroba!!!.

Sirta ku Qarsoon sadaqada waxa ogsoon uun qofkii Allah (swt) Khayr la damco oo lama soo koobi karo waxaase ka mid ah:-

1) **Sadaqadu waxay baabiisaa gafafka, Dunuubtana waa lagu dhaafaa:-** Allah(swt) sadaqada wuxuu ka dhigay sabab lagu dhaafo macaasida lagalay , gafagka, iyo dhacdooyinka aan loo qasdin!!!.

2) **Sadaqadu sida biyuhu udamiyaan dabka ayay udamisaa danbiyada:-** wuxuuna yiri Nebi Maxammed (c.s.w.) " wax sadaqaysta timir jeexeedna ha ahaadee maxaa yeelay sadaqadu gaajada way tirtaa dambigana way damisaa , sida biyuhu dabka udamiyaan"!!!.

3) **Waxa lagaga baxaa fidnada:-** waxaa Nabigu ( c.s.w.) yiri:- " haddii ninka musiibo uga dhacdo xaaskiisa, maalkiisa, ilmihiisa iyo dariskiisa waxaa looga baxaa fidnadaas salaad iyo sadaqo, iyo ummaddoo wanaag loo sameeyo" xadiiskanna waxa wariyay bukhaari!!!.

4) **Sadaqadu Waa Daawo:-** Walaalayaal Siraha cajaa'ibka ah ee sadaqada dar Allah (swt) loo bixiyaa ee la siiyo qof u baahan oo ku habboon sadaqadaasi waxa ku jira daawo aad iyo aad wax tar u leh oo cudurada loo caal waayey lagu dabiibo si dhaqso ahna loogu bogsado, waxaana Dad badan oo La tacabsanaa xanuunno dawo aan lahayn ku bogsadeen sadaqo ay bixiyeen, Rasuulkeennuna (scw) wuxuu noo Sheegay inay Sadaqadu daawo tahay!!!.

Haddii Allah (swt) udambi dhaafay qof waraabiyay Eey ooman, maxaad umalayn inuu helayo qofkii waraabiya muslim haraadsan , ama dhargiya muslim gaajaysan ama maro u xira muslim arradan, balse ka warran hadduuba agoon yahay!!!. Waa hubaal Qofkaasi inuu helaayo wanaag iyo caafimaadba Allah (swt) Agtiisa, ee Walaayaal neftayda iyo tiinaba waxaa aan ku dardaarayaa in aynu ka faa'iideysanno siraha ku duugan sadaqada oo aynu ku dadaalno caawinta dadkeenna u baahan caawimada waxna tarno!!!.

# Q:- LABAAD-QISOOYIN JACAYL AH:-

## WAXA UU DIB UHELAY 70 SANNO KADIB WELIBA IYADA OO HADLAYSA!!!



Wuxuu akhriyay farriin ama waraaq qaraami ah oo uu u qoray haweeney uu jeclaa muddo laga joogo 70 sanno ka hor, waxayna u ahayd ilbidhiqsiyo dareen, xiise iyo xusuus gooniya leh, qisadanina waxay ku dhacday mid ka mida ciidamadii wadanka maraykanka ee qaybta ka ahaa dagaal weynihii labaad ee dunida!!!.

Waxa uu akhriyayey warqad uu waayey wakhti fog, warqadan oo uu qoray intii lagu guda jiray dagaalkii labaad ee dunida kuna beegnayd sannadkii 1944,

waxaana indhihiisa ka soo burqatay illin ay indhuhu haysan waayeen xilli uu akhriyayey ereyada & weedhaha shakhsi ahaaheed ee uu qoray.

Sarkaalkan ka tirsanaa ciidamadii maraykanka ee ka qayb qaatay dagaal weynihii labaad ee dunida oo la yidhaahdo:- " Bill Moore " wakhtiga uu warqaddan jacaylkiisa oo la odhan jiray " Bernadian " uqoray da'diisu waxay ahayd 20 sanno jir, wakhtigaas oo Bill Moore ku jiray fasax nasasho kuna soo laabtay dalkiisa hooyo intii uu socday dagaalka labaad ee dunidu, Bill Moorena war uma haynin inay is calfan doonaan Bernadian xaaskiisa-na ay noqon doonto muddo sannada ah kadib iyo in kale .

Haddaba warqadan la qoray 1944 iyo Docu-mentyo kaleba waxa laga helay file laga iibiyey qof aan la aqoonsan oo ay goob ganacsi ka siisay qiimo rakhiis ah, Qofkaa aan la aqoonsanina waxa uu go'aansaday in uu raadiyo ciddii warqadan lahayd si uu u guddoonsiiyo!!!.

Bill Moore ayaana ahaa 90 sanno jir ku nool rug lagu xanaa-neeyo dadka da'da ah oo ku taal Magaalada Aurora oo ka tirsan gobolka colorado ee wadanka maraykanka wakhtiga warqaddan loo keenay, Qofkan aan haybtiisa la aqoonsan ee warqada iibsaday ayaana ugu dambayn la xidhiidhay inan "gabadh" uu dhalay sarkaalkan ka tirsanaan jiray ciidamada maraykan-ka ee Bill Moore, isaga oo gudoon-siiyey warqaddii uu qoray maalmo uun ka hor maalinta ciida jacayl-ka ee gaalada sannad-kii 2017 maalin-taas oo ay ugu yeedhaan "Valentine's day" kuna beegan 14 feb sannad kasta!!!.

Warqaddaas ayaa ugu dambayntii gaadhay gacanta Bill Moore oo hore uqoray wakhti laga joogo muddo dhan 70 sannadood, Bill Moorena waxa ka tan badiyey dareenka & caadifadda markii uu akhriyey weedhihii uu qoray 70 sanno ka hor isaga oo yidhi:- " waxay igu noqotay kedis & amakaag mana aanan filaynin inaan dib u heli doono sidanna ay igu soo geli doonto waraaqdani"!!!.

Bill Moore ayaa waraaqdan qoray isaga oo ka tirsan ciidamada saddexaad ee maraykanka, qoraalka warqadanna waxa ku qornaa ereyo amaana oo uu u qoray Bernadian waxaana ereyadaa ka mid ahaa " Qaalidaydii & Jacaylkaygii Caqliga badnayd"!!!.

Haweenaydan oo markii dambe ay is guursadeen ayaa u dhashay saddex carruura iyaga oo wada joogay muddo dhan 63 sannadood ka hor intii aanay dhiman sannadkii 2010.

Bill Moore oo ay waraysatay hay'adda warbaahinta maraykanka ee ABC ayaa ugu dambayn hadalkiisa ku soo gebogebeeyey isaga oo leh :- " waan jeclaaday iyana waa i jeclaatay waxa keliya ee aan sheegi karaana waa in aan murugo dareemayo, maxaa yeelay imika ilama joogto "!!!.

Dhambaalada jacaylka ah ee ay iswaydaarsadaan lamaanayaashu waa arrin muhiim ah, xoojisana xidhiidhka lamaanayaasha, kuwaas oo dareen xusuuseed kureeba qalbiyada lamaaanaha iswaydaarsanaya, waana mid kamid ah waxyaabaha

lagu xoojiyo korna loogu qaado xidhiidhka jacayl ee lammaanayaasha ku heshiiyay in ay nolosha inta kadhiman wada noolaadaan wada qaybsadaanna!!!.

Sidoo kalena waa waddo aad umari-karto hanashada qalbi kaasii-jeeda, kaas oo aad rabto in aad kasbato gacantana aad ku dhigto!!!

## ANIGA MA QURXOONI MIYAA!!!




Qisadani waxay Ka Dhacday Dalka Maraykanka Qissadana Waxa Ka Shekeeyey Shiekh Maxamed Xasan Oo Ka Mid ah Culumada Islaamka, Sheikhuna Wuxuu Yiri:- Nin Dhalinyaro ah Oo 24 jir ah Oo Faqiir ah Oo U Dhashay Dalka Marooko Oo aan Aqaanay Nin Akhyaar ahna ahaa Ayaa Waxaa Laygu Yidhi Ninkii Hebel Ahaa Ee Taqiinay Waa Milyaneer Wuxuuna Ka Mid Noqday Maal Qabeenada Aduunka Ugu Waawayn!!!.

Waa Sidee Ayaan Ku Iri Ma Qamaar Buu Ku Helay Mise Qamri, Bal iiga Warama Ayaan dhahay buu yidhi dabadeed!!!.

Maye Sheikh Aan Kuu Waranee Waxaa Dhacday Maalin Uu Shaqa Raadis Ahaa Ayuu Wuxuu Fuulay Daar Ka Mid Ah Daaraha Ugu Dhaadheer

Niyiiyook Ka Dib Wiishkii Dadka Qaadayey Ayaa Waxaa Isugu Yimi Dad Farabadan Intii Allaah (swt) Qadaray In Ay Isugu Yimaadaan, ka Dib Dadkii Waxay Bilaabeen In Ay Dagaan Midba Halkuu Ku Socday, Ka Dib Wiishkii Waxaa Isugu Soo Haray Gabadh Aad U Qurux-badan Iyo Ninkii Dhalinyarada ahaa, Subxaanallaah!!!.

Ninkii Dhalinyara ahaa Sida Lagu Yaqaanay Muslimiinta Gabdhii Indhii Ayuu Ka Laabay Oo Ma Fiirin, Xittaa Hal Mar Ma Fiirin, kadib gabadhii Way Yaabtay Ninkii Dhaliyara ahaana Markii La Gaaray Xafiiskuu Ku Socday Ayuu Dagay Gabadhiina Way Ka Dabadagtay, markaasay Istaajisay Waxayna Ku Tiri:- Aniga Ma Qurxooni Miyaa!!!.

Kadib wuxuu Ku Yiri:- Ma Garanayo Aniga Kumana Arag, haddana waxay kucelisay:- Maxaa Dhacay Oo Aad Ii Fiirin Waysay Ma Qurxooni Miyaa, Waa Sidee, Isna wuxuu ku yidhi:- Diintayda Ayaa ii Diiday In Aan Ku Fiiriyo!!!.

Markaasay Waxay Ku Tiri:- Marna Maku Fakirtay Inta aan Saarnayn Wiishka In aad i Kufsato Ama Aad i Dhunkato, Maya Allaah (swt) Ayaan Ka Magangalay allaah (swt) Ayaana Ka Cabsani, ayuu dhahay.

Markaabay Waxay Ku Tiri:- Aaway Allaah Aad Sidaa Uga Baqi, markaasuu U Sharxay, Markaabay Waxay Ku Tiri:- Ma Diintiina Ayaa Idin Diidaysa In aad ifiiriso Xittaa Mar Qura Ama Aad Wax Igu Samayso, Haa Ayuuna Ku Yiri haddana, Waana U Caddeeyey.

Markaasay Waxay Ku Tiri Ma I Guursanaysaa, Maye Ayuuna Ku Yiri Waxaan Ahay Muslim, misay waxay Ku Tiri:- Hadii Aan Islaamo Ma I Guursani, Haa Ayuuna Ku Yiri haddii aad sidaa samayso, Ka Dib Tawxiidkii Ayuu U Qabtay Gabadhiina Waxay Noqotay Gabar Muslimad ah Halkii Ayuuna Ku Guursaday Hantideedii Oo Dhan Ayeyna Ku Wareejisay, kadib ninkii Faqrigii Hayay Waa Ka Baxay Wuxuuna Noqday Taajir, Wuxuuna Isku Helay Gabar Qurxoon, Maal Iyo Ajar Badan Oo uu Allaah (swt) Ka Rajayn!!!.

Haddaba Intaa Oo Khayr ah wuxuu Ku Helay Ninkani Waa Indhaha Oo Uu Laabay, haddaba indhaha aan laabno oo aan qaadanno amarka allah (swt) iyo Rasuulkiisa Muxammed (scw) markaas ayaynu liibaanaynaa adduun iyo aakhiroba!!!.

## MAAMADII REER CHECHNIYA (SHIISHAAN)!!!



Sawirka kor idiinka muuqdaa waa Hooyo u dhalatay Chechniya "Shiishaan" oo Sannadkii 1996-dii Ciidanka Ruushku ku amreen in ay isaga baxdo Gurigeeda, haddaba maadaama aysan Xambaari karin Culeys badan, waxay Guriga kala baxday oo keliya Sijaayaddeeda Salaadda iyo Sawirka Ninkeedii dhintay Sannado kahor kaas oo xusuus ahaan ay u haysato!!!.

Dadka Wanaagsan waloow ay ifka ka tageen, haddana waxay weli ku dhex noolyihiin Quluubta dadkii ay Wanaajiyeen!!!.

Haddii aad ahayd mid udebecsan una wanaagsan xaaskiisa, qoyskiisa, ehelkiisa iyo ciddii ay kulmaanba, xittaa haddii aad ka tagto daartan adduun,

lagamayaabo haddana in aad marnaba kabaxdo quluubta iyo qalbiyada dadkii aad wanaajisay!!!.

Ku dedaal mar-walba iyo goob-walba in aad la timaaddo kuna dhaqanto hab-dhaqan wanaagsan, xushmad iyo qaddarin, si aad unoqoto qof mar-walba laxasuusto, aan kabixinna qalbiyada iyo quluubta dadka!!!.

**CIDDA FAHANTAABASE ISKA-YAR!!!.**

## KU DHEH WAAN KU JECLAHAY!!!



Waxa uu aha wiil qaba cudurka cancer-ka waxa uuna jeclaaday gabar ka shaqeysa super market uu ka iibsan jiray CD yada rikoodhada,mana uusan u sheegin in uu jecel yahay, maalin walbana waxa uu ka doonan jiray CD isaga oo kaliya ka rabay gabadhaas in uu la hadlo arkana!!!.

Haddaba maalinti danbe ayuu u dhintay cancer kii hayay, kadib waxa gurigiisa timid gabadhi oo raadineysa wiilki waxaana loo sheegay inuu dhintay, waxa eyna gashay qolkiisa waxa eyna ku aragtay waxa CD yaalo oo mid walba aan wali la isticmaalin!!!.

Kadib waa ay oysay, waxaana la weydiiyay sababta ey la oysay waxeyna tiri :- midkamid ah CD yaashan ayaan ugu Sooriday warqad jecel ah isna ma uusan furin oo aqrin !!!.

Haddaba haddaad qof jeclaato ku dheh waan ku jeclahay lagana yaabaa in sidaad ka aaminsanayd si ka duwan aad kala kulanto'e, haba yaraateena hawl ama arrin aad maanta qaban-kartid dib ha ugu dhigin berri iyo wixii ka danbeeyatoonna, waayo waxa laga yaabaa waxyaabo badan oo maanta kuusaamaxaaya arrintaa iyada ah in aad qabato dhammaysona in ay meesha ka baxaan berri iyo wixii ka danbeeyaba adiguna aad ku danbayso'uun qoomamo iyo shallayn!!!.

Ku dedaal wax-kasta ama shay-kasta oo kusugaaya in aad kuqabato sida ugu dhakhsaha badan, uguna suurtogalsan!!!.

## WAAD SAMAYSAY, HADDA KADIBNA SIDAAS USAMAY WELIGAA!!!



Gabar ayaa wiil ay jeclayd ku xujeysay in uu noolaado hal maalin la'aanteeda, wicitaan la'aan iyo message la'aanba waxayna ku tiri:- "haddii aad intaas samayso waan ku jeclaan doona weligey," kadib wiilkii wuu ka ogolaaday xujadii oo ma uusan soo wicin maalinkaas, messagena uma uusan soo dirin oo waxa uu rabay in uu kasoo baxo xujada jaceylkiisa!!!.

laakiin ma uusan ogeyn in jaceylkiisu la xanuunsanayso cudurka cancerka ah oo 24 saacadod uun uga hartay nolasheeda!!!.

Kadib maalinkii xigay ayuu wacay balse wax jawaab ah muusan helin, wuuna soo orday oo waxa uu yimid hooygii ay jaceylkiisa daganayd, kadib albaabka

ayuu xoog usoo furay asaga oo aan xattaa soo garaacin oo dhahaya "Gacaliso xujadii waan kaso baxay", Balse durbadiiba illin ayaa kasoo qubatay kadib markii uu arkay tacsidii jaceylkiisa, waxa uuna helay warqad ay ku qorantahay "waad samaysay gacaliye, hadda kadibna sidaas u samay weligaa"!!!.

Way adagtahay in qof aydaan weli nolosha ku bohooobin hayeeshee uu idinka dhexeeyo xidhiidh keliyi aad ogaato kana warqabto dhammaan waxyaabaha uqarsoon ee noloshiisa, hayeeshee haddana waxa lagaaga baahanyahay inaad isku taxalujiso inta karaankaaga ah arrintaa iyada ah.

Waayo waxbadan oo aad ka ogaato qofkan isaga ah xattaa waa mid kaa anfici doonta gadaal (waa haddii alle (swt) calaf isugu kiin daray'e).

Sidoo kalena waxaad ku dedaalaysaa inaad garab istaagto marka ay soo wajahaan dhibaatooyinka waayaha adduunyadu!!!.

## QAALI WAXAAN ARKAY LUGAHAAGA!!!



Haweeney ayaa Go'aansatay Inay Ogaato qaabka uu Ninkeeddu Uga Falcelin lahaa Haddii ay Guriga katagto iyadoo aan usheegin, kadib waxey uqortay warqad waxayna ku tiri:-" waa Kaa Tagay mana rabo Inaan kula noolaado intaan wax kabadan" kadib warqadii waxay dul saartay miiska iyadiina waxay hoosta kagashay sariirta!!!.

Haddaba saacaddo kadib ayaa waxaa yimid ninkeedii wuxuuna akhriyey warqaddii kadib waxuu bilaabay inuu heeso oo uu ciyaaro isagoo leh:- "anba waa ku nacay, waana ku dhibsaday".

wuxuuna iska baddalay dharkii waxuuna wacay qof, isagoo faraxsan ayuuna ku yiri:- "Gacaliso waa kuu imaanaa waana isla cunteynaynaa Tii doqonta ahaydna way ogaatay in aanan rabin wayna baxday"!!!.

Kadib kadinkuu boobay wuuna baxay, haddaba xaaskiisii sariirta ku hoos jirtay wax walbana maqlaysay ayaa soo baxday iyadoo niyad jabsan oo go'aansatay inay iska baxdo laakiin warqadii ayey furtay waxayna akhrisatay jawaaabtii uu uqoray, lkn waxaa warqada ku qornaa "qaali waxaan arkay lugahaaga taleefankana been ayuu ahaa qofna lama hadlin ee naga daa ciyaarta noocaas ah "!!!.

Ugu horrayn qorshee shaqo walba kahor inta aanad qaban ama bilaabin, kana taxadir, xisaabtana ku darso intii aad kasaalinkarto caqabadaha ka hor iman kara fulinta hawl-qabadkaas, si joogto ahna uhubi in arrimuhu usocdaan sidii aad uqorshaysay iyo inkale, haddii ay leexasho dhanka qorshaha ahi jirtona k dedaal sidii aad sida ugu dhaqsaha badan ugu sixi lahayd hawsha ama shaqadana ugusoo leexin lahayd dariiqii aad uqorshaysay ee aay ku socotay, kana taxaddir kafalcelinta aragtiyahaaga si dhakhso ah!!!.

## LAXDII LUGTA LOOGU XIDHAY DAASADDA!!!



Xaaskani waxay tidhi:- markii aan umulay ilmahaygii ugu horreeyay waxa aan aaday guriga qoyskayga saan usoo joogo inta aan afartan baxayo. waanaan la joogay, kadib maalintii aan dhammaystay ayuu isoo wacay ninkaygii oo igu yidhi waan kusoo kaxaynayaa sii diyaar garow, waayo gurigiiba adiga la'aantaa qiimo malaha!!!.

Anna waxaan isku dayey inaan inyar isu yara macaaneeyo oo uu xoog iigu sii xiiso taas oo ay hablihii iladhashay ay igula taliyeen, dabeeto waxaan ku idhi may masoo noqonayo imika ee laba todobaad/Asbuuc kadib ii kaalay, anigoo maqlaaya taladii walaalahay, kadib wuu iga cadhooday waxaanuu isku dayay inuu igu qanciyo inaan raaco laakiin go'ankaygii ayaan ku adkaystay!!!.

Haddana maalinkii danbe ayuu isoo wacay oo igu yidhi soo noqo, laakiin maan dhagaysan oo sidii hore ayaan ku adkaystay oo waan diiday, kadib waa uu iga tagay mar danbana igu muu soo celin, labadii usbuuc markay dhamaadeen ayuuna ii yimi oo Waa uu i kaxeeyey.

Markaa inta aanan bixin ayuu wuxuu iisheegay iguna yidhi:- gabadh kale ayaan guursaday labadii usbuuc aad iga maqnayd waxaanaan dajiyay gurigeena qaybtii sare markaa saas ula soco, waxaan anna isku dayay inaan u jawaabo, nasiib xumose inta uu igu qayliyay ayuu yidhi:- hadii aad doonayso inaad la joogto reerkiinna la joog haddii kalana inamari, Anna inaan raaco ayaan doortay si aan usoo arko xaaskiisa cusub oo aan uga soo aar goosto!!!.

Markii aan soo galay gurigii ayaan isla markiiba maqlay sanqadhii/jabaqda kabahay xidhnayd cidhibtooda, taas oo igu kaliftay inaan aad u murugoodo markasta oo aan maqlo socodkeeda, ninkaygiina waxa uu bilaabay inuu kolba sare aado oo uu tago iyadoo taasna qalbi jab igu noqotay, Markasta oo aan maqlo sanqadha kabahabana waxa igu soo dhacda inay taa macnahedu tahay inay markasta labisanayso oo xaragoonayso!!!.

Dabadeed laba cisho kadib ayuu igu yidhi:- is diyaari aad soo salaantid caruusadee taasina qasab ayay kugu tahay, waanaan raacay markaan albaabka hor istaagnay ee uu soo saaray furihii qolka Ayaanaan maqlay sanqadh albaabka oo qof furayo, bartii ayaanaan ku dhacayba, waxaana kusoo miiraabay/toosay anigoo wajiga biyo laygaga rushaynaayo oo uu ninkaygii igu leeyahay xbbt toos oo eeg!!!.

Markaan soo kacay aan eegayna waxa meeshii igaga soo baxay Wan/Lax kaas oo lugahiisa lagu xidhay daasado,

Ninkaygii ayaana igu yidhi:- waa caafimaad qabkii aad iigu timaadeen adiga iyo ilmahayga yari sidaa daraadeed waynu ku Alla baryaynaa wixii aad igu samaysayna dib haygu samayn xbbt!!!, kadib naxdin ayaan maalmo kasoo kaban waayay, laxdan xumina markaliya (**maaac)** may odhan intii ay ku xidhnayd meesha!!!.

Markasta ku dedaal in go'aan kasta oo adiga ku khuseeya oo aad qaadanaysaa uu noqdo mid adiga kaa yimaada ee aanu noqon mid cid kale kuu yeedhiso, waayo saamaynta ka timaada go'aankaa laguu yeedhiyay hadhaw cidda dusha uridanaysaa waa adiga, ee ma aha ciddii kuuyeedhisay, sidee ayaad markaa uqaadan kartaa go'aan aanad adigu gaadhin!!!.

Soomaaliduna waxay ku maah-maahdaa ( nin aan kuu furi doonini yaanu kuu rarin), taas oo looga jeedo qof aan hadhaw dhib iyo dheefba kula qaybsan doonini yaanu imminkaba go'aankaaga kuu yeedhinin!!!.

## FADLAN LACAG KU SHUBO!!!



Wiil ayaa aad u Jeclaa gabar balse marnaba ma lahayn geesinimo uu ugu sheegto, kadib habeen xilli fiid ah intuu geesinimo is geliyay ayuu mobile-ka ugu diray farriin kelmado daacad ah oo u qornaa sidan:- “Waan ku jeclahay, waxaan rabaa inaan kula sheekeysto. fadlan ii soo jawaab iina sheeg sida aad dareemayso”!!!.

Ilbiriqsiyo yar ka dib ayaa haddaba waxa dhacday waxa u soo dhacay fariin-qoraal ah mobile-kiisa, haddaba maadaama oo uu aad u baqsanaa, shucuurtiisuna ay aad u kacsanayd markaa, wuxuu go’aansaday in uusan aqrin message-ka illaa subixii goortii uu sidan ka yara degan yahay mooyee wuuna seexday!!!.

Haddaba maalintii xigtay goortii uu hurdada ka toosay ayuu duceystay kuna ducaystay in farriintu u noqoto mid wanaagsan, wuuna qubeystay, ilkihii cadayday, timihii shanleystay, weysa qaatay laba rakcana tukaday, markuu labistay oo quraacday ayuuna mobile-kii soo qabsaday si uu u aqriyo farriintii jawaabta ahayd ee u soo dhacday taas oo uu aaminsanaa filayayna in ay tahay jawaabtii uu kadalbay inay usoo celiso inantii uu farriinta udiray, waxayna u qorneyd sidan: -“Macmiil, waxaa kuugu jira hadhaa yar oo aan ku filnayn si aad message-kan u dirto. Fadlan lacag ku shubo, iskuna day mar kale”!!!.

Arrin aad maanta ama saacaddaa lajoogo qabankarto marna ha isku deyin in aad damacdo inaad wakhti kale dib ugu dhigto, duruufo kale oo la’aantood aan laqabankarin oo ku xaniba mooyee, Waayo waxa laga yaabaa in wakhti ay wakhtigaa kaga haboontahay oo kale aanu jirinba, haddii aad dayacdona aad inbadan gadaal kaqoomamoondoonto!!!.

## WIRELESSKII BILAA PASSWORDKA AHAA!!!



Sheekadani waxay ku dhacday Gabadh waxayna tidhi:- "Waxaan ahay gabadh 20 jir ah, mar kasta oo aan kasoo noqdo goobta shaqadayda oo aan imaado gurigana waxaan arkaa wiil gaarigiisu uu taagan yahay gurigayaga hortiisa, waan la qabsaday muuqaalkiisa, dhab ahaana wuxuu ahaa wiil ay ka muuqato akhlaaq heer sare ah, aad iimuu eegi jirin ee marka uu isha igu dhufto hoos ayuu eegi jiray, inkasta oo aan dhibsaday markii hore haddana waxaan dareemay farxad, waxaan dareemayey inuu isugayo si uu ii arko,Wadnaha ayaana aad ii garaacmo sida qof naxsan marka aan arko gaarigiisa oo gurigayna hortaagan isna uu ku jiro!!!.

Riyadaydu waxay ahayd in aan guursado ka hor inta aan waqtigu iga dhammaan oo aanan waynaan!!!.

In kasta oo gaarigiisu uu yahay Model ama nooc qadiim ah taasina ay muujineyso heerka dhaqaalihiisa haddana waxaan dareemay in aan danaynayo isaga, waayo waa qof akhlaaq wanaagsan, waxaana hubsaday waxa i haya inuu yahay **Jacayl,** waxaana is waydiiyey hadduu gurigiina garanayo oo yimid tolow muxuu aabahaa kuu waydiisan waayey?!!!.

Malaga yaabaa inuu ka baqayo in loo diido sababta heer keenna dhaqaale oo kala duwan?!!!.

Markasta oo aan shaqada ka imaado ama Shoping iyo dukaamaysi aan u socdo hoos ayuu eegi jiray isaga oo khijilaad iyo xishood ka muuqdo, waxuuna iska dhigi jiray qof wax ku mashqulsan!!!.

Waxaan is idhi waxba ha eegin hanti iyo dhaqaale ee mar hadduu sidaa kuu jecel yahay oo maalin kasta saacado kugu sugayo guriga hortiisa si uu kuu arko keliya, xittaa markaan galo guriga kamuusan tagi jirin ee wuu isugi jirey si aan usoo baxo, ama uu isha iigu xado, waxaana niyad ahaan u diyaar garoobay in aan maqlo hadalkiisa ama tilmaan yar oo uu isiiyo, diyaar baana u ahaa guurkiisa!!!.

Waqtigii ayaa bil iyo bar kor u dhaafay, maalintii dambe ayaan go'aan ku gaaray mar hadduu hadli waayay intaa ka badan ma sugi karee inaan anigu la hadlo, kadib darawalkii gaariga igu waday ayaan ku iri istaag, kadibna waan soo dagay, aniga oo wadnahaygu aad u bood-boodayo ayaana ku soo dhawaaday!!!.

Wiilkii muu ahayn wiil qurux badan, haddana waan u diyaar garoobay inaan aqbalo guurkiisa, kadib daaqada gaariga ayaan soo istaagay isaga oo sidii caadada u ahayd gaariga dhex fadhiya, xoogaa baan yara gariiray, haddana cagaha ayaan dhulka ku adkeeyey oo ku idhi:- Iga raalli noqo, waxaan arkaa maalin kasta adigoo taagan albaabka gurigayaga?, wiilkiina waxa uu iigu jawabay:- "Wirelesska Internetka xaafadiinna ayaa bilaa Password la aan ah waana isticmaalaa maalin walbo sidaa ayaan u imadaa gurigiinna!!!.

Kadib waxay tidhi gabadhii hadalkeediina kusoo geba-gebaysay:- naxdin iyo niyad jab Ayaan dhaqaaqi kari waayay!!!.

In aad iska Jeclaato Qof aanad ogeyn waxa uu yahay, garanayna ficilka ama sababta aad ku jeclaanaysaa in ay dhab tahay oo jirto iyo inkale waxay saamayn taban iyo burbur ballaaran ku keeni kartaa dhaawicina kartaa qalbigaaga!!!.

Ugu horrayn ku dedaal sidii aad u hubinlahayd ficil-kasta ama dareen kasta oo aad ka falcelinaysaa in uu dhabyahay, jirona, haddii kale waxaad kalakulmi kartaa arrin aanad mahadin!!!.

## MARWADII MASAYRKA DABNAYD!!!



Hadda ka hor ayaa waxa dhacday gabar ayaa ninkeeda ka masayrtay, kadib waxay u tagtay shiikh quraafaadka qaabilsan iyadoo rabto in loo sixro si ninkeeda loogusoo jeediyo uuna iyada ugu soo jeesto, haddaba toloow maxaa dhacay!!!.

Shiikhii ayaa ku xidhay gabadha in ay keento timo libaax , haddeysan sidaas sameynina aysan waxba soconaynin, gabadhiina way qaadatay amarkii waxayna doontay timo libaax!!!.

Waxay raadisabana waxay tagtay meel libaax joogo, kadib maalinwalba waxay u geeysaa libaaxa hilib iyo waxyaabaha libaaxu jecelyahay, mudo dheer ka bacdi oo ay is barteen llibaaxii iyo iyadu ayay maalin waxay samaysay waxay ku

dhawaatay libaaxii waxayna kasoo gooysay tin, waxayna ula timid shiikhii iyadoo leh waatan waanaan soo dhameeyay hawshii adkayd ee aad ii dirtay!!!.

Kadib shiikhii aad ayuu u yaabay wuxuuna su'aalay sida ay ku keentey timahan libaaxa?, waxayna uga sheekeeysay sida ay u kasbatay libaaxa iyo waqtiga ay ku qaadatay, markii ay sheekadii dhammaysay ayuuna shiikhii yiri:- libaax xayawaan ah oo aan caqli lehayn ayaad sidan usoo jiidataye maxaa kaa hor istaagi karo in aad ninkaaga soo jiidatid ?, Sida aad libaaxa usoo jiidatay usoo jiido ninkaaga ayuu dabadeed hadal ugusoo gebagebeeyay shiikhii!!!.

Kadib gabadhii ayaa garowsatay hadalkii shiikha waxayna ogaatay in wax walba ay tahay sida aad ka dhigato, arrintaa iyada ah ayayna ka hawl gashay!!!.

Waxa aad goosanaysaa wixii aad beeratay, marwalba taas niyadda ku hay xasuusnawna, kuna dadaal mar-walba in aad beerato wax qurux-badan oo wanaagsan, si aad ugurato midho quruxbadan oo wanaagsan!!!.

## MASAYRKII XADHKAHA GOOSTAY!!!



Haweenay mareykan ah oo Taajirad ah aadna u Hinaase ama Masayr badnayd ayaa xanuunsatay, waxaana ay marwadani cuqdad ka qabtay in haddii ay dhimato ama geeriyooto uu ninkeedu inta uu dhaxlo hanti badan oo ay lahayd, kadibna uu guursan doono gabar kale oo uu xoolaheeda kula raaxaysan doono!!!.

Gabadhan oo muddo xanuunsanaysay ayaa Aakhirkii markii ay dareentay in ay geeridii hayso ayaa waxey ninkeedii u qortay warqad ay kaga hadlayso dardaarankii dhaxalka, waxaana ay ku sheegtey in ninkeedu uu xoolaheeda ka qaato Laba ($2) Dollar oo lacag ah oo keliya, aanuna waxkale ka qaadan Karin kuna lahayn!!!.

Ninkii oo ogaaday dardaaranka gabadha, ayaa isaga oo aad u careysan weydiiyey, sababta ay sidaas ugu gelayso ee 2 doollar oo keliya u siisay, Laakiin halkii uu jawaab kale ka sugayey, waxa ay gabadhii si dhib yar ugu jawaabtay:- “waxaan doonayaa in aad lacagtaa siisato xarig aad isku dal dasho ama isku marjisid, si aad dhaqso iiga daba timaaddo oo aanad naag kale u haweysan”!!!.

Lamaanaha wada nool waa in uu midkastaaba dhankiisa ugu dadaalaa sidii uu u kasban lahaa qalbiga iyo quluubta kan kale, arrintaa iyada ah oo ay ka dhalanayso in mid kastaaba hantida iyo xoolaha uu gaarka uleeyahay uu u arko wax uu kan kale leeyahay, sidoo kalena badhaadhihiisa iyo barwaaqadiisuna ay tahay tiisa, mid kastaana uu kakale naftiisa ka horaysiiyo, taas oo keenaysa in qoysku uu ku noolaado farxad, badhaadhe iyo barwaqo iyo kala shaki la’aan, haddii geeridu kukala horaysona wanaag iyo isu laabxaadhnaan lagu kala boqoolaayo, masuuliyadda qoyskana uu marba ka danbeeyaa halkaa kasii wadayo!!!.

Kudedaal wakhti kasta iyo goob kastaba sidii aad lammaanahaaga ugu beeri lahayd, kalsooni dhab-ah buuxdana, una hanan lahayd, una kasban lahayd qalbigiisa/qalbigeeda iyo quluubtiisa/quluubteeda, markaas ayaadna noqonaysaan kuwo nolosha inta uga hadhay kuqaata kuna dhammaysta farxad, rayn-rayn iyo is-aaminaad!!!.

# GUURSANMAAYO ILLAA AAN HELO GABADH GARAAD BADAN!!!




Nin ayaaa yidhi guursanmaayo illaa aan la kulmo gabadh ila mid ah oo garasho leh dabadeedna wuxuu galay safar lug ah, kadib waxay waddada ku kulmeen oday oo ay halkaa iskala qabsadeen, kadib dhawr daqiiqadood markii ay socdeen ayaa ninkii dhalinyarada ahaa odaygii ku yidhi ma ku qaadaa mise waad i qaadi, odaygii ayaana ku yidhi ninkii dhalinyarada ahaa ma suurtagalbaa inaan ku qaado ama i qaadid waa ku sidee ninyahow!!!.

Haddana in yar kadib waxay la kulmeen naxash la sido misuu inankii dhalinyarada ahaa wuxuu haddana odaygii ku yidhi ma nool yahay mise ma noola, Odaygii oo cadheeysan ayaana mar kale haddana ku yidhi inankii waa ku sidee adeer sowdigan arkaaya in aanu noolayn oo la sido!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Dhowr daqiiqadood kadib ayay haddana waxay arkeen beer weyn oo si fiican u baxay, inankii ayaana wuxuu ku yidhi odaygii maxaad u malaynaysaa beertan dadkii lahaa miyeey cuneen mise may cunin?, Odaygii oo markan cadhaysan ayaana ku yidhi inankii adeer su'aalo waali ah uma haayo jawaabo, waxaanuu u raaciyey gurigaygu waa kaase ina mari oo illaa saddex cisho ila joog!!!.

Dabadeed markii ay aqalkii tageen odaygii oo carruur ka dhalay gabadh kaliya ayuu gabadhiisa ku yidhi aabbo casho noo diyaari waxa ila socda wiil dhalinyaro ah oo intii aanu wada soconay su'aalo bilaa micno ah i weydiinaayaye, kadib inantii ayaa ku tidhi oo muxuu kugu yidhi aabo?.

Odaygii ayaana wuxuu u sheegay inantii waxii dhex maray ninka yar, inantiisa ayaana ahayd mid aad u caqli badan taas oo u sheegtay inuu wiilka yari aabbeheed ka saxsanaa, oo markuu ku lahaa maad i qaadi mise anaa ku qaadi wuxuu ka waday maad ii sheekayn mise anaa kuu sheekeeyaa, markuu ku lahaa ma dhintay mise wuu noolyahayna wuxuu ula jeeday carruur miyuu ka tagay tolow mise kamuu tagin, tii beertana waxuu ka waday talow dadkii beerta lahaa ma iibiyeen oo wax ma ka cuneen wixii ka soo baxay beerta mise kamay cunin!!!.

Odaygii oo la dhacay jawaabaha inantiisa ayaa dabeed ku laabtay inankii oo ku yidhi waar waad iga saxsanayd oo sidaasaad ula jeeday su'aalahaagii, inankii ayaana ku yidhi:- maaha mid maskaxdaada ka timi ee runta ii sheeg xagge baad kala timid!!!.

Kadib wuxuu uu sheegay inuu dhalay inan caqli badan una sheegtay, halkii ayuuna inankii ku waydiistay odaygii inantiisii, odaygiina ku siiyay, sidaas ayuuna ku guursaday kulana aqalgalay inantii caqliga badnayd!!!.

Garashada iyo garaadku waa hibo Allah (swt) uu bixiyo, kumana xidhna d'a iyo wixii la halmaala toona sida aynu ka dheehan karayno qisadan aynu kor kusoo xusnay!!!.

Hammiga iyo himiladuna haddii aanad wal-walaac la iman ee aad sideeda ugu taagnaato, uguna adkaysato, ALLAHNA (swt) talo saarato, waxa hubaal ah in aad aakhirka ka guul-gaadhi doonto, wakhtiga ay kugu qaadataa inta uu doonoba kaleekaadee!!!.

**SHIMBIR WALIBANA SHIMBIRKIISUU LADUULAA!!!.**

## WAXAAN GUURSANAYAA NIN FARXAD ISIIN KARA!!!



Waxey dhihi jirtay waligeed “Waxaan guursanaya nin farxad isiin kara’’dabeeto kadib waxey guursatay abdirahman oo ah wiil aan laheyd lugo iyo gacmo oo Allah (swt) aanu siinin, markaas ayey asxaabteedii ku yiraahdeen “sow maad oran jirin waxaan guursanaya nin farxad isiin kara, markaa siduu farxad kuu siinaya nin aan lixdiisa lixaad laheyn oo naafo ah?!!!.

Kadib waxey tiri walaashan qalbiga wanagsan leh:- “Farxadda waxa laga helaa qalbiyada ama dadka ku qanacsan qadarta rabbi (swt), dadka raalli ku ah wuxuu rabbi (SWT) u qaddaray’’!!!.

Allaahu akbar, muhiim ma'ahan qofka aad nolosha la wadaageyso siduu u egyahay, reerkuu yahay iyo midabkiisa intaba, balse muhiimaddu waa qalbi diin iyo imaan leh, aanana laheyn xaasidnimo iyo xumaan.

Ku qanac qaddarta rabbi (swt) kadib waxaad noqoneysaa qofka ugu taajirsan uguna qanisan dunida, qaninimaduna waa qalbiga ee ma'aha maalka faraha-badan ee la-urursho, allahna (swt) ha inaga dhigo kuwa ku qanca oo raali ku noqdo qadartiisa!!!.

# GUURKII SHURUUDAHA WATAY!!!



Gabar baa jirtay aad u Qurux Badan oo Ahlu diin ah, laakiin Waxay Dooneysay wiil Si Fiican diinta u Yaqaana mooyee wiilkale in aanay guursan waxayna tiri:- waxaan guursanayaa Wiil maalin kasta Qur'aanka akhriya, sannadka oo dhanna Soomaya-habeekii iyo Maalintiiba, xasuusta Allena (swt) Afka ku heynaya goor kasta!!!.

Gabar aad u Qurux badan bay ahayd Wiilal badana Way doonayeen inay Guursadaan laakiin way ogaayeen wiilashaasi inaanay Sameyn karin Sida ay Dalbatay, ka dib ayaa wiil u yimid kuna Yiri Waan kasoo bixi karaa Waxa aad dalbatay oo dhan, isla Markiina labadoodii waa la isku Guuriyey!!!.

Kaddib arooskii Murkuu Maalin Saddexaad marayey Gabadhii waxay aragtay in uu Ninkeedii akhrinin Qur'aanka, xittaa in uu Soomin iyo in uu habeekii Saqda dhexe Soo kicin si uu allaah (swt) ugu Cibaadeysto, waxay is tiri Bal Sug hal usbuuc Haddii uu is beddelaayo, laakiin Wax isbedelitaan ah kama muuqato, ma eysana arkin wax isbeddela, markaas ayey Xanaaqday ka dibna Ay dalabtay inuu Furo!!!.

Kadib labadii is Qabaybaa iimaamkii isku daray u yimid markaas buu iimaamkii Waydiiyey Ninkii:- Maxey ahaayeen Shuruudda aroosku?, ninkii baana ku Jawaabay:-Waxey ahaayeen in aan Qur'aanka akhriyo maalin kasta, in aan Soomo sannadkii oo dhan, iyo inaan Habeen iyo Maalinba allaah (swt) Caabudo {Xasuusnaado}, markaas buuna iimaamkii ku yiri:- Ma Fulisay intaasi oo Shuruud? Ka dib baa ninkii isagoo Daggan ku yiri:- Haa, iimaamkiibaana Yiri: -haddaba haweenaydaadii Waxay igu Tiri:-ma aadan Sameynin,Sidaas awgeed Ayaana Furitaanka u dalbay!!!.

Kadib ayaa iimaamkii Ku dhahay Qur'aanka Ma akhrisay Maalin kasta?, wuxuuna ku Jawaabay Haah, markaas buu imaamkii yiri sidee ku akhrisay?, markaas buuna ninkii yiri:-Waxaan akhriyaa Suurad Al-ikhlaas Saddex mar maalin kasta wuxuuna u raaciyey nebigeena (SCW) ayaa yiri:-Akhrinta suurad al-ikhlas Saddex mar Waxay la mid Tahay Adigoo Qur'aanka dhan akhriyey.!!!.

Iimaamkii indhaha ayuu Taagay haddana ayuu Yiri:-Hayee sidee baad ku Soontay sanadka oo dhan?, ninkii baana ugu Jawaabay:-Waxaan soomay rabadaanka oo dhan, kadib lixda Beri ee ku Xigta ayaan ku daray ee Bisha Shawwaal ee Waddaaca, wuxuuna raaciyey Nabiga (SCW) Wuxuu Yiri:-Qofkii rabadaan

dhamaysta oo Lixda Shawwaal ku dara Yacnii Waddaaca Wuxuu la mid Yahay isagoo Sannadkii oo dhan soomay, Iimaankii Wax uu ugu Jawaabo ayuu Waayey illeen Wax khalad ah ma uusan Sheegine kadib buu haddana weydiiyey Sidee baad habeenkii dhan ugusoo Jeeday oo allaah (swt) u Xasuusaneysay, ileen Wuu hurday ayey Xaaskaagu igu Tiri'e?!!!.

Iimaamkiina wuxuu is dhahay Tan kama Jawaabi karo laakiin ninkii Si deggan Ayuu Haddana uga Jawaabay Wuxuuna ku Yiri:-Waxaan Jamaaco ku Tukaday Salaatul Cishe ka dibna maalinta kale waxaan Jamaaco ku Tukaday salaatul Fajri, wuxuuna u raaciyey Nabiga (SCW) wuxuu Yiri:-Qofkii salaadda Cishaha iyo fajriga Jamaaco ku Tukada Waxay la mid Tahay isagoo habeenkii oo dhan soo jeeday oo allaah (swt) Caabudayay, markaas buu iimaamkii Ninkii Fiiriyey isagoo yaaban kuna Dhahay adigiyo Gabadhaaduba baxa Allaah (swt) ha isku kiin Barakeeyo'e, Baxana arooskana Wax ka Khaldan ma Jiraane Guulaysta!!!.

Allihii (swt) abuuray makhluuqan majirto cid uga aqoon badani, kadib allah (swt) cajsigooda iyo wahsigooda awgeed ayuu waxwalba ufududeeyay qabashadeeda/qabashadiisa hayeeshee cid fahantaaba iska yar, inyar oo allah (swt) fahansiiyay ayuunbaana fahamsan, intaa yar ee fahamsanise waa inta nolosha if iyo aakhiroba ama labada daaroodba liibaanta, Allahna (swt) waxaan waydiisanaynaa in uu inagu daro kuwaas!!!.

**YAA RABBAL CAALAMIIN NAGU-DAR KUWAAS!!!**

# NINKII LAGU CASUUMAY KAQAYBGALKA AROOOSKA XAASKIISA!!!



Qisso la yaabka leh ayaa waxey ka dhacdey boqortooyada dalkaasi Sacuudiga kadib markii nin lagu casuumey arooska xaaskiisa inuu ka soo qeyb galo, waa arrin la yaab leh runtii, nin lagu magacaabo Sharmarke ayaa waxuu qabey haweenay, taas oo u joogtey gurugiisa isaguna waxuu shaqo u aadi jirey baadiyaha dalka sacuudiga uuna ka soo dhacsan jirey nolol maalmeedkiisa waxuuna ku maqnaan jirey laba isbuuc.

Haddaba waxa dhacdey in xaaskiisii ay shukaansato nin kale una sheegtey iney garoob tahey muddo dheerna ay wada socdeen, aakhirkiina waxay isla meel dhigeen iney is guursadaan, gabadha oo og in ninkeedu uu maqnaado laba isbuuc ayaana waxay arooska ka dhigtey maalin jimca ah oo uu isagu maqan yahey,

balse nasiib darro Sharmaarke waxaa soo wacey ninka xaaskiisa aroosi rabo oo ay saaxiibo ahaayeen waxuuna u sheegey in uu aqal gali rabo maalinka jimcaha ah uuna ka soo qeyb galo, sharmaarkena waxa uu u sheegey inuu imanaayo maadaama uu saaxiibkiis yahey, wuxuuna ka soo qeyb galay arooskii oo habeenkii jimcaha ka dhacayay magaalada jidda!!!.

Wax cunid iyo cabid kadib waxaa la gaarey xilligii arooska la soo galin lahaa, haddaba daqiiqada kadib waxay soo galeen goobta balse waxaa indhaha ku dhuftey Sharmarke oo ay aheyd xaaskiisa, wuuna naxey wuuna shakiyey isagoo iswaydiinaaya qoftan taashka wadato ma xaaskaagiibaa mise waa qof kale, markii wajiga si fiican looga qaadey ayayna indhaha isku dhufteen mise waa xaaskiisii oo gacanta uu heysto saaxiibkiis!!!.

Labadoodiiba waxay ku noqatey fajac iyo amakaag, talona farahay ka baxdey, kadib sharmaarke waxuu abaaray xaaskiisii iyo saaxiibkii meesha ay fadhiyeen waxuuna u sheegey xaaskiisii ineysan isku naxin ee ay dhameysato arooskeeda dibna aysan ugu soo laabanaynin isaga!!!.

Balse waxa soo dhexgalay isna ninkii arooska ahaa oo ku yiri Sharmaarke maxaa kugu dhacey, waxuuna u sheegey iney gabadhan tahey afadiisa ayna guriga u joogtey, ninkii saaxiibkiis ahaa ayaana naxey oo istaagey hadana fariistey una sheegey isna ineysan xaas u noqon gabadha waxan samaysay, sidii ayeyna dhanwalba kuseegtay, arrintan ayaana waxay ka fajicisey boqolaal dad ah oo ka soo qeyb galay arooska!!!.

Waxbadso waxbeelbay dhashaa, qofka daacadda ahna ALLE (SWT) ma hoojiyo, kudadaal markasta markaa in aad adigu noqoto ka daacadda ah, haddaad saas samaysona lagamayaabo in ay marnaba cidina ay kaa guulaysato, cidda marwalba guulaysanaysaana wuxuunbay noqondoontaa adiga ama cidda daacadda ah!!!.

**Daacadi ma hungawdo.**

## GABADHII IYADU IS GUURSATAY!!!



Haddii aad maqli jirtay lammaane aqal galay, rag isguursaday ama Dumar dhexdooda isqaba, maanta waxaa soo baxday sheeko intaas oo dhan ka duwan, Laura Mesi oo ah Macallimad dadka barta jidh-dhiska ayaa shaacisay iney iyadu isguursatay ka dib markii ay muddo 20 sanno ah raadineysay nin iyada ku habboon ayna ku guuldarreysatay iney soo hesho!!!.

Maadaama ay si dhab ah u qaadatay guuldarrada, Laura Mesi ayaa markaas hor joogsatay muraayadda, waxayna bilowday inay su'aalo weydiiso nafsaddeeda, isla markaana ay isla nafsaddeeda jawaabaha ka hesho!!!.

Sidaas darteed, 40 sanno jirtan Laura Mesi ayaa jawaabtii ugu habbooneyd ka heshay nafsaddeeda (waa say iyadu isku qancisaye), taasoo ku

dhaheysa:- maadaama aadan helin ninkii kugu habboonaa ‘Adigu isguurso’, xaflad aan nuuceeda dunida hore loogu arag ayeyna ku dhigatay magaalada Lissone, ee gobolka Lombardy ee dalka Talyaaniga, halkaas oo ay timid iyadoo xiran taajka caruusadda, waxayna dadkii ay ku casuuntay xafladda u xaqiijisay inay nafsaddeeda marwo u tahay wixii haatan ka dambeeya oo ay iyadu isguursatay!!!

Laura Mesi ayaa faraanti qaas ah isku gelisay si ay u muujiso inay iyadu nafsaddeeda guursatay. goor dambe ayeyna u sheegtay joornaalka La Repubblica inuu arooskani ku yimid sharad ay la gashay asxaabteeda iyo qoyskeeda, “Waxaan u sheegay asxaabteyda iyo qoyskeyga in haddii aanan helin ninka igu habboon illaa maalinta aan ka 40 sanno jirsanaayo, aan markaas guursan doono nafsaddeyda.” ayey tiri haweeneydan!!!.

Xafladdan oo cinwaankeeda laga dhigay (Laura Mesi Sposa Single), ayaa sawirro xafladdan laga soo qaaday waxay qabsadeen baraha bulshada isla markiiba!!!.

Wakhti kasta oo ay kugu qaadato, xattaa haddii ay kugu qaadanayso cimrigaaga oo dhan marna ha aqbalin guuldarada iyo inaaad nolosha ku fashilantay, una sheeg nafta marwalba in ay weli jaanis haysato, ummadeenna muslimka ahna gef aynu kagallay rabigeen (swt) ayayba inagu tahay haddii aynu nafta waxaas oo kale ugu sheekayno, waayo ALLAH (SWT) wuxuu inoo sheegay in waxwalba ay isaga gacantiisa ku jiraan, markay dhibaato inasoo wajahdona aynu isaga xaggiisa ula laabanno.

Usheeg nafta marwalba in aysan jirin wax guusha ka hortaagani, hana ka baydh-baydhin xariiqda tooska ah ee aad jeexatay raacaysona si aad ugaadho himiladaada, iskana ilaali kana taxaddir in ay kuniyad jebiyaan kuwa waxbalba dhanka xun kafiiriya arrimaha, haddii ay caqabadi ku hor istaagto kunasoo wajahdona unoqo rabbigaa (swt) waydiisona in uu kaa horqaado kuuna fududeeyo dhibkaas xallintiisa, waana hubaal haddii aad saa samayso in aad ka mid noqonayso kuwa guulaystay!!!.

**Samirku waa mid kamid ah furayaasha Guusha.**

# IYADAA ISKU HAYSA!!!



Nin geel jire ah oo doobnimmo ku raagay ayaa waagii dambe guur u kacay, isagoon docna ka eeginna ayuu gabadhii ugu horreysay ee ay isbarteen durbaba guur kula heshiiyey, waa dad aan is dabeecad iyo dhaqan aqoone markii arooskii laga baxay ee nolashii rasmiga ahayd bilaabatay ayaa haweenaydii waxay la soo baxday dabci aannu ninku jeclaysan!!!.

Waase nin doobnimmo dilootaye, geel badanna ka bixiyey haweenayda'e wuu iska dulqaatay oo wax hadal ah kama oran dabeecadda uu ku arkay xaaskiisa oo haddii uu ka sheekeeyo ceeb ayuu isula yaabay iyo in lagu maadsado, wixiisuuna iskala aamusay, dabeecadda ninku aannu jeclaysan ee haweenayda uu ku arkayna wax kale ma ahayne waa cir-wayni (cunto cun badni)!!!.

Iyadoo sidaa lagu wada nool yahay ayaa reerka waagii dambe waxa soo martiyey wiilka Aabihiis, dhawr maalmood oo uu joogayna isha ayuu hoos ugu xadayey cunto cunka wiilkiisa ilayn waa beer wax dhalaye, waxay saa ahaatobana aakhirkii waxa u soo baxday in caatada wiilkiisu u joogsaday iyo gaajada la soo daristay ay ugu wacan tahay haweenayda iyo in marka cuntada ay wada cunayaan isagu (wiilku) uu faraha fooddooda wax ku cuno, hase yeeshee gabadhu sacabka si weyn u buuxsato isla markaana iyadoo wax yar ka soo wareegin bilowga cunto cunka ay geesteeda saxanka deg-deg udhamayso!!!.

Odaygii waxa u cuntami wayday sida xaalku ku socdo, maalinkii dambe ayuuna wiilkiisii wuxuu ku yiri:- "Aabe waxaan jeclaan lahaa in maanta aniga iyo adiga aan wada qadayno, waayo waan u xiisay waagii hore ee aad ila cuntayn jirtey", sidii ayaana la yeelay oo maalintaas waxaa qaddada la isugu daray wiilkii iyo Aabihiis!!!.

Haddaba gabadhii meel dheer lama aadin saxankeedii ee meel u muuqata ayay qadadii iyaduna lugaha ula kala baxsatay, haddii sheeko iyo cunto cun lagu jiray, odaygus'e uu isha hoos ugu xadayo gabadha uu soddoga u yahay sida ay wax u rafaadinayso ayaa wiilkii wuxuu dareemay in Aabihiis uu la yaaban yahay gabadha xaalkeeda, kadib isagoo qancinaya Aabihiis ayuuna ku yiri:- "Aabe iska daa waxba yaanay ku dhibine wixii ay anniga igu haysey iyadaa maanta nafteeda ku haysee"!!!.

Hadda ogow wixii aad dhibaato ummad ama shakhsi aad u geysataa meel dheer ma aadayso ee adigey dib kuugu soo laabaneysaa, maalin maalmaha ka mid ah!!!.

Ku dedaal xubin kasta oo jidhkaaga ka-mid ah in ay ka nabad-galaan aadamaha kale iyo noole kasta oo rabbi (swt) abuurtay, markaas ayaad adna noqonaysaa mid ku naaloonaya inta nolosha uga hadhay jawi ammaan ah xasiloona!!!.

Diinteena islaamkuna waxa ay ina faraysaa in xubin kasta oo kamid ah jidhkeena ay bulshada inteeda kale ee aynu lanoolahay ka nabad-galaan.

## DOOB DAREEN BAA DILAY!!!



Nin u dhashay dalka Indonesia oo lagu magacaabo Faiz Nuuradiin oo 28jir ah ayaa nafta ka jaray Ayshah (Ca'isha) oo ahayd gabar ay jaar (deris) ahaayen oo ka dayn weyday su'aasha ah "**Goormaad Guursanaysaa?",** su'aashan oo inbadan gubtay Faiz ayaana sababtay in uu go'aan ku gaadho inuu nolosheeda oo dhan soo gabogabeeyo!!!.

Diinteena islaamka su'aasha badan way inaga reebtay, waxa ayna sidoo kale inoo sheegtay in sidoo kale umado hore lagu halaagay, Haddaba akhriste kadheerow su'aasha badan iyo sida tan iyo kuwa lamidka ah, waayo xitaa sida muuqata waxaaba suuragala inaad noloshaada ku waydo!!!.

## XAASKAAGA ILAASHO!!!



Ninbaa wuxuu qabay Gabar Qiimo dumar Alle (swt) udhammeeyay Samir iyo iimaana qalbigeeda Eebe wayne (swt) ka Buuxshay, Dabeecad, Dulqaad, Daacadnimo iyo dabacsanaanna Alle (swt) ku manaystay.

Waxay jeclayd iney Seygeeda marwaliba Adeecdo ninkuse wuxuu Ahaa Nin Aad uxun oo an Xaaskiisa Xaqeeda ilaalin waqtigiisa inta Badana wuxuu ku Bixinjiray Raadinta qaadka iyo Daroogooyin uu isticmaalijiray!!!.

Habeenkii wuxuu So dhacaa Xilli Dambe oo ay Xaaskiisu jiifto wuxuuna kaladuldhacaa qaylo iyo Qaxar, iyaduna waxay Tiraa Xaaji Hoos uhadal Haddaad doonto igu qayli lkn Derisku Yaaney Namaqlin waa xilli dambee, subixii

markuu Soo kacana wixii qarash Guriga yaala ayuu Hora uqaata Gabadhuna uma diido, dukaan yar ayey Xaafada kulahayd Biilkeedana Halkaasey kasoo kasbataa.

Maalintii dambe ayuu Hurdadii kudaahay Gabadhiina Dukankeedii yaraa ayey iska furatay, wuxuu hurdobana Maqribkii ayuu so kacay, Wuxuuna ku yiri:- Naa Isii lacag Aan qaad ku doonto, waxayna Tiri:- xaaji Waxaan Hayaa lacag yar oo Aan labada gabdhood Caana ugu gadan rabo ee Bal Caawa iska Samir!!!.

Kadib Inta uu qoslay Ayuu yiri:- Naa gabdhona aniga Waxba igamageline Lacagta isii, waxayna Tiri:- Dankalaad leedahaye malacagaan Hayaad waayi jirtay?, kadib intuu sidii Wax waalan ugu soo booday ayuu Feer iyo laad isugu daray, qayladiibaana Derisku kusoo Baxay, lacagtii yaraydna Waa lasiiyay Carruurtiina Deriskaa Caànihii kabixiyay!!!.

Gabadhii Waa ay Xanuunsatay maalmo kadibna Xanuunkii muddo markuu Hayay Ayaa Isbitaal lageeyay dhaqtarkiina Wuxuu xaqiijiyay In Uu nabar xuni gabadha kudhacay xilligii loobahnaana aan lakeenin, Gabadhiina gurigeeda ayaa luguceliyay Ayaàmo dhowra kadibna waa geeriyootay, Jugtii Ninkeedu ugeystay ayaana geerideeda usabab Ahayd waana lasoo aasay.

Hadda xaaladdii gurigu Way isbadashay, labadii Carruur ahaydna Waa Hooyo Beeleen, Dhimashadana waxa keenay  Allah (swt) ka sakow Abohood lkn iyagu wàxaas waxba kama oga oo waa saqiir, gurigii markuu yimid ayuuna wuxuu arkay labadii gabdhood oo sidii 2 Shimbirood Wajiga inta isisaarteen Ku hurdaya

Fadhi illeen Hooyo majirtee, Odagiina Nolol cusubaa ubilaabatay, waxaana Fuulay Masuuliyad Cusub oo Tii Hore uu u dayacay ay dhashay!!!.

Subixii Markuu waagu Baryay ayuu furay Boorsadii Xaaskiisa, waxa uuna arkay warqad, Wuu furay waxana ku qornaa Qoral uu layaabay oo ahaa:- “Ninkaygiiyow Waxaan Filayaa Markaan kaa fogaaday inaad isbadashay, 2 Daydii gabdhood Aabohoodii Xumaa Matihid ee Waxaad tahay Aabe Fiican oo kudadaalaya korinta gabdhihiisa yar-yar, Xaaji Alle (swt) Haku Cafiyo Lkn Waxaan kuu dardaarmayaa inaad guursato Eedo fiican oo 2 dayda gabdhood Hooyo unoqota, Garabkaaga Allah (swt) ha galo Waana ku cafiyay lkn Gabdhahayga Ha usheegin inaad Adigu idishay’’!!!.

Ninkii ilma kulul ayaa kasoo fakatay Waxa uuna layaabay Nasiibkiisu sida uu uxumaaday waayo xaas Wanaagsan ayuu EEBE wayne (swt) siiyay lkn Gacantiisa ayuu isku dhaafiyay, Hayeeshee hadda muxuu qaban karaa?, Jawaabtuna waa waxba, belaayaduna sida ay soomaalidu tidhaahdo hore laqabtay leedahay ee dabo laqabto ma laha.

Haddaba Wll haddii ALLAH (SWT) kusiiyo Xaas wanaagsan Abaalkeeda Hakadhigin Xumaan, waxaanaad ku dadaashaa Ilaalinta xuquuqda xaaskaaga, kasbo qalbiga xaaskaaga oo hakubeerin Nacayb iyo cuqdad. Gabar Adiga kuusoo go’dayna Mamudantahay inaad Sidii kubaddii ugu dheesho?, waa maya jawaabtu, noloshuna dulqaad bay Rabtaa, Markaas ayaadna noqonaysaan kuwo si wada-jira nolosha uga guul-gaadha!!!.

## GOD QIYAANO HA QODIN HADDAAD QODDONA HA DHEERAYN!!!



Wiil yar oo caadil la yiraahdo ayaa wuxuu ku noolaa nolol aad u qaraar oo xumaaan badan, qamrada buu cabi jiray, hablaha ayuu ka tuman jiray, fasahaad badan buuna ku noolaa, gabdhaha ayuuna meelahaas ka ugaarsan jiray!!!.

Waxa uu maalin helay gabar la yiraahdo Rabaab oo ardayad ah oo jaamacadda dhigata, kadib telfoonkeedii buu helay wuuna telefooniyay wuuna la hadlay, si wanaagsan beyna u sheekaysteen, Gabdhahana inta uu sidan oo kale la hadlo ayuu meel ku balamin jiray markaasuu xumaan ku samayn jiray!!!.

Haddaba gabadhan ayada ahi wey kashiftay oo tiri maya i arki meysid ee telefoonka aan weligeen ku sheekeysanno, lacag badan beeyna telfoonka kaga dhammeysay, maalin walbana waa uu u sheekeeyaa bes lkn inuu la ballamo weey iska diiday, markii danbe ayuuna wuxuu ku yiri inaan ku guursado ayaan rabaa, xumaana ma rabo, waxaas ayuuna ku dul aqriyay, waxa uuna ku yiri guriga aan kuu diyaariyay iyo alaabta aan iibiyay kaalay soo arag haddaad beentey moodeysid, wax uu wadabana wey soo jilicday gabadhii, wuuna u dhaartay wuxuuna ku yiri:- Wallaahi Cadiim inaanan xumaan rabin, hadalkaagu wuxuu u egyahay naag caqli badan, bes waxa rabaa inaan ku guursado gurigana soo arag maalin subax ah!!!.

Gabadhu kulliyadda ayay dhigataa, jaamacadda aabaheed ayaana subixii usii qaada duhurkiina soo qaada saas ayayna ku noloshahay, aabaheedna waa oday aad uu daran oo wuu kulul yahay.

Rabaab subaxdii markii odaygu meeshii dhigay ayay kula balantay inankii ku tirina kaalay meeshaas, iiguna imaaw jaamacaddii horteeda, meeshii buuna ugu yimid wuuna kaxeeyay, meeshii buuna la tagay, guri buuna tusay ay kireesteen asaga iyo qaar ay asxaab yihiin!!!.

Gurigii buu tusay, waa kan adigaa iska leh gurigan, ka aad iga badal dhahdidna waan kaa badalayaa balaa balaa balaa ayuu ku yiri gabadhii, gabadhii wuxuu wadaba wuu ka tunday markii danbena wuxuu ku yiri:- sharaab baan inoo soo qabanayaa sii yara joog!!!.

Kadib gurigii ayuu kor kaga qufulay wuuna baxay baabuurkiisii buuna kaxeystay si xun buuna u waday waayo ha iga habsaamin beey tiri Aaabaheey baa isoo doonaayee, waqtigii uu imanaayay ayaana soo dhawe, xoog ayuuna u waday baabuurka kadib qalad ayuu galay waana la qabtay, traffic kadii ayaana qabatay weyna kaxeeyeen, baabuurkii baana lagu riday, waa la xiray furuhiina asaga ayaa haya gabadhiina meeshii ayay ku jirtaa!!!.

Kadib mid saaxiibkiis ah oo isaguna fure kale haysta oo asaguna gabdhaha soo ugaarsada oo meeshaa keena ayuu u telefooniyay waxaana uu ku yiri:- war heedhe gabar baan ka tuntay oo ceyn kaas ah gurigii baanan intaan ku xiray, anigiina waa leey xiray, iyadana aabaheed ayaa uu iman rabee jaamacadii ayaay aadeeysaaye ee orod ka fur albaabka!!!.

Waa isa soo daayay kiina albaabkii ayuuna yara garaacay, gabadhiina waxay ku ooyeysaa:- alla aabahey ayaa imanaaya, alla maxaa i haleeyay, waqtigii waa la garaay, saas ayay ku ooyeysaa, albaabkii ayuuna ka furay, wiilkana Xaamid ayaa la dhahaa, kadib markuu ka furay ayaa mise gabadhuba waa walaashiis!!!.

Gabadha uu saxiibkiis la tuntay waaba walaashiis, Xaggii ayuuna naxdin dhaqaaqi kari waayay, iyadiina naxdin ayay isdhaqaajin kari wayday, markaas ayuuna yiri:- ma xumaan ayaad keentay, karaamadeydii ayaad meel uga dhacday, sharafteydii ayaad ku ciyaartay, timihii ayuuna jiid-jiiday, halkii ayuuna mindi ku galiyay sidaas ayuuna ku dilay walaashiis!!!.

Maah maah soomaaliyeed ayaa aheyd god qiyaano ha qodin haddaad qodona ha dheerayn ku dhici doontaana lama ogee, yacni haddaad walaalkaa god u qodid ha u dheerayn waxa laga yaabaa inaad adiguba ku dhacdide!!!.

Godkii uu gabdhaha kale la rabay in uu kusoo rido walaashiis ayaa lagu soo riday, ugu danbeyntiina iyadii ayuu dilay, falkii uu ku jiray ku kasii xun ayuuna shaydaankii usii qurxiyay oo ah in uu dhiig bani-aadam daadiyo.

**Yaa Allaah nagu hanuuni jidka toosan!!!.**

## DUNIDAN MAXAAD KA QABATAA OO SHAQO AH!!!



Nin ayaa wuxuu ku soo laabtay gurigiisa isagoo ka yimid shaqada, kadib markii uu guriga soo gaaray ayuu wuxuu la kulmay albaabka oo furan iyo ilmihiisa yar-yar ee saddexda ah oo banaanka ku ciyaaraya, waxay xirnaayeen dharkii jiifka ee xalay ay ku seexdeen oo maanta oo idil aan laga badalin!!!.

Korkooda waxaa ka muuqatay wasaq xad-dhaaf ah, waxay ku dhex jireen dhiiqo taas oo ka dhalatay biyo badan oo ay dhulka ku daadiyeen kadibna ay sidey rabaan ugu dhex rafteen!!!.

Ninkii isagoo yaaban ayuu hore usii gudbay, wuxuu galay qolka fadhiga oo ugu soo horeeyay qolalka guriga, Tv-ga saa'id ayuu u dheereysan yahay waxaana

shidan kanaalka kartoonka ay carruurtu ka daawadaan, barkimihii saarnaa kuraasta fadhigana midba meel ayay ku tuuran tahay, qolka oo idilna wuu isku dhex yaacsan yahay!!!.

Markale asagoo fajacsan ayaa wuxuu galay jikada, mise tii hore ka daran, alaabtii maacuunta ee wax lagu cunayay waa ay kala daadsan yihiin, qaarkood ayagoo jajaban ayey dhulka ku firirsan yihiin, cunto ayaa meel walba ku haleysan, dhulka biyo ayaa fadhiya, jikada oo dhana qaabkeedu waa mid aad looga naxayo!!!.

Ninkii markaan aad ayuu u naxay isagoo is leh tolow maxaa dhacay, xaaskaagii aaway, miyey xanuunsantahay, mise guriga maba joogto oo waa la af duubtay, ayuu kor u sii koray jaranjarada qeybta sare halkaas oo uu ku yaal qolka jiifku, Markii uu soo galay qolka jiifka ayuuna wuxuu arkay xaaskiisa oo dul saaran sariirta oo buug aqrisaneysa oo aysanba ka qasneyn!!!.

Layaab ayey ku noqotay sida farxada leh ee ay u fadhido xaaskiisa iyo wixii uu is dhex yaac hoos ku soo arkay, wuxuuna weydiiyay su’aasha ah:- “walaaley maxaa kugu dhacay maka warqabtid miyaa waxa guriga qeybtiisa hoose ka socda?”!!!.

Kadib iyadoo dhoola cadeyneysa ayey ugu jawaabtay:- “macaane waxba iguma dhicin balse adigu sow mar walba imaad weydiin jirin shaqada aan dunidan ka qabto, markaa maanta waan nasanayay wax shaqo ahna ma aanan qaban”!!!.

Waxay tuseysay muhiimadda ay leedahay shaqada ay qabato waayo isaga ayaa mar walba dhihi jiray (dunidan maxaad ka qabataa oo shaqo ah, keliya gurigan ayaad iska dhex fadhidaaye), balse halkii maalin oo ay hakisay shaqadii ay qaban jirtay wuxuu arkay in shaqo tan ugu muhiimsan ay qabato waayo wuxuu iman jiray guriga iyadoo wax walba kala nidaamsan yihiin balse ma uusan isweydiin jirin cida sidan quruxda badan wax u kala nidaamisa!!!.

Ragow ogaada in shaqada ay gabdhuhu qabtaan ay tahay mid aad u adag, hadday kugusoo baxsatona aanad ka dabbaalateen, sidaa darteed xaaskaaga shaqada ku caawi markaad guriga joogto, kana shaqee sidii marwalba aad uga shaqayn-lahayd wanaajinta niyadda xaaskaaga iyo ku caawinta wixii hawlo ah ee aad ka caawinkarto, markaas ayay Iyana noqonaysaa mid kuu calool xaadhan, kugulana nool niyad-sami, farxad iyo rayn-rayn, waana kaas qoyska guulaystay!!!.

# EYGII QABAY AYAA LASOO ISLAAMAY!!!



Gabar Kirishtaan ah ayuu jeclaaday isaga oo Muslim ah, gabadhana waxa Qabay Nin ay isku Diin yihiin iyada, hase yeeshee wuxuu Go'aansaday inuu Diinta Islaamka u soo Bandhigo Gabadha, markay Islaantana uu yiraahdo "haddii aad Islaamtay makuu Banaana inaad Ninkan Gaalka ah Xaas u sii ahaato", ka dibna uu ku yiraahdo "Iska Fur Ninkan aniga ayaana ku Guursanaya"!!!.

Ugu Dambeyntii Gabadhii wey Islaamtay Nasiib wanaag, wuxuuna la kulmay iyada oo Muslimad ah Xijaabkiina xiratay.

Runtii aad ayuu u Farxay, waxayna ku tiri:- "Walaal waxaan kuugu Bishaaraynayaa inaan Islaamay ninkeygiina ila soo Islaamay!!!.

Kadib ninkii Wadnaha ayaa Xanuunay Naxdin darteed, kolkaas ayuu si aan Niyad aheyn ku yiri "Kheer waaye", wuuna iska soo baxay isaga oo aad u Murugaysan, kolkaas ayuuna utegay lana kulmay Saaxiibkiis, wuxuuna Saaxiibkiis ku yiri:- Saaxiiboow Gabadhii maad Guursatid, wey soo Islaamtaye ?, markaas ayuu ugu jawaabay:- Saaxiib maxaan Sameeyaa Eygii qabay ayaa lasoo Islaamee ?!!!.

Qisadan waxa aan ka Fahmi karnaa Qofku haddii uusan Khayrka Dar Allaah (swt) u sameynin inuu Mirihiisa waayi karo Aduunka dushiisa, inta aan Akhiroba la islagaarin, ka marwalba guul-darraysanayaana uu yahay ka qaa'inka ah, sidoo kalena ka marwalba guulaysanayaa uu yahay ka daacadda ah.

## INANTII BOQORKA IYO NINKII SHAQAALAHA AHAA!!!



Boqor ayaa waxuu dhalay gabar uu alle (SWT) isugu daray qurux, akhlaaq wanaag iyo waliba diin, waxaana loogu wanqalay magaca Maryam, maryam waxa maalin maalmaha kamid ah ay si lama filaan ah u gaday silsilad dahab ah oo ay lahayd aadna qaali u ahayd si ay Masaajid hor Allah (swt) ugu dhisto!!!.

Waqti yar kadibna masjidkii markii gacanta sidaa looga qaaday ayay waxay doontay inay maalin soo fiiriso, kadib shaqaalihii ayaa amar lagu siiyay inay faaruqiyaan masaajidka, wayna soo gashay oo ay indhaha ka siibtay naqaabkii si ay ugu raaxaysato quruxda guriga ay aaqiro kasii dhisatay!!!.

Haddaba mid kamid ah shaqaalihii ka shaqaynayay masjidka oo kor saarnaa ayaa lagu ilaaway oo masjidka ku baaqi noqday, waxa uuna arkay quruxdeeda kadibna qalbigiisii taagta darnaa markiiba waa uu raacay!!!.

Gurugiisii ayaa uu ku noqday isaga oo maalinba maalinta ka dambaysay jacaylka uu u hayo inanta boqorku kusii kordhayay illaa uu sariirta dul dhigay oo uu bukaan noqday!!!.

Shaqaalahan oo magiciisa la odhan jiray Cali waxa dhashay hooyo da'ah oo aad iyana u taagdaran, cid kalana aan lahayn isaga mooyaane.

Kadib hooyadii ayaa waydiisay Cali:- wiilkaygiiyoow sidee laguu hayaa waadigan furaashka ka kici waayaye?, Calina waxa uu dhahay:- Maamo waxa aan jeclaaday gabarta boqorku dhalay, waan jeclaaday haddii aan guursan waayona waan dhimanayaa!!!.

Hooyadii da'da ahayd iyada oo aad u dareemaysa xanuunka wiilkeeda ayaa ay u jihaysatay dhankii ay ka xigtay inanta boqorku dhalay, waxa ayna ku tidhi iyada oo rajo beeshay waxaan kuula socdaa arrin aad la yaabi doonto, taas oo ah:- "Wiilkayga ayaa ku arkay maalintaad masjidka soo booqatay, waa uu ku jeclaaday adiga la'aantaana masii noolaandoono'', maryam ayaana si qabaw ugu jawaabtay:- waan aqbalay!!!.

Hooyadii: waan aqbalayaa?!!!.

Maryam:- Haa waan aqbalay balse hal shardi waa inuu fuliyaa, waa inuu 40 habeen salaatu layl oo aan kala go' lahayn tukadaa kadibna diyaar ayaan ahay anigoon wax adduun ah ku xidhaynin!!!.

Sidii ayay hooyadii Cali iyadoo faraxsan u baqooshay dhinacii gurigeeda iyo wiilkkeedii oo warkii si dag-dag iyo farxad badan ugu sheegtay, kadib wiilkii oo farxad iyo raynrayn ka muuqato ayaa yidhi:- marxaba hooyo shardigaa waan fulinayaa!!!.

Habeenkii koowaad ayaa taag darri awgeed uu fadhiga ku tukaday, habeen labaad iyo sadexaadkiina sidii oo kale isagoo qalbigiisu ku maqan yahay Maryam, balse Cali habeenba habeenka kusii xiga waxa uu usii dhawaanay dhanka Allah (swt) isaga oo qalbigiisu ku sii xirmayay Allah (SWT) oo awoodi usii kordhaysay!!!.

Jacayl kale ayaa qalbigiisa ku abuurmay, waa jacaylka Allah (SWT) isaga oo uu ka tirtirmay baahidii iyo jacaylkii gabadhu, 40 kii habeen markay u dhammaadeen ayaana hooyadii waydiisay goorma ayaynu hooyo u tagnaa inantii boqorka?!!!.

Cali:- Hooyo macaan wax baahiya oo ina haysaa ma jirto imaka, dhab-ahaantii waxa aan jecelahay Allah (SWT) oo ah abuuraha dhammaan dunida iyo korkeeda, isaga ayaana igu filan!!!.

Maansha Allah, bal fiiri Alle kacabsiga gabadhaas, waxa ay garatay in dawada Cali u baahan yahay ay tahay iimaan iyo Kalgacalka Alle (SWT).

Jacaylka dhabta ah ee la rabo in uu ku abuurmo qalbigaaga waa jacaylka Allah (swt) iyo Rasuulkiisa Muxammad (scw) intaas wixii soo raacaana waa wax iyaga daba socda uun!!!.

Ku dedaal jacaylka ALLAH (SWT) iyo suubbanihiisa MUXAMMED (scw) kaas ayaad if iyo aakhirobana ku faa'iidaysaa, ku liibaanaysaa, kuna guulaysanaysaa!!!.

## MAANTA WAA MARKII UGU HORRAYSAY EE AAN OGAHAY HALKA AY U SOCOTO XAASKAYGU!!!



**40** sanno ayay xaaskiisa wada joogeen, markay guriga ka baxayso hadduu waydiiyo halka ay u socoto waxay ugu jawaabi jirtay ( "maxaa kaa galay") haddii ay ku soo laabato guriga oo uu wayddiiyo halkii ay ka timidna mar kale ayay ugu jawaabi jirtay (waar maxaa kaa galay halkaan ka imid")!!!.

Muddo ayuu sidaa ku jiray, wuuna dhibsaday balse wuxuu mar walbo ilaalin jiray qalbigeeda wuxuuna ku dadaali jiray inuusan la murmin, Ugu dambayntiina waxaa gabadhii ay 40-ka sanno wada joogeen u timid tii Alle (swt), kadib markii meydkii la qaaday ayuu ku cel-celiyay kelmadda ah "SUBXAANALLAH" dadkii ayaana ku yiri:- waar qofka meydka ah towxiidka ayaa loo qabtaa ee waa sidee!!!.

Kadib sidii qof hurdo ka soo kacay oo kale ayuu u soo baraarugay, wuxuuna ku yiri dadkii meydka waday:- " Qofka aad waddaan waa xaaskaygii, waxaana wada joognay muddo 40 sanno ah, balse maanta waa markii ugu horreysay ee aan ogahay halka ay u socoto waana Aakhiro''!!!.

Subxaanallaah, markaynu nahay ummadda muslimka, diinteenna islaamku waxa ay inbadan inagala hadashaa arrimaha qoyska iyo muhiimaddooda, sidoo kale diinteenna suubani waxay si cad inoogu kala qeexdaa inooguna kala cadaysaa xaqa uu ninku ku leeyahay haweenaydiisa iyo sidoo kale xaqa ay haweenaydu ku leedahay ninkeeda.

Haddaba haddaynu nahay qoysaska shucuubta muslimiinta waxa laynooga baahanyahay in aynu xoojino ku dhaqanka diinteenna suuban iyo qawaaniinteeda, taas oo haddaynu raacno kuna dhaqano ay hubaal tahay in aynu liibaanayno if iyo aakhiroba, guryeheennuna ay noqonayaan kuwo barwaaqo iyo badhaadhe kudhisan!!!.

## KU QUUS QAADO!!!




Nin iyo xaaskiisii ayaa udabaal dagayay 25 sanno oo ay ku noolaayen bilaa muran, haddaba waxaa lawaydiiyay ninkii sideed u wada noolaydeen 25 sanno oo bilaa hadal (buuq) ah xaaskaaga!!!.

Kadib ninkii ayaa yidhi:- " Anaka oo toddoba bixii kujirna ayaan dalxiis utagnay goobaha raaxada, kadib midkaayaba faras ayuu fuulay si aan ugu raaxaysanno laakiin Faraskii ayaa riday ayna ka dhacday xaaskaygu, kadib intay istaagtay oo ay madaxa u salaaxday ayay tiri:-"waa markii koobaad"!!!.

Haddana Mar labaad ayay fuushay saa haddana way kadhacday kabacdi intay kacday oy madaxa u salaaxday ayay tidhi hadana " waa mar labaadkii"!!!.

Mar saddexaadkii ayay fuushay saa haddana wuu riday mar saddexaadkiina, kadib intay aayar istaagtay oo ay shandadeedii furtay ayay bistoolad kala soo baxday markaasay faraskii madaxa ka toogatay!!!.

Kadib waan yaabay oon ku qayliyay maxaad xawayaanka u dilaysaa? maadan qof wax garanaya ahayn? Dabeed aad ayaan u canaantay ayuu yidhi, misay Intay iisoo dhawaatay ayay tiri:- “doqonoow ma anaabaad i caayaysaa, saa intay madaxa iga salaaxday ayay tidhi:- “ **TANI WAA MARKAAGII KOOBAAD**”!!!.

Laga bilaabo maalinkaa nabad iyo hadal la’aan ayaan ku noolnahay walina ma gaadhin in la isiiyo digniintii labaad!!!.

Adiguba caqlaad leedahee aamus maxaa dhaama!!!.

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa nin kuu digay kuma dilin, digniinta lagu siiyaa waxa ay kaa caawinaysaa in aad arrintaa iyada ah wixii danbe ka dheeraato. ka digniinta bixinaayana waxa ay u noqotaa arrin hadhaw uu ku gar-naqsado lagana yaabo in ay kiisas badan ka buriso ama ka khafiifiso, ogowna weligaa haddii aad arrin fulinayso haddii uu digniin hore ubaahanyahay in aad digniinta horaysiiso taas oo hadhaw waxyaabo badan kuu sahlaysa ama kaa khafiifinaysa, aadna waxyaabo badan kukala bad-baadi kartaan!!!.

# 13 QODOB OO ADKAYN KARA XIRIIRKA LAMMAANAHA!!!



Waxyaabaha kadhiga xiriirka lammaanaha mid ku dhisan is aaminaad iyo jacayl waa mid ukala duwan lammaane kasta oo isqaba, qodobadan aynu xusi doonno oo dhanna ma ahan kuwo ku yimaadda laba cisho gudahood!!!.

Haddii aad ubaahan tahay xiriirka kaala dhexeeya lamaanahaaga in uu noqdo mid adag, waxaa lagaa rabaa inaad dadaal kubixisid sida aad u adkayn lahayd xiriirkaas isaga ah (ogowna wax walba tacab ayay rabaan)!!!.

Haddaba Qodobadan hoos ku qoran ayaa ah dabeecado sameyn kara, ama joogteyn kara xiriir caafimaad iyo farxad ku dhisan:-

1) **Aaminaad:-** Aaminaaddu ma ahan wax la'isa siiyo ee waa wax la shaqeysto oo lagaaro heer aad noqotid qof la aamin sanyahay, waxaa jira dad badan oo dhib ku qaba fahamka moowduuca aaminaadda, hadii aan soo koobona aaminaaddu waa shey qaali ah, haddii aad burburisid aaminaadda uu kugu qabay lamaanahaaguna waxay qaadaneysaa waqti dheer inaad dib usoo celisid, waxaana lagaaga baahan yahay inaad xaqiijisid in aad tahay qof uu lamaanahiisu/lamaanaheedu ku tiirsanaan karo, sidoo kale aaminsanaan karo, mana-jiri karo xiriir wanaagsan haddii ay is aaminaad la'aani jirto!!!.

2) **Is faham:-** Is fahamku waa furaha ugu horreeya ee xiriir wanaagga, hasa yeeshee qof kasta ma fahamsana sida loo abuuro is faham wanaagsan oo ka dhaxayn kara labada lammaane, haddii aad rabtid inuu jiro is faham waxa lagaaga baahan yahay inaad ka hadashid waxyaabaha ku dhibaaya shakhsiyan iyo waxyaabaha lamaanahaaga si gaar ah udhiba, is faham wanaagsanna majiri karo haddii aad tahay daneyste jecel inuu ka hadlo waxyaabaha isaga uun dhibaaya, oo aan jecleyn inuu dhag jalaq usiiyo waxa ay lamaanihiisu/lamaanaheedu ka sheeganeyso/kasheeganayo. haddaba si uu xiriirku u kobco waxaa labada lammaane looga baahan yahay iney xal uraadiyaan dhibaatooyinka jira si ay uwadaagan xiriir ay labadooduba ku faraxsan yihiin, waxaa jira wakhtiyo ku habboon waxyaaba aadan jeclayn in aad kala hadashid xaaskaaga/seygaaga, balse wakhti kasta iyo goob kastaba kuma habboona arrintaa iyada ahi, hasa yeeshee waa muhiim in uu jiro khad ka dhexeeya labada lammaane oo ay isugu soo gudbin karaan dareemahooda. Qaadona waqti aad kagala sheekeysatid lamaanahaaga dhibaatooyinka soo kordhay si aad ugu raadisid xal!!!.

3) **Xiriir adag:-** Dabcan xiriir adag waa shay fudud in afka laga dhaho oo ay adagtahay in laga dhabeeyo, si aad usameysid xiriir adag waxa lagaaga baahan yahay inaad si wanaagsan u baratid lamaanahaaga sababtoo ah waa qof laga yaabo inaad nolosha isla dhameysataan, waana muhiim inaad si daacadnimO ah isugu daydid inaad baratid waxa uu jecel yahay/shahay, waxa uu neceb yahay/tahay, waxa uusan/aysan ka helin iyo waxa farxad geliya/gelisa. Xiriirka adagina wuxuu qeyb wayn ka ciyaaraa sii socoshada nolosha ka dhexeysa labada lammaane khaasatan si caafimaad qabta!!!.

4) **Daacad nimo:-** Daacad nimadu waa arrin kale oo si wayn uga qeyb qaadata xiriir wanaaga. Majiro qof jecel in been loo sheego. Khiyaanaduna waa nooc kamid ah daacadnimo xumida, sidaa darteed ha gelinin naftaada xaaladahaas oo kale. Marka lamaanahaagu uu yahay daacad, majirto wax aad ka walwashid oo kugu saabsan. Marka aad tahay daacad waxaad siineynaa lamaanahaaga dareen rajo iyo aaminsanaan, laakin haddii aysan jirin daacadnimo majirto wax lagu tilmaami karo xiriir. Daacad nimaduna waa shey aad looga mahad celiyo oo dadka intooda badan aysan ka war qabin!!!.

5) **Kawarqabidda xaqa laysku leeyahay:-** Waa muhiim labada lammaane iney ka warqabaan xaqqa ay isku leeyihiin oo ay diintu sheegtay, waana lagama maarmaan in ay ulaabtaan diinta oo ay sameeyaan cilmi baaris ku saabsan xaqa ay isku leeyihiin, oo ay dadaal dheeraad ah ku bixiyaan sidii ay noloshooda ugu dabaqi lahaayeen waxyaabaha ay diintu sheegtay, tusaale haddii aan usoo qaato, Nabi Muxamad (NNKH) wuxuu yiri “Kiinna ugu wanaagsan waa kan uwanaagsan xaaskiisa”!!!.

6) **Kalsoonida:-** Kalsoonidu waa shey dad badan ay aaminsan yihiin inuu yahay wax lagu dhasho, kuwo kalana waxay aaminsan yihiin inuu yahay wax la is bari karo, waxaad ubaahan tahay inaad noqotid qof isku kalsoon, majirto qof rabo xaas aan ku kalsoonayn qoruxdeeda/quruxdiisa ama cilmiga uu ilaahay (swt) siiyay, taasna macnaheedu ma ahan inaad iskibrisid ama aad noqotid qof isla qabweyn, kalsooniduna waa hanti maguurto ah sababtoo ah majiro qof kaa qaadi kara kalsoonida illaa aad adigu u ogolaato mooyee!!!.

7) **Mahadnaq:-** Waxaan inta badan illownaa inaan umahad celinno dadka aan la nool nahay, waan ka fakarnaa mahad celinta laakin masoo xusuusano inaan tusno ama aan umahad celinno, sidoo kale waa dhacdo joogta ku ah nolosheenna jacayl, Isku day inaad tustid qofka aad jeceshay inaad maqsuud ku tahay, unoqo mid unaxariista, hadiyado ukeena intii laga kari karo IWM!!!.

8) **Dulqaad:-** La Imoow Dulqaad Kabadan Midkii Aad Lahaan Jirtay Markii Aad Kaliga Aheyd Waayo Markan Noloshu Sidii Hore Weyka Duwantahay!!!.

9) **Latashi:-** Waa Inaad Aalaabaa Latashataa Lamanahaaga Sababtoo Ah Qafna Kaligii Go'aan Kama Gaari Karo Arrimaha Qoyska Laxariira!!!.

10) **Masuuliyad:-** Waxaa Lagaaga Baahan Yahay Inaad Masuuliyad Iska Saarto Siduu Usii Dhisnaan Lahaa Hooygiinnu Adigoo Ka fogaanaya Waxkaste Oo

Iskudhac Keeni Kara Sidoo kalena Daboolaya Dulduleellada Uuka Imaankaro Qilaafku!!!.

11) **Xafiditaanka Siraha Qooyskaaga:-** Waa Midka Mid Ah Tiirarka Ugu Waaweeyn Ee Siijiritaanka Qoyska Xafiditaanka Siraha Qooyskaagu, Waxaa Aad Muhiim U Ah Waxkaste Oo Dhaxdiinna Ah Inaaney Cidkale Ogaanin, Waana Idiin Guuldarro In Sirta Qooyskiinnu Dibada ay Ubaxdo!!!.

12) **Hoos u xallinta khilaafaadka yar-yar:-** Waa Inaad Noqotaan Lammaane Marwalba Xalliya Waxyaabaha Yar-Yar Ee Dhaxdooda Kadhaca, Waana Hubanti Inuu Qilaaf Imaankaro Sababtoo Ah Bini-Aadam Ayaa laYahay Balse Waxaa Loo Baahan Yahay Inaad Dhaxdiinna Isxallisaan Waayo Sidaas Ayaa Qurux Badan, Lamaanaha Dhabta Ahina Waa Kuwa Iskudhaca Misane Dib dhexdooda uga dhammaysta!!!.

13) **Qirashada Qaladkaaga:-** qaladkaaga Oo Aad Qirato Waa Xalka Ugu Sahlan Ee Aad ku Gaarikartaan guul, Waa Iga Dardaaran Ee Waligiin Yuusan Idiin Xallin khilaafkiinna Qof Saddexaad Markaad Caqabado Lakulantaan, Kaliyaatana Isticmaala Raaligalin!!!.

Sifooyinkan Aan Kor Kusoo Xusay Haddii Laydinka Helo waa hubaal haddii Allah (swt) qadaro  Inaad Noqondoontaan Qoys Raaga, noloshana ku qaata badhaadhe, farxad, barwaaqo iyo rayn-rayn, haddii Allah swt uu ku arsaaqona kataga cidhib wanaagsan!!!.

## Q:- SADDEXAAD-QISOOYIN GUUD:-

## ALBAABADII GUUSHA!!!



Waxa kuu muuqdaa maaha talaagad cuntada lagu keydsado amaba kabadh alaabta lagu gurto, bal inyar ufiirso oo indhaha kala fur. waxa kuu muuqdaa waa buug weyn, waa buugii ugu weynaa u guna yaabka badnaa caalamka. magaciisana waxa la yidhaahdaa:- "Abwaabul najaax" Albaabadii guusha!!!.

Waxa uu ka koobanyahay 10551 safxadood miisaankiisu waa 45 kg dhererkiisuna waa 57 cm, waxaana qorey inantaa dhalinyarada ah ee aad moodo in buugeedu ku dherer dhawyahay, magaceeduna waa Nuura Daaca-Allaah, waxa ay udhalatay kuna nooshahay dalka Al-jeeriya!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Nuura waxa ay ku gashey buuggan rikoodhka buuga jiiniyaaska ( Genius ), waxa kaaga sii yaab badan Nuura waxa ay ku qortay buuggan hal sanno oo kaliya. waxeyna ku jabisey buuggii jiinayaaska ay hore ugu galeen koox qoroyaal mareykan ah!!!.

Nuura waxa ay tidhi " anniga oo yar oo 13 jir ah ayaan jeclaadey hal abuurka qoraalka, waxaana aan keydin jirey xikmadaha, weedhaha raadka leh iyo maah-maah yada caanka ah, habeen ayaanaan ku riyoodey iyadoo magaaladeyda uu yaal kitaab aad uweyn oo aan anigu leeyahay, waxii riyada ka danbeeyayna waxa aan go'aansadey inaan run ka dhigo"!!!.

Xilligaasi ay nuura riyootay waa hal sanno kahor wakhtigay buugga daabacday lakiin sannado ayay si iskeeda uqoreysay xikmadaha, suugaanta iyo maah-maahyada buugga ku duugaan!!!.

Hanka iyo himilada qofka bani-aadamka ahi ma aha mid ku xidhan da'da iyo inta uu jiro qofku balse waa wax ay kasimanyihiin dhammaan jiilasha kala duwan ee basharka-aadamku, waxase lagu kala duwanyahay waa ka go'naanta iyo qof walba iyo siday uga go'antahay inuu ka midho dhaliyo kana guulgaadho himiladiisa. Taasina waa ta basharka-aadamuhu isku dhaafay!!!.

# CAQLI KULA DHAQAN NINKA CASRIGAN DUNIDA JOOGA!!!



Nin ayaa laga xaday gaarigiisii maalin, kadib maalintii ku xigtay maalintii laga xaday gaadhiga ayuu ka helay gaarigii isla meeshii looga xaday, ayadoo weliba lasoo dhaqay, kadib markuu furay gaarigii ayuu ka dhex helay warqad ay ku qorantahay:- “Waan ka xumahay, waxaan qaatay gaarigaaga idan la'aan, waxa foolaneysay xaaskeyga oo aan ugu qaaday dhanka cusbitaalka, Alxamdulilaah weyna umushay,  waxa aan kursiga danbe kuu saaray haddiyad ah tigid aad adiga iyo qoyskaaguba kusoo daawataan show (bandhig faneed) caawa dhacaaya, waxaana aan kaa rajeynaa inaad ii cudur daarto)!!!.

Ninkii waa uu farxay oo waxuuna isdhahay ajar iskaga niyeyso falkaa dhacay, waxuuna isaga iyo qoyskiisiiba aadeen showgii!!!.

Haddaba markii ay kasoo laabteen showgii ayuu imaaday gurigiisi oo dhammaan wixii yaalay la xaday, lana gurtay, waxuuna ka dhex helay warqad ay ku qoran tahay:- (Haye, show-gu maku cajabiyey? )!!!.

Haku dagmin ka go’aan qaadashada dhaqamada dadka qaar, iyo kafalcelinta arrimaha kugu cusub, sababtoo ah magaranaysid sababta ka danbaysa dhaqankooda, caqlina kula dhaqan uunka casrigan dunida jooga!!!.

# OGOW IN AY JIRAAN DAD KAA CAQLI BADANI!!!



Waxaa jiray nin ganacsade hantiile ahaa oo safar badnaa, maalin maalmaha ka mid ah ayaana wuxuu aaday bangi ka mid ah bangiyada ku yaala magaaladii uu daganaa si uu ugasoo deynsado lacag shan kun oo dollar ah si uu ugu safro!!!.

Balse bangigii wuxuu ka dalbaday damaanad in uu keeno si loo siiyo lacagtaa, ganacsadihiina wuxuu geeyay gaari uu lahaa oo qiimo ahaan joogay shan iyo labaatan kun oo dollar, sidaasaana lacagtii deynta aheyd lagu siiyey, hase yeeshee waxaa amakaag ku noqotay maamulihii bangiga iyo shaqaalahiiba ninkan hantiilaha ah gaarigiisana qiimahaas joogo sababta ku kaliftay shan kun in uu deynsado, waxeyna ka dhigteen maadeys iyo in ganacsaduhu wax ka qaldanyihiin!!!.

Labo usbuuc ama laba toddobaad kadib ayuu so celiyey shantii kun iyo faa'iidadii bangiga oo aheyd 41$ dollar, Maamulihii bangiga ayaana weydiiyey sababta ku kaliftay isagoo hantidan leh in uu shan kun deynsado gaarigiisa qaaliga ahna damaanad ahaan u dhigto?!!!.

Kadib wuxuu ganacsadihii ku jawaabay:- "Magaaladan aan ku noolnahay ma jirto meel gaarigaagu uu ku nabad galayo muddo labo isbuuc ah, ijaarka laga qaadayana ay tahay 41 dollar oo kaliya?, markaa ujeedkeyga ma aheyn shanta kun balse waxey aheyd sidii uu gaarigani iigu nabad gali lahaa lacag badanna aan leyga qaadin inta aan safarka ku maqanahay!!!.

Haddii aad is mooddo inaad dadka ugu caqli badantahay ogow in ay jiraan dad kaa caqli badani!!!.

## WASTAADKII IYO MADAXII SHIRKADDA!!!



Waxaa Jiray Nin Fuundi/wastaad ah Oo Wax U Dhisi jiray Shirkad Ka Shaqeysa Dhismaha, kadib Markuu Cimrigiisii Waynaaday Oo Cuslaaday Ayuu Wuxuu U Tagay Madaxii Shirkadda Wuxuuna Ku Yiri:- Waxaan Rabaa IsTiqaala, Cumrigaygii ayaa Waynaaday, Waan Cuslaaday, sidaasi daraadeed Masii Wadi karo Shaqo.

Kadib Madaxii Shirkadda ayaa Wuxuu yiri:- Waxaan Ku Aqbalaynaa IsTiqaaladdaada Hal shardi Oo Kaliya, Ninkiina Wuxuu Yiri:- Shardigee, Madaxii Shirkadaana ku yiri:- Waa In Aad U DhisTaa Shirkadda gurigii Kuugu Danbeeyay Ee aad DhisTo, ninkiina Wuxuu Yiri:- Waayahay, Wuxuuna Goostay In Uu Dhiso guri aan Tayo Lahayn Oo Si Boobsiis ah Loo Dhiso!!!.


Wuxuu Dhisay guri Faalsa ah Si Uu IsTiqaladdiisa U Gudbiyo Oo Loo Siiyo Xaqa Uu Ku yeeshay Shirkadda, ka Dib Wuxuu U Tagay Madaxii shirkadda Si uu Ugu Warejiyo Furuyashii Guriga, Wuxuuna Ku Warejiyey Furyashii, halkaas markay xaaladi maraysay ayaana halmar madaxii Shirkaddu Wuxuu Ku Yiri ninkii:- gurigii Ugu Danbeyey Ee Aad Dhisatay Waxay Shirkaddu Shaqadii aad U QabaTay aawadeed Kuu Siisey Abaal Marin!!!.

Waa Cajiib, kadib ninkii Waa GubTay Waana Shallaayey Wuxuuna Bilaabay Calaacal ah Alla Maxaan Uga Dhigi Waayey guri adag Oo Qurux badan, Maxaan Saa U yeelay gurigayga Ayuu Ahaaye!!!.

Sidaas Oo Kale Waxaa La Mid ah Acmaasha Wanaagsan Ee aan Sameynayno, Sida Salaadda, Soonka, Zakada Iyo Wixii La Mid ah, Allaah (swt) Ayaa Iska Leh Oo Waa Nagu waajibiyay In aan Sameyno, Maalinka Qiyamaha Ayuuna innagu Abaal marini oo waa wax aynu sii hormarsannay, Allaahna (swt) Uma Baahna Addoomadiisa EE Waa Ka Deeq Toonyahay, ficil kasta oo wanaagsan oo aad samaysaana waa wax adigu uun aad sii hor marsatay!!!.

Hagaaji Acmaashaada adiga ayey ku Anficiye!!!.

## DHALASHADII SADDEX-GEESOODKA AHAYD!!!



Wiil ayaa ku dhashay dalka Shiinaha afar sanno ka dib markii ay waalidkii ku dhinteen shil gaari, sida ay ku warrantay warbaahinta dalkaasi Shiinahuhu, wiilkan ayaa waxa dhashay haweenay caloosheeda lagu beeray minidii ilmahan waalidkii!!!.

Lammaanaha dhalay ilmahan oo dhintay sannadkii 2013kii ayaa minidooda kaydiyay iyaga oo rajaynayay in loo tallaalo iyaga oo adeegsanaya habka IVF loo yaqaanno ee carruurta loogu raadiyo dadka aan awoodin in ay sida dabiiciga ah u dhalaan, markii ay lamaanahaas ku dhinteen shilkana waalidkood ayaa hardan dhanka sharciga ah galay iyaga oo raba in loo fasaxo minidii carruurtooda ee kaydka ku jirtay, si ay isugu dayaan in ay ka miro dhaliyaan riyadoodii!!!.

Haddaba haweenayda lagu beeray minida lamaanaha dhintay ayaa dhashay bishii Disembar 2017, sida ay ku warrameen warbaahinta Laos and The Beijing News, wargayska oo arrintan sharaxaya ayaana sheegay in dhacdadan oo kale oon horay loo arag ay horseeday in waalidka lamaanaha dhintay ay maraan caqabado dhanka sharciga ah ka hor intii aan haweenayda lagu tallaalin minida!!!.

Marka uu shilkaasi dhacayay minidu waxay ku kaydsanayd qaboojiye uu heerka qabawgiisu ka hooseeyo 196 digrii iyo dareere nitrogen ah oo weel ku jira, hirdankii maxkamadda ee ay galeen afarta waalid ee lamaaneyaasha ayaana horseeday in loo xukumo in ay xaq u leeyihiin in lagu wareejiyo manida la kaydiyay, Mana cadda illaa haddana in ilmahaasi uu yeelan doono dhaxalka labadiisa awaw iyo labadiisa ayay ee kala dhalay hooyadii iyo aabihiisii shilka ku dhintay, sida warbixintaas lagu sheegay!!!.

Waa hubaal oo maalinba maalinta ka danbaysa bani-aadamku waxa uu ku tallaabsanayaa horumar xagga farsamada ah, tanna waxa ay ay ka mid tahay horumarkaa maalinba maalinta ka danbaysa la gaadhayo, waana arrin ku tusinaysa heerka maanta uu marayo horumarka xagga farsamada ee basharka aadamuhu, waana horumar larabo qof kasta oo aadame ahi in uu dhankiisa qabsado, kunasoo kordhiyo intii awooddiisa ama karaankiisa ah!!!.

Haddii aad noqoto mid kaalin muuqata oo togan ka gaystana waa hubaal in inbadan ay taariikhdu ku xusi doonto, magacaaguna inbadan uu kuwaaridoono dunidan korkeeda!!!.

# WIILKII AGOONKA AHAA EE ISHA QUDHA HOOYADII KU NACAY!!!



Wiil Agoon ah ayaa Hooyadiis waxa ay laheyd 1 IL oo uu aad ugu nacay, wiilkan ayaa wax ka baran jirey mid ka mid ah Schoolada Magaaladii ay deganaayeen, halkaas oo ay hooyadiisna ku iibin jirtey Jalaato si ay uga soo saarto Biilka guriga iyo Waxbarashadiisa!!!.

Wiilkan ayaa aad u karaahiyeestay muuqaalka Hooyadiis isagoo weliba aad u necbaana mar walbo oo uu ku arko iyadoo Schoolka ku dhex iibineyso Jalaatada, maalin maalmaha ka mid ah oo Wiilkeeda uu lahaa Imtixaanka Sannad Dugsiyeedka ayeyna ugu soo gashey Class-ka/Fasalkii uu Schoolka ka dhiganaayey si ay Niyada ugu dhisto wiilkeeda, balse Nasiib darro aad ayuu uga caroodey asagoo u arkayey ceeb imaanshaha Hooyadiis ay timid Class-ka/Fasalka, weliba waxa uu ku eegay eegmo aad u fool xun oo ay la yaabtey!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Markii ay ka tagtey ayaa qaar kamid ah Ardayda iSkoolka ay qosol la dhaceen iyadoo mid ka mid ahna uu ku yiri:- **"AHAHAH HOOYADAA WAA ILBUUN''** la micno ah "Hooyadaa waxa ay leedahay 1 IL'' taasoo aad uga sii xanaajisay!!!.

Waxa uu dareemay Cariiri iyo Walbahaar ku aadanaa Muuqaalka Hooyadiis asagoo Jeclaa mar uun in ay Dhimato oo ay Adduunka ka tagto si aan loogu caayin, waxa uu sidoo kale ku fakiray in uu Dalka isaga baqoolo uuna ka dheeraado Muqaalka Hooyadiisa macaan!!!.

Waxa uu dhameestey waxbarashadiisii Dugsiga sare, isagoo Nasiib u yeeshay in uu ka mid noqdo Arday Deeq waxbarasho ahaan dibedda loogu qaadey.

Waxa uu soo dhameestey waxbarashadiisii Dibeda waxa uuna nasiib u yeeshay in uu Shaqo ka helo Hay'ad ka shaqeyneysay Gudaha Dalka oo uu dib ugu soo laabtey, waa uu guursadey asagoo uu ilaahey (swt) ugudeeqay Carruur iyo guri Farxadeed, waa uu is ilaawsiiyey Noloshisii hore iyo Xusuusta Hooyadiisa macaan oo uusan dib u jaleecin halka iyo meesha ay ku dambeysay!!!.

Dhanka kale Hooyadiis ayaa aad uga murugeesneed halka uu wiilkeeda ku dambeeyey balse nasiib wanaag sidii ay u raadineysay ayey maalin maalmaha ka mid ah soo ogaatey in wiilkeeda uu heer sare ka gaarey Nolosha uuna Dalka ku noolyahay, Iyadoo weliba soo heshay halka uu ku noolyahay!!!.

Waxa ay soo abaartey halkii loogu sheegay in uu wiilkeedu ku noolaa, iyadoo aad u faraxsan ayeyna soo garaacdey Albaabka hore ee guriga oo ay ka fureen Carruur uu dhaley!!!.

Aad ayey ugu faraxdey aragtida Carruurta uu wiilkeedu dhalay balse Nasiib xumo carruurtii ayaa dib u carartay markii ay arkeen Ayeeydood oo aysan dadka ka aqoon!!!.

Carruurta qaar ayaa ku qosley halka kuwa kalana ay ooyeen, Sawaxan badan iyo Buuq kadib ayaa waxa Albaabka soo istaagey Wiilkeeda oo aad ula yaaban waxa Carruurtisa ku dhacay, balse markii uu arkey Muuqaalka Hooyadiis oo uu muddo arag ayuu cod caro leh ku yiri:- ‘’ **MA WAXAAD U TIMID IN AAD CARRUURTA IGA CABSI GELISID OO AAD FARXADDA GURIGEYGA DUMISO, HOREY AYAAD TEYDA USOO DUMISAY’E, PLEASE ISAGA TAG GURIGEYGA KANA FOGOW NOLOSHEYDA IYO TAN FAMILKEYGA’’!!!.**

Hooyadiis oo aad ula yaaban wiilkeeda sidoo kalana ku faraxsan aragtida wiilkeeda iyo carruurtiisa oo aysan muddo arag ayaa si degan ugu jawaabtey:-**“iga raali noqo wiilkeygow waxaa dhici karto in aan Guri qaldan Albaabkiisa soo garaacey’e’’!!!.**

Mudo kadib ayaa wiilkii waxaa soo gaarey Warqad Farriin ah oo ka timid Schoolkii uu wax ku baran jirey waqtigii uu yaraa Hooyadiisna ay ku dhex

ganacsan jirtey, isagoo aad ula yaaban waxa ku qornaan doono ayuuna warqaddii furey, waxaana ku qoran Farriin qoraaleed looga yeerayo in uu tago Schoolka sida ugu dhaqsiyaha badan!!!.

Waxa uu xir-xirtey Alaabtiisa asagoo Xaaskiisana u sheegay in uu Safar Ganacsi oo deg-deg ah ugu Baqoolayo, Isla magaaladii uu horey uga soo haajirey naceybka uu u qabay Hooyadiis macaan dartiis, schoolkii markii uu tagay ayaana loo sheegay in looga baahan yahay in uu tago Guriga Hooyadiis ku nooleed, asagoo deg-degaya ayuuna qabtey wada dheer oo tagta Gurigooda!!!.

Nasiib xumose markii uu tagay Albaabkii gurigooda ayuu ka war helay in Gurigu uu xiran yahay, waa uu gar garaacey balse wax jawaab ah ma uusan helin iyo cid ka furta toonna, isagoo amakaagsan ayaana deriskii kusoo baxeen una sheegeen in Hooyadiis ay geeriyootey ,balse geerideeda ka hor ay uga tagtey Warqad Qoraal oo dar daaran ah!!!.

Kadib warqaddii ayuu furay asagoo aad u naxsan waxa ayna u qorneed sidatan:- "**WIILKEYGOW, IFTIINKA INDHAHEYGOW, KAAN DUNIDA UGU JECLAAYOW AAD AYAAN UGA XUMAHAY SIDA AAN NOLOSHA KUUGU CEEBEEYEY OO AAN KUUGU CARIIRIYEY, WAXAANA KAA CODSANAYAA CAFIS!!!.**

**NUURKA INDHAHEYGOW MA OGTAHAY IN ADIGOO YAR AAD GASHEY SHIL GAARI OO AAD KU WEYSAY MID KA MID AH**

**INDHAHAAGA, BALSE AAN SAMEEYEY WAX WALBA OO AY HOOYO WIILKEEDA AY U SAMEYN LAHEYD TAASOO AH IN AAN KUU BIXIYEY MID KA MID AH INDHAHEYGA SI AAD NOLOSHAADA WAX UGU QABSATID OO AAD WAX UGU BARATO!!!.**

**WAXAANA AHAA QOF KU FARAXSAN NOLOSHAADA IYO GUUSHA AAD KA GAARTEY WAX BARASHADII AAN SIDA DHIB AH KUUGU SOO BAR-BAARIYEY KA DIB DHIMASHII AABAHAA!!!.**

**HOOYO IFKA IYO AAKHIROBA KU NOOLOW NABAD IYO NAXARIIS''!!!.**

Markii uu intaas aqriyey ayaa waxaa mar qura indhahiisa soo buux dhaafiyey illin, waxa uu galey Fikir iyo Xusuus iyo sidii dhibka badneed ee ay hooyadiis kusoo korisay iyo siduu u necbaa Muuqaalkeeda iyo Nolosheedaba, laakiin waxba ma uusan qabiin karin waqti xaadirkaas!!!.

Wixii laga yaabo in aad berri ka qoomamooto, isku day in aad maanta ka feejignaato kana taxadirto samaynteeda!!!.

**ILAAHAYOW WAALIDIINTEENNA U NAXARIISO SIDII AY NOOGU NAXARIISTEEN MARKAAN YAR-YAREEN OO DAMBIGOODA DHAAF YAA RABBAL-CALAMIIN!!!.**

## GABADHII AAN CARRUURTA LAHAYN IYO WIILKII YARAA EE LANOOLAA!!!



Gabar ayaa waxay xaramka ku dhax aragtay maama wayn oo ooyneysa gacmahana kor u taageysa oo aan ilmada kala joojineenin, gabadhii way u timid maamadii oo waydiisay:- maama maxaa ku helay oo la ooyneysaa?, waxayna ugu jawaabtay sidatan:- maamo waxaan ahaa gabar, waxaan is guursanay nin, kadib waxaan wada nooleen muddo 8sanno ah, wax awlaad ahna ma aan dhalin, kaddibna waxa uu guursaday gabar kale oo Allah (swt) kasiiyay wiil, waxaan ahaa intaa kadib mid aad u qalbi jaban.

Labo sanno kaddib ayaa maaalin waxaa dhacday in ninkeeygi iyo xaaskiisii 2baad eey safar aadaan, kaddib waxaa la'iiga tagay wiilki yaraa ee ay dhaleen, markii eey sii baxaayeen ayaan waxaan go'aansaday inaan wiilka dilo, oon

gooraco (ama bireeyaba ), Lakiin inta aanan saas ku dhaqaaqin ayaa waxaa iisoo dhacay taleefoon kaasi oo la iigu sheegay ninkeeygi iyo xaaskiisii labaadba eey shill baabur galeen ayna ku geeriyoodeen, kaddib waxaan ku fakiray in wiilkaan yar aan silciyo uuna silic u dhinto, waan garaacay waliba garaacis oo la miir doorsamay, waliba isagoo ku dhawaaqaya:- maamma maamma, waxaana ku dhax tuuray qolka isagoo miir beelsan, haddana wuu soo naaxay saacado kadib isagoo leh:- maamma maamma caano, mar labaad ayaan haddana garaacay illaa uu ka miir doorsaday waxaana kusoo xiray qolkii mar labaad, dabadeed wax yar kadib waxaa i qabatay hurdo oo waan gam'ay lakiin waxaan arkay riyo aan ka seexan waayay mudadaasi!!!.

Waxaan arkay anigoo la i cadaabaayo gacmaheygana budad naareed lagu qaraacayo, mar qura ayaan soo booday waxaana maqlay saqiirkii oo cod hoose ku leh:- maamma biyo, kadib anigoo naxsan Ayaan qolkii kasoo bixiyay oo biyo siiyay oo caana yarna usameeyay, muddo kadibna wuu koray waxuuna ii heystay waligii inaan hooyadiis ahay, waxaana guursaday tiro saddex nin oo kala duwan oo kale wax carruur ahna uma dhalin!!!.

Hadda waxaan ahay 63jir isagiina waa 32jir maantana qofka xajka i keenay waa isaga wuxuuna i leeyahay kalimadii markii aan garaaci jiray ee aheyd maamma, waxaanana la ilmeeynayaa sida aan yeeli jiray xanuunkeeda iyo sida uu ii wanaajiyay maanta oo aanan cid kale heysan iyo aniga oon u sheegi karin sida aan ku sameeyn jiray markii uu ahaa saqiirka!!!.

Weligaa saqiir yar ha xasdin iyo qof bani-aadam ahba, waayo ma ogid barri sidaad isku noqon doontaan iyo in aad isaga hoos-tegi doontid midna!!!.

## MIRAHA IXSAAN-FALKA!!!



Haweenay uur leh ayaa soo martay waddada, markii ay waddada maraysay ayay weyday qof waddada ka gudbiya, qofwalba oo ay uyeedho waxa uu ku oranaayay meel baan ku ordayaa, markii dambe ayaa waxaa wadada soo maray wiil, wiilkii ayaa arkay hooyadatan, wiilkii inta uu naxariis dareemay ayuu ku yiri:- hooyo aniga ayaa kaa gudbinaya waddada ee isoo raac.

Wiilkii markii uu waddadii kagudbiyay ayay hooyadii kutiri hadal qalbiga kasoo go'ay:- hooyo Illaahay (swt) shaqo walba iyo muraadwalba oo aad ubaahato hakusiiyo, wiilkiina markii uu kasoo tagay ayaa loo sheegay in shaqadii laga ceyriyay sababtoo ah wuu kasoo daahay!!!.

Kadib wiilkii yaraa wuu iska soo tagay isaga oo sabraya, halkaa markuu xaal marayay, ayaana waxa dhacday labo maalin kadib wiilkii loo sheegay inuu helay shaqo shirkad dhan inuu maamule unoqon doono, wiilkiina waxa uu noqday taajir waxa uuna yeeshay lacag badan!!!.

Kadib maalin ayuu soo xasuustay hooyadii uduceysay oo tiri:- illaahow shaqo walba oo uu ubaahdo sii, dabadeed wiilkii intuu ooyay ayuu yiri:-hadii aan hooyadaa garab siin laheyn maanta heerkaa magaari lahayn!!!.

Unaxariiso ka taagta daran ee jilicsan, kaana jilicsan markaa ayuu adigana ALLAH (swt) kuu naxariisanayaaye!!!.

## NINKII HOOYADII KA OOHIYAY SI AY XAASKIISU UFARAXDO!!!



Qissadan waxa warinaya nin dahable ah wuxuuna yidhi:- dukaanka ayaa waxa iigu soo galay nin iyo xaaskiisa ooy daba socoto ninka hooyadii oo islaan weyn ahi iyadoo xambaarsan inan yar oo uu isagu dhalay, kadib afar qof ayaa soo galay dukaanka dahabka!!!.

Dabadeed xaaskiisii ayaa bilowday inay wax iibsato, ooy dahab iibsato, jawaahirna gurato, ka dibna ayuu ninkii ku yidhi dahablihii:- Imisa weeyi xisaabtaadu?, wuxuuna ku yidhi dahablihii:- labaatan kun iyo boqol riyaal, ninkii ayaana yidhi:- Oo boqolka ziyaadadi halkuu ka yimid?, Waxaanu annagu xisaabinay labaatan kun oo kaliyee, halkuu boqolkani ka yimid?!!!.

Dabadeed dahablihii ayaa ku yidhi:- Hooyadaa ayaa boqolka riyaal ku iibsatay kaatun-yicni faraati, markaas ayuu dhahay ninkiina:- Aaway kaatunku?, dahablihii ayaana ku yidhi:- waa kani, dabeeto intuu inankeedii qaaday kaatunkii ayuu ku tuuray dahablihii isagoo leh : Habruhu (Islaamaha duqdi) dahabka ma xidhaan!!!.

Kadib hooyadii duqda ahayd ayaa markay maqashay hadalkaa ooyday, waxayna ku noqotay gaadhiga, xaaskiisii ayaana ku tidhi:- Waar hebel maxaad samaysay? Maxaad samaysay?, waxa laga yaabaa inayna dib inankaaga u xambaarine, Waaba sidii ay tahay khaadimad!!!.

Dahablihii ayaa ninkii canaantay, dabeetana intuu xaggii gaadhiga u kacay ayuu ku yidhi hooyadii:- Wallaahi, qaado kaatunka haddii aad doonayso, dahabkana qaado haddii aad doonayso!!!.

Hooyadii ayaana tidhi: Maya wallaahi ma doonayo dahabka, mana doonayo kaatunka. Waxaan rabay inaan ciidda u farxo sida dadka kale u farxayaan, hase yeeshee waad kala daadisay farxadaydii, Ilaahay ha ku saamaxo!!!.

Dad badan ayaa dayacay xaqa waalidkooda, In waalidka la caasiyaana waxay leedahay muuqaalo badan ooy ka mid yihiin:-

1) Codka oo kor loogu qaado ama in lagu qayliyo!!!.

2) In si xun loo eego ama la huruufo!!!.

3) Amarkooda oo la caasiyo ama la diido!!!.

4) Xaqooga iyo danahooda oo la dayaco iyo In la ixtiraami waayo!!!.

5) Xaaska ama ninka oo kaala qiimo weynaada hooyadaa iyo aabahaa!!!.

6) In laga oohisiiyo iyo In laga cadhaysiiyo!!!.

Ka taxadir dhammaan kuwan aynu soo xusnay iyo kuwo kaloo badanba, lana imow oo lakaalay kuwan caksigooda, ama kasoo horjeedkooda, markaas ayaadna noqonaysaa mid labada daaroodba liibaanay, Ilaahayna (swt) hayna garan siiyo xaqa waalidka!!!.

## HOOYO ISUG WAAN KUUSOO LAABANAYAAYE!!!



Wiil Dhallinyaro ah ayaa Damcay inuu Hooyadii Buur Dheer Dusheed Dhigo si uu Kolkaa Waraabaha iyo Libaaxu ugu Cunaan, isna uu uga Reysto Hadalkeeda, illeen Waayeel ayey noqotay'e, Dabeeto Gurigii ayuu ka soo Kaxeeyey Hooyadii, wuxuuna la soo Dhex maray Keyn weyn!!!.

Kadib Hooyadii ayaa waxaa galay Shaki aad u weyn, weyna Dareentay inuusan Xaalka Wiilkeeda Maanta Caadi aheyn, dabadeed Muddadii Keynta ay ku soo jireen ayey Hooyadii waxey Jar-jareysay Caleemaha Geedaha iyo Dhirta, waxeyna ku Tirineysay Dhulka, illaa meeshii Buurta aheyd ee uu Geeyey Hooyadiis!!!.

Hooyadii ayuu keenay Buurtii, meel ayuuna Fariisiyey, wuxuuna ku yiri:- Hooyo i sug waan kuu soo laabanayaaye, markii uu soo noqonaayey ee uu Keyntii Dhex maraayay ayuuna illoobay/kalumay Waddadii uu Guriga ugu Noqon lahaa, sidoo kalena wuxuu Garan waayey Halkii uu Hooyo kaga soo tegay, Intaas ka dib ayuuna wuxuu bilaabay inuu Qayliyo isagoo leh:- Hooyo-Hooyo-Hooyo!!!, markaas ayey Hooyadii si Naxiis leh ugu yeedhay oo ku tiri:- Hooyo Maxaa ku Helay?, misuu ku yiri:- Hooyo Jidkii aan ku Imid aayan Garaan waayey!!!

Bal Fiiri Hooyo waxey ugu jawaabtay haddaba, waxey ku tiri:- Hooyo Dhirta aan Jar-jaray dib u Raac si ay Guriga kuu Geyso, adiga ayaan kuu dhigay si ay Tilmaan kugu noqoto'e!!!.

Subxaanallaah, Taasi waa mid ku tusinaysa hooyo naxariisteeda, waayo xabaasheeda ayuu qodaayay Iyana mustaqbalkiisa ayay ka shaqaynaysay, sidaadse sidaas usamayn kartaa iyada oo uu Suubaneheennu (NNKH) inoo sheegay in jannadu ay taallo hooyada labadeeda lugood dhexdooda, SUBXAANALLAAH!!!.

Noqo mid udhibirsan waalidkii haddii aad rabto inaad ku guulaysato hadafkaaga adduun iyo ka aakhiroba!!!.

# AKOONKAAGA BUUXSO INTUUSAN ALBAABKU XIRMIN!!!



Maalin maalmaha kamid ah ayaa haweenay faqiir ama sabool aheyd oo sidatay canug yar ayaa iyadoo ag maraysay meel god ah agtiisa bay maqashay cod dheer oo ka so yeeraya godka waxaana lagu yiri sidan:- "Soo gal godka oo qaado wax walbo oo aad jeceshahay balse ha hilmaamin ama ha iloobin Asaaska iyo kuwa lagama maarmanka ah waayo haddaad kabaxdo Albaabka godka wuu xirmi doonaa illaa ebid", Fursaddana ka faa' iideyso laakiin iska ilaali Asaaska iyo kuwa lagama maarmaanka ah inaad hilmaanto!!!.

Kadib Haweeneydii markii ay soo gashay godka waxay ku aragtay Lacag, Dahab, Luul iyo Qalin, Ilmahii ama Canugii ay siday ayeyna dhinac iska dhigtay iyadoo bilawday in ay gurbisato Lacagtii, Dahabki Iyo Luulkii waliba iyadoo aad ula

yaaban waxa meesha yaalla, waxaana ay bilawday isla markiiba in ay ka fakarto mustaqbalka iyo sida ay wax yeeli laheyd ee sugaya!!!.

Kadib codkii ayaa mar labaad soo yeeray oo lagu xasuusinayo in 8 second kaliya u harsan tahay, walibana loogu celiyay ha hilmaamin ama ha iloobin Asaaska, markii ay maqashay in sekanadu ay sii dhammaanayaan iridana xermi rabto ayeyna si dhaqsi ah dibada ugu soo baxday oo dibada fariisatay iyadoo ka fikireysa mustaqbalka iyo waxa ay heysato sidii ay u kala maamuli lahayd, Laakiin nasiib darro markii albaabkii xirmay ayaa waxay xasuusatay in canugeedii ay gudaha kusoo hilmaantay oo ay ugaga soo tagtay walibana albaabka godka weligiis xernaan doono!!!.

Hadda haweenayda murugta heysata iyo ilmada ka qubaneysa laysma bar-bar dhigi karo cunugeedii halkan ay kusoo hilmaantay iyo Lacagta, Dahabkii iyo Luulkii ay soo heshay!!!.

Dunidu waa sidaas oo kale, waxaad doonto kaqaado inta aad nooshahay balse ha hilmamin Aasaaska iyo waxa ugu muhiimsan!!!.

AASAASKU waa Alle (swt) ka cabsiga iyo  Camalka wanaagsan, mana'naqaan waqtiga Albaabku uu xermi doono awoodna uma lehin inaan dib u saxno waxaan qaladnay hadduu waqtigaagu dhammaado, sidaa daraadeed xisaabtan maanta ayaad wakhti haysataaye, isna xisaabi inta aan lagu xisaabin!!!.

# AWRBA AWRKA HORE AYUU SOCODKIISA LEEYAHAY!!!



Qoys ayaa waxay ka Koobnaayeen Hooyo iyo Aabe iyo Shan Carruur ah oo ay Dhaleen iyo Islaan Ayeeyo u ah Carruurta oo Hooyada Dhashay, intaa ka dib ayaa waxaa dhacday Habeen Habeennada ka mid ah ayaa Hooyadii Dhashay Shanta Carruurta ahi u soo gashay Carruurteedii oo Akhrisanaayo Daruustii loo soo Dhigay!!!.

Haddaba markii ay Dhammeeyeen wax Akhriskii ayey Hooyadii ku tiri carruurteedii:- Caawa waxaan Doonayaa inuu Qof waliba uu Sawiro waxaa uu Jecelyahay noocuu doono ha Ahaadee/noqdee!!!.

Ka dib Cayaalkii midba wax buu Sawiray mid Baabuur sawira, mid Dhir sawira, haddaba mid ka mid ah Carruurta ayaa wuxuu Sawiray Guri aad u Qurux badan iyo Qolyar oo meel Gaar ah (Gooni) ku yaal oo ka Fog Guriga uu Sawiray, Ciyaalkii ayaa Hooyadii u keenay Sawiradii, wayna wada eegtay, markii ay Aragtay Gurigaan Quruxda badan ayeyna ku tiri Cunugeedii:- Hooyo Gurigan waa Maxay?!!!.

Markaas ayuu ugu jawaabay:- Hooyo waa Guriga aan anigu Degi doono markaan Weynaado insha allah!!!.

Markaas ayey haddana mar labaad hooyadii ku tiri cunugeedii:- Hooyo waa si fiican, ee Hooyo Qolkan yar ee Cidlada ku yaalaana muxuu ahaa?, wiilkii yaraa ayaana ugu jawaabay:- Adiga ayaan ku Dejinaa halkaa markaad gabowdo!!!.

Hooyadii wey Naxday markaasay ku tiri:- Hooyo maxaad meeshaa Cidlada ah ii Dejinaysaa?, Isna Markaasuu ku yiri:- Hooyo Adiguba Ayeeyo sow Cidladaa maad Dajin, intuu meel farta ugu fiiqay!!!.

Kadib Hooyadii intay Naxday oo ay ilmo ku soo Istaagtay ayey tiri:- Hooyo waan ka soo Rarayaa meeshaa, Guriga ayaana keenayaa, ka dib Hooyadii waxay soo Rartay Hooyadeed oo ay soo Dhex Dejisay Guriga ay Daganaayeen!!!.

Soomaalidu waxa ay tidhaahdaa kuna maah-maahdaa:- awrba awrka hore ayuu socodkiisa leeyahay, haddii aad adigu waalidkaa ku xumayd ama ku xumaato adigana ubadkaaga ayaa kugu xumaanaya, aanaad kala kulmaysaa isla

dhibtii aad ku haysay adigu waalidkaa, haddii aad waalidkaa uwanaagsanaydna adna ubadkaaga ayaa kuu wanaagsanaanaaya aanaad kala kulmaysaa wanaagii aad adigu waalidkaa kula dhaqmi-jirtay una muujin-jirtay!!!.

**ALLOW NAWANAAJI, UBADKANA NOOWANAAJI, ADIGA AYAA WAX WANAAJIYEE!!!.**

## JINNIGII INSIGU XADAY!!!



Labo nin ayaa is raacay waxaana ay ahaayeen saaxiibo, sidoo kalena ilmo-adeer, kadib waxa ay ku heshiiyeen in aysan is qiyaamin waligood, haddaba Ceel ayaa ay ka wada cabi jireen, maalin walbana mid ayaa ceelka geli jirey midna kor ayuu biyaha ka dhaamin jirey!!!.

Haddaba maalin-maalmaha ka mid ah ayaa kii ceelka ku jiray looga tegay ceelkii, kii kalena markii uu biyihii kusoo shubay wadaantii ka ceelka ku jiraa ee uu biyihii cabay ayuu iska tegay!!!.

Habeenkii ayaa waxaa ceelka cabi jiray jinni, maalintiina Insi, dabadeed jinnigii ayaa habeenkii ceelka yimid, nasiib wanaagna ma aysan arkin ninka ceelka

ku jiray, Ninkii ayaana maqlay jinnigii oo dhahaya:- dahabkan waxaan dhiganaynaa ceelka geedka u dhow, waana ay baxeen!!!.

Maalintii ayaa waxa yimid dadkii, ninkiina ceelkii ayay ka saareen, balse ninkii waxa uu raadiyay dahabkii jinnigu sheegayay, nasiib wanaagna wuuhelay waana uu qaatay dahab aanay macquul ahayn tiradiisu, markii uu baxay ayaana waxa uu arkay saaxiibkiis, kaasoo uga dhex tegay ceelka, hadalkii ugu horeeyay ee uu dhahana waxa uu ahaa:- mahadsanid!!!.

Ninkii ayaa yaabay oo isyiri waar ninkani halkii uu kaa habaari lahaa ayuu kuu mahadceliyay waa maxay waxani, kadibna waxa uu ku yiri saaxiibkii:- sxb maxaad iigu mahad celisay, waxa uuna ugu jawaabay:- bal fiiri dahabkan waxaan ka soohelay ceelkii aad iiga tagtay ,waxaana uu u sharraxay sida uu dahabka ku helay!!!.

Kadib ninkii ayaa yiri sxbow ana ceelka i geli oo iiga soo tag aan dahab helee, sidii ay ballantu ahaydna waxa uu geliyay ceelkii ugana tegay, habeenkii markii la gaaray ayaana jinnigii yimid isla markiina waxa ay waayeen dahabkii, kadib jinnigii ayaa go'aansaday in uu ceelka duugo maadaama dahabkoodii la xaday halkii ayayna ceelkii iyo wixii ku jirayba ku duugeen!!!.

God qiyaano ha qodin haddaad qodana ha dheerayn ku dhici doontaana ma ogide!!!.

# QOFKU WAXA UU KA CABSAN KARAA LAKULANKA CADAWGIISA BALSE KAMA CABSAN KARO LA KULANKA CID UU JECELYAHAY!!!



Nin markaa cidda uu lahadlayay ay u arkaysay nin waalan ayaa soo maray nin caabida oo Rabbigii (swt) la munaashaqoonaya " arrimihiisa u sheeganaya" wuxuuna ahaa mid ooyaya dhabanadiisuna ay da'ayaan ilmo, wuxuuna lahaa:- Rabbigayow ha i hoojin, naarta ha i gelinne ii naxariiso oo ii dhibirsanow, Allahayow naar ha igu cadaabin, waxaan ahay daciif, ma lihi awood aan ku xammilo naarta, ee Allahayow ii naxariiso!!!.

Maqaarkaygu waa jilic-san yahay, awoodna uma laha in uu xamilo kulaylka naarta, lafahaygu waa kuwo jilicsan, mana xammili karaan naarta darane Allahayow ii naxariiso!!!.

Kadib Ninkii waalnaa ayaa xoog ugu qoslay ninkii caabidka ahaa, Ninkii caabidka ahaana waxa uu u jeestay xaggii ninka waalan isaga oo leh:- " Maxaad ku qoslaysaa Kaagan waalanow?, Ninkii waalnaa ayaana ugu jawaabay hadalkaaga ayaa iga qosliyey!!!, Dabadeed Caabidkii ayaa hadalkii qaatay oo yidhi:- Oo Muxuu kaaga Qosliyey / Maxaad ugu qososhay?!!!.

Ninkii waalnaa ayaana dhahay:- Waayo waxa aad ka ooyaysaa baqasho aad ka baqanayso naarta!!!.

Caabidkii:- Oo adigu ka baqan maysid naarta miyaa ?!!!.

Ninkii waalnaa:- Ka baqan maayo Naarta!!!, Kadib Ninkii caabidka ahaa ayaa intuu qoslay ku yidhi ninkii waalnaa:- waa hagaag waayoWaad waalan tahay!!!.

Ninkii waallaa:- Sidee ayaad uga baqanaysaa naarta caabid-kaaganow, adiga oo leh Alle raxiima oo naxariis badan, oo naxariistiisu shay kasta gaadhay?!!!.

Caabidkii:- Waxaan leeyahay dembiyo, haddii alle (swt) ii qabto / igu qaado caddaaladiisa naarta igu gelinaayo. Waxaana u ooyayaa si Alle (swt) iigu dembi dhaafo oo iigu naxariisto oo aanu caddaaladiisa iigu xisaabin ee uu iigu xisaabiyo dhibirsanaantiisa & naxariistiisa si aanan naarta u gelin.

Haddana Markale ayaa ninkii waalnaa ku qoslay caabidkii weliba si xooga oo sidii hore ka awood badan, kadib Caabidkii wuu yaabay wuxuna yidhi:- maxaad ku qoslaysaa?!!!.

Ninkii waallaa:- Caabid-yohow waxaad leedahay Alle (swt) caadila, haddana waxaad ka baqaysaa caddaaladiisa?, waxaad leedahay Alle (swt) dembiga dhaafa, naxariis badan towbaddana aqbala, Naartiisaanaad ka baqanaysa?!!!.

Caabidkii ayaa yidhi:- " Miyaanad Alle (swt) ka baqaynin ninkaagan waalanow?!!!, Ninkii waalnaa:- Haa Waan ka baqayaa Alle (swt), hasayeeshee cabsidaydu ma aha midaan naartiisa ka baqaayo!!!.

Markan Aad ayuu u yaabay ninkii caabidka ahaa dabeedna waxa uu yidhi:- "Haddii aanad naartiisa ka cabsanaynin, Maxaad ka cabsanaysaa?!!!.Ninkii walnaa:- Waxaan ka cabsanayaa hor istaagga Rabbigay (swt) & su'aasha uu i weydiin doono ee ah " Addoon-kay-gii-yow maxaad ii caasiday?", ninkii waalnaa oo hadalka sii wata ayaana intaa ku sii daray "Haddii aan ehlu naar ahay, waxaan door bidi lahaa inaan naarta galo, halkii Alle (swt) aan hor istaagi lahaa oo uu i weydiin lahaa su'aashaa, In la i cadaabona waxa iiga daran in su'aashaas Alle (swt) i weydiiyo xumaan ka nasahnaaye, maxaa yeelay Ma Awoodo inaan ku eego il khiyaamo, uguna jawaabo carrab hadal beena sheegaya, haddii gelitaankayga naarta raalli gelinayso Allahayga (swt) aan jecelahayna wax dhib ahi kuma jiraan!!!.

Kadib Caabidkii aad ayuu uyaabay, waxa uuna in badan ka fikiray hadalka ninkaa waalan, kadib Ninkii waalnaa ayaa mar kale yidhi:- Caabid yahow sir ayaan kuu sheegi lkn waxaad yeeli cid kale ha u sheegin!!!.

Waa maxay sirtaasi?, Waxa yidhi caabidkii!!!.

Caabidyahow Rabbigay (swt) naar ima gelinayo "ima cadaabayo" Magaranaysaa sababta ? Waayo ?, Waxa yidhi ninkii waalnaa, Caabidkii ayaana isna u hal celiyey ninkii waalnaa isaga oo leh:- Waayo?, Sababma?, ninkii waalnaa ayaana yidhi:- Maxaa yeelay anigu Alle (swt) waxaan u caabudaa hilow & jacayl aan u qabo, adiguna waxaad u caabuddaa cabsi & damac aad u qabto, Malaha & filashada aan ka qabo Rabbigay (swt) ayaana ka wanaagsan malaha, filashada & rajada aad adigu ka qabto!!!.

Caabidyahow maxaad Alle (swt) uga rajayn wayday wax ka wanaagsam waxa aad rajaynayso. Nebi Muuseba (NNKH) wuxuu u baxay si uu uqaado qori daba oo ay iftiinsadaan kuna diirsadaan isaga oo Nebi-nimo la soo noqday!!!.

Aakhirkiina Ninkii waalnaa wuxuu tegey isaga oo qoslaya ,caabidkina ooyayo oo leeyahay:- Ma rumaysan karo in ninkani waalan yahay, Ninkani waa ka ugu caqliga badan dadka, aniguna waxaan ahay ka waalan dhab ahaantii, Hadallkiisana ilmo ayaan ku qori doonaa insha allah!!!.

Mar kasta wanaaji filashada iyo rajada aad ka qabto rabbigaa (swt)!!!.

## NINKII WAALNAA EE KHAADIBKA NOQDAY!!!



Maalin jimca ah ayaa qadiibkii ka soo daahay qudbaddii kadib ayaa waxaa mimbarkii soo fuulay nin waalan. dadkii ayaana waxey damceen in ey ka dejiyaan ninkan waalan mimbarka, lkn mid kamida howl wadeennada masjidka ayaa yiri:- iska daaya ha qudbeeyee!!!.


Kadib ninkii waalnaa qudbadii ayuu billaabay, wuxuuna yidhi:- "Ilaahay ayaa mahad iska leh Allahii idiin abuuray labo labo, oo idiin qeybiyay labo labo, Qani idinka dhigay si aad uga shukrisaan, faqiirna idinka dhigay si aad u sabartaan.

Qanigiinuna ma shukriyo faqiirkiinana ma sabro, Ilaahay Ha idin lacnado dhamaantiin, Ee salaadda u istaaga"!!!.

Subxaanaka yaa cadiim!!!.

Ha umalaynin in xikmadda iyo murtidu ay ku jirto oo qudha midka miyirka qaba, ama aad isleedahay wuu miyir qabaa adigu, balse isku day in maqalkaaga iyo dhugashadaaduba ay cid walba ufuraadaan, waana run oo bani-aadmigan dhammantiina Allah swt ayaa inoo sheegay in uu karaameeyay, mana jiro qof madhani ama aanaay waxba ku jirini (xikmad) noocaydoontoba hanoqotee.

## DUKAANLIHII IYO GARSOORIHII!!!



Waxa uu yimi dukaanka digaaga isaga oo sita digaagad gawracan, kadibna waxa uu ninkii dukaanka haystay u dhiibay digaagaddii gawracnayd isaga oo kula heshiiyey in la habeeyo lagana guro baalasha & lafaha, dukaanlihiina waxa uu ninkii u sheegay in uu u diyaarin doono digaagadda isaga oo ku yidhi:- rubuc saac kadib ku soo noqo iyada oo diyaar ah, ninkiina waxa uu dukaanlihii si diirran ugu hal celiyey isaga oo leh:- waa hagaag, sidaas ayaynu ku heshiinnay, kadibna waa uu ka tegay!!!.

Isla markii uu sidaa uga baxay waxa dukaankii soo galay garsoorihii magaalada, kadib garsooruhu waxa uu dukaanlihii ka dalbaday in uu siiyo digaagad diyaarsan, ninkii dukaan-laha ahaana waxa uu garsoorihii ku yidhi:- " wallaahi ma

hayo digaagad aan ka ahayn digaagadan oo ah mid nin ii dhiibtay, rubuc saac ka dibna uu u soo noqonayo si uu u qaato!!!.

Garsoorihii ayaa yidhi:- " Iyadaba keen marka uu ninkii lahaa kuu yimaado ee ku warsadona waxaad ku tidhaahdaa way duushay, dukaanlihiina wuxuu yidhi:- wax la aqbali karo ma aha, siday suuro gal u tahay jawaabtani?, sideen u odhan karaa way duushay?!!!.

Dabadeed Garsoorihii ayaa yidhi:- waryaa, Waxaan ku leeyahay maqal, sidaa aan ku idhina dheh, Waxba lagaa weydiin maayo adiga'e, hadduu doono ha soo dacwoodo kuma khusayso adiga!!!.

Kadib Dukaanlihii waxa uu yidhi:- " Allahayow i astur", talo ayaana ku caddaatay si uu yeelo & tallaabo uu qaadona garanwaa, arrinina ku soo oodantay, garsoorihiina digaagadii sidaa ku qaaday!!!.

Arrini markay halkaa marayso waxa soo noqday rubuc saac kadibna yimi ninkii digaagadda lahaa, waxaanuu dalbaday digaagadiisii isaga oo leh:- digaagadaydii isii hadday diyaar tahay, dukaanlihiina ismaba dhibine waxa uu aayar yidhi:- digaagadaadii way duushay, ninkii digaagadda lahaana waxay ku noqotay layaab & Amakaag, Waxaanuu is raaciyey sidee ayay u duushay?, Miyaad waalan tahay?, Waxaabaan kuu keenay iyada oo gawracan'e!!!.

Labadii nin waxa dhexmaray muran iyo ismaan dhaaf xooggan iyaga oo is weydaar saday ereyo qal-qalafsan, muran badan kadibna ninkii digaagadda laha waxa uu yidhi:- inna mari maxkamadda ayaynu isla tegeynaaye si laynoo kala xukumo xaqaygana aan u helo!!!..

Labadii nin waa is raaceen waxaanay u dhaqaaqeen xaggaa iyo maxkamadda, haddaba intii ay jidka ku sii jireen ayaa waxa ay la kulmeen laba nin oo dagaalamaya, Labadaa ninna midi muslim ayuu ahaa kan kalena gaal yahuudi ah!!!.

Dukaanlihii waxa uu doonay in uu kala qabto labadan nin ee dagaallansan waxaanu u dhaqaaqay dhankoodii, markii uu soo gaadhay ee is yidhi kala qabona, waxa uu si aan u kas ahayn farta ula helay isha ninkii yahuudiga ahaa isaga oo isha farta ka geliyey, Ninkii yuhuudiga ahaana ishii ayaa ka soo dhacday!!!.

Beloba waa tan dambaysee dadkii ayaa iskugu soo baxay, ninkii dukaanlaha ahaa ayay qabteen iyaga oo u soo kexeeyey dhanka maxkamadda si caddaaladda loo hor keeno waajibkiisana loo mariyo, wax ay soo wadaanbana markii ay maxkamadda horteeda marayaan ayaa uu dukaanlihii ka fakaday dadkii, cagaha ayuuna wax ka dayay iyana ka daba caymade!!!.

Wax lays eryado oo lays baacsadoba, ninkii dukaanlaha ahaa masaajid ayuu firxadkii ku galay, kadib dadkii eryanayey qaar ka mid ah ayaa iyana ka soo daba galay, dukaanluhuna dab yar ma shudayne naf la caarigii isna waxa uu koray

minaaraddii masaajidka, lagana soo daba kor, kadib markuu arkay in aan weli laga hadhin oo minaaradiina laga soo daba koray ayuu waxa uu iska shubaaliyey oo ka booday minaaraddii, dabadeedna waxa uu cuskaday oodushaa kaga habsaday oday waayeel ah!!!, Odaygii waayeelka ahaana naxdintii, Jugtii & miisaankii cuskaday awgii halkii ayay naftu kaga hagaagtay oo laguma gaadhinba, waxaana yimi inan uu dhalay odaygii waayeelka ahaa, waxaana uu arkay aabihii oo mayd ah, waxaana uu eryaday ninkii dukaanlaha ahaa isaga oo soo qabtay!!!.

Inankii odaygu dhalay & dadkii waxay maxkamadda keeneen ninkii dukaanlaha ahaa ee odayga malgay oo dembiyo horena loo haysto, waxaana la hor geeyey garsoorihii!!!, kadib Markii uu garsoorihii arkay ninkii dukaanlaha ahaa waa uu qoslay isaga oo niyadda ku qabtay markiiba kana fikiray arrintii digaagadda ee uu ka soo qaatay mase ogaba in saddex dembi lagu haysto !!!.

**1)** Xatooyadii digaagadda!!!.

**2)** Ishuu yuhuudiga ka riday!!!.

**3)** Dilkii odaygii waayeelka ahaa!!!.

Markii se uu ogaaday madaxa ayuu qabsaday, wuuna fadhiistay si uu uga fikiro xallinta saddexda qaddiyadood ee is barkan, mid mid ayaanu uga fikiray, Intaa ka dibana waxa uu bilaabay xallinta saddexdii qadiyadood ee loo haystay dukaanlaha!!!.

Ugu horrayn Garsoorihii waxa uu u yeedhay ninkii digaagada lahaa isaga oo ka warsaday dacwadda uu wado & waxa uu ninkan kaga dacwoonayo, ninkii digaagadda lahaa ayaana yidhi:- Garsoore ninkan digaagad gawracan ayaan u dhiibtay, waxaana ka dalbaday in uu ii habeeyo, wuxuuna hadda i leeyahay digaagaddii way duushay, sidee ayay u dhici kartaa mudane garsoore arrintaa iyada ahi?!!!.

Kadib garsoorihii ayaa ninkii ku yidhi:- Ilaahay (swt) ma rumaysan tahay?, ninkiina waxa uu ku jawaabay:- haa Ilaahay (swt) waan rumaysnahay.

Garsoorihii ayaa dabadeed ku yidhi:- "Haddaba Alle (swt) ayaa Nooleeya lafaha baaliyoobay ee ramiimka noqday", Isaga oo ninkiina intaa u raaciyey iska tag ninkan waxba kuma lihide, ninkiina sidaa ayuu ku tegey!!!.

Marlabaadkii Mudicigii labaad ayaa loo yeedhay, waa ninkii yuhuudiga ahaaye, markii uu soo istaagay garsooraha hortiisa waxa uu isna yidhi:- Garsoore ninkani isha ayuu iga soo tuuray anna waxaan doonayaa in aan isha ka rido siduu isba igu sameeyey!!!.

Garsoorihii wuu yara fikiray dabadeed-na wuxuu ninkii yuhuudiga ahaa ku yidhi:- "Magta ama diyada gaalku muslimka ku leeyahay waa badh ama haaf'' isaga oo uga jeeda (Isha labaad ayaanu kaa ridaynaa si ninkan muslimka ah il looga rido), ninkii yuhuudiga ahaana waxa uu yidhi:- Bes Bes khalaas waan ka tanaasulay waxbana u sheegan mayo!!!.

Kadib Garsoorihii ayaa yidhi dacwadda saddexaadna halaysoo gudbiyo!!!, waaxana yimi wiilkii odayga waayeelka ahaa ee dhintay dhalay, waxaanuu yidhi:- Garsoore ninkani aabahay ayuu dusha kaga soo booday oo uu dilay!!!.

Garsoorihii wuu u yar fikiray waxaanuu yidhi:- israaca oo waxaa tagtaan minaaraddii, dabadeed-na kor oo dusha kaga soo bood dukaanlaha, Inankiina waxa uu garsoorihii ku yidhi:- waa hagaag laakiin haddii uu bidix & midig u dhaqaaqo oo ii baneeyo saw ma dhimanayo!!!.

Garsoorihina wuxuu yidhi:- wallaahi aniga dhibtayda maaha, waxbana igama gelin, aabahaa muxuu bidix & midig ugu dhaqaaqi waayey oo ugu banayn waayey?, halkii ayuu isna kiiskiisii kaga tanaasulay oo iska tegay!!!.

Meeshiina waxa kusoo hadhay dukaanlihii oo aan waxba loo haysan iyo garsoorihii garta qaadayay oo qudha!!!.

Waxa jira looyaro & garsoorayaal awood u leh aftahamona Alle (swt) u siiyey in ay si layaab leh u xalliyaan dacwad kasta oo loo keeno!!!, waxaanay beri kaaga dhigayaan khalad kasta oo aad gashay, kaagana soo dhex saarayaan sida tin qoosh ku dhex jirta looga saaro, Waa se haddii aad sida ninkaa afka u buuxiso, walow aanay diinteenna suubani saas ogolayn!!!.

## SADDEXDII C/LAAHI EE WALAALAHA AHAA!!!



Waxa jiray saddex wiil oo isla dhashay oo haddana isku magac ahaa, oo saddexdoodaba la odhanjiray cabdullaahi, Aabahood ayaa isugu wacay markii uu dhiman rabay wuxuuna ku yiri :- Cabdullaahi wuu dhaxlaa maalkeyga, cabdullaahi ma dhaxlaayo, cabdullaahi wuu dhaxlaa, Naftina waa ay ka baxday, hadalkaas ayaana wuxuu ka dhigan yahay in saddexda wiil mid ka mid ah uusan dhexleyn maalka uu ka dhintay aabahani!!!.

Wiilashi waa ay is qabqabsadeen waxeyna isku raaceen inay nin xaakim (qaaddi) ah oo aad u caqli badnaa u tagaan!!!.

Ninka xaakim ka ahi waxaa uu daganaa magaalo ka fog magaaladooda, waxa ayna aadeen magaaladii xaakimku daganaa, Intii ay waddadii kusii socdeen

ayaana waxaa ka hor yimid nin reer baadiya ah wuxuuna weydiiyey iney arkeen ratti ka lumay, kadibna waxey u sheegeen ineysan arkin, dabadeed Mid ka mid ah wiilashii ayaa ku yiri ninkii:- Rattigaagu gees ma u badan yahay (jiis cml /leexo) ma leeyahay?, ninkii ayaana ugu jawaabay :- “Haa’’!!!, mid kale ayaa haddana ku yiri ninkii:- Rattigaaga il ma la'yahay?, ninkii ayaana ugu jawaabay:- “Haa’’!!!, wiilkii 3-aad ayaa weydiiyey haddana ninkii:- Rattigaaga seynta maka go'anyahay?, ninkii ayaana ugu jawaabay:- “Haa’’!!!.

Kadib ninkii ayaa ku dhahay wiilashii aawey rattiga waad aragteene ii sheega?, waxeyna dheheen ma aanaan arag, ninkii ayaana dhahay saddexdiinaba xaakimka ayaan isula tageynaa, isaga ayaana na kala saaraayee noo geeyaa!!!, waxeyna ku dhaheen annaguba waan u soconaaye na wad!!!.

Markey u tageen xaakimkii waxey ku bilaabeen tii ninkii ratiga raadinaayey, markii uu xaakimkii dhageystay wixii dhacayna wuxuu ku yiri wiilashii:- sidee ku garateen in rattigu uu jiis yahay?!!!.

Kadib midka mid ah wiilashii ayaa ku yiri:- raadka ayaan arkey mana eheyn raadku mid afarta lugood si fiican dhulka u dhigaya oo culeysku qaarna wuu ku badnaa oo si fiican ayuu raadkooda dhulka uga muuqday qaarna raadkoodu khafiif ayuu ahaa oo culeysku wuu ku yaraa!!!.

xaakimkii:- Sidee ku ogaateen in uu rattiga seynta la'yahay?!!!.

Mid kamid ah cabdulaahiyaashii:- Sida caadada u ah geela marka u digeynaayo seyntiisa ayuu ku firdhiyaa digada, lkn ratigan digadiisa tuur ruur ayey eheyd, sidaas ayaan ku ogaaday inuu saynta ka go'anyahay!!!.

xaakimkii:- sidee ku ogaateen inuu il la'yahay?!!!.

Mid kamida wiilashii:- Geedaha hal dhinac ayuu ka cunaayey dhinaca kalana wuxuu ahaa mid aan la taaban, taas waxey ka dhigantahay inuusan dhinacaa arkeyn oo uu il la'aay!!!.

Halkaa markuu xaalmarayay xaakimkii ayaa u sheegay ninkii reer baadiyaha ahaa in wiilashan aysan arkin ratigiisa, oo uu raadsado ratigiisa, markii uu ninkii reer baadiyaha ahaa baxay ayaana xaakimkii weydiiyey wiilashii sababtii ay ayagu u yimaadeen halkaan!!!.

Waxayna uga sheekeeyeen qissadoodii, markii uu dhageystay kadib ayuuna dhahay caawa gurigeyga ayaad seexaneysaan oo anaad marti ii tihiin, subixii markii la gaaro ayaana qaddiyadiinna (mushkiladdiina) usoo jeesanayaa, waana ay aqbaleen guriga ayaana qol laga dajiyey, xaakimkiina nin khaadim (shaqaale) u ahaa ayuu ku amray inuu kor kala socdo wiilashan wax kasta oo ay sameeyaan iyo eray kasta oo ay ku hadlaan!!!.

Wiilashii markii ay qolka galeen ayuu midka mid ah dhahay:- meelahaa ka fiiriya qofna jaasuusaya!!!.

Intaa kadib khaadimkii ayaa usoo galay isagoo u wada casho hilib Eey iyo rooti ah, cashadii ayuu u dhigay wuuna baxay, kadib mid ka mid ah wiilashii ayaa dhahay:- ha cunina hilibka waa hilib Eey'e, mid kale ayaana soo booday markaasuu yiri:- naagta rootigan sameysay waa naag xaamilo ah oo bisheedi 9-aad ku jirta, kii saddexaad ayaana soo booday markaasuu yiri:- xaakimkaan waa wacal ( garac/waa mid aan guur xalaal ah ku dhalan)!!!, Jaasuuskii uu soo dirsaday xaakimkiina waa uu maqlaayey sheekadooda wuxuuna si toos ah ugu gudbinaayey xaakimkii!!!.

Subixii ayaa lagaaray wiilashiina waxey u tageen xaakimkii si uu u kala saaro!!!.

Xaakimkii:- Maxaa u dhahdeen hilibkii xalay la idiin keenay waa hilib Eey?!!!.

Mid kamida wiilashii:- xaakimoow hilibka la cuno waxa uu ka bilaawdaa laf, kadib jiidh, kadibna baruur lkn hilibkii xalay naloo keenay wuxuu ka bilaabanaayey laf, kadib baruur, kadibna jiidh, sidaas ayaan ku gartay!!!, xaakimkii ayaana u yeeray kariyihii cuntada (kuugii), wuxuuna weydiiyey xalay ma hilib Eey ayaad karisay mise hilib kale, kuugii ayaana ku jawaabay:- "haa''!!!.

Xaakimkii:- maxaad u dhahdeen rootigii xalay leydiin keenay waxaa dubtay naag xaamilo ah oo bisheedi sagaalaad ku jirta?!!!.

Mid ka mida wiilashii:- Sababtoo ah rootiga dhinacna wuu ka bislaaday dhinacna ceeriin ayuu ka ahaa, dumarkana marka ay bisha 9-aad ku jiraan foornada rootiga kuma foorarsan karaan sidaas ayaana ku gartay!!!, xaakimkiina shaqaalihiisii ayuu weydiiyey yaa dubay rootiga?, waxaana loo sheegay in islaan xaamilo ah oo bishi 9-aad ku jirta ay dubtay!!!.

Hadda waxa uu kayaabay xaakimkii wiilasha caqligooda!!!, Ugu danbayntiina xaakimkii wuxuu su'aalay wiilashii:- sidee ku garateen inaan wecel (garac) ahay?!!!.

Mid kamida wiilashii:- Qofka martidiisa jaasuus u dira maahan waxaan wecel ahayn!!!, xaakimkiina markuu intaa maqlay asagoo ordaya ayuu hooyadiis u yimid, markaasuu weydiiyey hooyo ma wecel ayaan ahay?, Hooyadiina waxey ku tiri:- "Haa!!!.

Dabadeed wiilashii ayuu usoo laabtay xaakimkii wuxuuna ku yiri:- Yaa yiri hilibkan waa hilib Eey?!!!, mid kamida wiilashii:- ani ayaa iri. xaakimkii ayaana ku yiri kii hadlay adi waad dhaxley maalka aabahaa!!!.

Xaakimkii:- yaa yiri rootigan waxa samaysay naag xaamilo ah?!!!, id ka mid ah wiilashii ayaana yiri:- ani, xaakimkii ayaana ku yiri kii hadlay adna waad dhaxlay maalka aabahaa!!!.

Xaakimkii:- yaa yiri xaakimka waa wecel (garac)?!!!, wiilkii soo haray ayaana yiri:- ani, xaakimkii ayaana ku yiri adi ma dhaxleysid!!!

Wiilkii ayaana weydiiyey sabab?!!!, xaakimkii ayaana ku yiri:- Sababtoo ah wecel ma garto wacal kale, wecel maahane!!!.

Intaa kadib wiilashii hooyadood ayey u laabteen waxeyna weydiiyeen cabdullaahigii la dhahay ma dhaxleysid sababta loo dhahay, Hooyadood ayaana tiri:- cabdulaahigaas walaalkiin ma ahan, aabihiin ayaana masaajidka hortiisa kasoo qaaday, saas ayuuna idin kula soo koray walaalkiin!!!.

Waa muhiim haddii aad cid isqabataan kalabixiwaydaanna inaad isla aaddaan cid cilmi, garaad iyo garasho usaaxiiba, si ay idiin kala furdaamiso, idiina kala xukunto, haddii kalese filashadu ma wanaagsana!!!.

## NINKII XAAKIMKA AHAA IYO JIRRABIDDII BULSHADIISA!!!



Nin xaakim ah oo aad u caqli badnaa ayaa hadda ka hor waddo (jid) ay dadku mari jireen ku gooyey dhagax weyn, mid ka mid ah shaqaalihiisa ayuuna ku amray inuu ilaaliyo una soo gudbiyo wax kasta oo ay dadku sameeyaan iyo eray kasta oo ay ku hadlaan marka ay dhagaxa soo gaadhaan!!!.

Kadib ugu horrayn nin ganacsade ah ayaa soo maray wuxuuna yiri isagoo qeylinaya:- waa in dowladdu ay tilaaba ka qaaddaa dadkii waxan sameeyay, wuuna iska sii socday!!!.

Haddana nin xoogsato ah ayaa soo maray wuxuuna si hoose u yiri:- waa in dowladdu ay tilaabo ka qaaddaa dadkii waxan sameeyay, wuuna iska sii socday!!!.

Haddana saddax wiil oo dhallin-yaro ah ayaa soo maray, waxeyna ka hadleen xaaladda xun ee dalkooda ka jirta, waana ay kasii socdeen!!!.

Laba maalin kadib ayaa waxa soo maray nin iska faqiir ah oo beeraleey ah wuxuuna u dhaqaaqey dhankaa iyo dhagaxii si uu uga wareejiyo (leexiyo) waddada, isagoo kaalmo ka dalbaday dadkii waddada maraayey si ay ula qaadaan dhagaxa, waana ay ku guuleysteen iney ka qaadaan dhagaxii weynaa waddadii, dhagixii markii ay qaadeenna ayey hoostiisa ka heleen sanduuq ku jiray god dhagaxa hoostiisa ka qodnaa!!!.

Sanduuqana waxaa ku jiray dahab iyo warqad ay ku qoran tahay:- Ka socota xaakimka ku socota qofkii dhagaxan ka wareejiyay waddada, sanduuqan waa abaal marin qofka wanaagga jecel oo ku dhiirada xalinta mushkiladaha uu xalin karo intii uu dowladda usoo ashtakoon(dacwoon) lahaa!!!.

Meeqa mushkilad oo yar-yar Ayaan la dhibaatoonaynaa, innagoo si fudud ku xallin karna!!!

**RISAALO KU SOCOTA SOOMAALIYOO DHAN:-** Walaalayaal aan joojinno ka ashtakooyinka iyo hadalka dhibaatooyin yar-yar oo aan innagu xallin karno, weliba si fudud, oo aan xallino dhibaatooyinkeenna annagoo shacab ah, waan xallin karnaaye, Gacmo wadajirbay wax ku gooyaan, markaas ayaynuna hore usoconaynaa si dhakhso ah, xawaareheeduna sarreeyo!!!.

## MARKABKII UGU WAYNAA QARNIGII 20AAD!!!




Markabkii ugu weynaa dunida qarnigii 20aad waxa sameeyey dalka England **1912kii** waxana lagu magacaabi jiray **TITANIC**, haddaba waxaa la waydiiyay ninkii sameeyay Markabkan Titanic:- bal kawarran markabkan awooddiisa?, kadib wuxuu yiri kuna jawaabay:- cid hor istaagi kartaa majirto xittaa Allah (swt)-(subxaanallaah), kadib tolow maxaa qabsaday!!!.

Waxa dalxiis ahaan u raacday **2500 oo qof**, dabadeed dadkii oo dalxiisaya farxadna Ku jira ayaa Galabnimo arbaco ah taariikhduna tahay **14/4/1912kii** uu Ku dhacay buur Wayn oo baraf ahayd, gebi ahaanbana markabkii wuu gaddoomay (dhacay) waxaana Ku geeriyooday kuna nafwaayay dadkii markabka ugu sarreeyey, ganacsatadii, maalqabeenadii iyo kuwii kibirka badnaa oo dhan!!!.

Waxaana Ku nafwaysay **1500 oo ruux**, markabkiina halkaa ayuu Ku burburay kuna dagay!!!, dadkii badbaadayna kuwo badan oo kamidi waa islaameen, xittaa waxa kale oo islaamay dad aan markabka saarnayn balse Ku noolaa waddanka Britain (England) oo uu Alle (swt) soo hanuuniyey kadib dhacdadan!!!.

Ciddii Alle (swt) isku taagta wallee araxda uunbay ka jabeysaa balse adigaagan muslimka ahow Ku tusaala qaado dhacdadaas iyada ah!!!.

Allaahu akbar, alloow adaa weyn oo waaxida!!!.

## MARNA HAKA QUUSAN GAR-GAARKA EEBBE (SWT)!!!




Waxa Socon waayey Culays daraaddii Markab sidey Alaab Aad u fara badan aadna u culus, kadib naakhuudeyaashii wadey iyo raggii ganacsatada ahaa ayaa waxay go'aan ku gaadheen inay alaabta qaar daadiyaan, waxayna go'aan ku gaadheen inay daadiyaan alaab aad u badan oo uu leeyahay mid kamid ah ragga ganacsatada ah kaas oo kucusbaa ganacsatada markabka, Isaga iyo Alaabtiisiibana badda ayay ku tureen!!!.

Mowjadihii ayaa qaaday Ganacsadihii waxayna geeyeen jaziirad aan cidna deganayn, kadib Isagoo murugaysan ayuu ruugagga ku fadhiistay ilaahayna (swt) baryey inuu caawiyo.

Dhowr maalmood ayaa kasoo wareegey intuu joogey jaziiradda cidlada ah wuxuuna quudan jirey midhaha dhirta, meel u dhoweyd oo biyo fadhiyeenna biyuhuu ka cabi jiray, buul yar uu ka dhistay dhirtana wuu seexan jiray!!!.

Haddaba Maalin yadoo dab u shidan yahay ayaa dabayl soo dhacday, dabkii ayayna kusoo saydhay buulkii yaraa, wuuna ka gubtey buulkii yaraa, kadib Wuu qayliyey isagoo leh:- Ilaahow maxay waxani iigu dhacayaan?, habeenkiina wuxuu seexday isagoo gaajaysan murugo awgeed!!!.

Aroortii ayaa haddaba waxa kedis ku noqotay wuxuu arkay markab kusoo dhow jaziiraddii, laashna way usoo direen si uu usoo raaco, kadib ayuu Wuxuu weydiiyey sidee ku ogaateen inaan halkan joogo?, waxayna ugu jawaabeen:- waxaannu aragnay qiiq baxaya saasaanu ku garanay in qof caawimo dalbanayo, waxayna usheegeen in Markabkii ganacsatadu Badda ku degey ganacsatadiina ku dhimatay dhammaanteed!!!.

Kadib Inta uu ilmeeyey ayuu sujuudey yidhina:- Ilaahow adaa mahaddaa iska leh, amarkaaga dhammaantiina waa khayr!!!.

Haddii arrimahaagu isugukaa toosi waayaan, haka quusan gar-gaarka Ilaahay (swt), haddii aad xidig waydona ha u cadhoon waayo waxa laga yaabaa in nasiibkaaguba dayax noqdo!!!.

## XIRFAD YEELO!!!



Qarnigii dhexe ee islamka ayaa Nin gar-guduudan oo wax ka yaqaan diinta islamka raacay dooni, waxaa doonida shaqaale (kuuli) ka ahaa Nin dhalinyaro ah oo xoogsada, oo sidii uu hargaha doonida u samaynayay tunkii waynaaday!!!.

Kadib ninkii ayaa xoogga iyo haybadda wiilka dhalinyarta ah ka yaabay, wuxa uuna Ku yiri:- "wiilow naxwaha ma taqaan"?, wuxuuna ugu jawaabay:- “maya’’!!!, kadib odaygii ayaa wiilkii intuu Quursaday (yasay) ayuu ku yiri:- cimrigagii bar ayaa tagay, haddii aadan cilmiga naxwaha aqoon!!!.

Doontii waxa ay socotaba dabayl ayaa utimid wayna bur burtay, dabadeed xoogaa kadib wiilkii doonta waday ayaa arkay madax guduudan oo Marna

soo baxaya marna quusaya (biyada dib ugalaya), kadib dhankiisii ayuu aaday wuuna soo bad-baadiyay, Mise waaba ninkii odayga ahaa!!!, kadib wiilkii ayaa yiri:- dabaasha mataqaanid miyaa?, ninkii ayaana yiri:- “Maya", misuu wuxuu ugu jawaabay cimrigaaga oo dhan ayaa tagay, haddaadan dabaal aqoon!!!.

Waxayna ugu danbayn yimaaden berri, markaasuu wadaadkii yiri:- wallaahi wixii aad barato waxay doonaanba ha ahaadeene maalin ayuun baad u aydaa ee jahli baan wax tarayn!!!.

Wax walba oo aad barato mar uun ayaad u aayi doontaa, tusaale ahaana wadaadku xirfad uma arkayn dabaasha waxayse bad-baadisay naftiisii, haddaba Is qiimee oo is waydii maxaad xirfad leedahay oo if iyo aakhiroba Ku anfici karta?, kana shaqaysii hadday jirto oo meel hala fadhiisan!!!.

## ODAYGII NASIIBKA BADNAA!!!



Sawirka aad aragtaan waa nin oday faqiir ah oo ku nool dalka Ghana (Gaana), waxaana lagu magacaabaa Xasan Cabdullahi, Tv-ga caanka ah ee TRT (Turkish Radio & Television) ayaa barnaamij filim ah ka diyaarinaayay tuulo ku taalo dalka Ghana oo ay muslimiintu ku badanyihiin, balse waxaa ka dhacday kaamirada duusha ee loo yaqaano (drone)!!!.

Haddaba mid ka mid ah sawirqaadayaashii ayaa baadi-goob u galay Drone-kii, waxa uuna ugu tagay nin oday ah oo gacanta ku haya oo la yaaban waxan yar ee duulaysa!!!.

Odaygii ayaa haddaba su'aal weydiiyay sawir qaadihii Turkiga ahaa, wuxuuna ku yidhi:-" Diyaaradan yar xajka ma ku tagi karaa?"!!!.

Kadib sawir qaadihii Turkiga ahaa ayaa waxa uu ku baahiyay barta Twitter arrintii iyada ahayd, nasiib wanaagna saacad kadib waxaa ka soo jawaabtay wasaaradda arrimaha dibada ee dowlada Turkiga, gaar ahaan wasiirka Arrimaha dibedda ee Turkiga, Isaga oo la xiriiray safaaraddiisa dalka Ghana, oo si dag-dag ah ugu dirtay odaygii caasimadda Istanbul halkaas oo lagu soo dhaweeyey odaygan, kadibna waxa loo qaaday xajka!!!.

Ninkan odayga faqiirka ahaa ee lagu magacaabo Xasan Cabdullahi, maalintii uu diyaaradda yar qabtay, maalmihii ku xigayba waxa uu joogay Dalka sacuudiga waxa uuna ku gudanaayay acmaashii xajka!!!.

Ogoow waxaad si qaalis ah ugu niyooto ee wanaag ah in Alle (swt) kuu fududeynaayo oo adoomadiisa kuu soo diraayo!!!.

**(Illaahay cidduu doono wuu aqzaaqaa xisaab-la'aan)!!!.**

# QALBIGA ALLAH CAABUDAA MAR-WALBA WUU QOYANYAHAY!!!



Waxa jiray nin oday ahaa oo 80 sanno jiray, kadib wuxuu ka yimid Masjidka wuxuuna u socday gurigiisa, dabadeed gurigiisa markuu yimid albaabkii ayuu hor istaagay wuuna gargaraacay, laakiin lagama furin, dabadeed Ilbiqriqsi kadib ayuu wuu miyir daboolbay (suuxay ) wuuna dhacay!!!.

Waxyar kadib xaaskiisa ayaa haddaba ka welweshay ineey wax ku dhaceen, albaabkii ayayna usoo oroday siyay u hubiso waxa albaabka gadaashiisa ka dhacay, haddey furtaybana mise waxaa yaala ninkeedii oo suuxsan!!!.

Haddii biyo lagu rusheeyay waxyar kedib wuu soo miyirsaday, wuxuuna yiri:- wallaahi lama miyir daboolmin, kuleyl jira ama jirro iyo cudur i haaya, Laakiin waxaan xasuustay maalinta Qiyaamaha, waxaana is waydiiyay haddii aan albaabka Jannada hor istaago oo la igana furi waayo, markaas ayaan dabadeed miyir daboolmay!!!.

Allaahu akbar, Qalbiga Allaah swt markasta xasuusaan, mar walba wuu Qoyanyahay, sida dhulku reyska u noqdo marka dhibicda roobku ku da'do, haddaba kudadaal goob kasta iyo goor kastaba xuska iyo xusuusashada Rabbi swt, si aad uhesho liibaanta If iyo ta Aakhiroba.

Allaah (swt) waxaan waydiisaneynaa Inuu Quluubteenna Sugo!!!.

# KULA DHAQAN DADKA DABEECADDAADA WANAAGSAN HANA KULA DHAQMIN DABEECADOHOODA!!!



Oday waayeel xakiima ayaa wuxuu fadhiyey webiga qarkiisa, waxa uuna daawanaayey una fiir-fiirsanaayey quruxda deegaanta & dabeecada wanaagsan ee ku xeeran, kadib ayaa waxa uu arkay Dib-qallooc ku dhacay biyaha webiga!!!.

Dib-qalloocaas biyaha ayaa liqayey oo dejinayey marna soo saarayey, isna waxa uu isku dayayey in uu naftiisa ka badbaadiyo in ay qarraqanto/ qarqoonto!!!, Odaygii xakiimka ahaana waxa uu go'aansaday in uu bad-baadiyo dib-qalloocii, gacanta ayuuna u fidiyey si uu u soo qabto, dib-qalloocina waa uu qaniinay!!!, Odaygiina waxa uu la soo booday gacantii isaga oo aad ula qaylinaya kulaylka qaniinyada dib-qallooca awgeed!!!.

Kadib Hal daqiiqa oo keliya markii ay ka soo wareegtay haddana waxa uu mar labaad isku dayey in uu soo bad-baadiyo dibcqalloocii, isaga oo gacanta u fidinaya mar kale, dibqalooociina mar kale ayuu qaniinyo kulul dhag ku siiyey, waxaanuu la soo booday gacantii isaga oo haddana aad u qaylinaya!!!.


Daqiiqad uun kaddib qanijnyadii labaad, Odaygii xakiimka ahaa mar saddexaad ayuu haddana isku dayay inuu soo bad-baadiyo dib-qalloocii!!!.

Haddaba waxa odayga meel aan sidaa uga fogayn fadhiyey nin kale oo la socday ishana ku hayey sida ay wax u dhacayeen, wuuna ku qayliyey odaygii isaga oo leh:- "Miyaanad ku cibra qaadanin wixii kugu dhacay Markii Koobaad & Markii labaad, oo waxaad isku dayaysaa inaad weliba mar saddexaad badbaadiso"!!!.

Kadib Odaygii canaantii ninka dheg uma dhigin wuxuuna ahaa mid isku dayaya inuu bad-baadiyo illaa uu ku guulaystay markii dambe bad-baadinta dib-qalloocii!!!, Intaa kadibna waxa uu u soo dhaqaaqay halkii ninkii fadhiyey isaga oo ku yidhi:-"Wiilkaygiiyow, Dabeecadda Dibwallooca waxa ka mida inuu wax qaniino, anna dabeecaddayda waxa ka mida inaan wax jeclaado una naxariisto, Maxaad u doonaysaa inaan u oggolaado in dabeecadda dib-qalloocu ka awood badato dabeecadayda?"!!!.

**Kula dhaqan dadka dabeedaddaada wanaagsan, hana kula dhaqmin dabeecadohooda xun-xun!!!.**

# ODAYGII HAWLGABKA AHAA IYO HAWEENAYDII AY DERISKA AHAAYEEN!!!



Waxa uu ahaa oday weyn oo da' ah, isla markaana hawl-gab ah. Odaygaasi waxa uu u xaadiri jiray ama qaadan jiray laba mushahar bil kasta, haddaba maalin ayaa odaygii go'aansaday in labadiisa mushahar mid ka mida uu ku sadaqadaysto haweeney deriskiisa ahayd, haweeneydaas oo nin-keedi dhintay isla mar ahaantaana haysatay carruur, waxa ayna ku jirtay xaalad adag oo wer-wer, walbahaar & dhibaato leh.

Kadib Odaygii waxa uu si qarsoodi ah oo cidina aanay ogayn u wareejiyay mushaharkiisii labaad isfahan dhex maray shaqaalihii boosta ee qaybinayey masaariifta ama mushaharaadka, waxaana odaygii ku yidhi ninkii:- " Sii gabadhaa mushaharka bil kasta" Ninkiina waxa uu fuliyey dalabkii odayga!!!.

Haddaba Sida aynu naqaano dadka jaarka ah waxa had & jeer dhex mara murano ama is fahanwaa iyo is qabasho sababta ay doonto haku dhacdee, gabadhan odayga la deriska ahina waxa ay ahayd mid ku ad-adag oo ku dhib badan odaygan waayeelka ah, mar-marka qaarna waxa ay u gaysan jirtay af-lagaado iyada oo ku odhan jirtay:-" Waa bakhayl, isaga oo maal haysta ayaanu haddana sadaqadda ka bixin, iyada oo cay & xad gudub u geysan jirtay inta badan"!!!.

Maalmo, bilo & sannado ayaa ka soo wareegtay, haweenaydii carrurta agoonta ah haysateyna waxa ay ahayd mid qaadata mushaharkii aanay garanaynin cidda siisa ee accaunka u soo dhigta, Intaa kadibna waxa geeriyooday odaygii da'da ahaa ee deriskeeda!!!.

Haddaba Maalin maalmaha ka mid ah kuna beegan wakhtigii ay soo qaadan jirtay masruufka ama mushaharka gabadhii ayaa waxa ay u dhaqaaqday halkii ay ka soo qaadan jirtay lacagta, markii ay soo gaadhay goobtii isla markaana ay dalbatay in la siiyo mushaharkiina, ninkii shaqaalaha ahaa waxa uu ugu war celiyey una sheegay in aan accounka wax lacag ahi ugu jirin!!!.

Markii uu intaa u sheegay gabadhii may aqbalin mana dhegaysan warkiisa waxaana ka dhex qarxay labadooda (waa gabadhii iyo ninkii shaqaalaha ahaaye) muran xooggan oo meel qadhaadh gaadhay, iyada oo gabadhii markii dambe dacwad cabasho ah u gudbisay maxkamadda!!!.

Maxkamaddii markii ay dacwadii dhegeysatayna waxa ay samaysay baadhitaan iyo u kuur-gal intaa kadib waxa ay ogaatay maxkamaddu in cidda mushaharkan bixin jirtay uu ahaa oday da'a oo "hebel" la yidhaahdo isla markaana uu dhintay!!!.

Kadib Gabadhii waxa ay ogaatay xaqiiqada, waxaana aad u murugo gelisay in cidda u sama fali jirtay ee wanaaga u samaysay ahaa odaygan ay dhibka iyo aflagaadada joogtada ah u geysan jirtay kuna haysay!!!.

Immisa qof ayaa si sir ah ama qarsoodiya wanaag inoogu sameeya innaga oo aan ogayn, innana aynu si cad oo muuqata dhib iyo waxyeello ugu gaysannaa innoona dulqaata waxbadanna inaga dhaafa, qisadanina waxay inoo tahay tusaale nool oo arrintaa iyada ah ina tusinaysa!!!.

Ka digtoonow ficilladaada af iyo addinba, kuna dadaal wixii aad bixinayso in ay ahaadaan wax qarsoon sirna ah, Rasuulkuna (scw) waxa uu inoo sheegay in kuwa maalinta hadhka ILAAHAY (SWT) mooyee aanu hadh-kale jirin hadhsanaaya hadhkaas uu kamidyahay, “ mid waxa gacantiisa midig ay bixinayso aanay ogaan gacantiisa bidix”!!!.

## BAAQIGA ISKA HAYSO!!!



Wuxay weydiisey "Immisa/meeqo ayaad iibineysaa Ukunta/beedka?", Odaygii ayaana ugu jawaabay:- "Waxaan iibinayaa 0.25cent xabbaddii ukun/beed ah, waxayna ku tidhi:- "Waxaan qaadanayaa 6 xabbo waxaanaan bixinayaa $1.25 ama aan iska boxo", Odaygiina wuxuu ku yidhi:- "Kaalay intaad rabto ku qaado qiimaha aad dooneysid, waxa laga yaabaa iney ii noqoto bilow wanaagsan oo maanta waxba leygama iibsane"!!!.

Ukumihii/beedkii ayay qaaday iyadoo isku heysata inay tahay gabadh guuleeysatay oo nafteeda ku qancinaysa qiime jaban baad maanta wax badan ku soo iibsatay ayay dusha kaga dhacday gaadhigeedii quruxda badnaa wuxayna aaday dhankaa & magaalada!!!.

Waxay soo gashay Cafeteria aad u qurux badan iyada oo ay la socdaan dhowr asxaabteeda ah waxayna iska galeen sheeko dheer. Shaah, sharaab & cuntooyin ayey dalbadeen oo meesha si fiican bey ugu sheeko dhammaysteen!!!.

Waxay u dhaqaaqday dhankaa iyo qolka lacag qabashada si ay u soo bixiso lacagtii ay wax ku cuneen, waxaana loo sheegay in lacagta laga doonayaa ay tahay 40 dollar. Iskama ayna waalin ee waxay soo bixisay 50 dollar miiska ayayna u saartay waxayna ku tidhi "Baaqiga iska hayso"!!!.

Ha illoobin baaqigu waa 10 dollar, Odaygii iibinaayey Ukunta/beedkana waxay ka soo qaadatay alaab lacagteeda aanay bixin!!!.


Su'aashu waxay tahay Maxaan ula soo baxnaa awood gorgortan oo dheeraad ah markaan wax ka iibsaneyno dadka ay ka muuqato baahida? Maxaanse lacago aaney u baahneyn indhaha uga gelinaa dadka ay ka muuqato xoolaha ay haystaan?!!!.

Hooyada nac-naca cadceedda la taagan & wiilkan yar ee Looska iibinaaya inaad kunka shilin aad ku adkeyso ninka meesha muraayadaha ah ku jirana aad adigoo qushuucsan boqollaal dollar siiso waxay noqoneysa wax laga fiican yahay oo u baahan in laga waantoobo!!!.

Ogowna taasi xittaa sadaqo kuu noqonmayso, halka tankale haddii aad sadaqo ula niyooto ay sadaqo kuu noqonayso!!!.

Inta aanad halkan dhaafin, bal-dib uyara munaaqishood!!!.

# ILAAHAYOW II QUUDI SIDA AAD UQUUDISO TUKAHA YAR!!!



Nin oday oo da'ah misana goblan ah ama carruur aan dhalin, haddana Laaji ama Qaxooti ah oo aan daganayn dhulkiisii hooyo ayaa beri waxuu ku noolaa magaalada Alexandria ee wadanka masar ku taala, wuxuu gali jirey ama uu ku noolaa guri yar oo cariish ama buul ah cid wax siisa ama u gargaartaana ma'aysan jirin, haddana noloshiisu waxay ahayd mid layaab leh oo dadka la jaarka ama deriska ahi ay is weydiin jireen tolow yaa quudiya odaygan gaboobay!!!.

Dadku marwalba waxay arkaan isagoo xiran dharka aad u qaaliya, gurigiisa marka ay hormarayaan dadku waxay uriyaan cunto aad u udgoon oo aan

ahayn urtii ay ka urin jireen guryaha caadiga ah, wajigiisuna wuxuu ahaa mid aad u iftiimaaya oo aanay wax diif iyo tacab ahi ka muuqan!!!.

Haddaba waxa dhacday in Maalin Ciid ah ay dadkii xaafadu isugu yimaadeen barxad weyn oo lagu tukado salaada ciida, iyadoo uu ka mid ahaa odaygii faqiirka ahaa dadka ciidaya ayaa waxa su'aal weydiiyey nin ka mid ah dadkii meesha joogay oo yiri:- adeer waxaan ku weydiiyey dadka xaafada ayaad ka mid ahayd illaa in muddo ah, mar kasta oo aanu wax u qabta is niraahnona waxaanu aragnaa adigoo ku nool nolol taayadaba ka fiican, wax shaqo ahna ma hayside maxaad quudataa oo aad ku nooshahay!!!.

Kadib Odaygii da'da ahaa wuxuu ku jawaabay jawaab dadkii oo dhan ka yaabisay, wuxuuna yiri:- waa runtiin wax camal ama shaqo ah ma hayo cid bani-aadama oo ii gargaartaana ma jirto laakiin waxaan la xiriiraa ILLAHA (swt) iska leh uumanka samada iyo arlada oo i quudiya!!!.

Kadib Ninkii ayaa wuxuu odaygii ku celiyey:- adeer ILAAHAY (swt) annaguba waanu barinaaye ma si naga duwan ayaad u baridaa, Odaygiina wuxuu yiri:- waxaan ILAAHAY (swt) ku baryaa ama ku ducaystaa **(illaahayow ii quudi ama ii arsaaq sida aad u quudiso ama u arsaaqdo TUKAHA YAR)** deedna waan helaa waxaan doonayo iyadoo aan ugu tago gurigayga wixii aan Ilaahay (swt) weydiistey!!!.

Dabadeed Ninkii waxa uu weydiiyey odaygii adeer bal iiga waran ducadan maxaa ku duugan!!!.

Odaygiina intuu ilmeeyey ayuu yiri:- waa arrin cajiiba ILLAAHAY (swt) sida uu u quudiyo TUKAHA YAR, waxa jirta in hooyada tukaha weyni ah marka ay dhasho ee ay beedka ama ukunta dhigto waa ay huurisaa illaa inta uu ka gaarayo xilligii uu dilaacayey, marka uu gaaro xilligii dilaaca ee ay afka ku dhufato ayaana waxa ay rajaynaysaa inuu kasoo bixi doono dhal madow oo iyada u eg laakiin waxa kasoo baxda dhallaan yar-yar oo cadcad oo aan madow ahayn, dabadeed TUKIHII weynaa waa ay ka argagaxdaa dhasha cad waana ay ka baxsataa!!!.

Marka ay sidaa uga tagto dhashii yarayd waxay u baahan tahay wax ay cunto illeen waa naflaye, intaa ka dib ILAAHAY (swt) wuxuu baalasha dhashayar kasoo saaraa ama kasoo kaahiyaa UR layaab leh oo ay ka dhashaan DIRXI, ka dib dirxigaa ayey dhashii cunaan oo ay ku noolaadaan!!!.

Muddo ka dib waxa maalinba maalinta ka dambaysa is bedesha baalashii midabkoodii oo noqda madaw, maalinta ay wada madoobaadaana ayey hooyadii oo dusha ka ilaashan jirtey kusoo noqotaa oo u timaadaa maadaama uu madowgii ay rabtay uu noqday!!!.


Isla marka ay u timaado waxa baaba'a urtii oo suula, oo waxa dhammaada dirxigii maadaama ay hooyadii u qaraabayso, aniguna sidaa ayaan ILAAHAY (swt) u baryaa oo uu iigu quudiyaa sida tukaha yar!!!

Dabeed waxaa ooyay dhamaan dadkii dhagaysanaayey oo la yaabay habka uu ALLAAH (swt) u quudiyo tukaha yar waxayna ku dhawaaqeen ALLAHU AKBAR JASAKA ALLAHU KHAYR!!!

Waa hubaal in Allah (swt) cid kasta oo ku barida gacmahana ku hoos dhigata si niyad iyo qalbi culan leh aanu baryadiisaa ku hoojin doonin wuxuu rabona uu siin doono!!!.

Sidaa aawadeed u bari Allah (swt) si niyyad ah, kuna bari qalbi culan oo saafi ah, filona oo rajee in baryadaadaa Allah (swt) uu kaa aqbali doono!!!.

## ODAYGII DUQDA AHAA IYO KIISHKII LACAGTA AHAA!!!



Oday duq ah oo kashaqeyn jiray hilibka ayaa waxa uu maalin maalmaha kamida isagoo usoo socda hilibka ayaa si kadis ah waxa uu ku argay lacag aad ufaro badan oo taala meel cidlo ah, kadib Odaygii ayaa intuu yaabay soo qaaday lacagtii, isma oran lacagta xad ismana oran carruurtaada ugey wey gaajeysan yihiine balse waxa uu soo aaday dhinaca magaalada waxa uuna maalintii oo dhan doondoonaayay inuu helo qofka lacagta leh illaa uu markii danbe kahelay!!!.

Kadib Ninkii lacagta lahaa ayaa layaabay daacadnimada odayga iyo sida uu Allah (swt) uga baqayo waxaana uu kuyiri:- waxa aan kusiinayaa lacag badan balse odaygii ayaa kadiiday inuu wax lacag ah kaqaato!!!.

Odaygii ayaa markii dambe usoo socday gurigiisa isaga oo fara maran ayuuna tagay gurigiisii, halkaas ayayna habeenkii kuqadeen!!!.

Haddaba xilli habeenbarkii ah ayuu riyooday, waxa uuna kuriyooday meel gurigiisa kamida oo dahab kujiro, subaxdii markii uu soo kacay ayuuna qoday meeshii waxa uuna kahelay dahab aad ufaro badan, waana uu iibiyay ilaa uu kanoqday taajir!!!.

Bal ufiirso-Lacag uu maalin meel kahelay uuna Allah (swt) dartii qofkii lahaa usiiyay uguna celiyay ayuu kunoqday taajir!!!.

Ficil kasta oo aad Allah (swt) dartii usamaysaana waa saas oo kale, lagamana yaabo inaad ku qasaarto, kuna hoogto, inaad ku faa'iido kuna tanaaddo mooyee, waase haddii falka aad samaynaysaa uu niyad wanaag kaayahay!!!.

## NINKII DOOLLIGA JAWAANKA KU SITAY!!!



Waxa dhacday in gaari ama baabuur ay isla soo raaceen nin oday ah oo beeraleey ah iyo nin kale oo aqoonyahan ah, haddaba ninka beeraleeyda ahi waxa uu wataa jawaan afka ka xiran oo u yaala lugihiisa hoostooda, wuuna ruxayaa oo isku qassayaa waxa jawaanka ku jira shan iyo tobankii daqiiqaba labo ama saddex jeer ka dibna booskii uu u yaalay ayuu ku celinayaa!!!.

Kadib ninkii aqoonyahanka ahaa ayaa la yaabay waxa uu samaynayo ninkan beeralayda ahi waxa uuna waydiiyey waxa jawaanka ugu jira?, ninkii beeralayda ahaana wuxuu ugu jawaabay:- Jawaanka waxa iigu jira jiirar (doolliyaal) waxaana aan u wadaa xarun cilmi baaris lagu sameeyo oo waa ay iga gataan ama iga iibsadaan!!!.

Dabadeed Aqoonyahankii ayaa waydiiyay mar labaad su'aasha ah:- maxaad markaad wax yar joogtaba u ruxaysaa jawaanka?, wuxuuna ugu jawaabay odaygii:- haddii aanan ruxin oo aanan isku dhex qasin waxay dareemayaan xassilooni iyo deganaan ka dibna waxay ku mashquulayaan in ay jawaanka duldulooliyaan si ay uga fakadaan ama uga baxaan, Laakiin haddaan ruxo waxay dareemayaan qal-qal iyo meesha inaan xassilooni ka jirin oo waa is nabayaan iyaga ayaana isku mashquulaya kamana baxayaan jawaanka!!!.

Hadaad si fiican ugu fiirsato qisadan waxaad ka dheehan kartaa oo aad si weyn uga fahmaysaa sida dalalka qaar ee kujira dhibaatooyinka sida dagaalada markii ay deganaan yar dareemaanba laysugu dirayo oo laysugu mashquulinayo (loo ruxayo jawaankii afka ka xirnaa ee ay ku jireen) si aanay uga bixin dhibaatada oo aanay marnaba xassilooni u helin!!!.

**WAX FAHMA CADAWGIINU WAA IDINKU MAQAN YAHAY IDINKUNA IDINKA OO WALAALO AH AYAAD ISKU MAQAN TIHIIN!!!, U MIDOOBA DANTA GUUD EE QARANKIINNA TAAS AYAANAAD KU GUULEYSAN KARtAAN KUNA GUULAYSANAYSAAN INSHA ALLAH!!!.**

## HA QUUSIN MAC-MACAANKA ADDUUNKA!!!



Mid ka mida dalxiisayaasha ayaa soo bookhday Biyo-dhaca Niagara "Niagara Falls" oo ku yaal maraykan-ka waqooyi, goob-taas biyo dhaca ah ee Niagara waxa si xawli ah oo awood badan uga soo shubma-yey biyo baaxaddoodu ay badan tahay, daawashada biyadhacaasina waxay arga-gax ku ubuura-yeen qof kasta oo daawasho u yimaadda xawaaraha ay ku socdaan, baaxad & dhawaqa ay samaynayaan awgeed!!!.

Dalxiisahaasi waxa uu indhaha la helay oo arkay gobol baraf ah oo dul sabbaynaysa biyaha u qulqulaya una socda dhankaa & darafka biyo-dhaca, gobolkaa Barafka ahna waxa dul saarnaa bakhti wan!!!.

Kadib dalxiisihii waxa uu si kedis ah u arkay gor-gor wayn oo ku soo degaya bakhtigii barafka biyuhu wataan dul saarnaa, gor-gorkiina waxa uu bilaabay in uu quuto bakhtigii wanka!!!.

Gor-gorkii wax uu cuno bakhtigiiba, gobolkii barafka ahaa ee uu dulsaarnaa bakhtiga gorgorku cunayaa waxa uu si xawli ah ugu sii dhowaanayey dhankii biyo dhaca Niagara ee jarka ahayd, Gor-gorkuna kolba madaxa ayuu kor u qaadayey isaga oo eegayey hortiisa waxaanuu u arkayey in u weli haysto masaafo u dhaxaysa isaga iyo biyo dhaca, mar kalena waxa uu dib isaga bilaabanayey cuntadiisa!!!.

Gorgorku waxa uu ahaa kolba mid eega inta uu biyo dhaca u jiro illaa iyo markii dambe gobolkii barafka ahaa aad ugu dhowaaday goobtii biyo dhaca "biyo shubka" ahayd, markii uu soo gaadhay ka dibna waxa uu kala bixiyey labadiisii baal ee waaweynaa waxaanuu doonay in uu duulo, hasa-yeeshee ciddiyihiisii ayaa kala dhex galay hilibka & lafaha bakhtigii uu cunayey, bakhtigaas oo isna ku sii dhegganaa barafka, Gor-gorkiina waxa uu isku dayay In uu naftiisa bad-baadiyo lugahana kala baxo meesha, balse waa awoodi waayey taas!!!.

Gor-gorkii aad ayuu u qayliyey isaga oo baalashiisa ku garaacaya bakhti-ga & barafkii hasa-yeeshee waxa ka tan badiyey xawaaraha & xawliga qulqulka biyaha barafka waday ay ku soconayeen, baraf-kii, bakhtigii & gorgorkiibana iyaga oo is wata waxa ay ka soo dhaceen jarkii dheeraa ee biyo dhaca iyaga oo gaadhay gunta hoose, waxaanay quuseen biyihii sidaas ayaanay ugu dhamaatay gor-gorkii dibna looma arag!!!.

Sidan oo kale waxa ka dhigan qofka Alle (swt) ka fogaada, quusana mac-macaanka adduunyada, aakhirkana waxa uu quusaa kuna haftaa badweyn dembiyo ah, waxaanay si kedis ah u gaadhaa dhammaadkii noloshiisa adduunyo isaga oo u haysta in ay u hadhsanyihiin siina noolaanayo maalmo & sannado badan oo kale!!!.

**Fadlan ha quusin mac-macaanka adduunka!!!.**

# DADKA DHINTAY WAXAY QAYB KAYIHIIN NOLOL MAALMEEDKA CAADIGA AH!!!



Badankeen ma jecla in ay ka fikiraan ama ka hadlaaan dhimashada, laakiin waxaa jira dad ka hela, gobolka Toraja ee jasiiradda Sulawesi ee dalka Indonesia dadka dhintay waxay qayb ka yihiin nolol maalmeedka caadiga ah!!!.

Gurigan alwaaxa ka samaysan ee aysan oolin alaabadu ee dhawrka sawir ka muuqdaan ee codadku ka dhex yeerayaan naxashkuna ka soo carfayo, waxaa ka jira isu imaatin qoys!!!.

"Aabahaa ka waran?" ayuu qof marti ahi yiri, jawigii ayaana si dhakhso ah isu badalay oo qof kaste wuxuu fiiriyay guri yar oo meel gees ah ka dhisan halkaas oo uu yaalo nin duq ah oo saaraan sariir qurux badan!!!.

Mamak Lisa oo ah gabadhiisa ayaana qofkii su'aalay xaaladda aabaheed ugu jawaabtay "wali wuu xannuunsan yahay", kadib Mamak oo muusoonaysa ayaa u dhaqaaqday dhanka ninka duqa ah, iyada oo si tartiib u gacanqaadaysa ayayna tiri:- "Aabo marti ayaa kuu timid si ay kuu arkaan, waxaana rajaynayaa in aadan dhibsan doonin ama aadan ka xanaaqi doonin!!!.

Waxayna igu martiqaaday in aan soo dhaqaaqo oo aan la kulmo Paulo Cirinda, saas waxa yidhi ninka qisadan soo tebinaaya!!!.

Kadib isaga oo hadalkiisa sii wata ayuu yidhi:-Indhahayga ayaa ku dhaygagay sariirta uu saran yahay Paulo Cirinda oon dhaq-dhaqaaqaynin xattaa indho libiqsiba ha ahaatee, inkastoo ay igu adkayd in aan indhihiisa ka bogto awkiyaalaha uu qabo oon tir-tirnayn awgeed!!!.

Jidhkiisa waxaa ku yaalay duleelo badan sidii isaga oo cayayaan cunay, inta badan jidhkiisase waxaa saarnaa maryo!!!, waxaase layaab igu noqday markii ay soo galeen carruur yar-yar oo uu awoow u yahay oo iska ciyaaraya, mid ka mid ah oo qoslaya ayaana yiri "awoowgay muxuu markaste u jiifaa?, mid kii kalana wuxuu kor u yiri "awoowe toos oo kaalay aan wax cunnee", Mamak Lisa ayaana markaas tiri awoowe ha dhibina wuu jiifaa, waad ka xanaajin doontaane!!!.


Arrinta layaabka leh ayaa ah in Paulo Cirinda uu geeriyooday 12 sanno ka hor balse ay qoyskiisu u malaynayaan in uu nool yahay!!!.

Fikirka ah in mayd guriga lagu haysato layaab ayay ku tahay dadka aan halkan deganayn, laakiin hal milyan oo ruux oo ku nool gobolka Toraja ee dalka Indonesia waa dhaqan soo jiray qarniyo!!!.

Soomaalidu waxa ay ku maah-maahdaa:- nin aan dhul marini dhaayo l'a, bogcad kasta oo kamid ah caalamkan aynu ku noolahay ee ka kooban 194ka dal (waa markii buuggan la qoraye) waxaad ugu tegaysaa dhaqan iyo caadooyin gaar ah, waxaana hubaal ah haddii aad marto bogcado kala duwan oo kamid ah caalamkan aynu ku noolahay in ay kuu kordhi-doonto waayo-aragnimo iyo khibrad aad dheertahay dadka aan kula-midka ahayn!!!.

Socodka koonkan dushiisa ah wuu ufiicanyahay qofka Islaamka ah ee karaya ama awoodaaya, Diinteena Islaamkuna waa mid ay aad inagu dhiiri geliso, waayo casharo badan oo ku saabsan awoodaha Allah swt ee dhammaan makhluuqiisa kadhex muuqda ayaa marka aad ufiir-fiirsato kuu kordhinaaya Iimaan.

## KELIGAA AYAA DHIMANAAYA!!!



Nin caabid ahaa oo diintu ku weyntahay ayaa waxuu daganaa Magaalada Basrah ee dalka ciraaq, ninku waxuu ku jiray waayahiisii ugu danbeeyey ee noloshiisa, waxuuna saarnaa sariirta, kadib Ehaladiisii dhammaan ayaa ku soo xoomey iyagoo ilmeynaaya.

Waxuu fiiriyey Aabahiis waxuuna ku yiri:- Aabe maxaa kaa oysiinaaya?, haddana waxuu fiiriyey hooyadiis waxuuna ku yiri:- ooyo maxaa kaa oysiinaaya?, haddana waxuu fiiriyey walaashiis waxuuna ku yiri:- walaashey maxaa kaa oysiinaaya?, Ugu danbeyntiina waxuu fiiriyey ilmihiisa waxuuna ku yiri:- lmaheegiyoow maxaad la oyneysaan?!!!.

Intaa kadibna asagii ayaa oohin la sii jeestey, markaas bey qoyskiisii waydiiyeen maxaa kaa oysiinaayo?, waxuuna yiri:- waxaan la oynayaa inuu qof walibo oo idinka mid ah uu oynaayo walibo uu la oynaayo dhibkiisa kaliya, asagoo aniga dhibkaan la kulmi doono u oyneynin!!!.

Ma idinku jiraa qof u oynaayo qabriga carrada ah oo la I dhigaayo? Ma idinku jiraa qof u oynaayo iney ciqaab igu dhacdo? Ma idinku jiraa qof u oynaayo maalinta hor istaagi doono RABBI (swt) iyo waxaan la kulmi doono!!!.

Kadibna wuu sii jeestey, ehelkiisii markey isku dayeen iney soo jeediyaana waxey la kulmeen xaalad meyd ah asagoo ku sugan, SUBXAANALLAAH!!!.

Camalkaaga ayaad la dhimaneysaa, kaligaa ayaa lagu duugayaa, kaligaa ayaa lagu soo-saaraayaa, kaligaa ayaa hor istaagi doona Rabbi (swt) maalinka isxisaabinta, ee maxaan u shaqaysanay aakhiradeenii ?!!!.

**ALLOW NAGA DHIG KUWA AAN KU FASHILMIN LA KULANKAAGA!!!.**

# OGOW LACAGTU MA AHA MID WAX-KASTA KUU FULINAYSA!!!



Mid ka mid ah dadkii ugu qani-sanaa qarniyadii hore, wuxuu ahaa nin yahuudi ah oo caan ah lana oran jiray "redcheild" meesha uu qani nimo ka gaarayna wuxuu mararka qaar lacag deymin jiray xukuumadda Britain!!!.

Haddaba Maalin maalmaha ka mid ah ayuu galay qasnadiisii lacagta, si lama filaana ayeyna kor uga xirantay!!!, kadibna waa uu qeyliyey laakiin nasiib darro cidna ma maqlin!!!.

Ninkaan dhaqamadiisa waxa ka mid ahaa inuu mararka qaar maqnaado oo uu iska safro iyadoon la ogeyn, markii la waaayeyna waxa loo maleeyay in uu safray soona laaban doono!!!.

Ninkii sidii uu u qeylinaayey waa uu daalay, oon iyo baahina waa iskugu darsameen isagoo khasnadiisii ku dhex jira, Usbuucyo kadib ayaana la arkay isagoo ku dhex dhintay khasnadiisii, lacagtii khasnadda ka buuxdayna waxba uma aysan tarin!!!.

Ogoow lacagtu ma ahan mid wax kasta kuu fuluneysa, farxadna ku siineysa wakhti kasta sida dadka qaar aaminsanyihiin!!!.

## SHIRQOOLKII DILKA!!!



Nin ayaa waxa uu u gacan qaadi jirey oo dili jiray xaaskiisa aadna wuu u garaaci jiray, isaga oo leh waan edbinayaa, dabadeed maalin maalmaha ka mid ah ayaa isaga oo garaacaya xaaskiisa waxa uu ku dhuftay meel halis ah waana ay u geeriyootay!!!.

Ninkii ayaa waxa uu qoomameeyay dilka uu u geystay xaaskiisa, waxaana uu u cararay xaggaa iyo Nin ay deris ahaayeen oo aan ka fogeyn, mar-marna sheekeysan jireen waxaana uu uga warramay sida xaaskiisii u dhimatay isaga oo edbinaya, waxuuna weydiistay in uu siiyo talo uu kaga badbaado dilkaas uu geystay!!!.

Kadib ninkii oo talo xumaa ayaa waxa uu kula taliyay oo ku yiri:- “Saaxiib inta aad Wiil dhallinyaro ah waddada uga yeerto gurigaaga u kaxee oo isaga dhig inaad uga baahan tahay arrimo muhiim ah inuu kula xalliyo, dabadeed isna dil oo gawrac, meydkiisa iyo meydka xaaskaagana is barbar-dhig, si loo moodo in iyada oo gogol dhaaf sameynaysa aad wiilka iyo iyadaba wada dishay”!!!.

Intaas ka dib ninkii ayaa Taladii saaxiibkii u riyaaqay durtadiibana waxa uu u yeeray Wiil waddada marayay gurigiisa ayuuna geeyay waana uu dilay meydkiisiina waxa uu ag dhigay meydkii xaaskiisa!!!.

Dabadeed illeen waatii hore loo yiri:- war xumi dugsi ma fadhiyee, Qoyskii gabadha oo yaacaya ayaa yimid illayn waata la yiri;- “Gabadha dhaqashadeeda ayaad leedahay ee dhiiggeeda ma lihide”, waxa ayna ku yiraahdeen waar maxaad gabadha ku dishay?, waxa uuna ugu jawaabay waad arkaysaan oo wixii Nin xaaskiisa oo gogol dhaaf sameysay ka yeeli lahaa Ayaan ka yeelay labadoodiina waan wada dilay!!!.

Kadib reerkii gabadha dhalay oo argagaxsanaa ayaa waxa ay yiraahdeen haddii sidaa ay sameysay waa Muslim ceebays si fiicanna waad ka yeeshay reerkayagiina way ceebaysay, Meydkeedana dooni mayno ee meelahaa gee oo ku aas, waana ay iska laabteen!!!.

Intaas ka dib ayaa Ninkii u tagay Saaxiibkiisii talada xun soo siiyay waana uu u sheegay sida uu yeelay, dabadeed waxay isu soo raaceen xaggaa iyo

gurigii labada meyd yaalleen si ay usoo aasaan!!!, Ninkii talada xun siiyay ayaana ku yiri saaxiib bal i tus wiilka aad dishay wajigiisa aan eegee, kadib waa uu eegay mise waa Wiilkiisii!!!.

Kor ayuu ugu dhawaaqay waar Inankaygii ama wiilkeygii ayaad dishay, isna wuxuu ugu jawaabay Saaxiib wiilkaaga miyaan garanayay taladii aad isiisay ayuunbaan ku dhaqaaqee!!!.

Weligaa ha kula talin Saaxiibkaa/Saaxiibadaa ama qof bani-aadam ahba talo shirqool ah oo ka dhan ah qof ama acid kale, haday dhacdona waxa inta aan aakhiro ama meel kaleba laysla gaadhin in isla iyadii ay adiga dib kuugusoo laabatoba!!!.

**Yaa Allah jidkaaga toosan nagu hanuuni.**

## WIILKII DAMIIR-LAAWAHA AHAA!!!



Wiil iyo gabar baa haasawe dhex maray, wiilku gabadha waxuu usheegay in uu aad ujecel yahay uuna doonayo in ay kulmaan xaafaddiisana ay ugu timaado, gabadhuna arrintaas wey ka diiday hase ahaatee hadallo mac-macaan iyo beer laxawsi badan kadib gabadhii wey ka ogolaatay, waxuuna uu u sheegay barrito saacaddu markey tahay (05:00 pm) in ay utimaaddo, xaafaddiisana waqtigaas qofna joogin, sidaas ayaana lagu ballamay!!!.

Kadib wiilkii wuxuu ballansaday saaxiibadiis, xaafadda ayeyna ugu yimaaden si ay gabadha imaan doonta u wada xoogaan, xoogaa kadibna wiilka hooyadiis ayaa telka ka soo wacday, kama qaban dhoor jeer ayeyna kusoo cel-celisay, markii danbe ayuuna ka qabtay waxeyna ku tiri:- waryaa aabahaa ayaa tacbaan ah,

isbitaalka ayaana joognaa, camaliyo/qalliin dag-dag ah ayaana lagalin rabaa ku aaway?!!!.

Kadib wuu isku naxay, saaxiibadiis ayuuna u sheegay arrinta ku soo siyaaday waxuuna ku yiri:- gabadhii wey soo dhawdahay, xilligiina waa la joogaa, anigana waa sii baxaa, isbitaalka ayaana sii aadayaa ee haddey timaaddo ku sii baashaala!!!.

Wuu soo cararay asagoo gaariga u'wada sidii wax waalan oo kale, kana walwalsan aabihiis, isbitalka ayuuna soo gaaray!!!, hooyadiis ayaana ku tiri:- waar aaway walaashaa, waxuuna ku yiri:- ma arkin, kadib hooyadii waxey ku tiri:- adiga ayaan kuu soo diray markaa telka naga qaban weyday xaafadda ayeyna aaday, ninkiina naxdin ayaa u dhammaatay, talaana ku caddaatay!!!, mar kale ayuuna soo cararay sidii wax waalan ookale, xaafadda markuu yimidna waaba tan walashiis dhulka jiifta ayadoo qaawan sxbadiisna ay waxay doonaan ku sameeyeen isagana tageen, maxaa yeelay isagaa u ballamiyay, gabar ayeyna sugayeen weyna u imaaday!!!.

Nin walboow ka hor inta aanad xumaan la damcin gabar kale ka fikir tan kula dhalatay, hooyadaa, gabadhaada iyo xaaskaaga, hana u quurin wax aadan u quurin walaashaa, hoyadaa, gabadhaada iyo xaaskaagaba!!!.

# WIILKII DAMCAY INUU KA SINAYSTO GADADH MAYD AH!!!



Qissadani waxay ka Dhacday Waddan Ka Mid ah Wadammada Khaliijka, Qissadana Waxa Ka Sheekeeyey Nin Goob joog ahaa, Waana Nin Saaxiib La ahaa Ninkan Ku Kacay Falka Ee Damcay In Uu Ka Zinaysto Gabar Dhoowrsoon Oo Cafiifad ahayd, Wuxuuna yiri:- Saxiibkay Gabadhan Aad Ayuu U Jeclaaday Jaceyl Xad Dhaaf ah, gabadhuna Waxay ahayd Gabar Aad U Dhoorsoon Oo Cafiifad ah Oo Alleheeda (swt) Ka Cabsata.

Ninkan Saxiibkay Ah Wuxuu Damcay Inuu la Sameeyo Calaaqaad Aan Sharci ahayn gabadhan wuxuuna Damcay In Uu Kula Xiriiro Telfoon Wayna ka Diiday, haddana wuxuu Damcay In Uu La Kulmo Waana Diiday, Ka Dib Waxaa Ku Ziyaaday Jecaylkeedii, Ka Dibna Wuxuu Aaday Gurigeeda Oo Uu Ka Doontay Waalidiinteed Waana Loo Diiday Oo Waa Nin Ay Ku Yaqaaneen Macaasi!!!.

Waxayna Ku yiraaheen Gabadhayada Ma Gaydid, wuxuuna Yiri Ninkii Saxiibkii Ahaa Baa Sheekada Wadee Saaxibkey Wuxuu Bilaabay Maandooriye Inuu Isticmaalo, sida inuu Qamri Cabbo Markaasuu Wuxuu Dul Wareegi jiray Gabadhii Gurigooda Habeen Iyo Maalinba Si Uu Maruum Isha Ugu Dhufto Xabiibtiisa!!!.

Wuxuu dhahay ninkii Saaxiibkey ahaa Cagligiibaa Doorsoomay, Ka Dib Waxaa yimi Allaah (swt) Amarkiisii Gabdhiina Ajasheedii Ayaa Timid, ninkii Saxiibkay ahaana Waa Maqlay Waana iiyimi Wuxuuna igu yiri:- ma ogtay Maanta in Ay Dhimatay Xabiibteydii, Waxaana Ku Iri:- Allaah (swt) Ha u Badiyo Ajarka, Wuxuuna igu Yiri:- Maanta Kaama Rabo Tacsi, Waxaana Fiiriyey Wajigiisa, mise waxaad Mooddaaba In Uu isoo Eegayo Shaydaan, Markaasbaan Waxaan Ku Iri Saxiib Maxaad Ku Fakari, wuxuuna igu yiri:- Waxaan Raacaynaa Janaazada, Markaabuu Dhoola Caddeeyey Oo Yiri:- MAANTA WAA MAANTAYDA CAAWANA WAA CAAWADAYDA!!!.

Markaabaan Waxaan ku Iri:- Maxaad Ula Jeeddaa saas wuxuuna iigu jawaabay:- Caawa Xabiibtayda Ayaan Waxaan Ka Qaadani Wax aanan Ka helin NoLasheedii!!!.

Waan Ku Qoslay Markabaan Waxaan Ku Iri:- Saaxiib Waad Kaftami miyaa?, Wuxuuna igu yiri:- wallaahi Kaftan Igama Aha, ee Caawo Xabiibteyda Iyo Jacaylkayga Ayaan Waxaan Ka Qaadani Wax aanan Ka Helin Nolosheeda!!!.

Kadib Saaxiib Maxaad Ula Jeeddaa Ayaan ku Iri:- Wuxuuna Igu yiri:- Waxaan Ka Qaadani Caawa Waxa Uu Ka Qaato Ninku Xaaskiisa, sidee yacni Ayaanaan Ku Iri, Wuxuuna Igu yiri:- Waxaan Raacaynaa janaazada, kadib Marka La aaso Ee laga Soo kala Dareero Ayaan Faagi Qabriga Ka Dibna Xabiibtayda ayaan U Tagi Sida Aan Aduunyadaba U Rabay!!!.

Intaas dabadeed waxaan Ku Iri:- Allaah (swt) ka Cabso Ee Ha Samayn Sidaa, Waxaanaan Ku Iri:- Sxb Waxaan Macaasi aan Wada Samaynay Maanta Ma Waxay Kaa keentay In aad Gabar Cafiifad ah Oo Dhoorsoon Nolaaheedana Nin Arag Waligeed Miyaad Rabtaa Caawa Aad Sharafteeda Ku Ciyaarto, wuxuuna igu yiri:- Tag Hana ila Saaxiibin, Ka Dib Waan Raacay Cabsi Aan Asaga U Cabsan Dartii, Waxaana Raacnay Janaazadii!!!.

Intaa Saaxiibkay Dadkiibuu Eegayaa Asagòoo Faraxsan Dadkiina Way Murugaysanyihiin, Waxaadna Mooddaa In Uu Ku Leeyahay Khayr Alle (swt) Ha Idinsiiyo Guryihiinnana Ku Laabta Caruusadii, Xabiibteydii iyo Zoojadaydiina Waad Iikeenteen, Meel aan Rabo Ayaadna Ii Keenteen, Ka Dib Gabadhii Waa la Aasay Waana Loo Duceeyey Dadkiina Way Dareereen, Waxaana Soo Haray aniga Iyo Saxiibkay keliya!!!.

Saaxiibkay Wuxuu U Dhaqaaqay Qabrigii, dabadeed Gacantii Ayaan Qabtay Oo Ku Iri:- Ka Soo Laabo Saaxiib arrintan iyada ah, wuxuuna igu yiri:- Isiidaa Haddii Kale Cad-Cad Ayaan Kuu kala Dhigi, Wuxuu iila Soo Baxay Tooray Oo Igu Qabtay Oo Igu Yiri:- Iga Fagow yanan Ku Qalini, Waana ka Fogaaday Bal In aan Oogaado Shaydankan Wuxuu Samayndoono!!!.

Waxaan La yaabo Ayaan ku Arkay, Qabrigii Ayuu Faagay Wuxuuna Soo Saaray Gabadhii Dhawrsoonayd Maykeedii , Ka Dib KaFantii Ayuu Ku Jeex jeexay Tooray, gabdhii Ayuu Dul Tagay!!!.

Asagoo Sidaa Ku Sugan Ayaana Malakul mood Calayhi Salaam U Yimi Allaah (swt) U Soo Diray Naftii Ayuuna ka Qabtay, Gabadhii Dhawrsoonaydna Allaah (swt) ayaa Ilaaliyey Sharafteeda, Asagiina Khaatimo xumadaa ayuu ku dhintay!!!.

Walaalayaal aan Ka Fogawno Zinada waayo Cawaaqib Xumo Adduun Iyo Aakhiroba Ayey leedahay!!!

Alloow Naga Fogee!!!.

## KAREEBTOONOW QADAFKA!!!



Haweenay kamid aheyd dadkii deganaa Magaalada Madiinah ayaa waxa la Sheegay in ay geeriyootay oo Ajashii ku timid, durbadiiba dadkii deriska ahaa oo Maqlay Qaddarka geerida ayaa iskugu soo xoomay guriga Marxuumadda si Maydka loo dhaqo ama loo mayro looguna diyaariyo in loogu hooyo gurigeeda dhabta ah.

Dhaqitaanka Meydka ayaa haddaba loo xil saaray Mid kamid ah Dumarkii goobta yimid, haddaba Marxuumadda Markii la geeyay Qolka dhaqida laguna bilaabay meyrista ayaa Waxa dhacday in haweenaydii Meydka dhaqeysay ay Nafteeda kula Khidaabto ama iskula hadasho:- " Alla Maxay xumaan sameysay oo ay Jirkaan ku Zineysatay''!!!.

Markii ay Kalmadahaas xun Afkeeda ka bixisay kadib Waxaa Naagtii Mucjiso looga dhigay in gacanteedii ay ka Fujin weydo Qeybtii Xumaanta ay ku tilmaantay ee Jirka Meydka!!!.

Musiibo ayaa dhacday oo Cid ka warqabto aysan Jirin, dadkii Ehelka ahaa oo Qolka dibaddiisa taagnaa kana war sugaayay inta laga Meyro Meydka si Kafanta loogu xejiyo ayaa dheeraystay Waqtiga uu Qaatay dhaqidda Meydka, dabadeedna inta ay sugi kari waayeen markii danbe intaa wax kabadan ayey Qolkii gudaha u galeen!!!.

Waa yaab iyo lama arkaan, dadkii waxa ay indhahooda ku arkeen haweenaydii Meydka dhaqeysay oo gacanteedii lagu dhajiyay Jirka Meydka lana awoodi waayay in laga Fujiyo haddii Xeelad kasto la adeegsaday!!!.

Dadkii Joogay guriga ay Musiibadu ka dhacday ayaa ku kala Qeybsamay Sida arrintan laga yeelayo, Qaar baa ku taliyay in gacanta la Jaro Maadaama ay Waajib Diini ah tahay in Meydka la aaso, halka kuwa kale ay diideen in la Jaro gacan Nool oo aan dhimanin!!!.

Si kastaba ha ahaayee Khilaafkii waa uu siyaaday iyadoo aan Meelna lagu heshiinin ilaa ugu danbeyntii Mas’alada Murunka dhalisay iyo Mucjisada goobta ka dhacday intaba loola tago oo Su’aalo laga weeydiiyo mid kamid ah Imaamyadii afarta ahaa oo markaas ku sugnaa magaalada Madiina, si loo gaadho xalka Munaasabka ah ee arrintan laga yeelayo!!!.

Markii uu yimid Madasha waxa uu Su'aalo weeydiiyay haweenaydii Meydka dhaqeysay isagoo ku yiri:- Maxaad ku tiri Meydka oo aad Ciqaabtan ku Muteysatay?, waxaana ay ku Jawaabtay Qeybta taranka ee Meydka Markii aan dhaqaayay ayaan Niyada iska dhahay:- Alla Maxay ku Zineysatay xubintan!!!.

Intaas kadib Imaamkii waxa uu Faray dadkii Ehelka u ahaa Meydka in lagu fuliyo Sideetan Jeeydal si xadka Qadafka looga rido ayadoo laga run sheegayo Qowlka Eebe Subhaanahu Wa'tacaalaa!!!.

Haddaba Markii karbaashka lagu bilaabay laguna dhameeyay Sideetanka Jeeydal waxa fududaatay in gacantii ka soo Fuqdo Jirka Meydka dabadeedna la aaso Meydkii oo Noqday Mid lagu Cibro Qaato!!!.

Si kastaba Walaalka Muslimka ahoow ku dadaal inaad ka reebtoonaato Qadafka ama been abuuradka xubnaha kale ee bulshada, sida faafinta ama ku xukminta xog aanad hubin ama aan jirin cid kale, si aadan ku Muteysan Carrada Eebe Jalla Wa'calaa!!!.

# DADKA WAXA QANCIYA DHAQANKA DADKA EE MA-AHA BADEECADDA UU IIBINAAYO!!!




Laba nin oo kala lahaa laba dukaan oo jaar ama deris ah ayuu midkood iibin jiray malabka, kan kalena waxa uu iibin jiray khalka dhanaan, haddaba dadka ayaa aad u iibsan jiray khalka cidda gasha dukaanka malabkuna waabay iska yarayd!!!.

Maalintii danbe ayuu ninkii lahaa dukaanka Malabka iibiyaa u qaatay in sababta ay dadku uga iibsan waayeen malabka ay tahay qiimaha qaaliga ah, sidaa darteedna wuu jebiyay ama raqiisiyey qiimaha uu ku iibin jiray malabka, illaa uu gaarsiiyay qiimaha khalka uu ku iibiyo ninka haysta dukaanka ay deriska yahiin!!!, laakiin markii uu jebiyay qiimaha malabkana ma ay jirin wax iska bedelay weli dalabkiisii sidii ayuuna iska ahaa, markii danbe ayuuna u yimi ninkii ay jaarka ama deriska ahaayeen waxaana uu weydiiyay sababta ay dadku uga iibsan waayeen

malabka macaan ee ay isaga uga iibsanayaan khalka dhanaan ee aan lahayn macaanka!!!.

Ninkii Waxuu uu ugu jawaabay:- anigu carrab malab ah oo macaan Ayaan ku iibiyaa khalka, halka adiguna carrab khal ah oo dhanaan aad ku iibisid malabka!!!.

Haddaba dadka waxa qanciyaa waxa ay yahiin dhaqanka qofka ee Maaha badeecadda uu iibinayo, Waxaana halkaasi inooga cad in dadku ay baahi u qabaan hadal malab ah oo run ah, kuna dhisan niyad wanaagsan qalbi saafi ahina ku lammaan yahay!!!.

## GANACSADIHII MUSLIMKA AHAA IYO NINKII YUHUUDIGA AHAA!!!




Waxaa jiray Nin ka mid ahaa dadkii wan'wanaagsanaa oo lahaa Dukaan shaqaalihiisana waxa uu u dar-daarmi jiray haddii ay Ceeb leedahay Alaabtiisa in dadka aanan loo qarin dadkana loo sheego Ceebta, haddaba waxaa dhacday Maalin maalmaha ka mid ah in Nin yuhuudi ah uu Dukaankii uu yimi uuna iibsaday Maro meel yar ay ka jeexan tahay, Ninkii Dukaanka lahaana ma uusan Joogin, Ninkii Shaqaalaha ahaana waxa uu Nafsadiisa ku qanciyay maxaa iga galay Yuhuudkan!!!.

Waxaa yimi Ninkii Dukaanka lahaa waxa uuna waydiiyay Maradii ceebta lahayd? waxa uuna usheegay in uu ka iibiyay Nin Yuhuudi ah, waxaana ka siiyay 3000 Dirham mana aanan u sheegin marada in ay jeexan tahay oo ay ceeb leeedahay ayuu hadalkiisa sii raaciyay!!!

Aaway hadda ninkii ayuuna ku yiri?, waxaana uu ugu jawaabay:- waa uu tagay safarkii uu la socday buuna la laabtay!!!, kadib Lacagtii buu ka qaaday dabadeed waxa uu ka daba baxay safarkii si uu u uga gaaro inta aysan fogaanin, waxayna ku qaadatay in uu la gaaro Safarkii 3dax maalmood oo safar ah!!!.

Waa uu la kulmay kadibna waxa uu ku yiri waxaan ahay Tukaankii aad marada ka soo iibsatay Ninkii iska lahaa marada lagaa iibiyayna ceeb-bay leedahay ee lacagtaada qaado waatane Maradiina isii!!!.

Kadib Ninkii yuhuudiga ayaa waxa uu ku yiri Su'aal ma ku waydiin karaa?, “haa’’ buuna ku yiri, markaas ayuu ku dhahay maxaa kugu kalifay in waxan oo dhib ah aad u soo marto si aad iigu sheegto ceebta maradu ay leedahay, lacagtaydana aad iigu soo Celiso!!!, waxa uuna ugu jawaabay:- waxaas oo dhan waxa ugu bixiyay waa Islaamnimada aan aaminsanahay Nabigeygana (scw) waxa uu yiri:- (Qofkii na qayaamaa nagama mid aha)!!!.

Halkaa markii xaal marayay ayuu ninkii Yuhuudiga ahaa waxa uu yiri 3000 Dirham ee aan idin siiyay waxay ahayd Faalis (lacag aanan sax ahayn), ee 3000 Dirham oo Sax ah qaado, walina waxaan kuugu sii darayaa intaas inaan qaatay diinta islaamka, halkii buuna ku Ashahaatay!!!.

Haddaan nahay Musliimiin maanta maxaa inooga baahi badan in Akhlaaqdeenu ay noqoto Akhlaaq islami ah, Maalintii aan Kitaabka Alle (swt) dhabarka ka tuurnay ayaa waxay noqotay Akhlaaqdeenu mid Maanta haddii uu

Nabiga (scw) iyo saxaabadiisa dhamaantood Allaha kawada raali noqdee ay Noolaan lahaayeen ay ka wada bari noqon lahaayeen!!!.

Waxaadna ogaataa akhriste in haddii qofku si kasta oo kale uu u fiicanyahay laakiin uu ka liito xagga akhlaaqda, haba yaraatee waxaas kale oo dhan aan lasiin doonin wax muhiimad ah!!!.

Akhlaaqda wanaagsanina waxa ay kugu hogaaminaysaa in aad noqoto daacad, soomaaliduna waxa ay ku maah-maahdaa:- daacadi ma hungowdo!!!.

**Aynu ubeddelno diinta aynu haysano ee Islaamka Dhaqan, markaas ayaynu liibaanaynaa if iyo Aakhiroba'e.**

# NINKII TAAJIRKA AHAA EE DABAQA SAARNAA IYO MISKIINKII FAQIIRKA AHAA!!!



Nin miskiina ayaa waxa uu hoos marayay dabaq aad u dheer hoostiisa kadibna nin saaran fooqa sare ee dabaqa ayuu ka codsaday inuu usoo dego, markii uu usoo dhaadhacay ee uu u yimidna ayuu ku yidhi:-waxaan kuugu yeedhay, waxaan ahay miskiin, waxaana kaa codsanayaa in aad sadaqo isiiso?!!!

Ninkii Aad ayuu u cadhooday, muusanse u muujin cadhadiisaa wuxuuna ku yidhi:- Isug, dabadeed markii uu fooqiisii koray ee uu gaadhay dabaqii u sareeyay ee uu sarnaa markii ninkan miskiinka ahi la hadlayay ayuu ku yidhi:- iska tag!!!.

Miskiinkii oo yaaban ayaana ku yidhi:-Oo maxaad iigu sheegi wayday markii aadan korin dabaqa?, markaasi ayuuna ugu jawaabay:- Oo adigu maxaad wax ii weydiisan wayday aniga oo fooqa sare saaran ee aad iisoo daadejinaysay!!!.

Sidaasi ayay dadka qaarkood markiiba u aargutaan iyaga oon kuwa gefka ku sameeyay aanay marnaba dareemayn jawaabtooda, balse ka dheerow in aad ka mid-noqoto kuwaas waayo Nebigeennu (NNKH) waxa uu innagula dar-daarmay:- " xittaa qofka xumaan inoo gaysta in aynu innagu wanaajinno kulana dhaqanno akhlaaq wanaagsan", markaas ayaadna noqonaysaa qof bulshada dhexdeeda kuleh maamuus, qaddarin, ixtiraam iyo tix-gelin, aakhirona wax wanaagsan sii hor marsanaaya.

# MULKIILIHII HUDHEELKA IYO NINKII MISKIINKA AHAA!!!



Nin Miskiina oo Haysta Xabbad Roodhi ah oo Qallalan, Isla Markaana Waayay Wax uu Ku cuno Roodhidan ama Iskaga Dejiyo Ayaa Waxuu Soo Ag Istaagay Meel Madcam ama Maqaayad yar ah, kadib ayuu waxuu Hoos Fadhiistay Daaqada Madbakhii Maqaayadaasi oo ay Kasoo Carfaysay Udgoonkii Cuntada Lagu Karinayay!!!.

Kadib Waxuu Go'aanSaday Inuu Roodhidii ku Cuno Udgoonkii Cuntada u Carfaysay waanuu Ku Cunay, oo Roodhidii Ayuu Iskaga Dajiyey!!!.

Haddana Maalintii Labaad ayuu Daaqaddii yarayd Hoos Fadhiistay Si uu Udgoonka Cuntada Ugu Cuno (Roodhidiisii Yarayd), Waxase Maalintani Arkay

Mulkiilihii Hudheelka yar oo Qabtay Isagoo Weydiiyey Inuu Iska Bixiyo Lacagtii uu ku cunay cuntada?, miskiinkii ayaana Yaabay oo Yidhi:- Roodhidani aniga ayaa Sitay, waxuuna Mulkiilihii Ugu Jawaabay:- Waan Ogahaye Waxaad iska Bixisaa Lacagtii Udgoonka Illeyn Roodhida Kaligeed Maad Cunteen Haddii aanad Udgoonka Cuntadayda ku Cuneyne"!!!.

Iyagoo Sidii Isku Haysta oo Miskiinkii Yaaban yahay Ninkii Hudheelka yar lahaana Raqabada Shaadhka uu Haysto Miskiinkii Ayaa Waxa Kusoo Baxay Nin, kaas oo Hudheelka kusii Socday, Kadib Waxuu Weydiiyey Waxay isku Haystaan Waanay U Sheegeen!!!.

Ninkii ayaa Inta uu Ninkii Hudheelka ku jeestay Ku yidhi waa Immisa Uduga Cuntadaada eed Miskiinka ka Rabtaa, waxuuna Ugu Jawaabay:- waa 5 Dirham, dabadeed Inta uu Jeebkiisa kasoo Saaray Shantii Dirham oo ahaa Kuwo Shilimo ah (bir ah) ayuu Intuu Gacanta Ku Qabtay Shilimadii Isku Garaacay Iyagoo Sameeyey Dhawaaq!!!, markaas ayuu Mulkiilahii Hudheelka ku Yidhi:- Ma Maqlaysaa Dhawaaqa Shanta Dirham?, markaasuu Mulkiilihiina Yidhi:- HAA waan maqlayaa, kadib ninkii Intuu Shantii Dirham Jeebada ku Ceshaday ayuu Ninkii ku yidhi:- Sxbow Udgoonka / Carafta Cuntadaada U Qaado Dhawaaqa 5-ta Dirham, Ninkani Miskiinka ahna Iska sii Daa, Waanuu ka Fasaxay miskiinkii!!!.

Aadamuhu kama sinna garashada, kamana sinna mahad-celinta iyo umahad-naqa Eebbe (swt), haba yaraateena wax uu ka simanyahay ma jirto, waanakii waxkasta ku kala duwan!!!

Haddaba akhriste si kasa too ay tahay, adigu ku dedaal in aad qofkasta oo baahan ama dhibaataysan oo aad aragtoba aad ugar-gaarto, tartona wixii karaankaaga ah ee aad u awoodi karto!!!.

Ugar-gaar ka xanuunsan intaad ugar-gaari karto, caawi ka miskiinka ah intii awooddaada ah, una naxariiso ka mustaafirka ah iwm, waana hubaal haddii aad sidaas samayso in adna xagga Rabbi (swt) lagaaga gargaari doono, ammuurahaaga oo dhanna laga fufudayn doono!!!.

# NINKII FAQIIRKA AHAA IYO KIISHKII LACAGTA AHAA!!!



Waxaa la wariyey Nin Faqiir ah ayaa wuxuu ku noolaa Makka, wuxuuna qabay Xaas wanaagsan, haddaba maalin maalmaha ka mid ah ayaa Xaaskiisii waxey ku tiri:- Ninkeygiyow ma haysanno wax aan Cunno iyo wax aan Xidhannaba!!!.

Ninkii wuxuu aaday Suuqa si uu u soo raadiyo Shaqo, kadib wuu raadiyey, laakiin ma uusan helin wax Shaqo ah, markuu ka daalay raadinta ayaana wuxuu aaday Xaramka, halkaas ayuuna Laba rakco ku tukaday, wuxuuna guda galay inuu ilaahey (swt) Baryo in uu ka Feydo Kurbada, markuu Ducadii dhammaystayna wuxuu usoo baxay Xaramka Barxaddiisa, wuxuuna ka helay Kiish, wuu fiiriyey wuuna Furay, mise waxaaba ku jirto Kun Diinnaar!!!.

Wuxuu u laabtay Xaaskiisii si uu uga Farxiyo Lacagtan uu soo helay, laakiin Xaaskiisii wey ku celisay Lacagtii, waxeyna ku tiri:- waa inaad Lacagtan u celisaa qofkii lahaa, maxaa yeelay Xaramka ma banaana in wax laga qaato!!!.


Ninkii wuu baxay Xaramkii ayuuna aaday, wuxuuna helay Nin ku naadinaaya:- yaa helay Kiish Kun Diinaar ku jirto?, ninkii Faqiirka ahaana wuu Farxay, wuxuuna dhahay Anaa helay, hoona qaado Kiishkaaga, waxaan ka helay Barxadda Xaramka'e, Abaal mariskiisana wuxuu noqday, Ninkii wax Naadinaayey in muddo ayuu Fiiriyey Ninkii faqiirka ahaa, ka dibna wuxuu ku dhahay:- Kiishkaaga qaado adigaa leh'e waxaa kaloo ku jirto Sagaal kun oo kale!!!.

Ninkii Faqiirka ahaa wuu yaabay wuxuuna ku yiri sabab?, kii wax Naadinaayeyna wuxuu dhahay:- Nin Dhulka Shaam deggan ayaa wuxuu ii dhiibay Toban Kun oo Diinnaar, wuxuuna i dhahay:- Kun ka mid ah waxaad ku Tuurtaa Xaramka, ka dibna Naadi , haddii uu kuu soo celiyo Qofkii helay wada sii dhammaan, maxaa yeelay waa Aamin, Allena (swt) Qur'aankiisa wuxuu ku leeyahay:- (qofkii Alle ka Cabsada Alle wuxuu u Furaa Faraj, wuxuuna ka Irzaaqaa meel uusan ka Fileyn)!!!.

Waxa hubaal ah tallaabo kasta oo aad Alle kacabsi uqaaddo in aanad ku qasaari doonin!!!.

(Yaa Allah Meel aanaan filaynin iyo meel aanu filaynoba naga Arzaaq, yaa Rabbal caalamiin)!!!.

## QOFKA MU'MINKA AHI WAA INUU KU QANCO WIXII RABBI (SWT) UQORO!!!



Nin shaqaale ah oo uu aad u hooseeyay mushaharkiisu, misana shaqo wacan oo aan daalin oo si fiican u gutta waajibkiisa shaqo ayaa jirey, wuxuuna ninkaasi masuul ka ahaa walaaladii, hooyadii iyo carruurtiisa intaba!!!..

Haddaba maalin ka mid ah maalmaha ayuu shaqadii ka maqnaaday markaas ayaa ninkii uu u shaqayn jiray naftiisa ku yiri:- Allaylehe ninkaasi nin shaqo wacan buu ahaa mushaharkuna kuma filna ee aan u kordhiyo!!!.

Subixii danbe markii uu shaqadii yimi ayuu ninkii uu u shaqayn jiray siiyey musharkiisii oo waxoogaa uu ugu kordhiyey, ninkii shaqaalaha ahaana muu ku amaanin ficilkaas ninkii uu u shaqayn jiray ee shaqadiisii ayuu iska sii watay!!!.

Muddo ka dib ayuu haddana maalin kale ka maqnaaday shaqadii, kadib ninkii uu u shaqayn jiray ayaa carooday ama xanaaqay waxaana uu yiri:- balan Allaah swt waxaan ku qaaday inaan ka jaro intii aan u kordhiyey, markii uu ka jaray intii uu u kordhiyeyna ninkii shaqaalaha ahaa kama murmin ee shaqadiisii ayuu iska sii wattay!!!.

Ninkii taajirka ahaa ayaa yaabay oo waydiiyey ninkii shaqaalaha ahaa:- war heedhe maalintii horena mushahar ayaan kuu kordhiyey oo kumaad farxin, maantana waan kaa jaray oo kamaad caroone bal ii warran?!!!.

Dabadeed Ninkii shaqaalaha ahaa ayaa yiri:- maalintii hore ee aan maqnaa xaaskayga ayaa wiil ii dhashay oo aan ku mashquulsanaa, markii aan soo noqdee aad mushaharka ii kordhisayna waxaan iri:- wiilkii kuu dhashay irzaaqadiisa weeye oo Allaah (swt) kuu diyaariyey, maalintii danbe ee aan maqnaana iskama maqnayne Hooyaday ayaa geeriyootay ama dhimatay, markii aan soo noqdee aad iga jartay Mushaharkana adigoo caraysan waxaan iri:- hooyo way dhimatay oo mushaharkaas kaa go'ayna wax kale maaha ee irzaaqadeedii ayaa go'day!!!!.

Markaasaa ninkii taajirka ahaa aad uga murugooday qisaska uu uga sheekeeyay ninkani!!!.

Waa in Qofka muuminka ahi uu ku qanco wixii Allaah (swt) uu u qoro una garto, waana hubaal haddii aad saas samayso in aanu rabbi (swt) ku hoojin-doonin, naftuna waa damaaciyad ee qanaacada aan ogaanno!!!.

# HAKA CABSAN IN AAD SEEGTO ARZAAQDII BABBI (SWT) KUU QORAY!!!



Nin Ayaa isagoo Ceel shubaya Kaligii ku Dhacay Ceelkii, Wuxuuna Bilaabay In Uu Gargaar dalbo Oo Uu Qayliyo, Si Loo Badbaadiyo, kadib Dadkii Ayaa Maqlay Qaylidiisii Wayna ku Soo Yaceen Si ay U badbaadiyaan!!!.

Waxay Ka Soo Saareen Ceelkii Markaasay Siiyeen Caano Si Nafta Uu Ugu Ceshto ( si uu qayladii iyo daalkii uga nefiso), haddaba Markuu Noolaaday (nefisay) Oo Uu Wax kala gartay Ayey Su'aaleen Qaabkii Uu Ugu Dhacay Ceelka!!!, ninkiina wuxuu Bilaabay In Uu Sharraxaad Ka Bixiyo Qaabkii Uu Ugu Dhacay Ceelka, Wuxuuna Dul Tagay Ceelkii, Ka Dibna Waa uu Ku dhacay mar labaad, Waana Dhintay markan!!!.

NaFina Ma DhimaTo Illaa Ay Cunto Ama CabTo Arzaaqdii ay Ku Lahayd Dunidan, ninkanna Ceelka Waxa Looga soosaaray Koob Caana ah Oo Uu.Ku lahaa Dunidan welina aanu cabbin, Markuu Cabbayna Waa Geeriyooday!!!.

Markaa marna haka Baqin In aad Wayso Arzaaq kuu qoran, Asbaabtiina La Imow Allaahna (swt) Tala Saaaro, Isagaa Ku arzaaqiye!!!.

## ADDUUNYADU WAA HADHKAA LABADIISA GELIN!!!



Waxay aheyd habeenkii ugu horreysay arooskooda, kadib markay xafladii dhammaatay oo labadooda aqalka keli ku noqdeen oo cashadii cunisteeda u fariisteen ayaa qof albaabka ku soo garaacay, kub, kub, kub, kadibna Ninkii baa xaaskiisa ku yiri soo fiiri qofka saacadaan albaabka taagan, Markay albaabka furtayna mise waaba nin miskiin ah oo tuugsanaya!!!.

Sug bey tiri, ninkeeda ayeyna ku soo laabatay waxeyna u sheegtay in qof tuugsanaya oo baahan uu bannaanka taaganyahay, ninkii ayaana aad intuu uxanaaqay buu si dag-dag ah ugu tagay miskiinkii albaabka taagnaa, qeylo iyo cay ayuuna iskugu daray waxuuna ku yiri:- Ma xilligan baa albaabka la isku soo garaacaa , miyaadan xishoonayn, waa habeenkii ugu horreeyay ee aqal galkeena, waxba kuuma haynee Bax na dhaaf, ninkii miskiinka ahaana asagoo yaaban ayuu iska tagay!!!.

Ninkii aroooska ahaa xaaskiisa ayuu kusoo laabtay asagoo is leh guda gal howlaha sariirta, shaarkii iyo surwaalkii ayuuna siibtay, sariirta ayuuna dhinac Ka soo koray laakin nasiib darro Isla markiiba waxa ku soo booday xanuun maskaxda iyo qalbiga ah wuuna waashay!!!, gabdhiina waa kala tageen isla maalinkii xigtay habeenkaas!!!.

Mudda dheer ayay gabadhii Garoob ahayd, kadib ayaa haddana laguursaday, dabadeed isla habeenkii koowaad ee arooskeeda ayaa haddana qof albaabka kusoo garaacay, ninkeeda ayaana dhahay bal soo eeg qofka albaabka taagan, markey albaabka furtayna waaba nin tuugsanaya oo leh ii kaalmeeya!!!, waxayna kusoo laabatay ninkeeda waxayna ku tiri:- waa qof miskiin ah, waxuuna dhahay hoo cuntadan iyo biyahan u gee!!!, markey cuntadii u geeysay ayeyna aqoonsatay qofka tuugsanayo, Ninkeedii ayeyna ku soo laabatay iyadoo ooyneysa!!!.

Wuxuu dhahay maxaa kugu dhacay, waxeyna tiri:- ninkan tuugsanayo waa ninkeygii hore oo habeenkayagii arooska ayuu qof miskiin ah ceyriyay oo si xun ula hadlay!!!, markaas ayaa ninkeedii asagana ooyay, waxuuna dhahay:- anigana waxaan ahay ninkii miskiinka ahaa ee habeenkaas tuugsanayay!!!.

Adduunyadu waa harkaa labadiisa galin, Waligaa qof dhibaataysan Si xun ha ula dhaqmin, ama ha ula hadlin adiga oo ku xaqiraaya xaaladda uu markaas ku suganyahay, Berrina in ay adiga ku qabsan doonto Ma ogide!!!.

## WAXA AAD GOOSANAYSAA WIXII AAD BEERATAY!!!



Oday Waayeel ah ayaa wuxuu la Noolaa Wiilkiisa iyo Gabar uu Sodog u yahay oo Wiilkiisu Qabo iyo Cunug yar oo 5 jir ah oo Wiilkiisu Dhalay, Odeygu wuxuu ahaa Nin Da'diisu ay aad u Waynayd, Araga Indhahiisuna aad bey u Liiteen, Xattaa Gacmihiisu wey Giriirayeen, Tilaabaduna wey dhibeysey, Markuu Cuntada cunaayana ama uu Cabaayo Biyahana inta badan wuxuu ku Daadin jiray Miiska Cuntada lagu cuno, Awoodda Gacmihiisa oo aad u Liita darteed.

Sidaa darteed Wiilkiisa iyo Gabarta uu Sodoga u ahaa oo Miiska kula Cunteen jirey aad bey u Dhibsadeen Duqa!!!, kadibna wiilkiisii ayaa yiri:- Waa inaan Xal keennaa oo Arrinta sidan ka Beddelnaa!!!.

Haddaba, Wiilka iyo Xaaskiisii ayaa waxey u Diyaariyeen Miis yar oo Gooni loogu bixiyo Cuntadiisa, si uusan u Dhibin mar Dambe, sidoo kale waxey u Hagaajiyeen madiibad dhoobo ah si uusan mar kale u Jebinin Alaabtooda, markii ay Fiiriyaan Odeyga dhiniciisana, Mararka qaar Indhahiisa waxa ka Muuqatay Murugo, wuxuuna Dareemaayey in Gooni loo Takooray!!!.

Cunugii yaraa ee uu Awoowga u ahaa Xaalada oo dhan Indhaha ayuu ka Fiirinaayey, wax walbana wuu Dareemaayey, dabadeed habeen habeenada ka mid ah iyadoo Cashada loo Fadhiyo ayaa Cunugii yaraa aad u Mashquulay, isagoo Miiska Hoostiisa Fadhiya oo Alwaaxyo iyo Masaamiir ku Ciyaaraaya!!!.

Aabihiis ayaa si Deggan u Weydiiyey oo yiri:- Aabo maxaa kugu Dhacay oo aad ku Mashquulsantahey?, wiilkii yaraa ayaana ugu jawaabey:- Aabo waxaan idiin Sameynayaa Adiga iyo Hooyaday Miis yar oo Gooni idiin ah oo aad Cuntada ku Cuntaan iyo Madiibad Dhoobo ah, markaad Duqowdaan, sidii Awoowe aad u sameyseen oo kale, si aydaan anigana ii Dhibin, Intaas ka dibna Cunugii yaraa wuxuu Dib ugu noqday Howshiisii, Subxaanallaah!!!.

Ogow, oo Ogow, Waalidkaaga sidii aad ula dhaqantid uun in adigana ubadkaagu uu kuula dhaqmi doono!!!.

## KALLUUMAYSTIHII LA XOOGAY!!!



Nin iska Miskiin ah oo ahaa Kalluumaysato ayaa Maalin soo Dabtey Kalluun, isla markaana waxa u yimid Nin aad u Xoog badan, oo Kalluunkii Xoog uga Qaatay Miskiinkii. Haddaba waxa dhacday ninkii Kalluunka Xooga ku qaatay markuu Gurigiisii tagey ee uu isku Dayey inuu Karsado Kalluunkii, ayaa Kalluunkii Lafahiisii Laf ka mid ah waxey ka Mudday Gacanta!!!.

Gacantii baa Barartey oo Cudur qaaday, ka dib markii Dhaqtar loo Geeyay waxaa la Amray in Gacanta la jaro, si uusan Cudurka ugu Faafin Jirka intiisii kale, sidii baana la yeeley oo Gacantii waa la jaray. balse Ninka wuu Ogaa meesha laga Haysto inuu yahey Ninkii Miskiinka ahaa ee uu sida Dulmiga ah uga qaatey Kalluunka!!!.

Xanuunkii baa ku sii Fidey, kadib waxuu Go'aansadey inuu Raadiyo Ninkii uu Dulmiyey si uu Cafis uga Dalbado, markuu la Kulmey Ninkii ayuuna ku yiri:- Walaaloow ma i Garaneysaa aniga, waxaan ahey Ninkii Xooga kaaga Qaatey Kalluunkii, sidii Maalinkaasna Dhibkan ayaa i soo Gaaray, ee Walaaloow iga Raali noqo oo iska kay Cafi!!!.

Ninkii ayaana yiri:- Walaaloow waan ka Xumaha, intaan gacanta lagaa Goynin maxaad iigu Iman weyday waan ku Cafin lahaa'e. oo waxaan sameeyey Maalintaad iga Qaadatey Kalluunka Habeenkeedii Anigoo Ooynaaya ayaan Rabbi (swt) Salaad u hor Istaagay, waxaana ka Baryey inuu Xaqeyga Ilaahay swt iiga kaa Qaado, maadaama aad ii Awood sheegatay, oo Dacwadeyda Rabbi (swt) ayaan u dhiibtay!!!.

**SUBXAANALLAAH**:-Rasuulku (CSW), wuxuu yiri:- Qofka Dulmanaha ah ee la Dulmiyey, Ducadiisa Rabbi (swt) ma soo Celiyo oo waa la Aqbalaa!!!.

Ka digtoonow weligaa in xaq bani-aadam ku raaco, noocuu doonoba ha ahaadee, haddii aad si badheedh ah uqaadatona ogow in noloshaada adduun iyo aakhiradaaduba halis ku suganyihiin!!!.

(**YAA ALLAH XAQ BANI-AADAM IYO XAQ ISLAAMEED TOONNA HANNA GELININ, YAA RABBAL-CAALAMIIN)!!!.**

## ILAAHAY AYAA IIGAKAA QAADAY!!!



Laba Nin ayaa Suuq Dhexdood isku Dagaalay, kadib mid ayaa Bistoolad la soo baxay wuxuuna ku Riday kii kale, dabadeed xabaddii Ninkii lagu waday way Dhaaftay waxayna ku dhacday Nin Harqaanle ah oo Shaqadiisa ku jira, ninkiina wuu Curyaamay oo Laf Dhabarta ayaa wax ka Gaadheen!!!.

Haddaba Nin Dagaalka Daawanaayay ayaa Xanaaqay oo Qeyliyay, wuxuuna Tagay Masaajid wuxuuna yiri:- Dulmi ayaa jira ninkan aan Waxba Galabsan ee ay Rasaastu ku dhacday, Xaqiisa haloo Dhiciyo!!!

Intaa kadib Imaamkii Masaajidka ayaa Ninkii si Xikmadaysan ula Hadlay waxuuna ku yiri:- Ninka ay Rasaastu ku Dhacday iskagama ay Dhicin ee soo Wareyso, Labaatan Cisho Guduhood ayuuna Ninkii kusoo Noqday Imaamkii,

wuxuuna ku yiri:- waxaad Sheegaysay Run bay ahayd, Imaamkii ayaana yiri:- Haye ka Waran?!!!.

Ninkii wuxuu yidhi:- Ninkan Harqaanlaha ah inta aanay Rasaastu ku Dhicin Maalin ka hor ayuu Walaalkii Dhintay waxa uuna ku yiri Walaal Dhaxalkeyga waxaad siisaa Wiilkeyga Curadka ah, kadib ninkiina haye ayuu ku yiri walaalkii, Habeenkii ayuuna Wiilkii u yimid, wuxuuna ku yiri:- Adeer Dhaxalkii Aabahay i sii, Adeerkiina wuu Diiday, Dabadeed Wiilkii wuxuu Adeerkiisa ku yiri:- Adeer Ilaahay (swt) ayaa iiga kaa Qaadi doono, wuuna ka Tegay!!!, subaxdii Xigtayna waa tan ay Rasaastu ku Dhacday Adeerkii, Markay Rasaastu ku dhacday ayuuna yiri:- ii doona Wiilkii aan Adeerka u ahaa, kolkii loo keenay ayuuna ku yidhi:- adeer Hoo Xaqaaga iyo Dhaxalkaaga Ilaahay (swt) markaad igu Reebtay waatan Balaayadan igu Dhacday’e, Ilaahayna (swt) Waakaa iiga kaa Qaadaye!!!.

Cid kasta oo isbidda awood iyo itaal, Allah (swt) waa kii qabta uun, awoodina Allah (swt) ayay usugnaatay!!!.

Ka dheerow iskibrinta iyo in aad ku xadgudubto cid kaa itaal hoosaysa, xusuusona in ay jirto awood habayaraatee cid ka sarraysaa aysan jirin!!!.

## WAA GABADHII ALBAABKA IGA FURI LAHAYD!!!




Waxa layidhi wiil iyo gabar ayaa muddo dheer oo ay is-jeclaayeen kaddib waxay go'aan ku gaarey in ay is-guursadaan, kadib inta ay is-mehersadeen oo loo mashxaraday ayey horay ka-aqal-galeen, dabadeed illeen waa lammaane isku oommanaaye, waxa ay isla qaateen in illaa bil aysan aqalka qofna ka furin, xittaa haddii ay waaliddiintii yihiin!!!.

Iyada oo sidii arrin yahay, baa usbuuc kaddib, waxa la soo garaacay hoygii. Wiilkii baa inta booday waxa uu ka fiiriyey dadka soo gaaracaya daldaloolka albaabka, mise waa labadiisii waalid, Isla markiiba waxa kusoo dhacay ballantii isaga iyo xaaskiisii dhex martay ee ahayd, in aan guriga cidna laga furin, inta muddadaas ah. dabadeed Iyaga oo albaabkii garaacaya ayuu inta ka soo laabtay u yimid xaaskiisii, Inta uu u sheegeyna cidda illinka taagnayd ayuu baalka ka sii galay!!!.

Shan beri kaddib ayaa misena albaabkii la soo garaacay, Gabadha oo kolkaas daaradda taagnayd ayaana inta aadday ka fiirisay daloolka albaabka dadka soo garaacaya, mise waa labadii dhashay, axdigii ayey soo xasuusatay, waa heshiis adag oo ay la gashay seygeedii ay jeclayd, iyada oo weliba ogayd sidii uu isna wacadkii u oofiyey, ee uu waalidkiis illinka uga furi waayey!!!.

Gabadhii beerkaa balbalay, waxaana ku adkaatay in ay dhageysato waalidkeed!!!.

Haddaba Iyada oo weli taagan, ayaa waxaa ku soo baxay ninkeedii, kolkaas baa inta illini ka soo daadatay, bey ku tiri:- “Qaali, hooyo iyo aabbe ayaa bannaanka taagan, mana awoodo iyaga oo albaabka taagan in aan ka furi waayo”, Iyada oo weli hadalka ku jirta, baa waalidkii albaabka mar kale garaaceen, markaas baa iyada oo aan jawaab ka sugin seygeedii, inta ay laab-dillaac la joogi weydey albaabkii fag ka siisay!!!, Inta ay ku boodday ayey inta ay labadiiba labada dhaban ka dhunkatay, soo gelisay minankii, kadib Inta ay meel har ah fariisisay ayey biyo qabow u keentay isla jeerkaasina ku qaabishay waji jeceyl iyo jamasho mug-buuxisay!!!.

Wiilkii intaas waa eegayey, arrintaas kalama hadlin, waana isaga aamusay!!!.

Gabadhii waayadiiba waa uureysatay, waxa ayna dhashay wiil, Seygeediina waxa uu u qalay wiilkii laba neef oo ari ah oo walqal ah, Laba

xiniinyoodle kale ayey ku xijisay, isla sidii oo kale, laba neef oo ari ah ayuu u gawracay, waxa ay ku saddexaysay gabar, markaas buu waxa uu u qalay 20 neef oo ari ah iyo 5 lo' ah iyo 5 geel ah!!!.

Waxaa uu isugu yeerey walqalkaas 500 oo qof, kadib Arrintaan baa lala yaabay, sababta uu wiilasha, mid kasta laba neef ugu bireeyey, gabadhiina uu Alla-berigan weyn ugu sameeyey, kadibna gunaanadkii xafladda ayaa la weydiiyey ujeedka, kolkaas buu ugu jawaabay dadkii:- "Waa gabadhii albaabka iga furi lahayd"!!!.

Waa arrin Rabaaniya oo xagga Rabbi (swt) ka sugnaatay in dumarku raga ay ka beer jilicsanaadaan kana naxariis bataan, xigmadda ku jirtana Alle (swt) ayuunbaa og, waana in aad arrintaa iyada ah marwalba niyadda ku haysaa, kuna xisaabtantaa marka aad gaadhayso, qaadanaysona go'aamada khuseeya lana xidhiidha jinsigaa isaga ah!!!.

**(alloow dumar hanoo waayin)!!!.**

# WALAALIHII AAN ISU TALLAABI JIRIN!!!



Laba nin oo walaalo ah ayaa is qabtay, xiriirkoodii ayaana dabeed xumaaday oo nacayb ayay isu qaadeen, beer ay lahaayeen ayaana midba uu dhinac ka degay, labada daraf ee beertana waxa dhex mara ilo biyo ah, manay isku tallaabi jirin oo mid waliba kan kale uma aanu tegi jirin!!!.

Kadib, berigii dambe, labada wiil kii da' ahaan weynaa ayaa damcay in uu tago Xajka waxaana uu u yeeray nin Injineer ah, isaga oo ku yiri:- "Xajka ayaan tegayaaye, waxa aan kaa rabaa in aad beertan deyr weyn u dhexaysiisid, si aan la isugu tallaabin", ninkii Injineerkiina inta uu fahmay xaaladda meeshan ka taagan ayuu "Haye" ku yiri!!!.

Injineerkii isaga oo aan cidna kala tashan ayaa waxa uu beertii ka dhex dhisay buundo/biriish, wiilkii yaraana waxa uu u qaatay buundadan in lagu dhisay amar ka yimi walaalkiisa weyn oo raba in dib ay isugu soo noqdaan oo ay isu soo tallaabaan!!!.

Xajka markii uu kasoo laabtay wiilkii weynaa, waxa uu yimid beertii oo injineerkii uu ka dhex dhisay 'buundo/biriish" fududeenaya in si fudud ay isugu soo tallaabaan labada wiil ee walaalaha ahi!!!.

Haddaba Isaga oo yaabban, ayaa waxa u yimi oo buundadii kasoo tallaabay walaalkiisii yaraa ee joogay darafka kale ee beerta, kadibna waxa uu ku yiri:- "Walaal, waxa aad samaysay wixii uu samayn lahaa walaal kasta oo weyn, adiga ayaa mar walba udub dhexaad noo ah, waan ku cafiyey walaal ee aan is cafinno"!!!, wwalaalkii weynaana waxa uu la fajacay waxa uu sameeyey injineerkii uu u diray in uu isaga iyo walaalkii kala teedo oo deyr iyo xuduud u kala sameeyo!!!.

Walaalladan kala carooday oo kale oo aan isu tallaabi karini waa badanyihiin, Injineerrada noocaas ah ee sidaa wanaagsan u fekera ayaase innagu yar!!!, Qof kasta oo innaka mid ahna waxa looga baahanyahay in uu noqdo mid kashaqeeya maslaxadda dadka is-haya ama isu caraysan ee walaalaheen, asxaabteen ama qoysaskeenna ah, si aynu unoqonno bulsho isku wada tiirsan, iswada jecel iskuna wada laabxaadhan!!!.

**ALLOW WANAAGGA NA FAHAMSII!!!**

# LABADII SAAXIIB EE SAFARKA WADA GALAY!!!



Waxa ay ahaayeen laba nin oo saaxiibbo ah, waxa ayna isu raaceen safar, mar ay marayeen meel saxare ah, ayaa waxa dhexmaray muran xooggan iyo is maan-dhaaf ba'an, intaa kadib labadii nin ayaa midi saaxiibkii wejiga ka dhirbaaxay, ninkii dhirbaaxada lagu dhuftayna aad ayuu u xanuunsaday balse wax falcelin ah ma samayn hadalna ha noqotee, waxase uu ciidii ku qoray qoraal u dhiganaa sidan:- " Maanta Asxaabtayda kii ugu qiimaha badnaa ayaa wejiga iga dhirbaaxay"!!!.

Intaa kadib labadii nin ee saaxiibka ahaa waxay sii wateen socodkoodii, waxa ayna ku soo beegmeen Dooxo " Dhul carro jilicsan oo biyo leh dhirina ay ku taallo" waxa ayna go'aansadeen in ay ka gudbaan dooxadan.

Haddaba ninkii dhirbaaxadu ku dhacday ayaa waxa la go'day carradii jilicsanayd, waxaana uu ku sigtay in ay liqdo oo uu dhinto, hase-yeeshee saaxiibkii ayaa gacanta qabtay soona badbaadiyay!!!, markii saaxiibkii bad-baadiyey ee uu dhimashadii ka nabad galay ayuu istaagay daba-deedna dhagax u dhawaa ayaa waxa uu ku xardhay oo uu ku qoray qoraalkan:- "Maanta asxaabtayda kii ugu qiimaha badnaa ayaa dhimasho iga bad-baadiyey"!!!.

Intaas kadib saaxiibkii wax dhirbaaxay markii hore ayaa waydiiyey oo yidhi:- Maxaad markii aan ku dhir-baaxay ciida ugu qortay, imminka markii aan ku bad-baadiyeyna dhagaxa ugu qortay?, waxa uuna ugu jawaabay:- "Marka qof ina dhibaateeyo waxa uu inagu sameeyey ciida ayaynu ku qoraynaa, dabadeedna dabaylaha cafiska ayaa baabiinaysa, hasayeeshee marka qof wanaag inoo sameeyo waa in aynu ku xaradhnaa dhagax, dabayl kasta oo timaadaana ma tir-tiri karto"!!!.

Waxaad maanka ku haysaa in aad dhibka laguu gaysto aad cafiso, wanaaga laguu sameeyona aanad hilmaamin, kuwa saas sameeyaana waa kuwa caqliga usaaxiibka ah!!!, If iyo Aakhirobana liibaanaaya.

## ISKA ILAALI SAAXIIBBADA XUN-XUN!!!



Nin dhalinyara ah Ayaa ka toobad keenay macaasi oo ALLE (swt) u soo laabtay, kadib waxaa Dhacday Ninkan dhalinyarada ah asaxaabtii uu lahaa oo ay isla wadi jireen macaasida ayuu maalin u tagay Markuu ka maqnaa in muddo ah oo Allah (swt) kaligii uu caabudayay!!!.

Wuxuu jeclaystay in uu kasoo waaniyo asxabtiisa oo ay ka toobad keenaan macaasida ay ku jiraan, Wuu kala hadlay oo Waana uu ka waaniyey macaasida in ay iska daayaan Oo Ay Rabbigood swt usoo laabtaan, kadibna waxay is xasuusiyeen waayo-waayo iyo wixii ay isla soo mareen, ahlu macaasidana way dhagar badanyihiine waxay ka xumaadeen saxiibkood oo qaatay hanuunka!!!.

Xasad ku jira awgeed ayeyna waxay u dhigeen shirqool xun, waxayna ku Dhaheen saxiib waxaan rabnaa in aan safarno oo aad na raacdo oo na wacdido oo aad salaada natujiso, ninkii dhalinyadara ahaana wuuu aqbalay wuuna raacay, markii ay tageen goobtii loo socday ayeyna Dageen Hoteel, waxayna bilaabeen fisqi iyo qamro cabid asagiina Qol gaar ah bay dajiyeen!!!.

Waxayna guda galeen in ay fuliyaan dhagartoodii ay ka damacsanayeen ninkan dhalinyarada ah ee aan ogeyn dhagarta ay wataan xaasidiintani aan aqoon saaxiibku qiimaha uu leeyahay, waxayna lacag siiyen naag Qurux badan oo dumarka xun-xun ah, ka Dib Waa ay u direen si uu ugu dhaco Wixii uu ka toobad keenay!!!.

Naagtii waxay sameysay wixii loo diray, ninkii ayey u gashay Qolkii oo ay ag fariisatay, (Rasuulkuna (scw) wuxuu yiri:- (**naag iyo nin meel kuma kaliyoobaan illaa waxa saddaxeeya shaydaan),** ninkii shabaabka ahaana wuxuu ku dhacay faaxisho wuxuuna cabbay qamri, waagii markuu baryey ayeyna asaxaabtiisii faasiqiinta ahaa Waxay yimaadeen Qolkii Uu daganaa Waana ay garaaceen!!!.

Naagtii dumarka xun-xun ahayd baa ka furtay waxayna ku tiri:- wixii aad iisoo dirteen sidii aad u rabteen ayaan u qabtay, qamro wuu cabay wax walbana wuu sameeyey haddana waa midkaan qaawan ee aad arkaysaan!!!.

Waxay u galeen saaxiibkood ayagoo qoslaaya oo ku faraxsan, waxa ayna ku sameeyeen Way u dhawaqeen si ay uga kiciyaan hurdada, waa soo toosi waayey, kadib way rog rogeen si ay u hubsadaan in uu nool yahay iyo inkale, Subxaanallaah,

ninkii dhalinyarada ahaa sidii ayuu ku geeriyoday asagoo ku jira fisqi ayuuna dhintay!!!.

Bal eega saaxiibadan xun-xun dhibka ay u geysteen sxbkooda rabay in uu ka badbaadiyo naar, ayagana waxay ku tuureen waadi naareed!!!.

Iska ilaali saaxiibka xun haddii aad ka tagto, saaxiibka xunna haku laablaaban ee ka carar samaysona saxiibo wanaagsan oo kugu kaalmaynaaya daacadda Allaah (swt), haddii kale saa ookale ayaa kugu dhacaysa, maalinka qiyaamahana waad ka shalayn oo Waad ka qooma-mayn!!!.

## HAKU DEG-DEGIN CADHADAADA!!!



Gabadh ayaa Waxay tidhi:- waa laysoo guursaday waxaana Layla Dejiyey Soddohday, Mudo Kadib Waxay Soddohday Noqotay Qof Muran iyo Buuqbadan, waan Dhibsaday Saygaygana Waan U Sheegay isaguna Hooyadiis Wuu Ka Caalwaayay Oo Waxba Way ka Qaadanwayday!!!.

Kadib gabadhii waxay tidhi Qayladii iyo canaantii ayaan Ku Noolaan kari waayey, ninkaygana waan jeclahay oo in aan ka tago ma doonayo!!!, maalintii dambe ayaana go'aan ku gaadhay in aan islaanta dilo si aan nolol raaxo leh aan ugu noolaado, waxay tidhi waxaan tagay Farmasi Xaafadda Ku Agyaalay, Dhakhtar Farmasigaasi Ka Howlgalayay ayaana Arrintii Ubandhigay, Waxaana ka Codsatay In Uu Sun isiiyo si aan Islaanta u dilo isagana lacag laaluush ah aan siiyo!!!.

Dhakhtarkii Wuu iga ogolaaday Wuxuuna Galay Qeybta Daawooyinka Ee Farmasiga Wuxuuna iiSooqaaday biyaha wax lagu mudo (Water for injection) oo ku jira quraarad yar, Wuxuuna igu yidhi waa suntii oo aan awood badan lahayn waayo haddaan Sunwayn Oo Halmar Islaanta Disha Kusiiyo Waa lagu Fahmayaa Ee Qaado Quraaradan yar Oo Udiyaari Maalinkasta Islaanta Cunto Dheeli Tiran Oo Hilib, Digaag, Iyo Khudaar isugu Jirta, Hal Dhibic Oo daawadan ahna Ku Dar Muddo Markaad Sidaas ku Waddo Ayeyna Islaantu Dhimanaysaa!!!.

Dhakhtarku wuxuu Intaas iigu Daray Noqo Qof Wanaagsana Oo Iskana Dhagatir Canaanta iyo Muranka Islaanta Ulana Dhaqan Sidii Hooyadaa Oo Kale Illeen Danbaa Wadataaye Si aad u jeedadaada u gaadho!!!.

Gabadhii waxay tidhi Taladii Dhakhtarku isiiyey ayaan qaatay sidii ayaana Sameeyay, Ninkaygiina wuxuu Ka Raystay Dhexdhexaadintii labadayada, buuqii iyo Murankiina Islaanta Oo Kaliya ayuu ku koobnaaday, anna waan Iska dhego Tiraa hadalka islaanta!!!.

Dabadeed muddo Kadib Ayaa Islaantii Iska dhaaftay Canaantii iyo Murankii Waxayna iila Dhaqantay sidii Ay idhashay oo kale!!!.

Gabadhii waxay tidhi waxaan Kusoo Laabtay Dhakhtarkii Waxaana Ku idhi:- Dhakhtar Taladaadi ayaan Qaatay Laakiin Islaantii way Wanaagsanaatay, Hooyaday Oo Kale Ayey Noqotay imminka, Marabona in an Iskadilo waayo Way

Iiwanaagsantahay Oo Wey Ijeceshay Ee Sidee Ubadbadbaadiyaa si aanay Iiga Dhiman Waan Jeclahaye?!!!.

Waxay tidhi kadib Dakhtarkii ayaa igu qoslay, Wuxuuna Yidhi Anigu Sun Kuma Siin, ee Biyo Yar ayaan Kusiiyay, Keliyana Waxaan Sumeeyey Fikirkaagii Xumaa Oo waan Wanaajiyay!!!.

Haku Deg-degin Cadhadaada Oo Wanaaji Dhaqankaaga, Ulana Dhaqan Dadka Sidaad Rabto in Laguula Dhaqmo, Allena (swt) waxaan ka baryeynaa in uu quluubteenna waanaagga iyo jacaylka ku beero!!!.

# ALLAH (SWT) AYAA ISIIYAY DAWO KADIB MARKAAN UNAXARIISTAY MID KAMID AH ADDOOMIHIISA!!!



Nin ayaa maalin waxa uu aaday dhakhtarka waxaana loo sheegay inuu qabo cudur xun ayna xirmayaan xididada jirkiisa waxaana lagu yiri raadso dhakhtar dibada ah, ninkii markii uu aaday ayaana loo sheegay in lagu sameynayo qaliin boqolkiiba shan lagu dhinto.

Ninkii waxa uu yiri labo beri isiiya si'aan usoo macsalaameeyo qoyskaygii maadaama aan dhiman karo, ninkiina markii uu kusoo noqday dalkiisii isagoo maraya meel wado ah ayuu arkay islaan meel qashin qub ah kaguraneysa lafo, ninkii intuu naxay ayuuna weydiiyay islaantii maxaa kufalaysaa lafaha aad guraneyso?, waxayna kujawaabtay waxa aan ukarinayaa carruurtayda labo sano hilib macunin'e!!!.

Ninkii intuu murugooday ayuu geeyay meel hilibka lagu gado waxa uuna kuyiri maalin walba hilib kaqaado lacagtana aniga ayaa bixinaya islaantii intay faraxday ayayna uduceysay, ninkiina labo beri kadib waxa uu kunoqday dhakhtar kii,balse lama filaan dhakhtarkii ayaa usheegay inuusan qabin wax xanuun ah xididada jirkiisuna ay caadi yihiin!!!.

Allahu akbar dhakhtar kii ayaa weydiiyay meesha uu isku soo daweeyay, ninkii ayaana kujawaabtay:- Illaahay (SWT) ayaa isiiyay dawo markii aan unaxariistay mid kamida addoomihiisa!!!.

Sadaqadu waa arrin cajiib ah, diinteenna suubanina aad ayay uga hadashay uguna dhiiri gelisay ummadda muslimiinta ah, Rasuulkuna NNKH waxa uu xadiis ku yidhi:- **( kudaweeya kiina buka sadaqada)**, qisadanina waa mid kamid ah qisaska si itaabsii ah inoo tusinaaya xadiiskan iyo faa'iidada ama waxtarka ay leedahay sadaqadu!!!.

# DHAKHTARKII CAAQILKA AHAA IYO XARIIFKII REER MAGAALKA AHAA!!!



Nin Dhakhtara Oo Caqli Badnaa Ayaa Magaalo Ka Furtay Cisbitaal, Waxuuna Boodhka Ku Qortay:- “Haddii aan Ku Daweeyo Waxaad Bixinaysaa $200, Haddii Aan Ku Guul daraysto Inaan Ku Daweeyana Anigaa $50 ku Siinaya"!!!.

Dadkii Ayaa La Yaabay Kalsooniisa Qofkastana Wuu Ku Guulaystaa Inuu Daweeyo!!!.

Haddaba Maalin ayaa nin xariifa Oo Magaalada Degan uu usoo Fikiray Sidii uu Dhakhtarkan Uga Rayn Lahaa , Ugana Qaadan Lahaa $50 ka Dollar!!!.

Waxuu U Yimid Dhakhtarkii Waxuuna U Sheegay Inuu Hayo Xanuun ah:- Inaanu Waxba Dhadhamin Karin, Macaanka & Qadhaadhkubana ay Isugu Mid Yihiin!!!, dhakhtarkii Ayaana Kalkaalisadiisii Ku Yidhi:- Waxaad Usoo Qaaddaa Ninkan Dawada Ku Jirta Sanduuqa 22aad, Gabadhii ayaana Soo Qaaday, Waxuuna Ninkii Ku Yidhi:- Cab Dawadan!!!.

Ninkii Markuu Cabbay dawadii Ayuu Si Deg-dega U Tufay, Isagoo Yaabana Dhakhtarkii Ku Yidhi:- oo Digtoor Kani Waa Baatroole (Petrol)!!!.

Dhakhtarkii Ayaana Intuu Dhoolacadeeyay Ku Yidhi:- Hambalyo Xanuunkii Waad Ka Bogsatay, Dhadhankiina Wuu Kuuso Noqday, waxaanaad Bixisaa $200, ninkiina Waxuu Ka Baxay Cisbitaalkii Isagoo Murugaysan, Kamase Uu Hadhine Waxuu Balan Ku Qaaday Inuu Dhakhtarkaa Ka Rayn Doono, kana aar-goosan doono!!!.

Maalin Dambe ayuu haddana Kusoo Noqday Cisbitaalkii Dhakhtarkiina u Sheegay In Uu Ku Dhacay Xanuun Xusuustii Ka Qaaday Oo aanu Waxba Xasuusan Karin, Dhakbtarkii Baana Yidhi:- haye, Dawadaada anaa Haya, Waxuuna u Dhawaaqay Kalkaalisadiisii, Waxaanuu Ku Yidhi:- Waxaad ii keentaa Dawada Ku Jirta khaanadda 22aad!!!.

Ninkii oo Xasuusan khaanaddaa Dawada Ku Jirta Ayaa Isagoo Is Ilowsan Ku Yidhi dhakhtarkii:- "Oo Digtoor Khaanadaasi Maanay Ahayn Tii

Batroolku Ku Jiray"!!!, Dhakhtarkii ayaana Ugu Jawaabay:- HAA, Hambalyo Hadda Xasuustii Waa Kuusoo Noqotay, Waxaadna Bixisaa $200!!!.

Ninkii Ayaa Mar Labaad Isagoo Dhacan Kasoo Baxay Cisbitaalkii, Waxuuna Hadda Ku Fikirayaa Siduu Lacagtiisii Uga Soo Ceshan Lahaa Dhakhtarkaasi, walow ay qaadanayso wakhti badan si lacagtiisii ugusoo wada noqoto!!!.

Dhowr Malmood Ka Bacdi ayuu Kuso Noqday dhakhtarkii Isagoo Markan Gashan Muraayad Madow Kuna Socda Ul Iskana Dhigaya nin Indhoole ah, waxuuna U Sheegay dhakhtarkii inuu Indho Beelay Oo aanu Waxba Arkay!!!.

Dhakhtarkii Ayaa Markan Intuu Aamusay Waxooga Fikiray, Waxuubana Ugu Jawaabay, Inaanu Cudurkan Indho La'aanta Aanu Dawo U Hayn, Waxuuna Jeebkiisa Kasoo Saaray Lacag Kuna Yidhi Qaado $50-kan Dollar Oo Iska bax, ninkii Oo Ku Faraxsan Inuu Qorshahan Ku Guulaystay Ayaa Cisbitaalkii Ka Baxay, markuuse Albaabka Marayo Ayuu Lacagtiisii is Yidhi Jeebka Gasho Waxuuse Arkay inaanay Lacagtu ahayn $50 Dollar, ee ay Tahay $5!!!.

Dabadeed isagoo Ka Xanaaqsan Khiyaamada Dhakhtarka Ayuu Kusoo Noqday Kuna Yidhi:- "Digtoore Lacagtan Maaha $50 ee Waa $5, Dhakhtarkiina Intuu Lacagtii Ka Qaaday Ayuu Ku Yidhi:- " Hambalyo, aragaagii waa kuusoo noqday, waxaanaad bixisaa $200, Ninkiina Isagoo Ciilka Haysta Isla Hadlaya Ayuu Cisbitaalkii Ka Baxay Lagana Qaaday isu Geyn $600!!!.

Haddaba Akhristow Yaa Haya Fikrad Uu Miskiinkaasi Ku Soo Ceshan Karo Lacagtaasi oo kale, Bal Aan Eegno Cidda Ka badin karta Dhakhtarkaasi Caqliga Badane!!!.

Noqo qof hal-abuur leh, kuna dadaal sidii aad dunidan/caalamkan aynu ku noolahay wax cusub ugusoo kordhin lahayd, taas oo kuu fududayn doonta xaqiijinta ahdaaftaada iyo riyooyinkaaga!!!.

# SI DEG-DEGA ARRIMAHA HA UGA GO'AAN GAADHIN!!!



Nin odaya ayaa lahaa afar wiil, kadib ninkani waxa uu doonay in uu wiilashiisa afarta ah baro cashar wanaagsan oo nolosha ah, casharkan oo nuxurkiisu yahay in ayna si deg-dega arrimaha uga go'aan gaadhin aragtidooduna noqonin mid Ku kooban oogo-sare!!!.

Sidaa awgeed ninkii odayga ahaa waxa uu u diray wiilashii meel durugsan, fog oo leh geed wayn, mid kastana waxa uu faray in uu geedkaa u soo sifeeyo tilmaamona uga soo bixiyo!!!.

Sidaas oo ay tahay waxa ugu horrayntiiba baxay wiilkii wiilasha ugu roonaa, waxa ay ahayd ama Ku beegnaydna wakhti adag oo jiilaal ah.

Waxa Ku xigay oo isna markiisa baxay wiilkii Ku xigay da'ahaan, wiilka kan ahna waxa ay ugu beegantay Wakhti barwaaqo, waana xilligii guga!!!.

Wiilkii saddexaadna waxa uu baxay wakhti xagaa ah, Halka wiilka afraad oo ahaa kan ugu yarina jaaniskiisu noqday uguna hagaagay xilli dayreed!!!.

Markii mid waliba safarkiisa goonidiisa u soo dhamaystay kana soo guryo noqdeen safaradoodii dheeraa, aabihii waxa uu isugu yeedhay wiilashiisii afarta ahaa, mid mastabana waxa uu ka dalbay inuu sharraxo si waafiyana uu u sheego waxa uu soo arkay?!!!..

Kadib waxa war bixintiisa bilaabay oo ku hormaray wiil-kii ugu roonaa ee safarka ugu hor baxay kuna beegmay xilliga adag ee jiilal-ka ah isaga oo leh " wuxu ahaa geed xun oo qallalan"!!!.

Wiilkii labaad ee xilliga gu'ga safray waxa uu soo gudbiyey warbixin gebi ahaanba ka duwan walaalkiisa ka horreeyey, Isaga oo yidhi:- " wuxuu ahaa geed caleemo leh oo cagaaran"!!!.

Wiilkii saddexaad oo yaaban ayaa isna yidhi:- " waxa daboolay ubaxyo udgoon, qurux badan waxaanuu u muuqday isla markaana ahaa mid soo jiidasho leh aadna u qurux badan!!!.

Wiil-kii ugu yaraa ayaana soo geba-gebeeyey warbixinihii wiilasha afarta ahaa Isaga oo leh :- " Geedka waxa ka buuxay midho"!!!.

Intaa kadib Aabihii waxa uu bilaabay gudo-galayna inuu fasiro oo sharraxo hadalkoodii waxaanuu yidhi:- " waa sax dhammaan maxaa yeelay mid kastaaba waxa uu tegay Wakhti ka duwan kuwa kale", sidaa darteed waxa habboon in aan qofku qaadanin go'aan deg-dega oo aan ka fiirsi lahayn iskana xukmin arrin wakhtigaaba!!!.

Haddiiba aad isdhiibto wakhtiga adag ee jiilaalka, waxaad waayi oo aad khasaari quruxda gu'ga, nolosha rayn-raynta leh & Midhaha dayrta!!!.

Guntii iyo geba-gebadii xikmadu waxay tahay ha yeelin hana ogolaanin in xanuunka iyo dhibka Ku soo gaadhay wakhti cayimani kaa dhigo mid Ku guul daraysta sababtiisana Ku waaya farxaddii wakhtiyada kale!!!.

Nolosha hal dhacdo laga-gama go'aan gaadho, sar-ka xaadisna Laguma qiimeeyo, sidaa darteed Isku day in aad xilliyada ka-kan kaga gudubto go'aan qaadasho adag oo ka fiirsi leh, waxaad Ku gaadhi wakhti wanaagsane, culays kastana fudayd ayaa ka dambeeya!!!.

FG:-Sawirada kor kamuuqdaa waa isla hal goob waxase la qaaday wakhtiyo kala duwan oo sannadka ah!!!.

## INANTII KHAMAARKA LAGU KALA HELAY!!!



Adduunyada Nin noolow maxaa aragti kuu laaban, Aabo u dhashay Dalka Pakistaan ayaa intii uu noolaa, waxa looga helay qamaar Gabadhiisa oo markaas 1-sanno jirtay, kadib markii uu iska bixin-waayey lacagtii qamaarka oo uu ka helay Nin ay wada cayaareen Turub!!!.

Aabahan oo awoodi waayey inuu deynta iska bixiyo, ayaa kula heshiiyay Ninkii Qamaarka ka helay inuu siinayo Gabadha-yar ee u joogta guriga, haddii uu bixin-waayey deynta lagu leeyahay, wuuna ka aqbalay Ninkii codsiga loo soo jeediyay, ninkii Gabadha Turubka ku helay ayaana ogolaaday inuu sugayo illaa iyo inta ay ka qaan-gaareyso, balse Odaygii ayaa geeriyooday!!!.

Haddaba Ninkan Pakistaaniga ah oo lagu magacaabo Haydar ayaa xiriir toos ah la soo sameeyay Hooyada dhashay Gabadha qamaarka lagu kala helay, wuxuuna ku wargeliyay maadaama waqtigan ay jirto 17-sanno in lagu soo wareejiyo Gabadha loona guuriyo sida ugu dhaqsiyaha badan!!!.

Rasheeda Cumrani oo iminka qaan-gaartay iyo Hooyadeed Nooraani ayaa arrin lama filaan iyo yaab ah ay ku noqotay arrintani,waxayna Ninkii kula taliyeen inay siinayaan lacagtii deynta ahayd, balse wuu ku gacan-saydhay wuxuuna wacad ku maray inuu afduubanayo Rasheeda, Hooyadeedna dilayo haddii aan la oofin balantii ay kala saxiixdeen Aabaheed!!!.

Kadib Odayaal degan Magaalada Hyderabad oo ay qissadani ka dhacday ayaa talo ahaan ku soo jeediyay iyadoo la raacayo Xeer-ja-jabka u yaal dhaqanka Dalka Pakistan, in Gabadhan loo guuriyo Wiilka uu dhalay Ninkan oo lagu magacaabo Abdul-Ghani da'diisuna tahay 23-sanno, maadaama Odeyga Gabadha Turubka ku helay uu yahay 65-sanno jir!!!.

Rasheeda Cumrani ayaa codsi usoo jeedisay dhamaan Muslimka Adduunka ku nool iyo Dawladda Pakistan inay usoo gurmadaan oo ay ka bad-baadiyaan guurkan aysan doonayn!.

Intaa kadib Taliyaha Ciidamada Booliiska ee Magaalada Hyderabad-Irfan Bhutto oo wakhtigaa (markii qissadani dhacaysay) gacanta ku haya kiiska dacwadan ayaa balan-qaaday in Dawladda Pakistaan magan-gelyo siin-doonto

Gabadhan dhibanaha ah iyo Qoyskeeda,wuxuuna sheegay inuu dacwad ku soo oogi-doono Mr Haidar iyo Wiilkiisa Abdul-Ghani iyo Odayaashii xukumay in Gabadhan xoog lagu guursado intaba!!!.

Soomaalida ayaa waxa ay ku maah-maahdaa:- (waan baahanahay bakhti looma cuno), Dhib kasta iyo culays kasta oo kusoo wajaha haddana isku day in aad markasta ilaaliso sharaftaada iyo sharafta qoyskaaga, karaamadaada iyo karaamada qoyskaaga, waayo adduun sida lagu waayo iyo sida lagu helo labaduba way fududyihiin balse sharaftaada iyo karaamadaada sida aad ku waayi kartaa way fududahay sidase aad kusoo ceshankarto ayaa aad u adag!!!.

## KOOXDII SHAQADA!!!



Wiil baa soo iibsaday surwaal cusub markaas ayuu arkay in uu ka dheeryahay dherer ahaan, kadib wuxuu Hooyadii ka dalbaday in ay 4cm Kagoyso oo gaabiso, balse waxay u sheegtay in ay mashquulsantahay!!!.

Wuu kayimi walaashiisii waynayd buuna u tagay oo ku yidhi:- ii gaabi 4cm, laakiin iyaduna way ka cudur daaratay Sababtoo ah qadadii bay diyaarinaysay!!!, wuu iska baxay wuxuuna u tagay Dawaarle oo u gaabiyay maradii uu sitay!!!.

Markuu Gurigii kusoo laabtay ayuu wuxuu ku riday kabadhkiisii si uu u xidho subaxa wuuna Seexday, Intaa kadibna Hooyadii baa Xasuusatay codsigii


Inankeeda, waxayna tagtay qolkii wiilka, weyna soo saartay surwaalkii kana jartay 4cm kadibna ku celisay kabadhkii, walaashii Waynaydna markay dhamaysay Hawshii ayay Xasuusatay Dalabkii walaalkeed kadibna qolkiisay tagtay oo way u gaabisay maradii 4cm kabadhkiina ku celisay!!!.

Subaxdii ayuu Toosay isagoo ku Faraxsan surwaalkiisa cusub in uu ku labisto, si kadis ah Ayuuna u arkay isagoo jilbaha jooga oon la xidhan Karin, taas oo uu ka murugooday!!!.

Haddii kooxda shaqadu Shaqeeyaan iyagoon is ogayn wax nidaamsan Ma Suubinayaan ama masamaynayaan, Waxayna ku danbeyndoonaan guuldarro taasi oo imanaysa xattaa iyadoo ay jirto Naf Hurid yo Niyad Wanaagsani!!!.

Ushaqeeya Mid-mid iyo Koox-kooxba idinkoo is og Xaqiijinayana Waxqabad markaas ayaadna guulaysanaysaan Insha Allah!!!.

# INDHEER-GARADKII IYO DIRA-DIRAALIHII!!!



Xilligii ay jirtay dawladdii Cabbaasiyiinta ee xarunta islaamku ahayd Magaalada Baq-daad oo hadda ah caasimadda dalka Ciraaq, ayaa waxa dhacday in nin war xumaan ah xambaarsan uu ula tegay nin aqoonyahan indheer-garad ah, waxaana labadaas nin dhexmartay sheekadan yar:-

Ninkii farriinta siday:- Ma ogtahay waxa aan maqlay ee uu kaa sheegay saaxiibkaa?!!!.

Indheer-garadkii:- Bal horta aamus oo inta aanad wax ii sheegin, waxa aan ku marinayaa saddex tijaabo oo yar-yare!!!.

Waa hagaag ee soo daa tijaabooyinka aad sheegayso, ayuu ku jawaabay ninkii warka siday!!!.

Indheer-garadkii:- ka hor inta aanad waxba iiga sheegin saaxiibkay, waxa fiican in aad marka hore waqti yar qaadato, kadibna aad shaybaadho ama kala shaandhayso waxa aad doonayso in aad tiraahdo ee khuseeya warka aad ii sido!!!.

Tijaabada koowaad:- Si dhab ah 100% ma u hubtaa in waxa aad ii siddo ee saaxiibkay iga sheegay ay run yihiin?!!!.

Ninkii warka xambaarsanaa:- Maya, ee waan maqlay uun, Oo ma hubo!!!.

Indheer-garadkii:- Waa hagaag, markaa si dhab ah uma hubtid run iyo been inuu yahay waa qodob.

Tijaabada labaad:- Waxa aad ii siddo ee aad ka mashaqay saaxiibkay ma wax wanaagsanbaa? Ayuu weydiiyey Indheerad-kii dira-diraalihii!!!.

Ninkii warka xambaarsanaa:- Maya, wax wanaagsan ma aha ee waa hadal xun!!!.

Indheerad-garadkii:- Sidaa darteed, wax xun ayaad iiga keenaysaa saaxiibkay oo weliba aanad hubin inuu run yahay taasina waa qodob.

Tijaabada saddexaad:- Waxa uu xambaarsan yahay hadalka aad saaxiibkay iiga siddo ma wax aniga faa'iido ii leh baa? Ayuu weydiyey Indheer-garadkii haddana!!!.

Wuxuuna ninkii kale ku jawaabay:- Maya, xaqiiqdii wax faa'iido ah kuuma laha!!!.

Indheer-garadkii:- Hagaag, haddii warka aad iiga keentay saaxiibkay aanu ahayn mid run ah, wanaagsan, oo aan wax faa'iido ah ii lahayn, waa maxay danta kuugu jirta in aad iiba sheegto?!!!.

Kadibna ninkii warka siday oo khajilaad ka muuqato ayaa iska noqday isagoo xambaarsan warkiisii!!!.

Sidaa darteed, waxa fiican walaal in aanad ka dhegaysan qofka war kuula yimaada ee weliba jecel inuu kuu sheego wax xun oo uu kaaga sido saaxiibkaa, qoyskaaga, ehelkaaga iyo cidda aad wadashaqaysaanba!!!.

Saddexdan su'aaloodna weydii, waana tijaabo lagula dagaalami karo qofka warka u kala qaada dadka walaalaha ahe!!!

## NIYADDAA SALDHIG AH!!!



Nin oday ah ayaa maalin wuxuu arkay haweenay ilma yar xambaarsan oo ooyaysa, waxayna lahayd:- "I caawi Ilmahan wadnaha ayaa laga hayaa, Qalliin deg-deg ah buu rabaa haddii kale wuu dhimanayaa, Qalliinkana waxaa la yiri waa 1000$ (Kun Dollar) anigana ma heli karo, waa agoon Aabihiina wuu dhintay. Fadlan I caawi.",ninkiina aad buu uga naxay, wuxuuna siiyay lacagtii ay codsatay oo dhan!!!.

Dabadeed Gurigiisa markuu yimi ayuu reerkiisa u sheegay, ka dibna qolkiisa galay, daqiiqado kadibna reerkii oo TV-ga daawanayay ayaa waxay Warka ku arkeen oo ka daawadeen, Booliska oo qabtay Haweenay ilma yar ku qaraabata dadkana lacag kaga qaadata, iyadoo u dambeysay nin ay saaka lacag badan kaga qaadatay war been ah!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

Reerki baa qeylo ku dhuftay oo odaygii u yeeray, waxayna yiraahdeen, “Waa lagu siray, haddaana TV-ga laga soo daayay, ilmahuna wadnaha kama xanuunsanayn ee waa caadi, Islaantuna sidaa ayay ku qaraabataa.”!!!.

Kadib Odaygii wuxuu yiri:- “Alxamdulilaah”, dabadeed Iyagoo yaaban bay yiraahdeen:- "waaba lagu dhacay miyaadan ka xumaanayn?", Odaygiina wuxuu ugu jawaabay:- "Waxaan lacagta u bixiyay in ilmahaa yar badbaado, mar hadduu noolyahay oo caafimaad qabo waa intii aan rabay oo niyeystay"!!!.

Cumar Binu-Khaddaab (RC) wuxuu yiri:- “Waxaan maqlay Rasuulka (SCW) oo leh:- Niyaddaa Saldhig ah (xag Alle (swt) ), mudnaanshaha in qof laga abaalmariyo camalkiisii iyo in kale, qof walbaana wixii uu camalkiisa ula jeedo xagga niyada buu leeyahay!!!.

Wax kasta waxay ka bilowdaan niyadda, haddii qofka niyaddiisu tahay inuu camal wanaagsan oo uu Alle (swt) ugu dhowaanayo sameeyo, dar Allena (swt) wax u sadaqeysto, dadka caawiyo, marnaba ma shalayn karo, ama ma dareemi karo in khasaare soo gaaray ama in la khiyaamay!!!.

Niyaddaa asal ah, Wax kasta aad la baxeysid ama sameynaysid u niyeyso in aad Alle (swt) ugu dhowaanayso, u samee Alle (swt) dartii!!!.

Alle (swt) ha na siiyo Niyad xoogan iyo iimaan sugan!!!.

## DAMACAAGA OO CAQLI HOGGAAMIN WAAYAA WAXLA'AANBUU KU BADAA!!!



Nin maalqabeen ahaa oo xikmad badnaa ayaa isaga oo doonaya in uu tijaabiyo damaca aadamaha waxa uu isugu yeeray beeraleydii deegaankiisa, kadib mid ka mid ah ayuu u sheegay in uu siin doono dhul aad u weyn oo uu beerto!!!, ninkii oo durbadiiba damac weyni ka galay dhul-beereedka weyn ee ninkan maalqabeenka ahi leeyahay ayaa weydiiyey cabbirka dhulka la siinayo!!!.

Kadib waxa uu maalqabeenkii u sheegay in uu dhulkaas dhex lugeeyo, oo illaa halka uu socod kaga gaaro, kadibna uu dib ugu soo noqon karo halkii uu ka dhaqaaqay, in uu ku wareejinayo. waxaana uu u sheegay in shardiga ku xiran in dhulkaa la siiyaa ay tahay oo qura in marka uu istaago halka uu doonayo uu dib ugu soo noqdo halkii uu ka dhaqaaqay inta aanay qorraxdu ka dhicin!!!.

Ninkii beeraleyda ahaa oo aad u faraxsan ayaa socod aad u tallaabo dheerays ah ku dhaqaaqay, waxa uu doonayey in masaafadda ugu fog ee suurtogal ah uu gaaro si dhul weyn uu u helo!!!, arkii uu muddo xawaare ku socday ee uu daalay ayuuna istaagay, oo uu is yiri intaasi kugu filan ee haddaba dib ugu noqo halkii aad ka soo dhaqaaqday.

Waa socodkii uu saaka waaberigii soo bilaabay, oo daal badan iyo gaajaba waa ay hayaan sidaa awgeed marnaba uma suurtogelayso in uu ku socdo xawaare la mid ah kii uu maanta oo dhan uu ku soo socday!!!.

Intii taagtiisa ahayd soo socoy isaga oo ilna kula socda qorraxda ku sii siqaysa godkeeda oo waqtiga ku yar awgeed uu mararka qaarkood moodayo in ay sidii hore ka dheeraynayso qorraxdu!!!, aakhirkii isaga oo talax gabay oo tallaabada aan qaadi karin ayuu soo gaaray goobtii lagu sugayey iyada oo qorraxdii cabbaar sii maqan tahay!!!.

Intii aanu istaaginbana waxaa loo sheegay warka uu iska sii ogaa oo ah in uu sidaa ku waayey dhulkii, waayo waxa uu ka soo bixi kari waayey shardigii ahaa in inta aanay qorraxdu dhicin uu ku soo noqdo halka uu socodka ka bilaabay!!!.

Waa in qofku uu naftiisa ku qasbo in ay qaadato waxa ay awoodi karto, in ay goosato uun waxa ay awoodi karto, iskana jiro in uu damac qaado oo wax aanu awoodi karin uu u hanqal taago!!!.

## WAA BASHAR ADIGA OO KALE AH!!!



Waa habeen jiilaal, waxa jira dheel, dhaxan gamadana ah & qabow daran, derbijiif & danyare faqiir ahina inuu u adkaysto daaye gawsaha isla dhacayo, waxa intaa dheer oo da'aya roob jir ah, dhibicda daruurta ka soo dhacdaa soo marayso kumanaan mitir oo jawi qabow ah barta ay jidh-ka kaga soo hagaagto ee ka qabsataana ka dhigan tahay in talaagad barafa la geliyey!!!.

Dadka qaar waxa ay siteen oo ku soo gaashaanteen dallaayad iyaga oo isaga dhigayey dhibicda roobka ee aadka u qabow, qaar kalena waxa ay miciin sanayeen orod si ay u gaadhaan meel gabbaad ah oo ay ka galaan roobkan, dhaxanta & dheelkan is barkaday!!!.

Jawigan isku darsaday dhaxanta qabow & roobka daadinaya dhibicda qabow, waxa dhex taagnaa nin!!!, ninkaasina ma ahayn mid wax dhaqaaqa samaynaya waxaana uu u taagnaa sida sanamka, waxa uu ku lebisnaa maryo baaliya, gaboobay oo jeex-jeexan, dhaq-dhaqaaq la'aanta ninkaasi aanu samaynaynin wax xarako ah awgeedna dadka qaar waxa ay u maleeyeen in uu yahay sanam ama taallo meesha la qotomiyay!!!.

Ninkan maskaxdiisa iyo maankiisuba waa ay maqan yihiin murugo badanna wuu dareemayaa, illinta ka da'aysa indhihii-su waxa ay ahayd mid diirinaysa dhabanadiisa waxaanuu ku sugnaa xaalad adag!!!.

Sidaas oo ay tahay, xaalna halkaa marayo waxa arkay nin-kii kuna soo baydhay mid ka mid ah dadkii waddada maraayey isaga oo u eegaya si xaqiraada waxaana uu weydiiyey su'aal isaga oo leh :- "MIYAANAD HAYSAN DHAR KUWAN KA WANAAGSAN?"!!!.

Intaa markii uu yidhi ,haddana waxa uu la soo baxay shandada yar ee lacagta lagu qaato isaga oo u dhaqmaaya si isla-weyni & kibir ku jiro waxaanuu yidhi:- “MA WAX AYAAD U BAAHAN TAHAY’’?!!!, ninkiina waxa uu u jawaabay si deggan isaga oo ku yidhi:- "WAXA KELIYA OO AAN RABAA IN AAD WEJIGAYGA KA HOR DHAQAAQDO"!!!

Ninkii wuu dhaqaaqay isaga oo si hoose oo aan hufnaan lahayn ninkii taagnaa ugu leh "WAAD WAALAN TAHAY", ninkiina waxa uu iska sii hoos

fadhiistay roobkii da'aayey isaga oo aan wax dhaq-dhaqaaqa samaynaynin illaa roobkii qaaday "Istaagay"!!!, Intaa kadibna waxa uu u dhaqaaqay xaggaa iyo hotel u dhowaa!!!.

Waxa u yimi shaqaalihii soo dhowaynta, waanu ku qayliyey isaga oo ku leh:- "Bax, Ma fadhiisan kartid, waa ka Mam-nuuc dawarsigu halkan"!!!.

Markii uu intaa yidhi shaqaalihii soo dhowaynta hadalkiina uu afkiisa ka soo wada dhammaaday, ninkii waxa uu si cadho ka muuqato u eegay shaqaalihii soo dhowaynta ee hotelka, waxaanuu jeebka ka soo saaray fure uu ku qoran yahay ( Number 1), Furahani waa mid ka mid ah furayaasha qolalka qaybta ugu wanaagsan hotelka oo kaabiga ku haysa webiga!!!.

Ninkii waxa uu iska sii watay socodkiisa isaga oo fuulay jaran-jarada waxaanuu soo jalleecay ninkii shaqaalaha ahaa isaga oo leh:- Soddon daqiiqo kadib ayaan soo baxayaa baabuurkayga ii diyaari!!!.

Ninkii shaqaalaha ahaa wuu fajacay waxaanay ku noqotay layaab isaga oo leh siday wax u dhacayaan, xattaa qashin layaasha ayaa ka dhar wanaagsan!!!, ninkiina waxa uu iska galay qolkiisii saacad badhkeed kadibna waxa soo baxay nin aan kiiba ahayn!!!, oo ku lebisan Suit qurux badan , ta’i cajiiba & kabo qurux badan oo dhalaalaya, ninkii shaqaalaha ahaana weli waxuu la amakaagsan yahay arrinka ninkan!!!.

Markii uu soo baxay ninkii waxa uu koray baabuur-kiisii oo ahaa nooca loo yaqaan "Rolls-Royce" oo ah mid ka mid ah baabuurta raaxada kuwooda ugu qaalisan, waxaanuu u yeedhay ninkii shaqaalaha soo dhowaynta ka ahaa hotel-ka isaga oo ku yidhi:- Waa Immisa Mushaharkaagu?!!!.

Shaqaalihii: - waa $3000 Mudane!!!.

Ninkii:- Ma kugu filan yahay?!!!.

Shaqaalihii: Maya Mudane!!!.

Ninkii: - Ma dheeri ayaad doonaysaa? macnaha ma in laguu kordhiyo!!!.

Shaqaalihii:- Oo yaan doonayn Mudane!!!.

Ninkii: Dawarsigu miyaanu halkan mamnuuc ka ahayn!!!.

Shaqaalihii:- isaga oo dhibsanaya Haa!!!.

Ninkii:- Hoogiinee, dadka waxaad u kala horaysiisaan una soo kala dhowaysataan sida ay u kala lacag badan yihiin, waxa xumaan ka madhan Allaha (swt) daqiiqado gudohood ku beddelay hab-dhaqankii aad igula dhaqmaysay!!!.

Wuxuu intaa raaciyey ninkii isaga oo shaqaalihii la hadlaya:- "waxaan isku dayaa jiilaal walba inaan tijaabiyo dareenka & dhibka dhaxanta daran iyo qabowga ku dhacaya dadka saboolka ah si aan ula dareemo aniga oo isu dhigaya qabowga & dhaxantaas, idinkana xaggiina qofka aan lacag haysani wax ixtiraama malaha, waar haddaydaan caawinaynin ha xaqirina maxaa yeelay hadalka wanaagsani waa sadaqo"!!!.

Masakiinta & dadka saboolka ah haddii aanad kaalmaynaynin, waxna taraynin, afkaaga & adinkaaga haka nabad galaan, erey san mooyaane ha u quudhin hadal xun waayo waa bashar adiga oo kale ah, taas ayaad adiguna liibaan ku gaadhaysaa If iyo Aakhiroba!!!.

## MAXAA IGA MAQAN!!!



Nin Saalixiintii hore Ahaa Oo Indha Beelay Ayaa La Waydiiyey Wixii Indhaha Beeliyey, wuxuuna yiri:- Aniga iyo Toddoba Carruur ah oo aan Dhalay iyo Xaaskayga ayaa Waxaan Daganayn Meel Miyi ah, Dabadeed Waxaa nasoo Weeraray Col, Waxey Laayeen Reerkeygii Balse Waxaa ka Badbaaday oo keliya Aniga iyo kii iigu yaraa Carruurta oo Lix Bilood jiray!!!.

Ka Dib Waxaan go'aansaday In aan Halkii Colku Nagu Qabsaday Ka Guuro Oo aan Raadiyo Meel aan ku Badbaadno, aniga iyo wiilkaygii yaraana Waxaan Diyaarsanay Sahaydii, Waxaan Rartay Faraskaygii, Waxaan xambaartay Cunugaygii yaraa Ka Dib Waan Socday!!!.

Markaan in Badan Socday ayaan Faraskii ka Degay Canugii yaraana Agtayda Jiifiyay, goobtu Waxay Ahayd Meel Hawd ah Oo Ay Bahaluhu Ku Badanyihiin, Ka Dib Waxaa iga Baxsaday Faraskii, Waan ka Daba Cararay Markaan In yar Daba Orday Ayaana Maqlay Qayladii Canugaygii Markaas ayaan Xagiisii U Soo Cararay, dabadeed Waxaan Ku Soo Baxay Wiilkaygii Oo Waraabe Ruugayo, Subxanallah, waana Badbaadin kari waayey Anigoo Fiirinaaya Ayuuna Hal Mar Laqay!!!.

Ka Dib Faraskiii Xaggiisii Ayaan soo aaday, Muddo ka Dibna waan Gaaray, ka Dib Markaan is iri Qabo ayuu Harraati Wejiga igaga Dhuftay indhahaygiina sidaas ayaan ku Beelay, Alxamdulillaah Ilaahey (swt) Nimcadiisa Wuu ii Dhammays tiray!!!.

Markaasaa Raggii Uu U Waramayey Mid ka Mid ahaa Ku yiri:- Ma adigoo Xaasakaagii iyo Carruurtaadii Iyo Idhahaagiiba Waayey Ayaad Leedahay Ilaahey (swt) Nicmadiisa Ayuu Ii Dhammaystiray!!!, ninkii Idhoolka ahaa ayaana yidhi:- Hadduu Ilaahay (swt) Isiiyey Carrab Aan Mar Walba Ku Xuso iyo Qalbi Aan Mar Walba Ugu Qushuuco maxaa Iga Maqan, Dad Badan Ayaanba haysanine.

Ku shukri nimcada Ilaahay swt ku siiyay ee aad dheertahay dad badan oo kula mid ah, markaas ayaadna noqonaysaa mid dareema deganaansho iyo xasilooni nafsadeed!!!.

**ALXAMDULILLAAH ALXAMDULILLAAH ALXAMDULILLAAH !!!.**

## DADKU WAXA AY DABA SOCDAAN MA-AHA QOFKA!!!



Xilli ay ku beegnayd qarnigii 14-aad ayaa dalka Suuriya tuulo ka mid ah waxa ku noolaa nin maal qabeen ahaa oo la oran jiray Abdalla ibnu-Saalixi, Abdalla waxuu ahaa nin wax bixin badan, tuulada dhanna ninka kaliya ee ay fiirsato ayuu ahaa oo waxii dhib ah loola yimaado, waa uu xallin jiray, dadkuna waa ay jeclaayeen taas oo ka dhigtay xiddiga keliya ee la fiirsado tuuladaas oo dhan, tuulada dadka ku nool badankooduna ninkan maalqabeenka ah ayey shaqaalo u'ahaayeen!!!.

Ninkii maalin-maalmaha ka mid ah ayuu waxuu kasoo galay safar, kadib isagoo aad u daallan ayuu waxuu damcay in uu seexdo ama jiifsado markaasaa isla markiiba waxa gurigii soo galay nin xaaskiisa ay ka Umul raacday oo geeriyootay isla markaana aanu haysan wax dhaqaale ah oo uu ku aaso dabeedna waa uu siiyay!!!.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

Abdalla oo damcay inuu aado sariirtiisa ayaa waxaa misana soo galay isla markiiba rag ka tirsan Odayaasha tuulada, waxaana ay ka lahaayeen dan ku saabsan dhaqaale waana uu u fuliyay!!!.


Waxaa haddaba dhacday in ninkii maal-qabeenka ahaa ee Abdalla ibnu-Saalixi uu Gacmaha kor ugu taagay Alle (swt) isagoo leh:- ILLAAHAYOW dadkan waa ay i dhibeen ee Rabbiyow culayskooda iga dul qaad!!!.

Ninkii waa uu seexday markii uu soo kacayna waxa loo sheegay in beerihiisii la gubay Dukaamadiisii Dahabka iyo kuwii cadarada ahaa oo dhanna la qaatay oo Qolo soo duushayna ay sidaas yeeleen, Abdalla ibnu Saalixi ninkii taajirka ahaana laba maalin ka dib wax kale iska daaye waxuu waayay qof xattaa salaan ugu soo leexda isagoo dariiqa maraya!!!.

Dadku waxa ay daba socdaan ma aha qofka ee waa Maalka ama Xukunka , waayo qof kastoo hadda la daba yaaco bal fiiri in horay loo daba yaaci jiray inta aanu dhaqaalaha helin ama xukunka aanu qaban!!!.

Ku dedaal sidii aad mar-walba mansab iyo maalba ugu raalli-gelin lahayd keliyaata Allah swt, una tabco cadawgaaga iyo khayrkaaba adi oo Allah swt uun raalli-gelinaaya, noqona mid wanaag iyo samafal kaga dhex-muuqda bulshada uu lanoolyahay iyo bulshada caalamkaba!!!.

## DADKU INTOODA BADAN WAXAY ARKAAN XUMAANTA OO KELIYA!!!



Maalin ayaa waxa dhacday in nin Macalin ah oo arday wax u dhigayey uu soo qaaday sabuurad wayn oo Cad, waxaanuu ku dhejiyay gidaarka ama derbiga, kadib bartanka sabuuradda ayuu ku sameeyay dhibic madow, markaasi ayuu ardaydii weydiiyay:- maxaad gidaarkan ku aragtaan?!!!.

Kadib dhammaantood waxay ku jawaabeen dhibic madaw!!!.

Hadda-na wuu ku celiyay dabadeed kolba mid ayaa isku daya oo yiraahda:- dhibic madow!!!.

Markii ay halkaasi dhaafin waayeen ayay ka codsadeen Macallin noo sheeg?, Dabadeed Macallinkii oo yaaban ayaa ardaydii ku yiri:- gidaarka waxa ku dhejisan Sabuurad Cad oo saafi ah, Laakiin Idinku waxaad arkaysaan dhibicda yar ee madow oo keliya!!!.

Sidaasi ayayna aadamiga badankiis xumaan yar u wada arkaan iyagoo wanaagga faraha badan indhaha ka lalinaaya ama ka duwaya!!!.

Haku mashquulin raadinta ceebaha yar-yar adiga oo heli karaya wanaagyo farabadan oo aad faafiso!!!.

# QAWSAARKII ADHIRAACA AHAA IYO NIMANKII SOCOTADA AHAA!!!




Nin qawsaar ah oo ido ku raacayey saxaraha dalka Sacuudiga ayaa waxa u yimid niman gaari ama baabuur watay, waxayna ka codsadeen inuu hal neef ka iibiyo, wuxuuse u sheegay in uusan isagu lahayn xoolaha oo uusan ka iibin Karin!!!.

Nimankii ayaa waxay ku yiraahdeen ninkii:- ninka xoolaha iska leh wuu lumay ku dheh, markaasuu uu ugu jawaabay:- llaahay (swt) baa ii jeeda, xittaa haddii aad i siisaan Laba Boqol oo kunna ma iibinayo!!!.

Kadib waxay weydiiyeen:- maxaad raaxo iyo nolol ku heysataa xoolahan aad raaceyso, kolkaas ayuuna ugu jawaabay:- xalaal inaad shaqaysato ayaa raaxo iyo nololba ah!!!.

Bal ka warran dadka Alle (swt) dhaqaale & Madaxtinimo siiyay oo haddana ummaddii dhacaya, xaqoodiina cunaya, hantidii lagu ammaanaystayna kala boobaya, iska daa ammaano ay xafidaane suuqa iyo warbaahinta lasoo istaagaya in ay laaluush iyo wixii lamid ah qaateen!!!.

Garashada, damiirka, naxariista iyo Alle (swt) ka cabsigu ma ahan wax qofku uu aqoon ku kasbado, balse waa Xikmad iyo iimaan Alle (swt) bixiyo, waana in aad taas aaminsanaataa, rumaysnaataana, ALLAHNA (swt) waxaynu waydiisanaynaa in uu inaka yeelo kuwo uu arrintaa iyada ah ku mannaysto!!!.

## SIR MAQABE ALLAA USAHAN AH!!!



Nin beeraley ah oo sabool ah ayaa ka safray tuuladii uu deganaa, waxaanuu aaday magaalada wayn, ugana sii gudbay halka uu danta u lahaa oo ahayd suuqa dhexe, si uu ugu iib geeyo subag nooca burcadka loo yaqaano ah, subagaas burcadka ah oo ay lushay oo ay samaysay xaaskiisu, burcad-kaasina waxa uu u samaysnaa qaabka goobada ama sida kubbad wayn, xabbad kasta oo burcadkaa ka mid ahna qiyaasteedu waxay ahayd 1KG!!!.

Ninkii Beeraleyda ahaa waxa uu dukaan-laha ka iibiyey burcadkii waxaanuu ka soo iibsaday wixii ay qoyskiisu magaalada uga baahnaayeen, kadibna waxa uu kusoo noqday tuuladiisii, ninkii dukaanka lahaana waxa uu bilaabay in uu burcadkii geliyo kuna kaydiyo talaagadda, Intii uu waday howshaana waxa ku soo dhacday maskaxdiisa inuu horta iska miisaamo goboladan burcadka ah, Kolkii uu

miisaamayna waxa uu ogaaday in xabbaddii burcad ahba miisaankeedu yahay keliya 900G, iyaga oo dhamaantoodba noqday isku miisaan!!!.

Toddobaadkii xigay, sidii caadada ahayd waxa yimi soona safar tegey Ninkii beeraleyda ahaa, Afaafka hore ee Meheradda markii uu soo istaagaybana waxa qaylo kala hortegay oo ku qaabilay ninkii dukaan-laha ahaa ee uu macmiilka u ahaa isaga oo leh:- "Dib dambe kuula macaamili-maayo waayo waxaad tahay Khiyaa-noole, dhammaan burcadkaad iga iibisay miisaankoodii waxa uu noqday Keliyaata 900G, Adna waxaad ii xisaabisay in ay yihiin 1KG Oo dhammays ah!!!.

Ninkii Beeraleyda ahaa ee saboolka ahaa madaxa ayuu ruxay isaga oo aad uga xun arrintaa iyada ah, waxaanuu u hal celiyey ninkii dukaan-laha ahaa kuna yidhi:- Ha iga filan Male Xun ama filasho aan wanaagsanayn, Dad saboola ayaannu nahay mana haysanno waxaanu ku miisaanno yacni KG (Kiiloo garaamka), sidaa darteed Marka aan kaa qaato Kiiloo sonkor ah waxaan kefedda dhinac saaraa kiiloogaa sonkorta ah, kefeda dhinaca kalena waxan saara Burcadka!!!.

Waxa uu xukumay xukun la'aan., Isaga oo marka hore miisaan dhiman wax kaga iibiyey, Isla miisaankii dhinnaa ee uu wax ku gaday ayaana loogu soo miisaamay!!!, Qof kastaabana waxa uu goosanayaa/guranayaa midhaha geedka uu beerto, taasna markasta niyadda ku hay!!!, Qofka daacadda ahina marka uu intii awooddiisa ah sababtii layimaado, Allahna (swt) talo saarto, marna lagama yaabo in uu khasaaro ama uu hungoobo haddii aanu isagu faham xumaysan.

## WAKHTI WALBA AHAW MID DIGTOON!!!



Xanuun ayaa kusoo booday gabadh yar, kadib aabaheed ayaa ula cararay isbitaalka, markii lageeyay waxa lagu xidhay oksajiinkii wayna rafanaysaa xanuunka dartiisa, Dhaqtarkii intuu waraaqad uqoray ayuu Ku yiri aabihii dhalay gabadha orodoo meel hebla tag kanasoo qaad dawadan warqadda Ku qoran, Aabahiina wuu baxay asagoo wal-walsan isna dhahaya armay kaa dhimataa gabadhaadu.

Kadib Maxaa dhacay, Aabihii maba soo laaban, dhaqtarkii yaab iyo waar maxaa Ku dhacay duqii ayaa kasoo hadhay, mid kale ayuuna diray intuu waraaqad uqoray!!!.

Kii sidii uu usocday meeshii ayuu tagay wuxuu waydiiyay:- makuu imaaday nin aan usoo dhiibnay warqad, “Maya’’ ayaana layiri, kadib ayuu kasoo qaaday daawadii, dhaqtarkii ayuu ukeenay gabadhiina waa lasiiyay wayna soo caafimaaday, gabadhii oo faraxsan baana tiri:- aaway aabahay, dhaqtarkii ayaana yiri illaa shalay maanu arkin, guriga halaga fiiriyo ayayna tiri.

Gurigii markii laga eegay saa waaba mayd guriga Ku dhaxjira, hala rogo aya layiri saa waaba gabadha aabaheed, qarracan, waa laqaaday waa ladhaqay waana laduugay dadkii duugayay ayayna Ku jirtay gabadhiisa!!!.

Gunta iyo Gabagabadii Duqa iyo gabadha yaa geerida u dhawaa?!!!.

Markaynu jawigan sare ee iinsaanka aragtidiisa eegno jawaabtu waa Gabadha waayo ayadaa isbitaal Ku jirtay naftuna qaad qaadaysay, Duquna wuxuu islahaa badbaadi gabadhaada lkn war uma haynin in asagiiba goor dhaw dhimanaayo!!!.

Akhyaarta geeridu meel dheer majirto, haddii nafsadaadu kaa dhaadhiciso waxaa tahay dhalin-yaro markaad gaarto duqnimo ayaadna usoo jeedsan cibaadada Allaah (swt) Ee hadda iska tumo waxaad doontana samay, ogow inta geeridu kuusoo jirto cidna kuuma sheegine!!!.

Bal kaba soo qaad duqnimaad Ku dhimanaysaa, ma dhalin yarnimadaada ayaad isbaraysaa raaxo, geedku markuu yaryahay ayaa dhankii ladoono looleexin

karaa mar hadduu waynaadose qalaas waa sidii uu uwaynaaday lamana leex-leexin karo!!!.

Adigu markaad yartahay haddaadan isbarin cibaadada Alle (swt) iyo wanaagga raacidda Rasuulka (scw) makula tahay waynaantaada inaad isbarayso?.

Geeridu meel fog ma joogtee Digtoonaada, waxaad Ilaahay (swt) la hortagi lahaydna diyaarso illeen qof walba Ilaahay (swt) ayuu hor istagayaa barri'e, walibana si toos ah ayaad iskula hadlaysaan turjumaanna majiro, turjumaan majiro, turjumaan majiro!!!.

## NINKII KU BADBAADAY SALAANTIISII WANAAGSANAYD!!!



Waxay ahayd dhammaadkii saacadihii shaqada ee wershadda barafka, shaqaalihiina waxay u xirxirteen inay rawaxaan, kadib cillad farsamo ayaa gudaha ka dhacday, nin kamid ah shaqaalihii ayaana ku noqday gudaha si uu u xalliyo!!!.

Kolkii uu dhammeeyay waxay ahayd xilli dambe oo albaabadii la wada xiray, nalkiina la damiyay, kadib wuxuu ku go'doomay gudaha qaboojiyaha wershadda iyadoo hawo & iftiin midna uusan jirin!!!.

Wuxuu ka cabsanayay in Qabri baraf ah ku sameysmi doono oo uu meesha ku dhiman doono, illayn habeenkii ayay warashaddu barafka samaysaaye!!!.

Saacado kadib, wuxuu maqlay qof albaabka furaya, mise waardiyihii Amniga oo ahaa nin Mareykan ah ayaa soo galay isagoo toosh watta, wuxuuna ku caawiyay inuu ka soo baxo meeshii!!!, markay banaanka yimaadeen ayuuna ninkii weydiiyay:- sidee ku ogaatay inaan gudaha ku jiro? Yaase kuu sheegay?!!!, waardiyihii ayaana yiri:- Qofna iima sheegin mudane, ee qeybtan waxa ka shaqeeya ilaa 50 qof, adna waxaad tahay qofka keliya ee igu salaama subixii “Assalaamu Calaykum” Fiidkiina i yiraahda “Assalaamu Calaykum”, Saaka waad igu tiri laakiin rawaxaadii igumaad oran!!!, taasina waxay igu dhalisay shaki ah inaad soo baxday iyo in kale sidaas darteed ayaan usoo galay gudaha warshadda!!!.

Wuxuu yiri ninkii la bad-baadiyay:- Marnaba ma moodayn in ficil yar oo qof aan salaamo uu unoqon doono badbaado naftayda!!!.

Ugu Dambayn xusuuso inaad si wanaagsan u salaanto, ulana dhaqanto markaad qof ama dad la kulanto ama iska soo hor baxdaan, waayo dabcan marnaba ma garan kartid inay sidoo kale kuugu shaqayso noloshaada si mucjiso ah!!!, Ogowna salaantu dadka kale ayay ku jecleysiisaa qalbigoodana kuu xaartaa.

**Badi salaanta iyo bariidintaba!!!.**

## BEDDEL QAABKA IYO HABKA AAD WAX UWADDO MARKA AAD ARAGTO IN AANAY USOCON SIDII AAD UGU TALA-GASHAY!!!




Nin indhoole ah ayaa waxa uu fadhiistay jaran-jarada mid ka mid ah cimaaradaha "fooqyada " magaalada uu ku noolaa, isaga oo hortiisa dhigay koofiyad uu xidhnaa, koofiyaddaa waxa agteeda yaalay boodh uu ku qoran yahay:- " Waan indho la'ahay fadlan i caawiya"!!!.

Intaa ka dib waxa indhoolihii hortiisa soo maray nin ka mida ragga wax xayaysiiya isaga oo dul istaagay, dabadeedna waxa uu arkay in koofiyadiisa ay ku jiraan dhawr shilin oo keliya waxaana uu ugu kordhiyey shilimo kale!!!.


Ninkii waxa uu qaatay boodhkii horyaalay ninka indhoolaha ah isaga oo aan wax ogolaansho ah weydiisan, waxaana uu ku soo qoray qoraal ama weedh kale isaga oo soo celiyay isla markaana boodhka dhigay halkiisii ka dibna iska dhaafay!!!.

Indhoolihii waxa uu dareemay in koofiyadiisi shilimo & lacagi ay buuxisay, waxa kale oo uu dareemay maqlayna in is-beddel jiro!!!.

Haddaba si uu u ogaado isbedel-ka dhacay waxa uu waydiiyey mid ka mid ah dadkii meesha marayey waxa boodhka ku qoran, kadibna qofkii waxa uu akhriyey qoraalkii ku qornaa boodh-ka oo u dhignaa sidan:-**" waxa aynu ku jirnaa xilligii gu'ga, hase-yeeshee anigu ma awoodo inaan arko quruxdiisa"!!!, q**oraalkan ayaana noqday sirta isbedelka dhacay ee indhooluhuna dareemay!!!.

Beddel qaab-ka & hab-ka aad wax u waddo, marka aad aragto inaanay u socon sidii aad ugu talo gashay, haddiise aanad saa yeelin waxaad ku danbaynuun guul-darro aad sii ogayd!!!.

## HUBSIIMO HALBAA LASIISTAA!!!




Nin safar ah oo doonayey in uu Markab raaco ayaa maalin-maalmaha ka mid ah wuxuu yimid dekeddii markabku ka bixi lahaa, saacad ayaa ka dhinayd wakhtiga ambabaxa, saacaddii ka dhinayd ambabaxa markabka ayuu ninkii wuxuu eegay meel uu ku sii nasto inta doonidu diyaar garoobayso, wuxuuna soo qaatey Buug uu akhristo iyo waxyaabo macmacaan ah oo uu cuno oo Buskud ka mid yahay!!!.

Buuggii ayuu akhris ugu dhaqaaqay lugaha inta uu isa saartey ayuuna hadba eegayaa saacadda, laakiin sheekada buugga oo xiiso lahayd awgeed horey ayuu indhaha ugu celinayaa akhriska!!!.

Ninkii geeskiisa waxa soo fariisatey Haweenay iyaduna Markabka doonaysa inay raacdo, waxay la soo baxday Joornaal ay akhrisato iyadoo sidoo kale horey u soo gadatey baakad buskud ah!!!.

Isha uun ayaa la iska eegayay, qof kastaana wuxuu dhawrayaa muddada ka dhiman safarka Markabka, saacada ayaana isha lagu xadayaa!!!.

Waa dad safar iyo duni kale ka fikirayee waxa la ruugayaa buskudkii, ninkii wuxuu eegayaa haweenayda xageeda wuxuuna niyada iska leeyahay "Iimaanka ALLE kaa qaad, tani maxay ahayd, iimaan la'aa, iyadoon i waydiisan fasax iyo ma cuni karaa odhan ayay buskadka qamta ku haysaa"!!!.

Ninku wuu iscelcelinayaa, waxaana ka soo dhaw in uu qaylo afka ku dhufto oo cannaanto haweenayda, laakiin xoogaa waa iscelcelinayaa wuxuuna isagoo hadba neef tuuraya iska sii wataa akhriska buuggiisa, Haweenayduna ninka is gubaya ee caro darteed la qarxi raba dan iyo heello kama lehe, hadba hoosta ayay isha uga xadeysaa!!!.

Baakaddii buskudka ahayd illayn laba qof ayaa raamsanaysee waxa ku soo hadhay hal xabbo, ninkuna wuxuu taagan yahay "tani armay xittaa xabadda buskudka ah afka gashataa", Isagoo isla hadalkii hoose ku sii jira ayaana haweenaydii xabbadii buskudka ahayd ee ugu dambaysay laacdey!!!.

Ninkii waxay ka gaartey meeshii ugu dambaysay in uu hadlo ayuuna damcay waase is celiyay, haweenaydii xabbadii buskudka aheyd ayey inta kala jebisay cadkeedii afka gashatey, cadkii kalena baakadkii ku celisay!!!, ninkiina jabkii buskudka ahaa ayuu dafay isagoo is leh "Tani wax reebi maysee jabkan adigu jajabso", saacaddii markabka la raaci lahaa ayaana la gaaray qof kastaana wuxuu horey u sii qaatay shandaddiisii iyo wixii kale ee alaab ahaa ee uu watay!!!.

Markii markabka oogadiisii la tegay ee ninkii uu fadhiistay kursigiisiina wuxuu ku arkay boorsadiisa baakaddii buskudka ahayd ee uu soo iibsadey, waa baakaddii uu islahaa haweenaydii ayaa kula cunaysay!!!, wuxuuna ogaaday in baakadda buskudka ah ee maanta oo dhan uu daliigayay ay ahayd tii haweenayda ee aanay ahayn tiisa, isla markaana ay haweenaydu ahayd qof deeqsiyad ah oo aan waxba ka oran ninka iska gacmaysanaaya baakaddeeda buskudka ah, waliba xabbaddii ugu dambaysay inta kala jabisay jabkii ay cuntay ma ahane kii kale ku celisay baakadka si uu ninku u cuno!!!.

Qissadan waxaan ka dhadhansan karnaa laba arrimood, waa tan koowaade sida ay muhiim u tahay in qofku uu wax hubsado, is dajiyo uusanna deg-degin, iyo tan labaad oo ah deeqsnimada qofku inay tahay wax ALLE (swt) ku beero qofka oo aanay ahayn iska yeel-yeel iyo halagaa sheego!!!.

## HILIBKII DABKU KARI WAAYAY!!!



Suuqa ayuu uga doonay xaaskiisa hilib ay cunaan, kadib hilibkii markuu soo iibshey isagoo jidka soo socda ayaa La Aqiimay salaaddii, dabadeed masaajid ka ag dhowaa ayuu galay isagoo hilibkiina sita si uu ugu tukado salaadda!!!.

Salaaddii markuu soo dhammaystay ayuu hilibkii soo qaatay gurigiisiina usoo dhaqaaqay, xaaskiisii ayuuna u dhiibey hilibkii si ay u kariso, dheriga ayayna biyaysay hilibkiina ku riddey dabka ayayna saartay.

Dhawr saacadood ayay ka maqnayd, kaddib ayay usoo noqotay hilibkii, mise waxaad mooddaa sidii in aanay dabba saarin oo isma bedelinba, way yaabtay Xaajigeeda ayayna u yeedhay una sheegtay sida wax u dheceen!!!.

Wuxuu xasuustay inuu masaajid la galay hilibka wuuna naxay, wuxuuna is yidhi armaad khalad samaysay, wuuna soo orday wuxuuna u tegey Iimaamkii masaajidka, qisadii ayuuna usheegay laakiin imaamkii wax aanu filanayn ayuu ugu jawaabey, wuxuuna ku yidhi:- ( Salaadda markaan ku jiray ayaan Ilaahay (swt) ka baryey inaanay Naartu korkiisa taaban dhammaan inta masaajidka ku jirta)!!!.

**SUBXAANA-ALLAH=SUBXAANA-ALLAH=SUBXAANA ALLAH!!!**

Waxa jira wakhtiyo ducadu ay tahay mustajaabah ama la aqbalo, wax kasta oo Rabbi (swt) laga baryo ama la waydiistona aan lasoo celin, wakhtiyadaa oo ay kamid tahay xilliga uu qofku Ilaahay (swt) hortaaganyahay ee uu salaadda ku jiro, walaw ay jiraan shuruudo la rabo in uu qofku marka hore buuxiyo si ducadiisu ay unoqoto mustajaabah ama mid la aqbalo!!!.

Marnaba haka caajisin baryada Rabbigaa swt iyo waydiisashada baahiyaadkaaga oo ay ugu horrayso Raalli-ahaanshihiisu swt, rajeena aqbalka dalabkaaga, adigoona ku dedaalaya buuxinta shuruudaha aqbalka ducada ee diinteenna suuban ku sugan.

# HADDII AAN EMAIL SAMAYSAN LAHAA WAXAAN NOQON LAHAA SHAQAALE NADIIFIYA MUSQULAHA SHIRKADDA MICRO-SOFT!!!



Wuxuu ka mid ahaa koox Shaqadoon ah oo Wareysi shaqo la xiriirta Nadaafada u gashay Shirkadda Microsoft oo laga leeyahay dalka Mareykanka kuna caan baxday sameynta Barnaamijyada ka shaqeeysiiya kumbuyuutarada.

Madaxa Shaqada iyo Shaqaalaha ayaana u sheegay inuu ku guuleystay shaqada, wuxuuna ka codsaday inuu u reebo Email-kiisa si ay ugusoo diraan Warqadda heshiiska Shaqaalenimada ugalana soo socodsiiyaan waqtiga uu shaqada bilaabayo, shaqadoonihiina wuxuu u sheegay inuusan laheyn Email uusanna adeegsan Karin kumbuyuutarka, taasina waxay sabab u noqotay inuu sidaa ku waayo shaqadaas, Irridka shirkadda Microsoft ayuuna kasoo baxay isagoo murugeysan,

waxuuna ka fikirayay siduu ku heli lahaa shaqo uu ku maareeyo nolol maalmeedkiisa!!!.

Dabeedna isha ayuu ku dhuftay Dukaan lagu iibiyo nooc khudradda ka mid ah oo la yiraahdo Strawberry-ga oo ah miro yar-yar oo guduudan, kadib lacag dhan $10 oo uu heystay ayuu ku iibiyay 5-Kiilo oo Strawberry ah deetana wuxuu bilaabay inuu ku wareejiyo waddooyinka, Nasiib wanaagna 2-Saacadood gudahood wuu dhammeeyay wuxuuna ka helay Lafihiisa iyo $10 oo faa'iido ah!!!.

Haddana mar 2-aad iyo mar 3-aad ayuu sameeyay sidaas oo kale, nasiib wanaagna wuxuu habeenkii gurigiisa ku laabtay isaga oo haysta lacag dhan $ 60!!!.

Maalinkaa wixii ka dambeyay wuxuu goostay inuu ka xoroobo fikirka Shaqaalenimada, iyadoo uu xooggiisa isugu geeyay siduu kusii horumarin lahaa shaqadan cusub, wuxuuna shaqo ka dhigtay inuu maalin waliba Strawberry ku wareejiyo wadooyinka Magaalada, galab kastana wuxuu gurigiisa ku laaban jiray isagoo heysta in ka badan Saddex Jibaar Lacagtii uu Suuqa lasoo galay Subaxaas!!!.

Sannad ka dib wuxuu helay Baaskiil kaas oo uu ku wareejin jiray Strawberry-ga, markii adeeggiisa la bartayna wuxuu samaystay Gaari macaamiishiisa dalabaadka ugu geeya Guryahooda, Shan sanno ka dibna wuxuu noqday Milkiilaha mid ka mid ah Sharikadaha ugu caansan Mareykanka ee laga dalbado Cunnooyinka diyaarsan!!!.

Ninkani Sannado ka dib wuxuu u tegay shirkad Ceymis, isaga oo rabo inuu ka diiwangeliyo shirkaddiisa si ay ugu fududaato kasoo kabashada marka ay dhacaan musiibooyinku, kadib haddaba waxa dhacday in wakiilka Sharikadda Ceymisku weydiiyay Email-kiisa si uu ugu diro Warqadaha Heshiiska, balse wuxuu u sheegay inuusan laheyn Email, uusanna aqoon sida loo isticmaalo kumbuyuutarka, wakiilka Shirkadda Ceymiska ayaana kadib ku yiri:- oo siday kuugu suura-gashay inaad dhisto Sharikaddan baaxadda wayn, adiga oo aanan laheyn Email lagaala soo xiriiro aana aqoon sida loo isticmaalo kumbuyuutarka?!!!.

Haddaba, wuxuu siiyay jawaab aad u caan-baxday oo ahayd:- Hadddii aan Email sameysan lahaa, waxaan ahaan lahaa Shaqaale nadiifiya Musqulaha shirkadda Microsoft!!!.

Haddii dhib, mushkilad iyo caqabadi kusoo wajahdo kaana hor istaagto bar aad tilmaansanaysay, ha noqon mid ka murugooda ee dheh:- Allahayow adigaa og sida khayrku iigu jiro ee iwaafaji, waayo waxa laga yaabaa in arrin adigu aad uhaysato in aad ku guuldarraysatay kuna qasaartay uu sidaas khayrku kuugu jiro!!!.

**KA WAX-WALBA OGINA WAA ALLAH (SWT)!!!.**

## KEENNEE XOOG BADAN!!!



Wiil ayaa walaashiis iyo labadiisii waalid ugu soo galay Guriga dhexdiisa, gaar ahaan qolka fadhiga kadibna intuu beegsaday Gabadhii ayuu Indhaha kaga daboolay Gacantiisa isagoo ku yiri:- yaa xoog badan aniga iyo adiga?,

Walaashiis ayaana ku Jawaabtay aniga ayaa xoog badan!!!.

Haddaba wiilkii oo la yaaban Jawaabta kaga timid walaashiis ayaa mar Labaad iyo mar Sadexaad ku celceliyay:- yaa xoog badan Labadeenna waqti xaadirkaan ama iminka?!!!.

Gabadhii weli kama baaqsan in ay tiraahdo aniga ayaa xoog badan, Cajiib, wiilkii oo libinta ama guusha loo diiday ayaa Gacmahiisa ka Qaaday indhaha walaashiis una dhaqaaqay Albaabka dhankiisa isagoo dib u soo Milicsaday walaashiis kuna yiri:- imminka yaa xoog badan aniga iyo adiga?, gabadhii ayaana waxa ay tiri:- adiga ayaa hadda iga xoog badan!!!.

Si kastaba wiilkii oo la ashqaraaray Jawaabta ay walaashiis bixisay ayaa mar kale dib u weeydiiyay sababta aysan goor hore u dhihin waad iga awood badan tahay xilligii uu Indhaha kaga daboolay Gacantiisa?!!!, gabadhii oo sharraxaad ka bixinaysa farqiga u dhaxeeya Labada xaaladood ayaana Jawaabteeda ku bilawday:- Markii aad Indhaha iga saartay Gacmahaaga waxaan ku taagnaa Dhabarkayga waxaana cugsanaayay Labadaada Gacmood oo taageero fiican siinaayay Garbahayga, Laakiin Markii aad iga fuqday oo aad iga dheeraatay waxaan noqday Qof daciif ah oo tabar daran adiga la'aantaa!!!.

Si kastaba waxaa xaqiiq ah in walaalaha wada dhashay rag iyo Dumarba aysan kala maarmin, gaar ahaan Gabadha leh walaal Jecel oo xoojiya waxa ay mar weliba noqotaa tan ugu sarraysa Hablaha ku nool Dunida oo dhan waayo waxa Afarteeda dhinac ku gadaaman darbi ay adag tahay in si fudud looga soo tallaabo!!!, dadka Soomaaliyeed ee walaalaha ahna dhammaantood waa muhiim in ay sidaas oo kale isu jeclaadaan isuna garabsadaan.

**ALLOW UMADDA MUSLIMIINTA IYO QOYSASKOODABA DHEXDOODA JACAYL IYO KALGACAL KUBEER!!!.**

## KA DIGTOONOW MALAHAAGA!!!



WAxa uu ahaa Nin Oday ah oo aad looga danbeeyo Farshaxanka iyo Qurxinta kaasi oo ay Shaqadiisu ahayd inuu Nashqadeeyo Looxa kuna xardho Rinji kala Nooc ah dabadeedna u iib geeyo Suuqa si uu Nolol Maalmeedkiisa uga soo dhacsado.

Haddaba Maalin-Maalmaha kamid ah Odaygii farsamo yaqaanka ahaa waxa u yimid Nin Faqiir ah kana Mid ah dadka Tuulada degan isaga oo ku yidhi:- adiga waxaad Shaqadaada ka xoogsataa Lacag badan ee waa Maxay sababta aadan u caawin dadka Saboolka ah ee Tuulada ku Nool?, ninkii oo hadalkiisa sii wata ayaana waxa uu yidhi:- bal eeg Kawaanlaha aan haysan xoolo badan ee Maalin kasta Qaybiya Hilib uu ugu talo galay inuu ku quudiyo dadka Masaakiinta ah halka adigii

ugu dhaqaalaha roonaa tuulada aad isku koobtay Lacagtaada iyadoo aysan Jirin Qof aad kaalmo u fidisay!!!.

Ninkii Odayga ahaa oo aan wax Jawaab ah u celin Ninkii u yimid ayaana intuu si daggan u eegay dhoola caddeeyay isaga oo aan Afkiisa u kala furin wax hadal ahna aan la wadaagin!!!.

Si kastaba ha ahaatee ninkii Faqiirka ahaa oo la yaaban xaaladda uu la kulmay ayaa waxa uu dib ugu laabtay Tuuladii si uu dadka Deegaanka ah ugu sheego dhacdada lama filaanka ah ee ka Qabsatay Odayga, Isagoo kadibna iskugu yeedhay dadkii Tuulada oo uu Dhegahooda ka buuxiyay xumaanta Odayga iyo heerka uu ka gaaray Bakhiilnimada taasi oo horseeday takoor ay dhammaan dadkii kula kaceen Odaygii Miskiinka ahaa ee aan waxba galabsan oo xittaa salaantii laga Qaadi waayay!!!.

Waqtigu waa Mid is gura’e, Muddo kadib waxa dhacday in Ninkii Odayga ahaa uu xanuunsado iyadoo aysan Jirin cid la socota ama ka war Qabta Marxaladda uu ku sugan yahay waayo goor hore ayaaba dadkii Deegaanka ahaa loo gudbiyay ceeb uusan lahayn Odaygu, waana Midda Maanta sababtay in Odaygu uu daryeel la’aan ugu dhinto Gurigiisa!!!.

Mar haddii Odaygii uu dhintay Maantaba waxa la ogaaday xaqiiqda dhabta ah, oo tolow maxay tahay!!!.

Waxa Meesha ka baxay oo la waayay Hilibkii uu Kawaanlahu siin Jiray dadka Fuqarada ah, waxaana lagu soo xoomay Kawaanlihii si loo weeydiiyo arrinta hakisay Hilibkii uu Masaakiinta ugu deeqi Jiray, balse waqti xaadirkan dadkii waxa ay ku baraarugeen Jawaabta uu Kawaanlahu bixiyay isaga oo tibaaxay in Ninkii Hilibka u iibin Jiray Masaakiinta uu Geeriyooday sidaas daraadeed ay kaalmadii ka Joogsatay!!!.

Ugu dambeyntii Nuxurka ku gadaaman qisadan waxa uu yahay in aan la xumeyn Malada aad Qofka ka Qabto, xukminta arrimahana aan lagu deg-degin fiirsasho dheer kahor, waayo waxa laga yaabaa waxa Jira dad badan oo kuula Muuqda kuwa wanaagsan balse ay gadaal ka riixayaan dad samo falayaal ah oo aan dooneyn in Magacooda la shaaciyo ama la ogaado, walow waxqabadkooda la ogaado Marka ay Geeriyoodaan Kadib!!!.

## AKHLAAQDA WANAAGSAN!!!



Nin Maalqabeen ah ayaa Nin Faqiir ah siiyey Selled ay ka buuxdo Cunto Xumaatay iyo Waxyaabo uu isagu soo Nacay, kadib Faqiirkii ayaa Dhoola Caddeeyey una Mahad celiyey, selleddiina ka qaatay oo iska tegay!!!.

Haddaba Ninkii Faqiirka ahaa ayaa selleddii ka bixiyay wixii ku jiray, wuxuuna ka Buuxiyey Ubaxyo aad u Qurux badan, aadna u Udgoon, wuxuuna yimid Guriga Ninkii Maalqabeenka ahaa, selleddii Ubaxu uu ku jiray ayuuna Guddoon siiyey!!!.

Intaa ka dib, Ninkii Maalqabeenka ahaa ayaa aad u yaabay, oo ku yidhi kii Faqiirka ahaa:- waxaan ku siiyey selled ay ka buuxaan Cuntooyin iyo Waxyaabo

iga Xumaaday oo aanan u Baahnayn, Adigana waxaad ii keentay iyadoo Ubaxyo Udgoon ay ka buuxaan, maxay tahay Sababtu?, ninkii Faqiirka ahaa ayaana ugu jawaabay:- Qof kasta wuxuu Bixiyaa wixii Qalbigiisa ku jira, Ruuxa Qalbiga Madow wuxuu Bixiyaa wax aan Qalbiga u Wanaagsanayn, Qofka Qalbigiisu Nadiifta yahayna wuxuu Bixiyaa wax Farxad geliya Qalbiga Ruuxa Walaalkiisa ah!!!.

Waa sidaas Akhlaaqda Wanaagsan ee Qancisa Qalbiyada Bini'aadamka!!!.

**(ALLOW QALBIGEENA XUMAHA KA DHAWR)!!!.**

## WELIGAA HA RAJO DHIGIN HANA ISDHIIBIN!!!



Maalin-maalmaha ka mid ah ayaa dameer wuxuu ku dhacay ceel ay biyihii ka gudheen oo aad u dheer, kadib dameerkii aad buu u qayliyay, ninkii lahaa dameerka ayaana wuxuu isugu yeedhay dadkii xaafadda deganaa oo dhan si looga wada tashado sidii dameerka godkan dheer looga soo saari lahaa!!!.

Nasbiib darrose waa lagu guuleysan waayey waxayna ninkii dameerka lahaa kula taliyeen inuu godka iska duugo maadaama oo uu dameerku soo bixi Karin, halkaas markii xaal marayay ayaana dameerkii wuxuu dareemay in meesha ciid iyo dhagxaan lagu shubi doono oo isaga gabi ahaantiisba la duugi doono, kadib dameerkii aad buu u qayliyay, dadkii ayaana waxay bilaabeen inay godka duugaan, waxayna

bilaabeen inay ciid ku shubaan godkii, In cabbaar ah markay wadeen ayayna waxay hoos u eegeen godkii ceelka ahaa, Waxayna arkeen arrin ay aad ula yaabeen!!!.

Mar walba oo ay ciidda godka ku shubaan waxay ku dhacaysay dameerka dushiisa, dameerkii ayaana wuxuu bilaabay in ciidda dhabarkiisa ku soo dhacaysa uu iska ruxo isla markaana uu ku dul istaago, sidaa daraadeedna mar walba ciidda wuu iska ruxaa kadibna wuu ku dul istaagaa illaa uu sidaas banaanka ugu soo baxay!!!.

Muhiimaddu ma ahan dhibaatada kugu dhacda ee waa sida aad adigu uga jawaabtid ugana falcelisid!!!.

**Weligaa ha quusan hana rajo dhigin!!!.**

## DARAWALKII CAYAARTA BADNAA!!!




Nin ayaa meel baar ah fadhiyay, wuxuuna eegayey Sharaab hor yaallay muddo saacad iyo badh ah, kadib nin Darawal ah ayaa soo ag fadhiistay wuxuuna cabay cabitaankii ninka kale hor yiil, ninkii miskiinka ahaana wuxuu bilaabay inuu ooyo!!!.

Ninkii darawalka ahaa ayaa naxay oo ku yidhi:- war heedhe waan kula kaftamayay ee aamus waan kuu iibinayaa cabitaankaagee!!!.


Wuxuu yiri:- maya Arrintu cabitaanka waa ka wayntahay ee dhegayso, maanta waxay ii ahayd maalin dhib badan, shaqadii ayaan ka habsaamay oo waa la iga soo eryay, markaan guriga ku soo noqo is idhina baaburkaygii oo la xaday ayaan la kulmay, kadib tagsi ayaan qaatay markuu gurigii i geeyay ayaana waayay boorsadii

ay lacagtu iigu jirtay, tagsiilihiina waa iga tagay isagoo xanaaqsan, markaas ayaan halkan u imid si aan isku dilo adna suntii aan isku dili lahaa ayaad iga cabtay!!!.

Wakhti kasta iyo goob kasta oo aad ku sugantahayba ka taxadir hab-dhaqankaaga iyo ficillada aad samaynayso, hana noqonin mid deg-dega, kuna deg-dega ficil aanu kafiirsan saamaynta kaga iman karta.

Soomaaliduna waxay ku maah-maahdaa:- qunyar socde qodaxi ma muddo, sidoo kale waxay tidhaahdaa oo taas cagsigeeda ah:- shinbir duud-duul badani af-libaax bay gashaa!!!.

## WAX KASTA OO DHACA MA-MUDNA IN AAD JAWAAB AMA FAL-CELIN KA BIXISO!!!



Mas ayaa soo galay geerash, isagoona ku dhex noq-noqonaya garaashkii ayaa wuxuu kor maray miishaar, korka ayayna ka xagatay wayna dhaawacday, dhaawac fudud, kadib maskii ayaa yaabay wuuna qaniinay miishaartii isagoo jawaab ka bixinaya dhaawacii la gaarsiiyay!!!.

Haddaba, qaniinyadii waxay sababtay in maskii afkiisa uu dhiig kasoo daato, wuxuuna aaminay in miishaartu ay soo weerareyso, waxa kale oo uu ogaaday in uu dhimanaayo maaddaama afkiisa uu dhiig ka socdo, waxuuna go'aansaday in uu sameeyo falcelin adag oo dhibaato u geysata miishaarta, wuuna isku duubay isagoo isku dayaya inuu kala gooyo, laakiin isagii ayaa kala go'ay wuuna dhintay!!!.

Mararka qaar waxa aan isku daynaa inagoo xanaaqsan inaan dad kale dhibaatayno lkn mar uu waqti dhamaaday ayaan ogaanaynaa in aynu inagu is dhibaataynay, noloshuna waxay u baahantahay mararka qaar Inaad iska indhatirto dhacdooyinka qaar, wax kasta oo dhacana ogow ma mudna inaad jawaab ama falcelin ka bixiso!!!.

**Inta aanad falin kafiirso.**

## FAA'IIDADA ALLE-KACABSIGA!!!




Nin Dadkii Saalixiinta ka mid ahaa ayaa wuxuu yidhi:- waxaan soo galay Masar waxaana arkay Nin Biraha ka Shaqaysta (Birtume) isagoo Birta Dabka uga soo Bixinaayo Gacantiisa, Birtii oo Guduudana Gacantiisa ku Gedgedinaayo isagoo aanan ku Gubanayin!!!.

Waxa aan is idhi ninkani waa Owliyo oo Dabka kuma Gubanaayo, ka dib waan u Dhawaaday waana Salaamay oo waxaan ku idhi:- Walaalkeygiyoow Allihii kugu Manaystay Karaamadan ayaan kugu dhaarshee ii Ducee, markaas ayuuna Ooyey, wuxuuna igu yidhi:- Walaaloow sida aad Imoodday ma ihi!!!.

Kolkaas ayaan ku idhi:- walaalow waxan aad Samanayso Qof aanan Owliyo ahayn ma Samayn karo, wuxuuna yidhi:- Arrintani waxay ku Timid Sheeko Yaab badan, haddaad Rabto inaan kaaga Sheekeeyana waan kaaga Sheekayn!!!.

Waan ka Codsaday inuu Iiga sheekeeyo Sheekadaas, wuxuuna hadalkiisa ku Bilaabay:- Maalin-maalmaha ka mid ah waxaan Dhex Fadhiyay Dukaankan, waxaana ahaa Nin Firfircoon oo Bulshaawi ah, waxa ii Timid gabadh aanan weli Arkin gabadh iyada ka Qurux badan, waxayna igu tidhi:- Walaalow wax aad Ilaahay (swt) Dartiis u Bixinayso ma haysaa?!!!.

Waxaana ku idhi:- Guriga ma ii Raacaysaa aan ku Isticmaalee, waxaad Rabto oo Dhanna waan ku Siinayaa, ka dib Cabbaar ayey i Fiirisay, waana iga Tagtay!!!.

In muddo ah ayay iga Maqnayd ka dib Wey ii Timid haddana, waxayna igu tidhi:- Dan iyo Baahi ayaa igu Kaliftay inaan kaa Ogolaado inaan ku Raaco ee innakeen, dukaankii ayaana xidhay Guriga ayaana u watay, markii aan Guriga Galnay ayaana waxay igu tiri:- waxaan ka soo Tagay Carruur aan dhalay oo aad u baahan ee hadda wax yar isii sii aan u sii Geeyo ee waana kuu soo noqonayaa, ballan adag ayaana ka qaaday in ay ii soo noqoto, waxaana siiyey xoogaa Daraaahim ah!!!.

Way Baxday Saacad ka dib ayeyna ii Timid, Guriga ayey iigu soo gashay, kadib albaabka ayaan xirtay, markaas ayaa waxay igu tidhi:- Maxaad u Xidhay Albaabka?, waxaana ku iri:- Dadka inay na Arkaan ayaan ka Baqayaa, kolkaas

ayaana waxay igu tidhi:- Walaal Dadka waad ka Baqeysaa, oo Allihii (swt) ku Abuuray maxaad uga Biqi wayday?!!!.

Waxaana ku iri:- Alle (swt) waa Dembi Dhaafe Naxariis badan, ka dib Xaggeeda ayaan Aaday markaasay Oyday oo illinteedii Dhabanada ku soo Hooreen, markaas ayaa waxaan ku iri:- Maxaad la Oyneysaa?, waxayna igu tidhi:- Ilaahay (swt) Cabsidiisa ayaan la Oynayaa, waxeyna intaas ii Raacisay:- Walaaloow haddii aad Ilaahay (swt) dartiis ii Dhaafto, waxaan Ballan Qaadi in uusan Alle (swt) kugu Cadaabin Dab (Naar) Adduun iyo Aakhiroba!!!.

Intaas markay igu tiri:- Waan Istaagay wixii aan Hayey oo Dhanna waan siiyay, waxaana ku idhi:- Gabaryahay waxaan kugu Dhaafay Illaahay (swt) Cabsidiisa!!!.

Markay iga Tagtay ayaa waxa aad ii Qabatay Hurdo, waana Seexday, kadib waxaan Riyo ku Arkay Naag aad iyo aad u Qurux badan, Madaxana ku wadato Taaj waxayna igu tidhi:- Ilaahay (swt) Khayr ha innaga kaa Siiyo!!!.

Waxaana ku idhi:- oo Tumaad ahayd?!!!.

Waxay igu tidhi:- waxaan ahay Hooyadii Carruurta lahayd ee kuu Imanaysay ee aad Alle (swt) Dartiis ku Dhaaftay, Ilaahay (swt) Dab kugu Gubi maayo Adduun iyo Aakhiroba, ka dibna waxaan ku idhi:- Isu kay Sheeg? Oo

Qabiilkee ka Dhalatay Ilaahay (swt) hakuu Naxariistee?, waxayna igu tiri:- waxaan ka soo Jeedaa Nasabka Rasuulka (CSW)!!!.

Kadib waxaan markiiba ka soo Booday Hurdadii, laga soo Billaabo Maalintaasna Dab oo dhan kuma Guban, waxaana Rajaynayaa Aakhirana in aanan ku Guban Insha Allaah!!!.

Waxa hubaal ah in wax kasta oo aad Ilaahay (swt) dartiis uga tagto aad heli doonto deddelkeeda, Allahna (swt) waa arke caadilla!!!.

**(ALLOW JIDHKEENNA NAARTA KA BAD-BAADI, YAA RABBI)!!!.**

## DHEEFTA SADAQADA!!!




Wiil dhalinyaro ah ayaa wuxuu Hospitalka ku hayay hooyadii oo koomo ku jirta dhaq-dhaqaaqna lahayn, dabadeedna dhakhaatiirtii waxay wiilka u sheegeen in hooyadii ayna rajo lahayn dhimana karto saacad kasta!!!.

Wiilkii isaga oo naxsan miyirkiisuna maqan yahay ayuu gurigoodii yimid, inyar ayuu iska jiifsaday, dabadeedna subixii ayuu gaadhigiisii soo kaxaystay, kadibna intaanu dhakhtarka gaadhin ayuu kaalin shidaal istaagay si uu gaadhiga ugaga shubto shidaal.

Haddaba waxa dhacday intii loogu shubayay shidaalka ayuu waddada ku arkay bisad kartoon ku jirta, ilmo yar-yar na haysata, markaas ayuu is dhahay tolow

yaa cuntada u keena ilmahan yar-yar mana socon karaane!!!. tukaan lagu iibiyo cuntada xayawaanka ayuuna tegay markaas ayuu cunto uga soo iibiyay, wuuna quudiyay, muddo yar ka dib ayuuna dhakhtarkii yimid, lkn hooyadii ayuu sariirtii ka waayay!!!.

Markaas ayuu naxay, dabeeto gabadh dhakhtarad ah ayuu ku dhahay:- aaway maamadi xagan jiiftay?, gabadhiina waxay ku dhahday:- way caafimaaday, waxaana u wareejinay qolkaa kale!!!.

Wiilkii isaga oo yaaban ayuu ku dhahay intuu utegay maamadii:- hooyo maxaa dhacay?, waxayna ku dhahday:- hooyo markaan koomada ku jiray ayaan arkay bisad iyo ilmaheeda yar-yar oo ii ducaynaya!!!.

Qisadan waxa aan ka baraneynaa Faa'iidada ay leedahay Sadaqadu iyo wixii si niyada Noolaha Ilaahey (swt) nooca uu doonoba ha ahaadee loogu caawiyo inuu Ilaahey (swt) u abaal-gudayo qofka sadaqada baxsaday!!!, xattaa haddii aanu ifka kula kulmin abaalkeedana waa xaqiiq in ay tahay kayd aakhiro usii yaalla aanuu maalin kale oo loo baahanyahay u aayi-doono.

## WANAAGGA SADAQADA!!!




Qoraaga la yiraahdo Muxammed Xasan Bin-Cuqayl Muusa ayaa Kitaabkiisa afka Carabiga ku qoran ee Al-Mukhtaar Al-Masuun Min Aclaami Al-quruun ahna kitaab uu qisas iyo culuun farabadan ku ururiyay, ayaa waxaa ku jirta qisso aad u yaab badan oo ka dhacday Tuulo la yidhaahdo Alxamrah, waxaana ay u dhacday sidan:-

Waxa jiray nin beeralay ah oo ku noolaa magaalo la yidhaahdo Alxamrah, waxaana uu ahaa nin aad u Alle ka cabsi badan, sadaqadana aad u bixiya sidoo kalena Masaajid ka dhisay degmadiisa.

Maddaama oo xilliga uu ninkani jiray uu ahaa intii aan la helin Laydhka ama korantada iyo guud ahaanba qalabka sida fudud wax loogu iftiinsho, waxa uu

ninkani habeen kasta masaajidkaas keeni jiray Faynuus lagu tukado iyo cashada ay isaga qoyskiisu ugu tala geleen, in haddii uu helo cid baahan uu ku sadaqaysto uuna siiyo, haddii kalana inta uu Masaajidka ku cuno uu salaadda ku sugo masaajidka!!!.

Muddo ayuu ninkani dhaqankan ku dhaqmi jiray, kadib waxa dhacday abaar aad u ba'an oo baad iyo biyo la'aan badan keentay, waxaana gudhay ceelashii biyaha, waxaana ay abaartani wax yeello gaadhsiisay beertii ninka odayga ah, waxaana gudhay ceelkii beerta uu ka waraabin jiray.

Markii ay beertii oontay, ayaa odaygan iyo wiilashiisu ay go'aansadeen in ay qotaan ceel cusub bal si ay biyo uga raadiyaan. muddo ayayna ceelkan qodayeen oo hadba inyar ku darayeen iyaga oo naawilaya in haddii aanay quusan ay biyo ka heli doonaan, nasiib darrose ceelkii oo meel aad u fog maraya ayaa maalin-maalmaha ka mid ah isku dumay iyada oo odaygii Alle ka cabsiga badnaa guntiisa ama halka ugu hoosaysa ku jiro oo kalkiisa uu qodayay!!!.

Innamadii ama wiilashii uu odaygu dhalay ee godka la qodayay oo bannaanka ka joogay markii uu dumay ayaa markiiba quustay, maadaama oo ay ogaayeen dhererka xad dhaafka ah ee godkan, arkayeena sida uu isugu wada dumay, waxa ayna nafta ku qanciyeen in waxan ay qodayeenba ahaa xabaashii aabahood oo aanay ogayn, Jidka keliya ee u furanina uu yahay in aanay dib u soo faqin, si aanay uga calool xumaan burburka iyo goo-go'a aabahood maydkiisa, Go'aanka ay wiilashu qaateena waxa uu noqday kama-danbaystii in aanay godkaas dib u qodin ee ay halkaas ku xabaalaan ama ku aasaan maydka Aabohood!!!.

Markii uu ceelku dumay waxa uu odaygu ku jiray god yar oo hoose oo dhinac uga sii baydhayay daloolka weyn ee godka, kaas oo ay ogaan u duween, si ay u gaaraan jiho kale oo ay biyo ka filanayeen, nasiib wanaagna loox saarnaa dusha sare ee ceelka ayaa markii uu ceelku dumayey ku soo dhacay gudaha, waxa aanuu isku daboolay afka godkii hoose ee uu odaygu ku jiray!!!.

Intii aanu muddo badan ku jirin godkii ayaa waxa uu ninkii odayga ahaa arkay cid aanu arkayn oo u keentay isla faynuuskii uu gayn jiray masaajidka iyo cunto la moodo in ay tahay tii uu masjidka gayn jiray, habeen kasta, muddo lix sano ah ayaana uu ninkan Alle ka cabsiga lagu yaqaanay godkan hoostiisa ku noolaa isaga oo si joogto ah u hela cunto iyo biyo, ilayskii faynuuskuna aanu mar keliya ka damin!!!.

Lix sanno markii ay geeridiisa ka soo wareegtay, abaartiina sii daba-dheeraatay ayaa wiilashii oo iyagu illaawayba geeridii Aabohood, xanuunkeediina ka bogsaday waxa ay damceen in ay mar kale isku dayaan ceel qodis, sahamin badan iyo meelo kala duwan oo ay tijaabiyeen kadibna waxa ay arkeen in ceelka biyo ugu dhowi uu ahaa kii ay qodeen ee ay markaas dareemayeen in ay qoyaankii biyaha gaadheen, haddii ay taladii rog-rogeena waxa ay go’aansadeen in ay dib u qodaan ceelkii, oo aabahood inta ay ka soo saaraan xabaal caadiya u sameeyaan ceelkana intifaacsadaan!!!.

Waa ceel hore u qodmay oo ciiddii ku noqotay ayuunbaa dib loo soo gurayaaye, sidaa awgeed dhib badan kalama ay kulmin in ay gaadhaan halkii uu looxu isku daboolay, markii ay qaadeena waxa ay ugu tageenba aabahood oo nool oo weliba xaalkiisa caafimaad iyo nololeedba fiican yihiin, sidii ayaanuu ku soo baxay

muddo dambana sii noolaa, iyada oo ceelkiina uu noqday mid ay biyo ka heleen oo iyagii iyo beertoodiiba waraabiyay!!!.

Qissadani waxa ay tusaale fiican u tahay wanaagga sadaqada oo laga yaabo in ay sabab u ahayd badbaadista odaygan, sidoo kale Alle ka cabsiga iyo salaadda ayaa iyaguna meesha ku jira!!!.

Sidaa darteed ku dedaal markasta in aad ahaato ka gacantiisa fidiya, gacantiisuna ay sarrayso, dadka uu waxku dhaamona wax gaadhsiiya, cibaadada Rabbina (swt) waa qodob kale oo muhiim ah, mudnaantiisana leh!!!.

## KA XAMDI NAQ NIMCADA EEBBE (SWT) KU SIIYEY!!!



Waxa dhacday in nin oday ah oo 70 jir ah uu xanuunsaday oo kaadidii ay ku dhegtay, dabeedna Cusbitaal ayaa la geeyay dhakhaatiirtii ayaana u Sheegtay inuu u baahan yahay Qalliin deg-deg ah in lagu sameeyo, ninkii odeyga ahaana Qaliinkii ayuu aqbalay maadaama xanuun badan uu dareemayay.

Haddaba waxa dhacday in markii qalliinkii lagu guuleystay ee loo dhameeyay ayuu dhakhtarkii waxuu ku soo dallacay Lacagtii, ninkii odeyga ahaa ayaana aad ula yaabay lacagta Biilka lagu soo dallacay, waxuuna bilaabay inuu aad u ooyo!!!.

Dhakhtarkii markuu arkay Odaygii oo Ilmeynaya ama oynaya ayuu u sheegay in Lacag haddii uusan haysan laga Sugi karo, balse Ninkii odayga ahaa ayaa ku jawaabay:- Lama oynaayo in ay Lacagta badan tahay darteed, balse Waxaan la oynayaa, Garasha La'aanta Nimcada EEBBE (swt), waayo 70 sannadood ayuu ILLAAHAY (swt) Kaadida iga Keenayay, Hal marna Lacag iguma soo Dallicin, balse Bina'aadam Hal mar oo qura ayuu wax ii qabtay, Lacagna intaas leegna wuu igusoo Dallacay!!!.

Wll Nimcooyinka aan xadka lahayn ee Alle (swt) ina siiyay ee uu inagu galadaystay aynu ku mahdino goor-kasta, goob-kasta iyo xaalad-kastaba, markaas ayuu Allena swt inoo siyaadinayaa kuwo kalena inoogu kordhinayaa.

**Alxamdulillaah, Alxamdulillaah, Alxamdulillaah.**

# ORODOO SII KHAMRIGA DUULIYAHA DAYAARADDA!!!



Nin Muslim ah oo aad ugu ad-adag diintiisa ayaa hadda ka hor soo raacay Diyaarad, kadib markii muddo hawada lagu jirey ayaa ninkii waxa u timid gabar ka mid ah shaqaalaha diyaaradda oo Qamri wareejinaysa, rakaabka diyaaraddana uqaybinaysa, dabeedna waxey ku tidhi:- qamriga ma ku siiyaa, laakin ninka oo ahaa qof Ilaahay (swt) siiyay Iimaan ayaa yiri:- "Maya uma baahni, waad Mahadsantahay"!!!

Xoogaa ka dib misana Waxa u timid isla gabadhii oo wada dhaladii Qamriga, laakiin waxay kala kulantay isla jawaabtii hore ee ahayd:- Mahadsanid uma baahni, muddo kadibna gabadhii oo la yaaban ninkan diidan qamrigan qaaliga ah, ayaa ku tidhi ninkii shaqaalaha diyaaradda u sarreeyay:- "ninkaa wuu iga diiday sharaabkan, ee waa intaas uu kaa yeelaaye u gee adigu"!!!

Ninkii baa soo qaaday dhaladii qamriga ahayd, markuu u keenay ninkii muslim-ka ahaa ayuuna ku yidhi: "Mahadsanid uma baahni", markaa buu ninkii shaqaalaha ahaana yidhi:- "ninyahow maxaad ku diideysaa, miyaadan ka helin adeegga diyaaradda?"!!!.

Ninkii oo caaqil ahaa baana yidhi:- "Orodoo sii qamriga duuliyaha diyaaradda?", ninkii shaqaalaha ahaa ayaana yidhi:- "Maad waalantahay, sideen u siiyaa duuliyaha qamri, waajibaadkiisa ayuu gudanayaa, hadduu cabo qamrigana Diyaaradoo dhan baa burburaysa"!!!, kadibna ninkii muslimka ahaa baa yidhi:- "haddaba anigana Muslim baan ahay, waxaana gudanayaa waajibaadkeyga ah inaan caabudo Rabbigay (SWT), haddii aan cabana Qamrigan nolosheyda dhan ayaa Burburaysa Aduun iyo Aakhiroba"!!!.

Tani waxay ku tusinayaa dhibka iyo waxyeeladda uu leeyahay khamrigu, waxa kale oo ay ku tusinaysaa in Allah (swt) uusan ka mamnuucin ina-aadam wax waxyeello iyo dhibaato ugu jirto maahane!!!.

**(KA DIGTOONOW SHIRQOOLLADA IBLIISKA)**

# DUULIYIHII REER CANADA IYO KOOBKII SHAAHA AHAA!!!



Diyaarad ay leedahay Shirkadda Diyaaradaha ee Dalka Maraykanka oo nooceedu ahaa Boeing, oo siday 241 qof oo rakaab ah oo ay ku jiraan 14 shaqaalihii diyaaradda ka shaqaynayay ahi oo ku guda jirtay duulimaad ay kaga soo duushay Chicago una socotay magaalada Frankfurt ee dalka Jarmalka ayaa la kulantay qisso aad u yaab badan oo lala amakaagay, ka dib markii baayloodkii diyaaradda waday uu isku daadiyay koob shaaha oo uu cabaayay!!!.

Taas oo ay keentay in isaga oo baraadla' uu si kadiso ah u taabto badhankii khaaska ahaa ee digniinta u ahaa tilmaanta lagu garto afduubyada diyaaradda ku yimaadda, taas oo keentay in si deg-deg ah ay diyaaraddu u soo fadhiisato dalka Canada!!!

Waaxda gaadiidka cirka ee dalka Canada ayaa sheegtay, in diyaaradani ay si ku talo gal la”aan ah oo nabadgelyo ah u soo fadhiisatay garoonka diyaaradaha ee dalka Canada ee lagu magacaabo Pearson International Airport!!!.

Warku waxa kale oo uu intaa ku daray in koobkan shaaha ah ee uu isku daadiyay bayloodkii diyaaradan waday uu si kama’ah u sababay in uu bayloodku gacantiisa ku taabto badhanka halista ah ee muujiya afduubyada, taas oo keentay in uu baxo laydhka gaarka ah ee lagu garto in diyaaradda la afduubay!!!.

Geesta kale warka ka soo baxay waaxda difaaca ee dalka Canada, ayaa lagu sheegay in shaqaalihii diyaaraddan saarnaa ay xaqiijiyeen in aan la afduubin diyaaradda balse ay ku timi isgaadhsiinta oo si khaldan loo isticmaalay taas oo sababtay in ay jihadu ka lunto duulimaadkii diyaaradda!!!.

Saraakiil Canadian ah ayaa sheegay maamulka saadaasha hawada ee dalka Maraykanku in ay xaqiijiyeen in hakadka khalkhalka galiyay duulimaadkii diyaaradani uu yimi ka dib markii uu bayloodkii diyaaradan waday uu isku daadiyay koob shaah ah, ka dibna uu si gurracan u taabtay badhanka ka diga weerarada afduubyada ah ee diyaaradaha loo gaysto, taas oo jaahwareer galisay duulimaadkii diyaaradda!!!.

Tani waa mid ku tusinaysa horumarka farsamada aadamaha ee wakhtigani in uu yahay mid dhinac ka raran, taas oo markasta oo lasamaynayo

ikhtiraacyo cusub ay jiraan waxyaabo badan oo aan xisaabta lagu darsani oo hadhawna keenaysa in shaygii lagala kulmo caqabado fara badan!!!.

Noqo mid sameeya taxaddar aad ah markasta oo aad isticmaalayso aalad aadami-samee ah, si aad uga bad-baaddo ugana nabad-gasho arrintan oo kale iyo kuwa lamidka ah!!!.

**TAXADDARKU GOOR-WALBA, GOOB-WALBA IYO XAALAD-WALBA WAA MUHIIM!!!.**

# WAXAAD WARAABISAA BEERTA HEBEL!!!



Nin ka mid ah ummadihii hore ayaa waxa uu marayay meel lama dagaan ah (saxare) markaasuu daruuraha ka maqlay cod dhahaya:- Waxaad waraabisaa beerta Hebel, kadib ninkii wuu yaabay oo waxa uu is waydiiyay codka aad maqashay ma dhabbaa mise maaha!!!.

Ninkii oo yaabban ayaa daruurtii dhaqaaqday markaasu isaguna u dhaqaaqay dhankii ay daruurtu u jihaysatay, Inyar kadibna waxay daruurtii bilowday onkod iyo hillaac waanay da'day, roobkii ayaana ku ururay meel waadi (doox) ah kadibna biyihii waxay gaadheen meel beera markaasay beertii oo dhan waraabiyeen!!!, ninkii oo yaabban ayaana la kulmay ninkii beerta lahaa waxaanuu waydiiyay magaciisa waxaanu ku yidhi:- waa hebel, waana magicii uu daruurta ka maqlay!!!.

Dabadeed ninkii waxa uu hubsaday in codka uu maqlay ahaa malag, markaasuu waydiiyay waxa beerta kaligii loo waraabiyay?, markaasaa ninkii beerta lahaa ayaa ku yidhi:- maaddaama aad i waydiisay waan kuu sheegi sababta beertayda loo waraabiyay waxaana uu ku yidhi:- Markaan beerta beero waxa kasoo baxa ayaan u qaybiyaa saddex meelood, hal meel waxa quuta aniga iyo ubadkayga, qaybta labaadna waan sadaqaystaa (dar Ilaahay swt ayaan u bixiyaa) qaybta saddexaadna beerta ayaan dib ugu celiyaa si ay mar labaad usoo go'do!!!.

Marka koobaad qaybta uu siiyo reerkiisa waa sadaqo, qaybta labaadna dadka saboolka ah ayuu siiya oo Iyana waa sadaqo, qaybta saddexaadna waxa uu ku ilaaliyaa sadaqadiisa oo beerta ayuu dib ugu celiyaa Iyana waa sadaqo, waxayna ka dhigantahay inuu u bixiyay dhammaan xoolihiisa oo dhan dar Ilaahay (swt), markaasuu Eebana (swt) ku muujiyay mucjisadan!!!.

Sida diinteenna suubani inoo sheegayso sadaqadu xoolaha qofka siyaadin ay siyaadiso mooyee, haba yaraatee inyarna kuma keento wax nusqaamin ah!!!, sidaa daraadeed ku dedaal wakhti kasta iyo goob kastaba in aad waxkabixiso siisona ciddii lagu dhahay sii, xoolaha Rabbi (swt) uu kuu dhiibtay!!!.

## KAALAY ADIGU QABO!!!



Tuulo ku taalla waqooyiga Suudaan Ayaa waqtigii salaadda subax markii la gaadhay dadkii waxay aadeen masaajidka, iimaamkii markuu salaaddii bilaabay rakcaddii koowaad-na dhameeyay ayuu bilaabay rakcaddii labaad wuxuu-na akhriynaayay mid kamid ah aayadaha uu Rabbi (swt) kaga warramayo qissadii dhex martay ninkii kibirka badnaa ee fircoon iyo Nebi Muuse (cs), aayaddaas oo ah 20 suurat Taa-haa, oo macnehuudu yahay:- **(wuuna tuuray waa ayna soo baxday mas ordi)!!!.**

Kadib masaajidka saqafkiisa oo qoryo ah waxa ka soo dhacday abeeso waynaatay oo imaamkii hortiisa ku soo dhacday markaas buu aamusay imaamkii naxdin darteed!!!.

Dabadeed mid ka mid ah dadkii tukadayaasha ahaa Ayaa umaleeyay inuu imaamku aayadda ku xigta garan la'yahay oo usheegay aayaddii ku xigtay oo macneedu yahay:- **(wuxuuna yidhi (Eebbe) qaad hana cabsanin waxaannu ku celin xaalkeedii hore'e)!!!.**

Imaamkii inta uu gadaal fiiriyay ayuu ninkii aayadda usheegay ku yidhi:- **(tacaal anta khud-haa)** oo macneheedu yahay:- **(kaalay adigu qabo)!!!.**

Mucjisaadka Rabbi (swt) ma aha kuwo wakhti qudha ku eeg, ee waa kuwo wakhti kasta, goob kasta iyo xaalad kastaba la arki karo, hal adaygnimada iyo dhiiranaantuna ma aha wax layska yeel-yeeli karo ee waa wax Alle swt bixiyo!!!.

## BAD-BAADADA SADAQADA!!!



Gabadh ayaa ku riyootay nin ehelkeeda ah oo uu mas wayn cunayo, kadib gabadhii waxay utimi ninkii waxayna usheegtay arrinkii, dabadeed ninkii wuu naxay waxaana uu qalay neef waxa uuna uqeybiyay dariskiisii, kadib markii aysoo hartay wasladdii udanbaysay ayuu wuxuu damcay inuu cuno, dabadeed waxa uu soo xasuustay qof dumar ah oo uu illaabay, wasladdii ayuuna siiyay una geeyay, hilibkiina halkaas ayuu ku dhammaaday!!!.

Qoftii dumarka ahayd markii ay cuntay hilibkii ayay tuurtay laftii, dabadeed habeenkii waxa yimi maskii waxa uuna laqay laftii, waa ayna kudhagtay (cunaha) halkaas ayuuna ku dhintay!!!.

sadaqadu waa badbaado, qur'aanka iyo axaadiistuna inbadan ayay caddeeyeen, walaalkayga muslimka ahowna markasta iyo goob-kasta arrintaa iyada ah xasuusnow!!!.

**(ILAAHAYOW NAGA DHIG KUWII SADAQADU AY BAD-BAADISO)**

# ILAAHAY (SWT) WAXA UU NAGA XIJAABAY AYAA WAX-WALBA KA WAYN!!!



Hadda Kahor nin oday ah oo da' ah ayaa waxa uu Safar lagalay wiilkiisa, waxayna usafraayeen magaalo labo maalmood loo soconaayo, waxayna wateen dameer ay ku rarteen alaabtii ay wateen, Markaa ninka odeyga ah ayaa mar walba hadalkiisu wuxuu ahaa uuna kusoo celcelinaayay:- "Ilaahay (swt), waxa uu naga xijaabay ayaa wax walba kawayn"!!!.

Markaa ayagoo safarkii kujira, oo waddadii kala badh maraaya, ayaa dameerkii waxa uu kajabay Lug, markaasuu odeygii dhahay:- "Ilaahay (swt) waxa uu naga xijaabay ayaa wax walba kawayn"!!!, alaabtoodii ayaana nin walba gacanta kuqaatay, oo waddadii ayay sii socdeen, wax yar kadibna odeygii ayaa lug kajabay, oo wuu awoodi waayay inuu alaabta qaado, waxa uuna bilaabay in uu lugtiisa dhulka

kujiido, isagoo dhahaaya "Ilaahay (swt) waxa uu naga xijaabay ayaa wax walba kawayn"!!!.

Wiilkii ayaa alaabtiisii iyo alaabtii aabihiisba dhabarka kuqaaday, oo safarkii ayay sidii kusii wateen, haddana ayagoo waddadii kusii jira wali ayaa wiilkii waxa qaniinay MAS, markaasuu xanuun dartiis dhulka kudhacay, odaygii ayaana waxa uu dhahay:- "Ilaahay (swt) waxa uu naga xijaabay ayaa wax walba kawayn"!!!.

Haddaba markan wiilkii wuu xanaaqay, wuxuuna dhahay:- ma waxa nagu dhacay wax kawayn ayaa jira?, xoogaa kadib markii uu wiilkii fiicnaadayna ayay safarkii sii wateen, waxayna imaadeen magaaladii ay usoo socdeen oo Dadkii joogay oo dhan ay baaba'een, Dhul gariir xooggan oo meeshaa kadhacay darteed!!!.

Markaasuu Odaygii fiiriyay wiilkiisa kadibna wuxuu kudhahay:- fiiri wiilkayga, haddii waxa nagu dhacay inta waddada aan kusoo jirnay aysan nagu dhici lahayn, isla maalintiiba Magaalada waan iman lahayn wax wayna wuu innagu dhici lahaa, oo dadkan Baaba'ay ayaan kamid ahaan lahayn, markaas ayuuna wiilkii garawsaday hadalkii aabihii!!!.

Waxa loo baahanyahay in manhajka Nolasheenna aan sidaas oo kale kadhigno, si qalbiga culays iyo walwal aynaan usaarin, oo calaacalka iyo eer sheegashada badanna aan ujoojinno, mar walbana dad niyad wanaagsan aynu u ahaanno, annagoo Ilaahayna (swt) talo saaranayno, wax khayr badanna kafilaneyno!!!.

Ogowse wax haddii uu kugu dhaco wax kawayn oo kaxun ayuu Ilaahay (swt) kaa hayaa oo kaa xijaabay, muhiimaduna waxa weeye, Noloshaada in aad Ilaahay (swt) ugu mahdisid, inta aad haysatidna ku qanacdid, nimcada Ilaahayna kuxamdisid, wixii kugu dhacana usamirtid waayo wax kawayn ayuu Ilaahay (swt) kaa hayaa!!!.

**(ALXAMDU-LILLAAHI RABIL-CAALAMIIIN)**

# NINKII SADDEXDA KUN KU IIBSADAY SADDEXDA TALO!!!



Nin ayaa wuxuu u Shaqayn jiray Nin kale, muddo fara badan buuna Shaqaale u ahaa, ninkii reerkiisu muddo dheer wax war ah kama helin, maalintii dambe ayuu u yimi Ninkii uu u Shaqayn jiray wuxuuna u sheegay inuu doonayo inuu Shaqada ka tago si uu uga war doono Reerkiisii iyo Carruurtiisii oo uu muddo ka maqnaa, uuna siiso mushaharkiisii oo dhan.

Dabadeed wuxuu ugu jawaabay:- waayahay Musharkaagiina wuxuu noqday Saddex Kun oo shillin, Gacanta ayuuna ka saaray, markuu Gacanta u geliyay ayuuna ku yiri:- Saddexda kun oo shillin igaga iibso Saddex talo oo aad kuu Anfacaaya!!!.

Cabaar ayuuna fikiray Ninkii, ka dibna wuu Aqbalay inuu kaga iibsado Saddexda talo, Saddexdii kunbana wuxuu siiyay ninkii uu u shaqaynaayay, Intaa kadib ayaana Ninkii loo Shaqaynaayey u sheegay Saddexdii talo, waxeyna kala ahaayeen sidan:-

Ha marin weligaa Waddo Toobiye ah (waa waddo toosan) ee Qarda jeex, markaa iska ilaali intaad socoto Waddada toosan, weligaa ha gelin waxaan Dani kuugu jirin, iska ilaalina inaad gasho wax aan Dan kuu ahayn, haddaad Xanaaqdo Xakamee xanaaqaaga hana ku Deg-degin inaad ka jawaabto, Samirna yeelo intaanad Tallaabo qaadin, waxaadna ka Badbaadeysaa Qoomamo badan!!!.

Markuu u dhammeeyay Saddexdii talo ayuu Safarkii hore ka bilaabay, wuxuuna maray Waddo Qarda jeex ah oo dhib badan illayn waa tii talo lagu siiyay inaanu marin Waddada toosane!!!, dhulka uu marayaana waa Dhul baadiye ah, waxaana jira Bahalo Dad cun ah, sidoo kale waxa jira Dad Xun ah oo halis ku ah Noloshiisa, markuu in muddo ah Qardajeexa waday ayuuna u adkaysan waayay, wuxuuna go'aansaday inuu maro Waddadii toosnayd ee lagala taliyay inuu maro!!!.

Muddo markuu socday ayaana waxa ka hor yimid Niman Qaaqaawan oo yaacaya oo Dharkii iyo wixii ay siteen laga furtay oo Tuugo bursanayso (cayrsanayso), si deg-deg ah ayuuna uga Gabaday, markay dhaafeenna Qardajeexiisii ayuu dib uqaaday, illeen arag Dhibka ay leedahay Waddada toobiyaha ahiye, halkaasna wuxuu ku yaqiinsaday taladii koowaad Anfaceedii!!!.

Muddo markuu socday ayuu Magaalo ku soo baxay, markuu Geeska Magaalada soo galay ayuuna arkay Nin gabar si Xun u garaacaya wuxuu damcay inuu ka qabto laakiin wuxuu si Kedis ah u Xusuustay taladii ahayd waxaan Dani kuugu jirin ha gelin, ninkii Gabadha garaacayay ayaana arkay Ninkani in uu ka Xun yahay sida uu gabadha u garaacayo, laakiin aanu Ficil samaynaynin!!!, nninkii gabadha garaacay ayaana Ninkii ku yidhi:- War maxaad gabadha iiga qaban weyday miyaadan Muslim ahayn?, wuxuuna ugu jawaabay:- Walaal waxaan Dantaada ahayn lama galo!!!.

Ninkii gabadha garaacaayey ayaana ka yaabay jawaabta Ninka kaga timid, kaalay ayuuna ku yidhi Waxaad tahay Nin aad u fiican oo Caqli badane, kolkaas ayuuna ku yidhi:- anigu waxaan ahay Boqorkii Magaaladan, gabadhanna anigaa dhalay waxaanaan Abaalgud kuu siiyey Saddex kun oo Shillin ee Hoo (yacni jawaabta aad i siisay), halkaasna waxa uu ka helay Saddexdii kun ee talada uu ku iibsaday!!!.

Safarkiisii ayuu iska sii watay markuu muddo socday ayuuna ku soo baxay Niman Geel jirayaal ah oo Geel u xareysan yahay, waana Dhulkii uu ka filaayay inay yaalaan Reerkiisu hayb ahaan, way is garteen markay is Waraysteena wuxuu weydiiyay Reerkiisii, waxayna ugu jawaabeen:- waa Reerkaas halkaas ka muuqda.

Wuu u tagay Reerkii markiibana wuxuu Isha ku dhuftay Nin guriga Hurda iyo Xaaskiisii oo Xerada Adhiga ku jirta oo Ri' Liseysa!!!.

Wuxuu aad uga Xumaaday Ninkan Reerkiisa iska dhex jiifa, wuxuuna go'aansaday inuu Waran ku Dilo, inta aanu wax Ficil ah samaynin ayuuna Xusuustay taladii ahayd Xakamee Xanaaqaaga oo ha deg-degin, Intaa kadibna wuu is qabtay, wuxuuna dib ugu noqday Nimankii Geel jirayaasha ahaa ee usoo Tilmaamay Reerka, wuxuuna ku yidhi:- maxaad Beenta iigu sheegteen Reerku Reerkaygii maaha’e, nin wayn ayaana guriga iska dhex jiifa’e!!!, waxayna ugu jawaabeen ninka Guriga jiifaa waa Wiilkaagii oo weynaaday illeen muddo ayaad Reerka ka maqneyde, halkaasna waxa Badbaadisay taladii ahayd Xanaaqaaga Xakamee oo is celi!!!.

Hadda Saddexdii taloba wuu ka Faa'iiday, Tuug dhici lahayd wuu ka bad-baaday, saddexdiisii kunbana dib ayuu u helay, Inankiisii oo uu Dili lahaana waa u Badbaaday!!!.

Soomaalidu waxa ay ku maah-maahdaa:- wax-wax ku siiya wax badanbaad aragtaa, wax wax kuu sheegase wax yarbaad aragtaa!!!, waana hubaal oo wax wax-kutara in badanbaad arkaysaa, adduunyaduna waa wax si yar oo fudud lagu heli karo, laguna waayi karo, balse cid inta ay ku xaal waraysato ama xaalkaaga lasocota oo inta ay kuu yeedho kaala Talisa mustaqbalkaaga iyo aayahaaga kuuna laab-xaadhan wax yar ayaad arkaysaa!!!, waxaanaan filayaa in qaar kamida akhristayaasha qissadani haddii loosoo bandhigi lahaa, kala doorashada loo soo bandhigay ninka ay qissadani ka hadlaysay, ay dhaafsan lahaayeen intaa iyo inkabadanba arrintaa iyada ah!!!.

**Cidda fahamtaabase iska yar!!!.**

## SOO DHAWAYNTII LALA ASHQARAARAY!!!




Nin Sucuudiyaan ah ayaa waxa u shaqeeynaayay nin u dhashay waddanka Pakistan, ninkan ayaana u ahaa darawalka reerka, haddaba ninkan shaqaalaha ah ayaa ahaa nin akhlaaq fiican, shaqada u jajaban, dhega-fudud isla markaasina tixgelin iyo ixtiraam leh, carruurta reerkana sidii shaqaale ulama dhaqmo'e, sidii waalid oo kale ayuu ula dhaqmaa, oo uu ugu naxariistaa, qalbigoodana u ilaaliyaa!!!.

Ninkii Sucuudiyaanka ahaa ninkaas aad buu u jeclaaday, kolkaas buu heshiiskii shaqaaleynta dhawr jeer u siyaadiyay, Intaas keliyana ma samayn ee xittaa mushaharkii ayuu u kordhiyay, isaga oo gaarsiiyay in uu saddex jeer u jibbaaro, markii uu arkay wanaaggiisana, sida shaqaalihii ulama dhaqmo'e, sidii walaalkiis oo kale ayuu ka dhigtay!!!.

Dhawr jeer buu ninkii shaqaala ahaana weydiistay fasax uu waddankiisii u aado ninkii uu u shaqeynayay, laakiin ninkii baa ku dhegay, oo jeclaystay in uu joogo, sababta oo ah waxa uu ka cabsanayey in uu waayo ninkan qiimaha leh, Qoyskiisa ayuuna u keenaa Sucuudiga, intii uu isagu aadi lahaa waddanka Pakistan!!!.

Waa dambe ayaana ninkii shaqaalaha ahaa ku adkaystay in uu baxo, isaga oo u sheegay ninkii, in uu waddankiisii u hiloobay!!!.

Maalinntii dambe ayuu fasaxay ninkii shaqaalaha ahaa, maalintii uu baxayeyna ninkii iyo qoyskii dhammaan ayaa sagoontiyey, isaga oo lacag badan iyo hadiyado badan loo sii dhiibay, Bil ka dib ayaana ninkii soo wacay ninkii madaxda u ahaa, waxa uuna u sheegey in uu soo baxayo.

Ninkii Sucudiyaanka ahaa waa farxay, oo farxay. Maalintii uu imaanayey magaalada Riyaad ayaana ninkii Sucuudiyaanka ahaa waxa uu soo diyaariyey qoyskii, qaraabadiisii iyo saaxiibbadiis dhammaan, waxaa kale oo uu sii kireeyey Hoteel weyn, si xaflad soo dhawayn ah uu u sii diyaariyo!!!.

Ninkii shaqaalaha ahaa markii uu soo degeyba, waxa uu arkay dad farabadan oo saf ugu jira, oo sidii madaxweyne la soo dhaweynayo, waxaa isla markiibana ku soo booday ninkii uu u shaqayn-jiray, oo inta uu ku dhegey dhabbannada ka shummiyey (dhunkaday), oo weliba cabbaar uu ka fuqi waayay, waxa kale oo ku soo orday carruurtii uu ninkaasi dhalay oo ugu soo kala orday sidii carruur aabbahood uu sannado ka maqnaa oo yimid!!!.

Ninkii shaqaalaha ahaa, gaari qurux badan inta lagu soo kaxeeyay ayaa la geeyay Hoteel, xaflad si heer sare ah loogu agaasimay, halkaas baana keeg uu magaciisu ku qornaa isaga iyo ninkii uu ushaqayn jirayba wada jareen!!!.

Ninkii shaqaalaha ahaa, ayaa hadal lagu soo dhaweeyey, laakiin inta uu is hayn-waayay jacaylka loo muujiyey darteed ilmo maashaysay, kolkaas buu xafladdii ka hadli waayay qiiro-ilmo darteed, kadib Inta uu soo booday ayuu isku duubay ninkii uu u shaqayn jiray, oo uu cabbaar ka fuqi waayay, kolkaas baana isaga oo illini ka socoto waxa lagu qaaday gaarigii, waxaana loo kaxeeyay hoygiisii!!!.

Waa hubaal haddii aad akhlaaqdaada iyo hab-dhaqankaaga hagaajiso/wanaajiso in ay cid kastaaba ku jaman doonto!!!.

**Quruxduna ma aha ta muuqaalka guud ee waa ta qalbiga qofka ku qarsoon!!!**

## BANI-AADAMKU NIMCADA MA XEJIYO!!!



Nin ayaa waxa uu ahaa fiqiir waxaanuu guran jiray xaabada, kadib maalin-maalmaha ka mid ah ayuu wuxuu maqlay shinbir ku dhawaaqaya:- " bani adamku nimcada ma xejiyo", dabadeed malintii danbe ayuu ujawaabay oo uu ku yidhi :- yaa annaga na siiya maanu sii dayn lahayne!!!.

Markaasuu ku yidhi:- geedkan qaad oo boqorka ugee!!!.

Markaa boqorka magaalada ka taliya ayaa waxuu dhalay inan indho la', ninkii indhaha ujeexana wuxuu siinayaa illaa boqortooyada masuuliyadeeda!!!.

Maalintii danbe ayuu ninkii geedkii uu shinbirku u tilmamay qaaday boqorkii ayuuna ugeeyay isagoo leh:- waxaan sidaa dawadii inantu indhaha ay ku bogsanaysay, kadibna boqorkii ayaa ku yidhi:- kaalay kun horaa ku fashilmaye ee adna anuu kula eegno’e, ninkiina wuxuu dhahay:- waayay ee waa in seddex jeer lagu maydhaa, sidii markii lasameeyayna inantii ayaa indhaha kala qaadday!!!, halkaas ayuuna ku guursaday boqorna ku noqday (dhaxal suge boqortooyo), waxaana loo dhiibay gabiga furayaashii boqortooyada hal qol mooyee!!!.

Ninkii ayaa muddo siduu uhayay furayaashii maalintii danbe inantii boqorka ku yidhi:- aabahaa maanu igu kalsoonayn, mayee wuu kugu kalsoonyahay oo waa ka kuu dhiibay masuuliyadda boqortooyada oo dhan ee maxaa kaa maqan, ayayna ku dhahday inantii ina boqor ee uu qabay!!!, kolkaas ayuu yidhi:- furaha qolka ee uu haysto muxuu isna iigu dhiibi waayay, markaasbayna ku tidhi:- waar intii kaleba waadigan haystee iska iimaanso, ninkii ayaana utagay odaygii boqorka ahaa ee boqornimada siiyay (dhaxalka boqortooyada) waxuuna ku yidhi:- maadan igu kalsoonayn, wuxuuna ku yidhi:- mayee waan kugu kalsoonahay!!!, markaasuu yidhi:- waayee maxaad furayaasha qolkaa usoo raacin wayday furayaasha, waxuuna ku yidhi boqorkii:- oo ma qolka furihiisaad u oomantahay, ciidankii ayaana lagu amray ufura qolkaa, waxa ku jirana siiya, bacdayn ka saara meesha (xayndaabka boqortooyada)!!!.

Kadib qolkii ayaa loo furay waxaana ku jiray labadii dhar ee googo'naa ee uu maalintii ugu horraysay ku yimi, indhaha inta lagaga dhuftay ayaana dibada loo soo tuuray, kadibna waxuu yimi bartii uu ka guran jiray xaabada, wuxuuna yimi

shinbirkii oo weli ku dhawaaqaya:- " bani'aadamku nimcada ma xejiyo", kolkaas ayuuna ugu jawaabay:- waa runtaa oo annaguba xejin waynay!!!.

Intii Ilaahay (swt) ku siiyo ayaa lagu xamdi naqaa, ee yaanu ku hoggaamin hungurigu, haddiise uu maamulka iyo talada kaala wareego, kuna hoggaamiyo, ogow sharaf iyo karaamo kalatagte'e, meel xun baanuu aakhirka kugu danbaysiiyaa!!!.

## FAA'IIDADA SAMIRKA!!!



Aabbe ayaa waxa ka geeriyootay xaaskiisa (Hooyadii reerka), waxa ayna ka tagtay 5 gabdhood, isla markaana aabuhu isagaa hooyo iyo aababa u ahaa, kadib gabadhihii ayaa waxa soo doonay 4 nin, aabihiina wuxuu go'aansaday inuu u kala guuriyo gabdhaha sida ay u kala wayn yihiin!!!.

Balse gabadhii ugu waynayd ee curadka reerka ahayd ayaa diidday arinkaas, waxa ayna tidhi:- ma guursanayo aabahay oo waayeel ah hooyadayna dhimatay, illaa reerkan aan maamo u noqdo mooyee, yacni (cidda anigaa u wayn waxaana waajib isaaran ah inaan aabahay meel ku ogaado)!!!.

Gabdhihii kale ayaa loo guuriyay nimankii soo doontay halka gabadhii waynayd ay ku hadhay aabaheed oo u baahnaa xanaano iyo qof ogaada, muddo

kadibna aabihii waxa soo wajahay xanuunkii geerida waxa uuna bilaabay inuu isugu yeedho gabdhihii kale oo niman qabaan, farayna inay ka yimaadaan reerahooda si uu ugu dardaarmo, odaygiina waxa uu ku dardaarmay sidatan:- "yaan la iibinin girigan illaa walaashiin idinka wayn ay hesho meel ay u dhaxdo, bimacnaa ay guursato"!!!

Aabihii markuu geeriyooday gabdhii waxay go'aan ku gaadheen inaanay qaadan hadalka dardaaranka aabahood iyagoo aanan dan iyo muraad toona ka lahayn gabadhan walaashood ah oo aabaha dartii iyo ricaayada guriga u diiday inay guursato oo ka dhex baxdo reerka, kadibna iyagoo aanan u aabo yeelin meesha ay walaashood ku hoyan doonto maadaama gurigan qof kale iibsanaayo iyaguna mid walbaahi gurigeeda u laabanayso kadib markii ay qaadato qeybtii dhaxal ahaan u soo gaadhay ayaa gurigii iib loosoo bandhigay!!!.

Halkaa markii xaal marayay ayaa gabadhii dulmanayd waxay la xidhiidhay ninkii guriga laga iibinaayay waxayna uga sheekaysay qisada iyada iyo reerkooda dhex martay, wuxuuna ku yidhi: - "korkaaga dhib ma ahaan doono insha Allah"!!!.

Waxa la iibiyay gurigii dhaxalkiina waa la qaybsaday balse xagay ku dambayn doontaa miskiintii Ilaahay (swt) mooyaane cidkale wehel u ahayn?, muddo yar kadibna waxa gabadhii soo wacay ninkii taajirka ahaa ee guriga iibsaday iyadoo awal ka dalbatay in ay xoogaa guriga sii joogto inta ay hoy ka heleyso!!!.

Gabadhii markay aragtay wicitaanka ninka aad ayay u cabsatay iyadoo mooday in guriga laga kicinayo waxayna ku tidhi:- "iga raalli noqo walal ii cudur daar wali ma helin meel aan hoy ka dhigto", wuxuuna ku yidhi:- "dhib malahan aniga arrinkaas kuumasoo wicin laakiin waxaan kuusoo wacay inaan ku guddoonsiiyo sharciga guriga si aan meher kaaga dhigo, haddaad doontid waad aqbali kartaa inaan noqdo zawjkaaga, haddii aad doontidna gurigaaga waad isaga laaban kartaa, labada xaaladbana guriga adigaa iska leh adigaana xaq u leh"!!!.

Kadib Gabadhii way oyday waxayna ogaatay in Ilaahay (swt) uusan dayacaynin camalka muxsiniinta, waxayna ka aqbashay guurkii, waxayna kula noolaatay ninkii taajirka ahaa nolol xayaati leh oo qurux badan, nin wanaagsan iyo gurigii Aabeheed!!!.

Waxa hubaal ah khayr walba oo aad Allah swt dartii usamayso Ilaahay (swt) camalkaaga ma dayacayo, haddii aanad abaal-marintiisa ifka kulasii kulmina waa hubaal in uu aakhiro kayd kuugusii yahay!!!.

**(Wanaaggu ma gaboobo, Dambigana lama iloobo, Deymuhuna ma dhintaan, Sidaad u dhaqantidna waa laguula dhaqmayaa)!!!.**

# HADDUU ALLE ASTURO CEEBAHAAGA MA JIRTO SABAB AAD URAADISO CEEBAHA DADKA KALE!!!



Wuxuu yidhi:- xilli Habeen ah ayay iigu timid Gurigeyga waxayna igu tidhi:- Alle (swt) ayaan kugu dhaariyee igu caawi inaad ila asturto ceebtayda, kadibna anigoo yaaban ayaan ku idhi:- Walaal maxaa ku haysta?!!!.

Waxay tidhi:- Walaal Nin ayaa i kufsaday muddo ka hor, kadibna Uur ayaan qaaday, haddana waxaan ahay Xaamilo, qof kasta oo Uurkan wax iga waydiiyana waan ka xishoodaa inuu ogaado in la i kufsaday waxaana u sheegaa inaan ahay Xaaskaaga, aana Uurkan adiga kuu leeyahay, waxaana kaa filanayaa khayr iyo Wanaag, ee fadlan ila astur ceebtayda, adna waxaan Alle (swt) kuu weydiinayaa inuu asturo ceebahaaga'e!!!.

Si fiican ayaan uga dhegaystay hadalka, kadibna aniga oo aan u jawaabin ayay iga tagtay una laabatay Gurigeeda, muddo kadibna way dhashay Gabadhii, Kadibna Imaamka iyo Jamaacada Masjidka qaarkood ayaa iigu yimid Gurigeyga iyaga oo iigu Hambalyeynaya dhalashada Cunugayga yar!!!.

Waxaan u muujiyay Farxad iyo Weji-furnaan, kadibna waxaan galay qolkayga, waxaana kasoo bixiyay Boqol Dirham, waxaana u dhiibay Imaamka Masjidka, waxaana ku iri: Walaal Gabadhaas waan qabi jiray, balse hadda waan kala tagnay, bilowga Bil kastana waxaan kuugu dhiibi doonaa Boqol Dirham oo Biil iyo Nafaqo u ah iyada iyo Cunuga yar oo ay ii hayyso, adigana waxaan kaa rajeynayaa inaad iga gaadhsiiso!!!.

Wuu iga aqbalay imaamkii, sidaas ayaana samayn jiray Bil kasta aniga oo aanan arag Gabadha iyo Cunugeedaba, Laba Sanno kadibna waxa dhintay Cunugii:- waxaana ii yimid dad badan oo iiga Tacsiyeynaya dhimashadiisa!!!.

Maalmo kadib xilli Habeen ah ayuu qof soo gargaraacay iridka Gurigeyga, waan ka furay mise waaba Gabadhii ii timid Laba sanno ka hor oo Gacanta ku waddo Boorso ay Lacagi ku jirto, kadibna iyadoo ooyneysa ayay ii dhiibtay Boorsadii waxayna igu tidhi:- walaal halkan waxa ku jira Lacagihii aad Imaamka Masjidka iigu soo dhiibi jirtay, waad ii ceeb qarisay, adna Alle (swt) ha usturo ceebahaaga!!!, balse kama qaadin oo waan ku celiyay waxaana u sheegay inaan Sadaqo u niyeysan jiray, kadibna waxay iga tagtay iyadoo faraxsan iina mahad-celinaysa!!!.

Sannad gudihiis Gabadhii waxa guursaday nin Ganacsade ah, maalmo kadibna Ninkii ayaa iigu yeeray inaan kula shirkoobo Ganacsigiisa!!!, waan ku farxay waana ka aqbalay, wixii xilligaas ka dambeeyayna wuxuu Alle (swt) ii waasiciyay Nolosha, wuxuuna ii furay ilo dhaqaale oo horay iiga xidhnaa!!!.

Qissadani waxay ku dhacday kana sheekeeyay Axmed Binu Mahdi oo Qarnigii Saddexaad ee Hijriyada ku noolaa Magaalada Baqdaad ee Dalka Ciraaq, Imaamu Ibnu-Kathiir ayaana ku wariyay Kutubkiisa Al-Bidaayah Wal-Nihaayah.

Hadduu Alle (swt) Asturayo Ceebahaaga, ma jirto sabab aad u raadiso ceebaha dadka kale!!!.

Qofna haku fadeexaynin dembi uu galay, waayo iridka Towbaddu waa furanyahay, waxaana dhici karta inuu Alle (swt) ka towbad aqbalo, adigana uu kugu hadho Dambigii Fadeexaddu!!!.

## ISXISAABI INTAAN LAGU XISAABIN!!!



Waxay tidhi:- waxa bilawday walaashay wajigeedu inuu bedelmo jirkeeduna daciifo, laakin siday mar walba ahayd, waxay akhrin jirtay qur’aanka, haddii aad raadisidna waxaad ka heli meesha ay ku tukato iyadoo gacmaheeda kor u taagaysa, Allaahna (swt) baryaysa!!!.

Sidaa ayay ahayd mana dhaafi jirin salaaddu mana daali jirin, Aniguse waxaan aad ugu dadaali jiray akhrinta buugaagta sheekooyinka iyo kuwa fanaaniinta, waxaan daawan jiray TV in ta badan, mana gudan jirin waajibka laygu leeyahay si dhammaystiran, salaaddana ma ahayn mid u tukata si toos ah!!!.

Markii aan xidhay fiidiyowgii aan ka daawanayay filmaan-ta kala duwan muddo saddex saaca oo isku xigta, ayaa aadaankii salaadda subax laga adimay

masaajid noo dhow, waxaan aaday sariir-taydii si aan u seexdo, waxaase ii yeedhay walaashay iyadoo fadhida meeshii ay ku tukanaysay, waxayna tidhi iyadoo si qabaw iila hadlaysa:- “ha seexan adigoo aan salaadda subax tukan”!!!, anigoo dhib-sanaya ayaana ku idhi:- oo waxa ka hadhay saacad, aadaankii aad maqashayna waa kii hore, sidaa ayayna walaashay ahayd ilaa uu ku dhacay xanuun aan caadi ahayn ayna noqotay mid dul taal furaashkeeda!!!.

Habeen habeenada ka mid ah ayay ii yeedhay iguna tidhi:- “Kaalay Hanaa agtayda”, ma aananse awoodin inaan diido anigoo og wanaageeda iyo runteeda, kadibna Cod ay cabsi ku jirto ayay igu dul akhriday aayaadkii quraanka ahaa:- {Naf walba waxay dhadhaminaysaa geerida waxaana loo oofinayaa maalinta qiyaame camalkii ay la timi}, way aamustay, wax yar ka bacdi ayaayna itidhi:- miyaadan rumaysnayn geeri-da?, waxaanaan idhi:- “ haa waan rumaysnahay”!!!.

Kadib waxay itidhi:- “miyaadan ogayn in lagaa xisaabin doono mid kasta oo yar ama wayn oo aad samayso”, anna waxaan idhi:- “ haa, balse Allaah (swt) waa kan dunuubta dhaafa naxariistana, noloshuna waa mid dheer!!!, waa kalmad qof kasta oo caqli yar ku hadlo waayo Allaah (swt) waa mid cadaabkiisu daran yahay!!!.

Waxayna iigu jawaabtay:- “walaashaydiiyey miyaadan ka baqayn geerida mideeda kadiska ah, fiiri walaashaa Hinda oo ahayd mid kaa yar waxay ku dhimatay shil baabuur, sidoo kale miyaadan ogayn heblaayo iyo heblaayo illaa ay tirisay gabdho badan oo aan aqaan oo hore u dhintay”, Iyadoo hadalkii sii wadda ayayna tidhi:- “mawdku ma yaqaan cimri mana laha qiyaas”!!!.

Wax yar ka bacdi iyadoo qol mugdi ah ku dhex jirta ayaan ku idhi:- sannadka miyaadan noo raacayn fasaxa waxaan rabnaa inaan magaalo kale aadno’e, si kadis ah ayayna iigu jawaabtay waxayna tidhi:- “laga yaabee inaan sannadkan u safri doono safar fog, walaal Hanaa Ilaah (swt) ayay noloshu gacantiisa ku jirtaa waxayna bilawday inay oydo!!!.

Waxa hadda ka hor walaashay lagu sheegay in uu hayo cudur xun oo aan laga badbaadi Karin laakiin iyada waa laga qariyay, markay oyday ayaana u maleeyey in loo sheegay xanuunka haya, waxaana ku idhi:- maxaad la ooyaysaa, ma xanuun baa hadda ku haya!!!, waxayna iigu jawaabtay:- “ma waxaad u malaynaysaa inaan cudurka ihaya la ooyayo, waxa laga yabaa inaan ka cimri dheeraado dadka ugu caafimaadka badan, adiguse illaa goormaad noolaanaysaa, inkasta oo aad noolaatona waxa ka dambeeya geeri”!!!.

Gacanta ayay isoo qabatay waxayna igu tidhi:- “wax farqi ah inoo ma dhaxeeyo kulligeen, waan guuri, waxaan ka tagaynaa adduunyadan ama janno ama naar, miyaadan maqal hadalkii Allaah (swt) uu quraankiisa ku yidhi:- { Qofkii ka badbaada naar ee janadana la geliyo ayaa ah mid guulaystay}!!!.

Waan ka dhaqaaqay iyadoo ileh ha illaawin salaadda, Ilaahay (swt) ha ku hanuuniyee!!!.

Subaxdii sideedaad ayaa anigoo hurda laygu soo garaacay albaabka mana ahayn waqtigii lay kicin jiray, waxaana maqlay oohin, waxaana is idhi “yaa

Rabbi war tolow maxaa dhacay", xaalkii walaashay Nuuro ayaa sii xumaaday, aabahay ayaana u qaaday cusbataalka.

Muddo dheer ka dib markii aan sugay akhbaartii Nuuro, saacaduna ay gaartay Kowdii duhurni-mo ayaa aabahay taleefoon soo diray, wuxuuna noo sheegay inaan soo booqan karno, Hooyaday ayaana waxay ii sheegtay in hadalka aabe ahaa mid welwel iyo walbahaar ka muuq-do.

Waxaan u yeedhnay dareewalki gaadhiga si deg-deg ah ayaanna u kor-nay gaadhiga, cusbitaalka oo aad nooga fogaa waxuu ila noqday mid dhow, Hooyaday ayaana dhinacayga fadhiday iyadoo leh:- "waxay ahayd gabadh saalixad ah oo i adeecda waligayna ma arag iyadoo waqtigeeda dayacda"!!!.

Waxaan galnay albaabkii cusbitaalka, waxaan sii dhex marnay dadkii cusbitaalka jiifay, dhegahaygana waxa ku soo dhacayay iyadoo la leeyahay:- "kan halkan jiifa waa indha beelay, kanna shil ayuu galay, kanna waa gubtay, halka mid ayaa dhintay oo laga qaaday", dadka meesha jiifayna way il dar-naayeen, waxaana kala garan waayey in ay yihiin dad aakhiro ama dad adduun!!!.

Jaranjar ayaan si deg-deg ah ku fuulnay, waxaana naloo sheegay in walaashay la dhigay qaybta dadka khatarta ah la dhigo, waxaana nasoo kaxeeyay gabadh ka mid ah gabdhaha kalkaalisada, waxayna noo sheegtay inaan loo ogolayn qof wax ka badan inuu u galo.

Waxa markii hore u galay hooyaday, laba daqiiqo ka bacdina way ka soo baxday iyadoo aan awoodin inay qariso oohinteeda, aniga ayaana galay, waxayna i siiyeen laba daqiiqo iyagoo ileh haku badin hadalka.

Waxaan ku idhi sidee tahay walaal Nuuro, waxayna itidhi:- waan ladnahay, waxaan ku fadhiyay sariirteeda, waxaan taabtay kubkeeda (lugta), lugtii ayayna iga fogaysay, kadib waxaan ku idhi:- waan ka xumahay haddii aan ku cidhiidhyay, waxayna itidhi:- maya, laakin waxaan ku fakaray hadalkii Eebe (swt) yidhi oo ah:- "Wal tafatu saaqu bi saaq- ilaa Rabbi yawmaidi-ni-l-masaaq {Markay isku marmaan labada lugood sakaraadka awgiis, maalintaa Illaah xagiisaa la aadi.}!!!.

Waxay itidhi:- “walaal Hana ii soo ducee, waxa laga yaabaa inaan qaabilo mar dhow maalmihii ugu horeeyay ee aakhiro’e, safarkayguna waa mid fog, sahaydayduna waa yar tahay’e”, kadibna waxaa iga soo daadatay ilmo markaan maqlay kalmadahaas, waan ooyay mana garanayn meel aan joogo.

Maalintaa ka bacdi waxa indhahayga laazimtay ilmo, wuxuu ahaa aabahay mid ii baqa in ka badan Nuuro waayo igama ay baran inaan sidaa u ooyo, markii qorraxdu dhacdayna waxa la soo sheegay in ay Nuuro dhimatay.

Makala sooci karin qof yimi iyo wax la yidhitoona, yaa Allaah (swt) xagee anigu joogaa maxaase dhacay, waxaan kari waayay oohintii, markaa ka dib aabahay ayaa gacanta I qabtay, waana baxnay si aan u sagootino.

Markii aan eegay iyadoo sariirta saaran oo mayd ah, waxaan xusuustay aayaddii ay akhriday oo macnaheedu ahaa { Markay isku marmaan labada lugood sakaraadka awgiis, maalintaa Allaah xagiisaa la aadi }, kabacdina waxaan xusuustay inay ahayd mid iigu ducaysa hanuunka oo jecel in Allaah (swt) i hanuuniyo.

Waxay ahayd mid habeenno badan oyday iyadoo iiga sheekaynaysa geerida iyo xisaabta aakhiro, Ilaahow ii gargaar.

Makii aan guriga imina waxaan arkay sujaayaddii ay had iyo goor ku tukan jirtay iyo kitaabkii ay akhrin jir-tay, waxaan kale oo aan xasuustay inay caawa tahay habeenkii ugu horreeyay ee ay u hoyatay qabriga markaas ayaan ooyay ayaamihii iga dayacmay, waxaana Ilaahay (swt) ka baryayaa in Illaahay (swt) ii naxariisto, iina dambi dhaafo, si kedis ah ayaana naftayda waxaan u waydiiyay haddii aan ahaan lahaa anigu qofka dhimatay xaggee lay gayn lahaa, muxuuse masiirkaygu noqon lahaa?!!!.

Waa su’aal looga baahan yahay in uu qof kastaa naftiisa waydiiso.

Waxa kale oo aad naftaada waydiisaa ‘haddii gabadhii habeen iyo maalin tukanaysay oo gudanaysay waajibaadka lagu leeyahay ay tidhi markii ay naftu ka baxaysay:- “safarkaygu waa fog yahay sahaydayduna waa yartahay”, adigu xagee joogtaa’, gaar ahaanna gabdhaha aan waqtigooda ka faaii-daysan oo aan xisaabin naftooda xagee buu noqonayaa masiirkooda iyo meesha Allaah (swt) uu gaynaayo markay geeriyoodaan ka bacdi, Ilaahay (swt) ha na asturo.

Aan dadaalno oo aan ku cibro qaadanno qissadan iyo adduunku inuu yahay meel aan la joogayn, aan Rabbina (swt) u noqonno, waqtiga yar aan adduunka joognona aan ka faa'iidaysanno oo jidhkeenna iyo diinteennaba aan xifidno.

Jidhkeennu waa cawro, ilaahayna (swt) aan ka baqno, kulaylka adduunka ayaan u adkaysan la'nahay ee sidee ugu adkaysan karaynaa kulaylka aakhiro, Rabbina (swt) ha inaka badbaadiyo ee aan khilaafno hawadeena oo diinta aan raacno.

Waxay tidhi Hanaa:- " maalintii ay walaashay dhimatay waxaan bilaabay inaan guto waajibaadka laygu leeyahay, haddii aan maqlo aadaanka salaadda subaxna waan kacaa waxaanna dareemay in walaashay ay ku jirtay raaxo iyo deganaansho aniga iga maqnayd markii aan daawashada filmaanta ku daahi jiray!!!.

**Haddaad waabariisato ha sugin galab, haddaad galabaysatana ha sugin subax, waayo ma-ogid goor tan ALLIHII (swt) lahaa uu qaadandoono, kuna dadaal sikin kasta iyo goob kastaba raali-gelinta ALLAH (swt).**

**ALLOW KHAATUMADA KHAYR NOOGU KHATIN!!!.**

## SACII LIQAY MOBILE KA!!!



Waa wax la fili karo in aad aragto waxaad la yaabto inta aad adduunyada joogto, haddaba sida lasoo tebiyay degmada Hodan ee Magaalada Muqdisho waxa ka dhacay arrin dad badan ka yaabisay kadib markii uu Sac uu lahaa nin deegaanka ka tirsan uu liqay Mobile uu lahaa nin kale!!!.

Lo'da oo lagu yaqaan inay wax walba cunto sida Xaashiyaha , Bacda iyo Baakadaha ayaa waxaa dhacday in nin bac Qaad ah sitey isla markaana waxaa Bacda Qaadka ugu dhex jirey Mobile, wuxuuna reer sac u joogey ka codsaday in la siiyo Musqul si uu ugu soo xaajoodo, waxa uuna qaadkiisii saartay meel darbi ah, dadkii guriga joogeyna wax feejignaan ah ma siin qaadka uu ninku meesha saartay, waxaana dhacday intii uu musqusha ku jiray in Sacii reerku lahaa soo galay daaraddii kadibna uu afka si fiican ula helay Qaadkii darbiga saarnaa oo uu ku dhex jiray Mobile-ku!!!.

Wuxuuna Mobile-ku ahaa mid yar oo aan sidaa u weyneyn, waxaana Sacii u suuragashay in uu isku liqo caleentii Qaadka iyo Mobile-kii!!!.

Ninkii markii uu soo dhammaystay xaajaddiisii Musqusha ayuu dibedda u soo baxay, waxa uuna arkay haraadigii qaadka oo ka sii laalaada afka Saca, inta uu naxay oo af-labadii yeedhay ayuuna ku dhawaaqay:- “Alla Mobile-keygii-Alla Qaadkaygii”!!!.

Reerkii guriga ayaa qaylo dhaantii ku soo baxay, waxa uuna ninkii u sheegay reerkii in Sacan uu ka cunay qaadkii uu watay iyo waliba Mobile ku dhex jiray bacda qaadka, Odeygii reerka oo yaabban ayaana yidhi:- “Qaadka garanay laakiin maxaa caddayn kara in Sacu uu liqay Mobile”!!!, kadibna waxa la wacay Mobile-numberkii waxa uuna yidhi “Lama heli karo, Waa mashquul, khadka ayuu ka maqan yahay iyo wixii la mid ah”, meeshiina waxaa ka bilowday muran xooggan oo u dhexeeyay ninkii socotada ahaa iyo reerkii!!!.

Ninkii lahaa saca ayaana isagu soo jeediyay in haddii uu Sacani liqay Mobile waxa lagu kala baxayaa ay tahay in Raajo (x-ray) la saaro Saca, murankii ayaana sii dheeraaday, qolo kale ayaana soo jeedisay in saca laga qabto ilaalo gaar ah si saxaradiisa loola socdo!!!, mar kale waxa la soo jeediyey in saca la qalo qarashkana uu bixiyo ninka Mobile-ka leh, hase yeeshee ninkii waa uu diiday, aakhirkiina waxa Odoyaashii meesha isugu yimid la go’aamiyey in ninkii Mobile-ka lahaa loo celiyo xoogaa lacag ah, sidaa ayaana markii dambe lagu kala baxay!!!.

Soomaalidu waxay ku maah-maahdaa:- cimrigaaga oo raagaa geel dhalaayana wuu ku tusaa, Ujeedka maah-maahanina ma aha sida kamuuqata ereyada ay ku dhisantahay maah-maahdu, ee waxa weeye markasta oo uu wakhtigu is beddelo adna aad sii noolaatid oo aanay taadii noqon in aad arki doontid lana kulmi doontid waxyaabo ku cajab geliya oo aanad hore usii malaysan innaba in aad arki doontid ama aad la kulmi doontid insha Allah!!!.

Waxa kale oo ay qisadani ku tusinaysaa go'aan kasta oo lagaadho ama la qaato iyada oo aan laga baaraan degin laysna waydiin saamaynta ka iman karta arrintan iyada ah, in badanka ay ubadantahay in dhibi ka timaaddo ama lagu fashilmo, waayo haddii ninkan qaadka meesha saaray uu iswaydiin lahaa ugu yaraan hal su'aal oo ku saabsan meeshan uu waxdhiganayo ama waxa uu kala kulmi karo, waxa laga yaabi lahaa in kasta oo ay qaddartu jirto qorantahayna haddana in aanay saasi-saa noqoteen!!!.

## ADDOONTII ILAAHAY KU XIDHNAYD!!!



Qisadani waa mid ka mid ah qissooyinka ugu Cajiibka iyo layaabka badan, uguna soo Jiidashada badan oo ay qoreen Culumada Islaamku, qisadan oo Run ahaantii noqon doonta mid dareen baaxad leh kugu reebta, akhris wacan iyo udiyaargaraw fiican:-

Gabar aad u Qurux badnayd, Hanaan Wacanna Ilaahey (swt) ku Manaystay ayaa waxa la Sheegay inuu aad uga Helay Nin ay meel isku Arkeen, ninkii ayaana aad ula Yaabay Gabadhan Quruxdeeda iyo Qaabka Ilaahay (swt) u Sameeyay, wuxuuna isku dayay inuu Gabadhan Xidhiidh la Sameeyo, si uu ula Sheekaysto, balse marar badan ayay ku Gacan Saydhay, Iyadoo ka diiday inuu Hadal la Furto!!!.

Ninkii ayaa Waddo walba u soo maray siduu mar uun ku Heli lahaa Gabdhan, Balse Addoontan Ilaahay (swt) ku Xidhan, Quruxdana lagu Manaystay ayaa Go'aankeeda ku Adkaysatay, iyadoo Fursad oo dhan u Diiday inuu Ninkani usoo Dhawaado!!!.

Ninkii ayaa Go'aansaday inuu Kufsado Gabadhan, oo uu Xoog wax uga Qaato, maadaama uu Xeelad kale wax uga waayay, wuxuuna Xoogay Gabadhii oo aan Raali ka ahayn, wax walbana Qasab ayuu uga Qaatay, balse Arrinka la yaabka leh ee Qalbigaaga Dhaqaajin doona ayaa ah Arrinka ay Gabadhani ku Dhaqaaqday intii uu Ninkani Howshiisa watay!!!.

Gabadhan ayaa Aragtay in Ninkani uu ka Xoog badiyay, wax ay samayn kartaana aysan jirin, waxayna ku Fikirtay waxa ugu Dhow ee Gacanteedu Gaadho inay soo Qabsato, balse Sheygii ugu Dhawaa ayaa Noqday Dab shidan oo meel Agteeda ah yaallay, Waxayna Gacmaha la Gashay Dabkii ayadoo Gacmaheeda u Badheedhay inay Gubto!!!.

Ninkii ayaa Howshiisa Dhamaystay, balse markuu ka Istaagay ayuu la Yaabay Ficilka ay Samaysay Gabadhu iyo Sababaha ku Dhaliyay iney is Gubto, waxuuna Waydiiyay:- Maxaa Sababay?!!!, iyadoona ugu Jawaabtay:- Markii aan Arkay inaad iga Awood Badisay, oo aanan Haynin Waddo kale oo aan isaga kaa Celiyo, waxaan Go'aansaday inaan Gacmaheyga Gubo, si aanan kuu Dareemin, Danbigana aanan Kuula Wadaagin!!!.

Arrinkan ayaa la Yaab iyo Dhakafaar ku noqday Ninkii, balse Ficilka ay Samaysay Gabadhani ayaa noqday tusaale Cajiib badan, Qalbiga Qofka Muslimka ahna Dhaqaajiya, ayadoo ay Habboon tahay in lagu Cibro qaato!!!.

Dhib kasta oo kugu habsata kuna qabsata hayeeshee haddana adiga ay kaa go'antahay inaad falawgeed qabato sidii aad dhibtaas iyada ah uga samata bixi lahayd, waa hubaal in aad aakhirka xal kama danbaysa u heli doonto aanaad ku guulaysan doonto xalkaa, wax kastaana waxa ay ubaahanyihiin go'aan qaadasho adag iyo hal adayg nimo, go'aankuna adiga ayuu gacanta kuugu jiraa!!!.

## NOQO WAKHTI KASTA MID ALLE (SWT) XUSA OO XASUUSTA!!!



Nin reer miyi ah ayaa marayay meel buur agteeda ah, wuxuuna arkay nin waayeel ah oo buurta agteeda fadhiya, wuu indho la'aa waxaana ninka jidhkiisa ka muuqday in uu qabo cuduro aad ubadan, waxay u ekayd in odayga uuna sii noolaan doonin!!!.

Qeybo jidhkiisa ka mid ah dareen malahayn, sidaa darteed 1 dhinac oo jidhkiisa ah kaliya buu ufadhiisan karayay!!!.

Markii ninkii reer miyiga (baadiyaha) ahaa uu in yar gudbay (dhaafay) odaygii ayuuna maqlay odaygii maskiinka ahaa oo leh:-"Allah (swt) ayaa mahad leh

oo iga badbaadiday cudurro faro badan oo uu dadkiisa ku imtixaamay, runtii Alle (swt) wuxuu iga doortay qaar fara badan oo kamid ah kuwa uu abuuray"!!!.

Ninkii reer miyiga ahaa ayaa ku soo laabtay odaygii,wuxuuna ku yidhi:- walaal wax Alle (swt) kaabadbaadiyay miyaa jira oo ah cudur?, Allah (swt) baan ku dhaartaye majiro cudur kamaqan jidhkaaga Ee bal Allah (swt) ka bari (tuug) inuu ku caafiyo, odaygii ayaana asagoo dhinac isku tiirinaya ugu jawaabay ninkii:- walaal haddaan haysto af iyo carrab aan Alle (swt) ku xuso iyo qalbi aan Alle (swt) ku xiriiriyo maxaa kaloo iga maqan?, nolosha qiimaheeduna waa intaas, intaasna dad badan ayaa jira oo aanan haysanin!!!.

Ereyadan ayaa baddalay dareenka ninkii reer miyiga ahaa, oo ahaa nin aanan diinta ku fiicnayn, Alle (SW) ayuuna u toobad keenay oo dambi dhaaf weydiistay, muddadaas kadibna wuxuu noqday mid Alle (swt) xusa oo xasuusta!!!.

Noqo mid wakhti kasta Alle (swt) xusa oo xasuusta, una mahad celiya marxalad kasta oo uu ku suganyahay, marxaladaha ad-adag ee kusoo maraana yay noqon kuwo ku illawsiiya mahadnaqa Eebbe (swt), waxaana laga yaabaaba in adiga uu khayrku kuugu jiro arrintaa iyada ah, ka wax walba ogina waa Allah uun (swt)!!!.

**(ALLOW NAXARIISTAADA NASII YAA RABBI).**

## BISADDA IIGU DHIIB!!!



Nin baa aad wuxuu u jeclaa inuu gurigiisa Ku qayilo, kadib waxaa nafta u keentay bisad guriga joogtay, maalinkii danbe ayuu bisaddii jawaan Ku riday oo xaafaddii kafogeeyay, ka dib gurigii ayuu Ku soo noqday mise way joogtaa!!!.

Maalinkii danbe ayuu haddana Ku riday jawaan oo wuxuu is yidhi masaafo fog gee illaa 40 luuq ayuuna maray, markuu bisaddii meel dhigay ayuuna kasoo tagay oo gurigii ayuu is dhahay aad, haddaba tolow maxaa dhacay!!!.

Gurigii ayuu garan waayay, maalintii oo dhan buuna socday, kadib wuu daalay, dabadeed geed cidlo ah intuu fadhiistay buu xaaskiisii wacay wuxuuna Ku yidhi:- bisaddii ma joogtaa guriga?!!!, Iyana waxay ku tidhi:- “haa’’, markaasuu

wuxuu dhahay:- naa iigu dhiib doofaaradda ballan waaye oo Mardambe masoo wadayee meeshay soo martay ha ii sheegtee aan soo maree!!!.

Maah-maah soomaaliyeed ayaa odhanaysa:- booraan hadimo ha qodin, haddaad qodidna ha dheerayn, ku dhici doontaana ma'ogide!!!, maah-maah kale oo soomaaliyeed ayaa Iyana ahayd:- inta aanad falin kafiirso, waa muhiim tallaabo kasta oo aad qaadayso in aad marka hore inta aanad go'aanka qaadan iswaydiiso waxa cawaaqib ka iman kara, go'aan qaadashadana aad ku darsato., sidoo kalena ka digtoonow shirqoolada aad maleegayso waayo waxa lagayaabaa in marar badan aad adigu uun is-shirqoosho!!!.

## KA FOGOW WAXA DHIBTA KUU KEENAYA XATTAA HADDII UU QOF KALE MASIIRKAAS KU FAA'IIDAY!!!




Nin Beeralay ah ayaa waxa uu lahaa Labo Dameer oo uu Mid kastaba u isticmaalo baahidiisa gaarka ah, Inkastoo adeegyo isku Mid ah ay Fuliyaan Labada Dameer haddana Maalin Maalmaha kamid ah waxa dhacday in Labadii Dameer lagu raro Labo Shay oo kala duwan.

Mid baa la saaray Cusbo halka Midka kale lagu raray Digsi iyo Saxuun, kadibna Lugta loo furay illaa inta laga gaadhayo tuulada uu Socdaalku ku ekaa, saacado badan oo Safar ah kadibna waxa dhacday in Dameerkii Cusbada siday uu dhaqaaqi waayo isagoo dareemay daal fara badan iyo tabar darro maadaama miisaanka Cusbadu uu aad u culus yahay halka Dameerkii kale ee xambaarsanaa Saxuunta iyo Digsiyada Madhanina uu farxad daraadeed la tamash leeyo hareeraha Waddada taasi oo ay ugu wacan tahay Qafiifka Alaabta saaran dushiisa!!!.

Si kastaba arrinku ha ahaadee, Dameerkii Dhabarka ku siday Cusbada waxa dhacday inuu ku leexdo kuna dabaasho Haro-wayn oo Biyo galeen ah isagoo ku dadaalayo sidii uu u soo ceshan lahaa awooddii badneyd ee kaga luntay Cusbada uu Dhabarka ku sido!!!, taasi oo ugu dambayn u Saamaxday inuu Biyaha ka soo baxo xaal uu yahay Mid illaaway Daalkii una Muuqday in hadda ay Naftii ku soo laabatay, Maxaa yeelay kala badh Cusbada oo dhalaashay milantayna darteed ayaa Sababtay in Dameerku uu dareemo fudayd iyo Miisaan ka fudud Midkii hore!!!.

Dhanka kale Dameerkii siday Saxuunta iyo Digsiyada Madhan ayaa Markiisa Qaraar ku gaadhay inuu Biyaha ku dhex dabaasho Maadaama uu arkay Firfircoonida uu helay Dameerka kale iyadoo taasi badalkeeda uu Mar Qudha Biyihii isku tuuray!!!, waxa uuna debedda u soo baxay iyadoo Digsiyadii iyo Saxuuntii oo dhan Biyo xad dhaaf ahi ka buuxsameen!!!.

Haddaba waxa la yaab leh in Dameerkii goor hore raaxada ku Jiray uu tallaabo Socod Qaadi waayo, Maaddaama waqti xaadirkan uu Dhabarka u ritay Miisaan tan dhaaf ah oo aan hore usoo Marin, waxa ayna arrintani keentay in Dameerkii uu Dhabarkiisa Labo Qeybood Noqdo Culayska saaran awgiis dabadeedna uu halkaasi ku Baqtiyo!!!.

Ugu danbeyntii Biyo dhacu waxa uu yahay inaad ka fogaato waxa dhibka kuu keenaya xittaa haddii Qof kale uu Masiirkaas ku Faa’iiday, Is weeydiina goor kasta Cawaaqibka kaaga iman kara Sheyga uu Sameeyay Saaxiibkaa kahor inta aadan u istaagin la imaanshahiisa ficil Qatar gelin karo Naftaada ama kuu keeni karo Dhimasho deg-deg ah!!!.

## MAARAYNTA WAKHTIGA!!!




Wakhti waa cabbirka iyo xisaabinta muddada u dhaxaysa laba goor oo kala duwan, middaasi oo ka soo bilaabanta wax la soo dhaafay, imminka (hada) iyo goor soo socota oon weli la gaadhin, sidoo kale wakhtigu waa tirinta isbeddelka saacadda, habeenka iyo maalinta, maalmaha todobaadka, billaha, sanadka, qarniga iyo wixii ka badan intaas.

Wakhtigu wuxuu wax badan ahaa qodob ka mid ah diimaha, sayniska, taariikhda iyo filoosafiga taasi oo si kala duwan loogu xusay dhammaantood, In kastoo qodobka ah "wakhti" uu ku fadhiyo micno aad u wayn oo saamayn ku leh qodobbo badan oo kala duwan, haddana waxa wakhtiga inta ugu badan loo isticmaalaa qiyaasta, la socoshada iyo xisaabinta in muddo ah oo noqon karta wax la soo dhaafay, mid hadda la joogo ama mid soo socda!!!.

Waxaa wakhtigu leeyahay halbeegyo lagu xisaabiyo oo lagula socdo, kuwaasi oo loo isticmalo siyaabo kala duwan, halbeegyada wakhtiga lagu cabbirona waxa ka mid ah saacadda (Ilbiriqsi, Daqiiqad), maalinta iyo habeenka, Todobaadka, bisha, sanadka, qarniga iyo wixii la halmaala ee intaas ka badan!!!.

Intaas waxa dheer, wakhtiga waxaa lagu xisaabiyaa dhammaan ficilada iyo dhacdooyinka Sayniska, Tusaale ahaan, cilmiga Fiisikiska marka la baarayo xawaaraha shey ku socdo waxa muhiim u ah wakhtiga!!!, sidoo kale, cilmiga Filoosofiga ah waxa rukun weyn u ah wakhtiga ayadoo loo cuskanayo marka laga soo bilaabo horraantii iyo dhismihii ugu horreeyey ee Koonka!!!.

Diimuhu dhammaantood waxay in badan ka warramaan wakhtiga, ayadoo laga soo bilaabo horraantii wakhtiga, wakhtiyada soo socda sida aakhiro, qiyaamaha iwm!!!.

Cilmi Falagu wuxuu in badan ka warramaa socdaalka meerayaasha Koonka iyo wakhtiga, sidii uu ku bilaabmey dhammaan koonku ayadoo la tixraacayo wakhtiga, sidoo kalena waxay isticmaalaan halbeeg ku salaysan wakhtiga!!!, xisaabinta wakhtigana waxa ka mid ah saacadaha taas oo loo isticmaalo si loola socdo kolba wakhtiga lagu jiro, taas oo ah lixdan (60) ilbiriqsi!!!.

Haddaba wakhtigu waxa uu leeyahay muhiimad gaar ah, Muhiimadda wakhtigana qofkasta Oo caqli u saxiib ah wuu garanayaa, mana aha inaan hadda idin baraayo, Lakiin nafteyda iyo idin-ka ayaan rabaa in aan Idin xasuusiyo muhiimadda

wakhtiga, waayo waxa Aad uga hadashay diinta islaam-ka waana muhiim inaan ku tashano wakhtigeena, qofkii wakhtigiisa khasaariya Oo dayacaana waa qof noloshiisa khasaariyey dabcan!!!.

Wakhtigeenna maka faa'iideysannaa? Maynoo qorsheysan-yahay wakhtigeennu? maxaase Aan uga faa'iideysannaa wakhtigeenna ma wax-dani inooku jirto adduun iyo Aakhira-ba, mise waxaan ku luminey wax maalaa-yacni ah?, wakhtigase Muhiima-ddiisana maku baraarug-sanahay?!!!.

Waxaa laga yaabaa inaan ku soo dhaweyneyno gacmo furan, kuna farax-sanahay maal-maha, asbuuca, bisha, iyo sannada-ha nadhaafayo, lakiin muhiimadda waxa weeye jaais kaas na dhaafayo maka faa'iideysannay, maxay-se nagu dhaafeen waana su'aal Aad muhiim u ah inaad is-weydiiso!!!.

Wakhtigu waa noloshaada, wakhtigu waa qofka noloshiisa waana hantidaada, waa inaad ka faa'iideysataa, inteysan kaa faa'iideysan habeen-ka iyo maalintu, waayo wakhtigu wuu ku jarayaa kuumana istaagaayo, sidaas lid-keedna waxaad Usii dhawaanay-saa gaboow-ga iyo geerida!!!.

Ilaahay (swt) wuxuu doono ayuu ku dhaaran-karaa Oo makh-luuqaad-kiisa kamid ah lakiin banii'adam ku waxey ku dhaaran-karaan Allaah (swt) Oo kali ah, Ilaahayna (swt) in badan ayuu ku dhaartay wakhtiga waxayna ku tusineysaa muhiimadda uu leeyahay wakhtigu!!!.

Wakhtiga haddii Aadan ka faa'iideysan wuxuu kugu keeni karaa inaad nolosha ka dhacdo iyo Inaad mustaqbal yeelan weydo iyada Oo aysan meesha ka maqnayn in lagugula xisaab-tami doono, daqiiqad walba Oo kaaga baxa maalaa-yacni, ama ficil aysan inoo banaynin diinteena suuban Ee islaam-kuna waa mid lagu waydiin doono!!!.

Caamir binu cabdi qays wuxuu kamid ahaa taabi-ciintii, waxaana laga sheegaa inuu nin ku yidhi ila-hadal kadib-na wuxuu ugu jawaabay "Qorraxda ii qabo inta Aan kula had-laayo"!!!, taasina waxay ku tusineysaa sidey uga faa'iideys-teen dad-kii wanaagsanaa wakhtigooda, kumana aysan lumin wax Aan faa'iido iyo dani ugu jirin!!!.

Wakhtiga waxaad uga faa'iideysan kartaa marka hore inaad fahamto qiimaha Uu leeyahay wakhtigu, qofkuna caadiyan wuxuu samayn karaa kana faa'iideysan karaa wuxuu qiimihiisa garanaayo, markaas ayaadna bilaabi kartaa inaad ka faa'iideysato wakhtiga, ogowna marka hore faa'iidada iyo qiimaha wakhtigu u leeyahay noloshaada!!!.

Waxaa laga sheegaa saxaabiga weyn Ee cabdulaahi ibnu mascuud (rc) inuu yidhi:- " wax iiga murug badan malaha maalin qorroxdu iisoo baxday, cimrigey-guna naaqusay anigana aysan iisiyaadin wax cilmi ah"!!!.

Waa inaan isweydiinnaa maxaa inoo kordhay maantay? Waxaadna Ogaan kartaa wakhtiga qiimihiisa markii Aad xisaab-tamayso waayo waxaad garan-kartaa wuxuu kuu gooyey!!!.

Waxaad heystaa 24 saac Oo kaliya maalin kasta sidaas darteed waa inaad ka faa'iideysataa saacad kasta, qorshaha aad leedahayna waa inuu noqdaa mid qoran!!!, waxaana ku jira 86400 Oo ilbiriqsi 24 saacadoodba, 1 ilbiriqsi-ba markuu kaa go'o waxaa naaqusey wakhtigaaga qayb-kamid ah!!!, waxaana wakhtiga ka hadlay xassan al-basri wuxuuna leeyahay:- " ibni aadanow waxaa tahay maalmo, haddii ay kaa tagto maalin kamid ahina waxaa kaa tagay qayb kaa mid ah"!!!.

Wakhtigu waa noloshaada, waana hantidaada, haku ciyaarin wakhtigaaga ugana faa'iideyso wax dani kuugu jirto waayo kaas ayaa ku anfacaayo adduun iyo aakhiroba!!!.

Noloshaada ka faa'iideyso una garo wakhtiga shayga ugu qaalisan ama mudan in looga faa'iideysto sida ugu habboon isla markaas-na ka ilaali In Aad dayacdo ama Aad ku bixiso wax-yaabo aysan faa'iido kuugu jirin adduun iyo mid aakhiraba, waayo wakhtigu waa shay haddii la dhowro Aad kaga guul gaari karto Adduun-yadaada iyo aakhiradaada labadaba!!!.

Wakhtigu waa shalay, maanta iyo berri, waxaana laga doonayaa qofku inuu ka faa'iideysto wakhtiga uu joogo waayo wixii horey inoo dhaafay masoo ceshan karno, waxa soo socdana ma garan-karno!!!.

Maxammed ibnu xassan wuxuu ardey u ahaa imaamu abii-xaniifa, habeen-kii ayuuna saddex u qaybin-jiray, qayb kamid ah wuu seexan-jiray, qaybna wuu tukan-jiray, qaybta saddexaad-na wax ayuu darsi-jiray!!!, waxaana sidaas sameeyey rag badan Oo uu kamid ahaa xaafid al-xasiirii waxaana laga baranayaa muhiimadda iyo qorsheynta ay wakhtiga siiyeen!!!.

Waxay ka faa'iideysteen wakhtigooda, habeen-kii ayaana saddex loo qaybiyey, waxaana la yiraah-daa dab-can qofka noloshiisu waa wakhtiga Uu nool-yahay, sidaas darteed miyeysan noqoneynin hadduu qofku khasaarsho wakhtigiisa in uu khasaariyey noloshiisa?, waxaana intaas Oo dhan inoogaga filan muhiimadda wakhtiga inuu kamid-yahay su'aalaha qiyaamaha lays-weydiin doono!!!.

Goorma ayuu wakhtigaagu kaa dhammaanayaa ? waan garanayaa oo qof ka jawaabi karo malaha, waayo Allaah (swt) ayaa garanaayo qofkaste wakhtigiisa iyo meesha uu ku eg-yahay, waxaana jaanis inoogu filan intaan caafimaad qabno inaan ka faa'iideysanno, gaar ahaan inta Aan dhallinta-nahay inaan Aad uga faa'iideysanno, waayo Su'aalaha lays waydiin-doono qiyaamaha waxaa kamid ah qofka dhalin-yaranimadiisii!!!.

Kasoo qaad inaad noolaan karto 60 sanno, habeen iyo maalinkasta oo noloshaada kamid ah waxaad seexataa 8 saacadood, haddii laysu geeyo wadarta wakhtiga aad hurdo ku qaadatayna waxay noqonaysaa 20 sanno oo kamid ah noloshaada!!!.

Waxaad shaqaysaa 8 saac habeen iyo maalinkasta, haddii laysu geeyona wadarta wakhtiga aad shaqaysay waa 20 sanno oo noloshaada ah!!!, 15 sanno oo noloshaada ka mid ahna waxaad ahayd ciyaal ama cunug yar!!!, Maalin kasta ugu yaraan labo jeer ayaad u fadhiisataa cunto waxaadna ku qaadataa 30 daqiiqadood middiiba inaad wax cunto, hadii la xisaabiyona waa 3 sanno!!!.

Haddii laysu geeyo wadarta wakhtigaaguna waa sidan 20 sanno hurdo + 20 sanno shaqo+ 15 sanno carruurnimo + 3 sanno oo cunto qaadasho ah, wadartuna waa 58 sanno oo cimrigaaga ah, haddii laga jaro tirada cimrigaaga oo (60 sanno) aynu kasoo qaadnayna waxaa kuu baaqi noqonaya 2 sanno!!!.

Haddaba maxay noqon doontaa jawaabtaadu marka aakhiro lagu waydiiyo maxaad ku soo qaadatay waqtigaaga intii aad noolayd?!!!.

Haddaba waxaan kuu hayaa xal dhow oo aad ku xalliso arrintan!!!.

Kitaabka quraanka ahi waxa uu ka kooban yabay 604 warqadood ama xaanshiyadood haddii aan u qaybinno 30 ka cisho ee bilwalbana maalintii waxaa kugu hagaagaysa ama kugu soo aadeysa 20 warqadood ama xaanshiyadood oo keliya!!!, Maalin kasta waxaad tukataa 5 salaadood. haddii aad 20 bog uqaybisona salaad kasta waxaad aqrin kartaa 4 bog (20/5=4)!!!.

Haddii aad gaadhsiiso oo keliya farriintan saaxiibadaa iyo faamilkaaga kadibna ay Dhammeeyaan akhriska quraanka bil walba miyaad qiyaasi kartaa ajarka

aad ka heli kartid adigu?!!!, markasta oo qof akhriyona waxaad helaysaa xasanaad iyadoo aan waxba laga dhimayn account –kiisa aakhiro, cajiib!!!.

Maxaad naftaada ugu samayn wayday fursad ganacsi oo faa'iido leh xagga xasanaadka/ajarka iyo aakhiradaadaba inta aad murmeysid maalinwalba, dood cidla ahna ku jirto!!!, maxaad dadka ugu tilmaami waydey adigoo qorshahana usheegaya inay dhammeeyaan quraanka bil walba ee curata adiga oo naftaada ka bilaabaya!!!, ma isweydiisay Wakhtigaaga Toddobaadkii bilaa qorshaha kaaga lumay, maxayse Tahay Sababta dadkeennu caadada uga dhigteen wakhtigaan Dilaynaa!!!.

Qof Kasta Oo Bini-Aadam ah Wuxuu Haystaa Fursad Taada Lasiman, mana Jiro Qof 24 Saac Ka badan Isticmaala habeenkii iyo maalintii, sidoo Kale Xittaa Qofka Dunida Ugu Qanisan Ma Iibsan Karo Daqiiiqad Dheeraada!!!.

Haddaba Waa Maxay Sababta Dadka Qaar Uga Calaacalaan Wakhtiga iyo Dhamaystirka Shaqo Maal-Meedkooda Dadka Qaarna Ugu Naalloodaan!!!.

Inta Badan Dadku waxay isku Qanciyaan ama ku Hadal Haystaan Wakhtigaan Dilayaa iyo ereyada lamidka ah, Haddaba waa Maxay Sababta Wakhtiga Loo Dilaayo?, Miyaysanse Jirin Shaqo Kale Oo Wakhtiga Firaaqada Laqaban Karo?!!!.

Ugu danbayn Halkan waxaan ku soo lifaaqayaa waxoogaa baraarujin ah oo ku saabsan faa'iidada ay Qorshaynta Waqtigu u leedahay horumarka nolosheenna, si ay unoqoto mid u layliyan inay la jaan qaaddo waqtiga, dabcan waxii naftayda aan la jecelahayna waa inaan la jeclaadaa walaalaha oo dhan!!!.

Maaraynta Waqtigu (Time Management) waa hannaan aasaasi ah oo u baahan la qabsasho, tababar, xirfad, agab, iyo qaab shaqo isku xidhan oo kugu caawinaya inaad qiimo badan siiso kor u qaadista tayada wakhtiga noloshaada, muhiimadda inaad waqtigaaga qaabaysaana micnaheedu maaha wax-qabad badan oo aad samayso, maxaa yeelay waxa taas ka mudan inaad ku hawlan tahay tacab midho-dhal leh iyo in juhdiga iyo dadaalkaagu ku wajahan yihiin jahada saxada ah, Ogowna oo haddii aad wakhti lumis tahay waligaa kob cagaar leh ka soo durdurin maysid!!!.

Haddaba ku dadaal inaad caado ka dhigato ka faa'iidaysiga bar kasta oo wahtigaaga ah adiga oo samaynaya sidan:-

1) **Qor oo qaabee amuuraha:-** Qaladaadka guud ee qorshaha wakhtiga haleeya waxa ka mid ah inaad isku halayso xasuustaada oo aad macluumaad badan ku kaydiso taas oo ugu dambayn buux dhaafisa maskaxda, wax badana aad iloowdo Inaad liis garayso oo qorto, tanna shay kasta waxay kuu awood siinaysaa inaad xaddido, kadib waqtiga mashaariicda iyo amuurahaaga adiga ayaa u fullinaaya si abaabulan!!!.

2) **U kala gur sida ay u kala mudan yihiin:-** Waxa la yidhi:- oodo dhacameed siday u kala sarreeyaan ayaa loo kala guraa, Waa lagama maarmaan inaad u liis garayso sida amuuruhu u kala mudan yihiin adiga oo diiradda saaraya waqtiga aad ku wajahayso xaajooyinka, sida dhabta ahna u saamaynaya mustaqbalkaaga, Una calaamadi liis kaaga siday u kala horreeyaan!!!.

**GUUL AYAAN KUU RAJAYNAYAA AKHRISTE!**!!.

## TIXRAAC:-

## BOGAG:-

- ✓ **Abdulahi nur Colombo.**
- ✓ **Afmaal-akhbaar.plogspot.com.**
- ✓ **Tuur yare.**
- ✓ **Qisooyin cajiib ah oo aad aqoon badan aad ka kororsan doonto.**
- ✓ **Somalidoc.**
- ✓ **Sama wade.**
- ✓ **Saxardiid xaashi ardaale.**
- ✓ **Ali mahad abdi mohamud.**
- ✓ **Badmacaan.**

- ✓ **Qisooyin waa qici ah.**
- ✓ **Qisooyin iyo sheekoyin.**
- ✓ **Somali post.**
- ✓ **Ahmed abdikarim waayo-arag.**
- ✓ **Bulsho times.**
- ✓ **Qisooyin jacayl.**
- ✓ **Cabdulaahi cisman xuseen.**
- ✓ **Maxaa cusub tv.**
- ✓ **Qisooyinka diin ah.**
- ✓ **Tv-ga dhacdooyinka dunida.**
- ✓ **Qisooyin diini ah oo cajiib ah.**

- ✓ Hiigsiga nolosha.
- ✓ Lone.
- ✓ Qolka quraanka kariimka.
- ✓ Qisooyinka diiniga ah.
- ✓ Shucayb sh.max'ud jabaaye.
- ✓ Ahmed Ibrahim ahmed.
- ✓ Qiso iyo murti kaftan iyo sheko.
- ✓ Qiso real page.
- ✓ Nasra bintu Suleiman.
- ✓ Qisooyin jacayl.
- ✓ Qoso jacayl.

# IRRIDAHA GUUSHA {2}

- Qarniyaal iyo qisooyin jacayl.
- Lamaanaha nolosha.
- Adbulkareem ali boltuur.
- Qisooyin cajiib a.
- Qisooyin dhab ah.
- Idaacada asal.
- Abdirizak atosh.
- Aljasiira news somali.
- Dhuubo dhexyar.
- Faafinta diinta islaamka.
- Hormarka qoyska.

**Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!**

**ururiyaha buugga:- cumar hong-kong**

## ASXAAB:-

- ✓ **Muhumud Osman.**
- ✓ **Mcm yare.**
- ✓ **Ahmed Mohammed artan.**
- ✓ **Nuur ahmed islaam.**
- ✓ **Mohamed mursal dahir.**
- ✓ **Mansour ahmedov.**
- ✓ **Abwaan siyaad nirgoole.**
- ✓ **Author jirde.**
- ✓ **Maxamed abdi qaadir shekh.**
- ✓ **Madadal yare.**

- ✓ **Hadhwanaagmedia.com.**
- ✓ **Wikipedia.com.**
- ✓ **Barocaafimaad.com.**

# ALLAA-MAHAD LEH

# DHAMMAAD QAYBTII LABAAD

**LASOCO QAYBTA SADDEXAAD (INSHA ALLAH)**